Jamhuuriyadda Somaliland



# Buugga Kaalmada Sharci Ee Dacwadaha Ciqaabta Ee Bahda Sharciyaqaanka Somaliland

## Qoraallada Dacwad Dambiyeedka ee Somaliland

UNODC
United Nations Office on Drugs and Crime

# Buugga Kaalmada Sharci Ee Dacwadaha Ciqaabta Ee Bahda Sharciyaqaanka Somaliland

## Qoraallada Dacwad Dambiyeedka ee Somaliland

Febarwari 2015

UNODC
United Nations Office on Drugs and Crime

## Mahadnaq

Buugga Kaalmada Sharci ee Dacwada Ciqaabta waxaa la diyaariyay iyadoo uu gacanta ku hayo Barnaamijka Cadaaladda dembiyada ee UNODC Xafiis Gobaleedka Bariga Afrika.

## Kooxda Buugga Kaalmada Sharci ee Dacwadaha Ciqaabta

Cilmi-Baadhista, qoraalka iyo tifaftirka:
Prof. Dr. Athanassia P. Sykiotou (La Taliye).
Shaqaalaha Mashruuca Cadaaladda Dembiyada ee Xafiis Gobaleedka Bariga Afrika iyo Somaliland ee taageerada maamul siiyay Buugga Tobabarka Kaalmada Sharci:
Rebecca Nyandiwa, Mohamoud Hassan iyo Abdifatah Mohammed.

*Taageerada Turjumaadda:*

Tubali Ltd.

*Farsamada iyo Qaabdhismeedka:*

400 Communications Ltd.

## Maamulka

Loide Lungameni (Wakiilka UNODC ee Xafiis Gobaleedka Bariga Afrika), Matteo Pasquali (Madaxa Barnaamijka, Cadaaladda Dembiyada ee Xafiis Gobaleedka Bariga Afrika), Simon Charters, (Xidhiidhiyaha Barnaamijaka, Cadaaladda Dembiyada ee Somaliland).

## Khubaradii talada ku lahaa diyaarinta Buugga Kaalmada Sharci ee Dacwada Ciqaabta

UNODC waxay u mahadnaqaysaa kaalmadii qiimaha lahayd ee ay ka heshay khuburo kala duwan, oo ay ka mid yihiin Wasaarada Cadaaladda iyo Unugga Kaalmada Sharci ee Wasaaradda Cadaaladda, bixiyayaasha kaalmada sharci, kaaliyayaasha qareenadda, la laliyayaasha caalamiga ah, wakiilo ka socda bulshada rayidka ah, u doodayaasha xuquuqda aadamaha iyo aqoonyahano, gaar ahaan Mudane Hussein Ahmed Aideed (Wasiirka Cadaaladda), Mudane Abdi Abdullahi (Agaasimaha Waaxda Garsoorka ee Wasaaradda Cadaaladda) iyo Mudane Mustafe Aided Osman (Madaxa Unuga Kaalmada Sharci, Waaxda Garsoorka, Wasaaradda Cadaaladda).

Diyaarinta Buugga Kaalmada Sharci ee Dacwada Ciqaabta waxaa looma faa'iidaystay deeqdii lacageed ee Wasaaradda Arrimaha Dibedda ee Maraykanka taas oo ka mid ahayd deeqdii ay siisay Barnaamijka Cadaaladda Dembiyada ee UNODC Somaliland.

## Afeef

Warbixintan si rasmi ah looga tifaftirin.
Tusmooyinka qoraanlkan kama turjumayso aragtiyada iyo siyaasadaha UNODC ama ururrada gacansiiya mana soo dhawaynayso.
Dadka loo shaqaalaysiiyay iyo soo bandhigista waxyaabaha qoraalkan ku jiran ma muujirnayaan fikaradaha UNODC ee khuseysa xaaladda sharci ee dal, dhul ama magaalo ama awooddeeda, ama khuseysa xaddaynta xuduudeheeda.

Xuquuqda Daabacaadda © 2014, United Nations Office on Drugs and Crime (UNODC).

# Tusmada

**Hordhaca Kaalmada Sharci Iyo Qaabka Buugga** **8**

**A. Taariikhda Kaalmada Sharci** **9**

**B. Ujeeddada Buugga iyo Qaabka** **11**
B.1. Waajahida Caqabadaha si loo dhaqan-galiyo Shuruucda 11
B.2. Xadka uu ku Egyahay Buuggani 13
B.3. Himilooyinka Tabobarka 13

**C. Guud-marka Tabobarka** **13**
C.1. Qaabka Tabobarka 13
C.2. Qorshaha Tabobarka 15

**Qaybta I: Qaabka-Shaqo Ee Kaalmada Sharci** **19**
Cutubka 1aad:
Qeexitaanka iyo Suurtogalnimada Kaalmada Sharci 21
1.1. Maxaynu uga Jeednaa Kaalmo Sharci? 21
1.2. Maxaa loo danaynayaa Kalmada Sharci? 23
1.3. Masuuliyadaha hawl-wadeennada Kaalmada Sharci 25
Cutubka 2:
Guud-marista Sharcinimada Xayndaabka Sharci ee Kaalmada Sharci 28
2.1. Xeerarka Caalamiga ah ee Kaalmada Sharci 28
2.2. Sharcinimada Kaalmada Sharci ee Xeerarka Gobol 31
2.3. Xayndaabka Qaran ee Kaalmada Sharci 33
Cutubka 3:
Mabaadi'da iyo Amaanka Kaalmada Sharci 40
3.1. Amaanka si loo Ilaaliyo Qareennada 40
3.2. Ammaanka si loo Ilaaliyo Eedeysanaha 42
3.3. Mabaadi'da Khuseysa Kaalmada Sharci 61
3.4. Mabaadi'da Khusaysa Asluubta Qareennada 63
3.5. Xidhiidhka Macmiilka 67
3.6. Ka Cabashada Qareenka 72
Cutubka 4:
Hababka Kaalmada Sharci 74
4.1. Kala duwanaanshaha Hababka Kaalmada Sharci 74
4.2. Nidaamka Kaalmada Sharci ee hadda Somaliland ka jira 79
4.3. Tusaalayaal Kaalmada Sharci ee Waddamo kale 83

**Qaybta II:**
**Wakiil U Noqoshada Iyo Difaacista Dembiilaha Marxalad Kasta Oo Habka Caddaaladeed Ee Ciqaabta Kamid Ah** **93**
Cutubka 1:
Kaalmada Sharci ee Marxaladda Booliska iyo Wakhtiga Baadhista 96
1.1. Mabaadi'da Guud 96
1.2. Baadhista Difaac ('Defense Investigation') 101
Cutubka 2:
Kaalmada Sharci ee Xilliga Maxkamadda 105
2.1. Doodda dacwadda 106
2.2. Baahida Fasiraada 109
2.3. Adeegsiga Turjumaannada 111
2.4. Su'aalaha la weydiinayo Maragyada 114
2.5. Khabiirrada 131
2.6. Gebogebada 133
2.7. Ku Xukumida Xabsiga 136
2.8. Rafcaannada 141
2.9. Dembiyada Fudud ee lagu Galo Gudaha ama Dibedda Maxkamadda 146
Cutubka 3aad:
Kaalmada Sharci ee Marxaladda Dhageysiga Dacwadda ka Dambeysa 149

**Qaybta III:**
**Habraacyada Tabobarka Qareennada Iyo Hawl-Wadeennada Kaalmada Sharci Si Loo Caawiyo Dhibaneyaasha Iyo Kooxaha Nuqul** **152**
Cutubka 1:
Caawinta Dhibaneyaasha 154
1.1. Nuglaanshaha Dhibanaha 156
1.2. Xaqa Magdhowga iyo Cawal-celinta ee Dhibanaha 158
1.3. Noocyada gaarka ah ee dhibaneyaasha nugul 160
Cutubka 2:
Caawinta Kooxaha Nugul 169
2.1. Carruurta Sharciga Khilaafta 169
2.2. Dadka la Taag Daran Xanuunka HIV/AID-ka 177
2.3. Dadka Maskaxda ka Jiran 179
2.4. Qaxootiga, Dadka Gudaha ku Baro-kacay iyo Dadka Ajaanibka ah 181
2.5. Marka Eedaysanahu uu yahay Dhibanaha 187
2.6. Ilaalinta Maraga 191

**Qoraallada La Tixraacay** **194**

**Lifaaqyo:**
**Qoraallada Ka Qayb-Galayaasha La Siinayo** **198**

# Hordhaca Kaalmada Sharci Iyo Qaabka Buugga

# Hordhaca Kaalmada Sharci Iyo Qaabka Buugga

## A. Taariikhda Kaalmada Sharci

Taariikhiyan Kaalmada Sharci waxay ku aroortaa dhaqdhaqaaqyadii waddamada Yurub gudahooga ka socday qarnigii 19naad ee xuquuqda in qofku uu Qareen helo iyo xuquuqda dhageysiga dacwaddeed oo caddaalad ah. Bilowgii rajadu waxay ahayd in Qareennadu ay u shaqeeyaan qaabka Kaalmada Sharci ee bilaashka ah ama jaban ('pro bono'). Horaantii qarnigii 20naad waddamo badan oo reer Yurub ah ayaan lahayn qaab caadi ah oo loo wajaho Kaalmo Sharci, dadka danyarta ahina waxay isku halayn jireen Kaalmada Sharci ee ay Qareennadu ugu deeqaan[1]. Waddamada badankoogu waxay u gudbeen inay sameystaan shuruuc jidaysay in Qareennada la siiyo khidmad dhexdhexaad ah. Si loo yareeyo codsiyada, Kaalmada Sharci waxa lagu ekaysiiyey khidmada Qareenka ee xilliga gar-maqalku socdo ee uu Qareenku lama-huraanka yahay. Waddamada leh nidaamka sharci ee Roomaaniyiinta ka soo jeeda ('civil law legal system') iyo kuwa leh nidaamka sharci ee shuruucdu ay ka farcanto go'aannada garsoorku ('common law legal systems') waxay ugu dhaqmaan laba hab oo kala duwan xuquuqda inuu qofku helo Qareen gar-maqalka dacwadaha madaniga iyo ciqaabta. Waddamada leh nidaamka sharci ee Roomaaniyiinta ka soo jeeda ('civil law countries') waxay u badan tahay inay dacwadaha madaniga ah awoodda saaraan xuquuqda inuu qofku helo Qareen, Sidaas darteedna ay u bixiyaan Kaalmo sharci markii Qareen loo baahdo, halka waddamada leh nidaamka sharci ee shuruucdu ay ka farcanto go'aannada garsoorku ('Common law countries') ay dacwadaha ciqaabta ah awoodda saaraan xuquuqda inuu qofku helo Qareen.

Qarnigii 20naad Kacdoonka loo samaynayey Kaalmada Sharci wuxuu ahaa mid sare ilaa hoos ah, iyadoo ay wadeen xubnahii ka midka ahaa mihnedlayaasha sharciga ku shaqaysanayey ee dareensanaa inay waajibaadkooga tahay inay daryeelaan kuwa (dadka) dakhligoodu hooseeyo. Kaalmada Sharci waxay ku xidhnayd kolba waxa ay Qareennadu bixin karaan si ay wax uga qabtaan *"baahiyaha sharci"* ee kuwa ay u aqoonsadeen inay yihiin dad faqiir ah, la bahdilay ama midab-takoor lagula kacay. Sidaas darteed gaadhsiinta Kaalmada Sharci waxay ahayd mid ku xidhan bixinta ee may ahayn mid ku xidhan dalabka, taasoo dhalisay inuu balaadho farqiga u dhaxeeya xadiga taakuleynta laga geystay baahiyaha iyo dalabaadka saxda ah. Hababkii adeegga sharci sida dhexdhexaadinta xaafadaha iyo adeegyadii kale ee sharci waxay si joogto ah ugu xidhmeen dalab la'aan halka kuwii kale ay la dawakhsanaayeen dadka loo adeegayo.

Kaalmada Sharci waxay xidhiidh dhow la leedahay taakuleynta daryeel ee uu qaranku bixiyo, Kaalmada Sharci ee uu qaranku dadka gaadhsiinayana waxaa saameeya kolba fikradaha laga haysto daryeelka. Kaalmada Sharci waa daryeel uu qaranku siinayo dadka aan sinaba u awoodi karin inay marin u helaan nidaamka sharci. Kaalmada Sharci waxay kaloo caawinaysaa in la xaqiijiyo in daryeelkii la bixinayey la dhaqan-geliyey iyadoo la siinayo taakulooyin lagu daryeelayo dadka loo oggol yahay sida guriyeynta bulsheed, oo ay u weheliso inay helaan talo sharci iyo maxkamado. Taariikhiyan Kaalmada Sharci waxay door muhiim ah ka qaadatay in la xaqiijiyo tixgelinta xuquuqaha bulsho, dhaqan iyo dhaqaale kuwaasoo ay ku lammaanaayeen taakuleynta maaliyaddeed ee la siiyo dadka bulshada ugu liita, guriyeynta, daryeelka bulsho, gaadhsiinta

1 Regan, Francis, (1999), *The Transformation of Legal Aid: Comparative and historical Studies*, Oxford University Press, pp. 89–90.

adeegyada caafimaadka iyo waxbarashada kuwaasoo ay bixin karaan hay'adaha dowladeed iyo dadka gaarka ahiba, iyo sidoo kale dejinta xeerarka shaqaalaha iyo ka hortagga midabtakoorka[2].

Intii ka horeysay badhtamaha qarnigii 20[naad] macluumaadkii laga qoray Kaalmada Sharci waxay iftiiminayeen in si isku duuban loo dhaqan-geliyo xuquuqaha dhaqaale, bulsho iyo dhaqanba. Maadaama waddamada muwaadiniinta daryeelkooda kafaalo qaadaa ay dhismeen 1940[tanaadkii], waxaa la aaminsanaa in muwaadiniinta ay si guud musuuliyadi uga saaran tahay xuquuqaha bulsho, dhaqan iyo dhaqaale, qarankuna uu masuul ka yahay dadka xannuunsanaya ama bilaa camalka ah ee aan awoodayn inay naftooda wax u qabsadaan. Waxay noqotay in xuquuqaha bulsho, dhaqan iyo dhaqaale si guud loogu dhaqan-geliyo siyaasado halkii waajib gudashada shakhsi ay ka ahayd. Shuruuc ayaa la samayeeyey si loogu taajeero bixinta daryeelka guud, inkastoo shuruucdu ay ahayd shuruuc loogu talo-galay dadka wax qorshaynayey oo aan loogu talo-galin Qareennada. Habab Kaalmo sharci loo bixiyo ayaa la sameeyey maadaama ay ahayd in qaranka masuuliyadiisa ay tahay inuu caawiyo dadka ku lug leh murannada sharci, laakiin waxay bilowgii indhaha ku hayeen xeerka qoyska iyo furniinka. Sanaddii 1950[naadkii] iyo 1960[maadkii] kaalintii daryeelka uu qaranku bixin jirey way isbaddeshay, himilooyinkii bulsho may sii ahaanin himilooyin guud oo la wadaago. Shakhsiyaadku waxay xor u ahaayeen ka midho-dhalinta himilooyinkooda. Daryeelka uu qaranku bixiyaa wakhtigani wuu balaadhay ilaa la bixiyey Kaalmooyin sharci maadaama ay walaacyo ka dhasheen awoodihii dadka daryeelka bixinayey iyo mihnedlayaashiiba. Tani waxay dhalisay inay kordhaan baaqyadii khuseeyey xuquuqda ay shakhsiyaadku u leeyihiin inay si sharci ah u dhaqan-geliyaan xuquuqaha bulsho, dhaqan iyo dhaqaale iyo bixinta daryeelka loo oggol yahay. Waxaa dhashay hababkii ay muwaadiniintu si sharci ugu dhaqan-gelin lahaayeen xuquuqaha bulsho, dhaqan iyo dhaqaale, markaas ayey Qareennadii daryeelka bixinayeyna ay Kaalmada Sharci kula talinayeen dadka dakhligoodu hooseeyaa marka ay la xaajoonayaan Saraakiisha Qaranka. Kaalmadii sharcina way ka balaadhatay xeerkii qoyska oo waxay noqotay guud ahaan xuquuqaha bulsho, dhaqan iyo dhaqaale.

Sanaddii 1980[maadkii] doorka daryeelka uu qaranku bixin jirey looma sii tixgalin inuu yahay lama-huraan togan, waxaana kordhaysay in daryeelka ay bixiyaan hay'ado jiritaan gaar ah leh. Tani waxay dhalisay inay korodho Kaalmada Sharci ee ay bixinayaan dadka gaarka ahi, laakiin waxay weli culayska saarayeen inay Kaalmadani ku bixiyaan dacwadaha maxkamadda ku jira oo qudha. Waxaana kordhaysay in muwaadiniinta loo aqoonsado sida macmiil oo kale, kaasi oo awoodda inuu ka doorto adeegyada la bixinayo ka uu rabo. Haddii ay suurtogal noqon weydo in muwaadinka ikhtiyaarkiisa adeeg loogu fidiyo, waxaa muwaadiniinta la siiyey xuquuq ay ku muujiyaan ku qancid la'aantooda iyagoo maraya hababka cabashada maamul.Tani waxay abbuurtay culays, maadaama oo aanay qorshaha Kaalmada Sharci ku jirin in la siiyo talooyin dadka raba in cawil celin lagu siiyo hababka cabashada maamul. Sidoo kale culaysyadu waxay soo baxeen markii qaramadii awoodda saarayey in shakhsigu dhaqan-geliyo xuquuqaha bulsho, dhaqan iyo dhaqaale ee aanay ku dhaqan-gelin siyaasad guud ahaantood, ay hoos u dhimeen kharashkii ay ku bixin jireen Kaalmada Sharci ee daryeelka uu qaranku bixiyo kamid ahayd. In shakhsigu uu dhaqan-geliyo xuquuqaha daryeelkuna

2 Regan Francis, ibid.

waxay ku xidhan tahay nooca Kaalmada Sharci ee ay qaramada awoodda saaraya in si guud loo dhaqan-geliyo xuquuquhu ay tahay inay bixiyaan[3].

## B. Ujeeddada Buugga iyo Qaabka

Ujeeddada Buuggani Kaalmada Sharci ee dacwadaha ciqaabtu waa in la siiyo dadka sharciga ku shaqeeya tilmaame dhameystiran oo ay tixraacaan si ay iyaguna u bixiyaan talooyin wanaagsan, u caawiyaan oo ay wakiil ugu noqdaan dadka lagu tuhmayo ama ku eedaysan inay galeen dembi dhegeysiga dacwadda ka horeeya, waxaana xoogga la saaray doorka iyo masuuliyadaha hawl-wadeennada Kaalmada Sharci ee xilliga baadhista, xadhiga, damaannada, dhageysiga dacwadda, rafcaannada, iyo marxaladdaha kale ee lagu xaqiijin karo in xuquuqaha aadamaha la ilaashay; sidoo kale xuquuqaha dadka dhibanneyaasha ah. Wuxuu sidoo kale ka kooban yahay hab-raacyada tababarka iyo Kaalmada ay Qareennada iyo hawl-wadeennada kale ee Kaalmada Sharci ay ku caawinayaan haweenka iyo kooxaha kale ee nugul sida caruurta, dadka dhallinyarada ah, waayeelka, dadka naafada ah, dadka la nool xannuunka HIV/AIDS-ka, kuwa waalan iyo kuwa aad u xannuunsan, qaxootiga, dadka gudaha ku baro-kacay iyo dadka ajaanibka ah ee dalalka kale u dhashay ee nidaamka caddaaladeed ka noqon kara eeddaysaneyaal ama dhibanneyaal.

Buuggani waxaa loogu talo-galey in lala isticmaalo casharada tabobarka Qareennada, caawiyeyaasha Qareennada iyo hawl-wadeennada kale ee Kaalmada Sharci ee Somaliland.

Buuggu wuxuu ka kooban yahay saddex qaybood. Qaybta ugu horeysaa waxay ka kooban tahay mabaadi'ida Kaalmada Sharci iyo guud-marka xeerarka, qaar kamid ah noocyada Kaalmada Sharci ee lagaga dhaqmo waddamada kale. Qaybta labaad waxay sharaxaysaa Kaalmada Sharci ee la siinayo dhinaca difaaca waxaanay u kala baxdaa hababka ay tahay inuu garto Qareenka difaacu (Sharaxaad lagu kaabay kiisas (dhacdo) wax laga baranayo iyo hawl-qabadyo laga shaqaynayo); qaybta saddexaadna waxa gebi ahaanteed loo gaar yeelay hab-raacyada tabobarka Qareennada dhibanneyaasha iyo kooxaha kale ee nugul sida haweenka, caruurta, dadka dhallinyarada ah, waayeelka, dadka naafada ah, dadka la nool xannuunka HIV/AIDS-ka, kuwa dhimirka ah iyo kuwa aad u xannuunsan, qaxootiga, dadka gudaha ku baro-kacay iyo dadka ajaanibka ah ee dalalka kale u dhashay.

### B.1. Waajahida Caqabadaha si loo dhaqan-galiyo Shuruucda

Jaahilnimada dhinaca sharciga, xuquuqaha aadamaha iyo nidaamka caddaaladeed ee ciqaabtu waa dhibaatooyinka ugu culus wadamo badan oo Afrikaana. Dadka aan garanayn xuquuqahooga sharci ma awooddaan inay dhaqan-geliyaan xuquuqahaasi, waxaanay khatar ugu jiraan in si khaldan loogu adeegsado nidaamka caddaaladeed ee ciqaabta (criminal justice system), gaar ahaan, kooxaha nugul sida carruurta, dadka dhallinyarada ah, dumarka iyo qaxootiga.

3 Regan Francis, ibid.

Booliska, Dacwad oogeyaasha, Garsooreyaasha iyo Qareennada dadka difaacaa dhammaantood waxay yihiin tiirarka aasaasiga ah ee nidaamka caddaaladeed, waana inay dhammaantoodu aad u garanayaan qodobbada muhiimka ah ee xeerka ciqaabta iyo xeerka habka ciqaabta.

Waxaa la soo tebiyaa in dembiyada qaarkood aan loo aragba in aanay haboonayn in dhinaca difaaca (eedeysanaha) lagu xukumo oo lagu ciqaabo dembiyo aan ku jirin Xeerka Ciqaabta ama xeerarka u gaarka ah ciqaabta. Garsooreyaasha iyo Dacwad Oogeyaashu, wakhtiyada qaarkood, waxay dabaqaan qaanuunka Shareecada iyagoo diiddaya inay raacaan qodobbada Xeerka Ciqaabta (XC) iyo kuwa Xeerka Habka Ciqaabta (XHC); ama looma ba arko wax aan haboonayn in inta layska dhaafo nidaamka caadiga ah dacwaddo badan lagala baxo nidaamka caddaaladeed lagu soo dhameeyo xeer dhaqameedka. Waxaa kale oo arrimahani kor ku xusan soo raacda wakhtiyada qaarkood dhibaatada musuqmaasuqa taasoo wadiiqadii u dhaxeysay aqoonta loo leeyahay shuruucda iyo in si buuxda loogu dhaqmo ka dhigaysa mid ay ka buuxaan caqabado.

Qareennada dadka difaacaa waxay aad u daneeyaan inay arkaan shuruucda oo dhaqan-gashay. Xeerarka qoran oo la qadarin waayo ayaa ah caqabada ugu weyn ee soo wajahda Qareenka qof difaacaya ee doonaya inuu ilaasho xuquuqaha macmiilkiisa oo uu siiyo difaac ku filan. Waxtarka dhammaan kaabayaasha uu wato Qareenka dadka difaacaa waxay ku xidhan yihiin saadasha iyo la xisaabtanka ay abuurayso u hoggaansanaanta adag ee xeerarka ciqaabta iyo habka ciqaabtu. Sidaas darteed, ku tabobarista Qareennada dadka difaaca qaab si toos ah u sharaxaya farqiga wayn ee u dhaxeeya nidaamka sharci ee ay abbuureen xeerarku iyo dhaqanka dhabta ah ayaa ah dariiqa qudha ee la filayo inuu daboolo qabyadaasi.

Buuggani waxaa looga dan leeyahay inuu qeexo qaab tabobar oo lagaga gudbayo kobcinta aqoonta [sharci] laguna gaadhayo shuruucda qoran oo si buuxda u dhaqan-gasha.

Waxa xusid mudan in garasho la'aantu aanay ahayn arrinta qudha ee daciifinaysa dhaqan-galka shuruucda qoran. Qareennada ka qayb-qaadan doona tabobaradani aad bay u garanayaan dhibaatooyinka ka jira nidaamka sharci badankooda. Doorka tabobarahu waa inuu si kedis ah ka qayb-galayaasha u weydiiyo inay sheegaan caqabadaha ay og yihiin inay wakhti xaadirkani hor taagan yihiin dhaqan-galka qodobbo gaar ah oo sharciga kamid ah iyo inuu ku dhiirigaliyo iyagu inay tilmaamaan oo ay dabadeedna qiimeeyaan dhibaatooyinkani.

Marka si buuxda loo qeexo dhibaatooyinka yaala dariiqii loo marayey in si buuxda uu u dhaqan-galo sharcigu, lana caddeeyo, ka qayb-galayaashu waa inay sameeyaan falan-qayn ku saabsan niyadda iyo awoodda ay ku wajahayaan kagana gudbayaan caqabadahani.

Waxaa muhiim ah in la abbuuro faham guud oo ku saabsan qaabka duruufaha imika lagu sugan yahay ay u ragaadinayaan tallaabooyinka lagu gaadhi karo dhaqan-galka sharciga qoran, inkastoo tabobarayaasha iyo ka qayb-galayaasha wax fahamsan ee wada shaqaynayaa ay dejin karaan Istaraatijiyad gaar ah oo wax lagaga qabanayo duruufahaasi.

Fikirka ah inaan waxba la qaban karin oo si toos ah loo waajaho keliya ayaa suurtogal ka dhigi kara in la dhiso caqdi cusub oo ay macquul tahay in la kobciyo ku dhaqanka sharciga, in la abbuuro xaaladdo

saacidaya fulinteeda iyo in la abaqaalo dhismaha isbaahaysiyadii lama-huraanka u ahaa ilaalinta kobcintaasi [ku dhaqanka sharci].

### B.2. Xadka uu ku Egyahay Buuggani

Buuggani loogama dan laha in lagaga hadlo dhaqanka yaala wixii ka baxsan awood-garsoorka Maxkamaddaha Somaliland. Lamana rabo inuu noqdo tixraac dhameystiran oo sharaxaya qaababka difaac ee suurtogalka ah oo dhan nidaam kasta (mid rasmi ah iyo mid aan rasmi ahaynba), kiis kasta; ama dembiyada la soo oogo oo dhan. Ujeeddada Buuggani waa in mabaadi'ida Kaalmada Sharci lagu dhaqmo dacwadaha ciqaabta ah dhexdooda iyadoo loo guud marayo si loogu dabaqo Kaalmada Sharci iyo iyadoo dacwaddo wax laga baranayo la siinayo si fahamku uu u jilicsanaado.

### B.3. Himilooyinka Tabobarka

Buuggani waxaa loogu talo-galey inuu ka qayb-galayaasha ka caawiyo inay yeeshaan xirfadaha ugu mudan ee lagu shaqeeyo ee lagama maarmaan ah si loo noqdo Qareen difaac oo hawl-kar ah, iyadoo uu gudbinayo aqoonta iyo xirfaddaha gaarka ah ee la xidhiidha sida [dadka] loo difaaco dacwadaha ciqaabta. Nidaam kasta oo sharci waxaa huran isbadal joogto ah. Sidaas awgeed, wax maanta ah Istaraatijad si wanaagsan u shaqaynaysa ayaan qiimo yeelan doonin mustaqbalka dhow. Waxaa intaa dheer, dacwaddo sharci, oo marka laga eego aragtida caalamiga ah u muuqda inay muran la'aan sax yihiin, ayaa xaalada gaarka ah ee wadan ay ka dhigi kartaa wax qayral sharci ah.

Qareennada dadka difaacaa waa inay noqdaan kuwo firfircoon oo isbadal ka dhalin Kara nidaamka sharci dhexdiisa. Sidaas darteed, waxaa si joogto ah loo tixraaci doonaa shuruucda maxaliga ah iyo kuwa caalamiga ah iyo mabaadi'ida sharci ee aan imika lagu dhaqmi Karin, laakiin ay iska cadahay in haddii si buuxda loogu dhaqmo ay faa'iido u tahay Qareennada dadka difaaca iyo macaamiishooda.

Himiladu waa in niyada loo dhiso Lana dhiirigaliyo dadka sharciga ku shaqeeya si ay iskugu dayaan inay gaadhaan derejooyin aanay markii hore hawaysan jirin mihnadooda dhexdeeda iyo si ay u dejistaan himilooyin ay kaga dhabayn karaan mihnadooda guud ahaan.

## C. Guud-marka Tabobarka

### C.1. Qaabka Tabobarka

Qareennada dadka difaaca waxay u baahan yihiin inay si quwadi ku jirto ugu dhawaaqaan diidmooyinkooda, su'aalaha ay u weydiiyaan si xirfadaysan, si lagu qanci karana ay ugu dooddaan afkaartooda. Tabobarkanina waa wakhtigii ugu haboonaa oo ay tahay in lagu dhaqmo xirfadahani. Tabobarkani wuxuu u baahan in si firfircoon looga qayb qaato doodaha, hawl-qabadyada, isticmaalka qaababka dhacdooyinka iyo tijaabooyinka xirfaddaha. Marka ay ka qayb-galayaashu doonayaan inay wax diiddaan, su'aalaan ama dood ka dhiibtaan mawduuca ay ku haboon tahay, maaha in lagu dhaliilo arrimahaasi, waxase looga baahan yahay inay si

xirfaddaysan u isticmaalaan hababkii la baray. Tabobarahuna waa inuu helaa ixtiraamkii uu Garsoorahu ku lahaa Qareenka dadka difaacaya, iyadoon laga badbadinayn lagana hoos marinayn.

Kaalinta tabobarayaashu maaha inay siiyaan ka qayb-galayaasha jawaabaha saxda ah. Marka lagu gudo jiro doodaha, dhibaatooyinka shaqo, ama layliyada, kaalinta tabobarayaashu waa inay ka qayb-galayaasha ka caawiyaan sidii ay u heli lahaayeen jawaabo ay iyagu leeyihiin. Ujeeddada tabobarku waa in ka qayb-galayaasha laga caawiyo inay sameeyaan qaab faa'iido leh oo lagu wajahi karo dhibaatooyinka ee *maaha in loo soo jeediyo jawaabaha gaarka ah.* Ka qayb-gale kasta waa inuu shakhsi ahaantiisa u qiimeeyo sidii fikraddaha la soo bandhigay ay ula midaysiin lahaayeen shaqadooda Qareennimo ee ay dadka ku difaacaan. Dhibaatooyinka soo wajahay Qareennada dadka difaaca malaha jawaab kelideed sax ku noqonaysa.

Su'aasha ah sida ugu wacan ee loo difaaci karo qof eeddaysane ahi ma yeelanayso jawaab kelideed sax ku noqonaysa. Ilaa iyo inta ay Qareennada dadka difaacaa gudanayaan waajibaadkooga mihnaddeed ee khasabka ah iyo masuuliyadaha ka saaran macmiilkooda waxay u badan tahay inay hababka badan ee saxda ah u galaan dacwadda. Qareen kastaa wuxuu keenaa xirfado iyo fahamka shaqadiisa oo isaga u gaar ah, tabobarkana looguma talo-galin inuu hoos u dhigo hibadaasi u gaarka ah oo la sheego in mas'alo qudha oo lagu guuleysan karaa ay jirto.

Balse, tabobarkani wuxuu raadinayaa inuu Qareenka ku beero aqoon dhammeystiran oo iskugu jirta hal-beegyada anshaxa mihnadeed ee aan laga hoos mari karin iyo fahamka xaaladaha runta ah ee aan la dafiri karayn ee ku lammaan shaqadooda, kuwaasoo ay tahay in mid kastaba la fahmo si go'aanno istaraatijiyadeed oo caqli badnaani ka muuqato looga yeesho sida ugu wanaagsan ee ay ugu adeegi lahaayeen danaha macaamiishooda.

Go'aannada laga dheegan karo qoraalka Buuggani waa inay badanaa noqdaan qaar u furan dood xilliga tabobarka. Haddii cadaymo ama dood lagu qanci karo lagu soo bandhigo in qayb qoraalka kamid ahi ay khalad tahay, qaybtaasi la diidday waa in lagu noqdaa ama laga saaraa [Buugga].

Dadka aragtiyaha kale qaba xilliga doodaha waa in lagu dhiirigaliyaa inay sharaxaan afkaartooda. Haseyeeshee, dadka hadlayaa waa inay keenaan waxoogaa dhacdooyin, asbaab, ama xeerar ah oo ay ku kaabayaan fikirkooga. Hadii ka qayb-gale uu sameeyo tixraac sharci ama qoraal kaleba, luuqada gaarka ah ee qoraalkaasi waa in la hubiyaa si loogu go'aan qaato haddii iyo habka uu u kaabayo fikirka laga dhawaajiyey.

Haddii aan aragtiyo laga dhiiban arrin ama aragti qudha ay ka dhiibteen ka qayb-galayaashu waxaa tabobaraha u habboon inuu ka qayb-gale ama koox ka qayb-galayaal ah u xilsaaro inay dood ka dhiibtaan iyagoo taageeraya ama kasoo hor-jeedsanaya fikirka gaarka ah ee uu tabobarahu doortay. *Qareenka dadka difaacaa waa inuu awooddi karaa inuu si cad u fahmi karo in arrimaha badankoogu ay ugu yaraan leeyihiin laba weji.* Qareenka hawl-karka ahi waa inuu awoodaa inuu sameeyo doodda ugu fiican uguna macquulsan ee ay danta macmiilkiisu ku jirto maadaama macmiishiisu ay kala duwan tahay wakhtiyada kala duwan sidoo kale waxaa habboon in doodda Qareenkuna ay ka duwanaato kuwii hore. Ka qayb-galayaashu waa in aanay rajeyn inay awoodi karaan inay badanaa raacaan dhinaca afkaarta taageersan fikirka ay iyagu shakhsiyan la xamaasadaysan yihiin.

Qareenka dadka difaacaa waa inuu xasuusnaadaa in xirfadaha aasaasiga u ah hadalku ay yihiin:

- Garashada in ka badan hal xal loo heli karo dhibaato keliya;
- Awooddista in fikirkaaga aad ku kaabto dhacdooyin, dood iyo/ama tixraac sharci, iyo
- Garashada sida ugu wacan ee loogu doodi karo labada dhinac ee arrin keliya.

Waxaa jira xirfado ay tahay in sidooda loogu dhaqmo qayb kasta oo tabobarka kamid ah. Tabobarayaashu waa in aanay ka leexanin in iyaga laftooda iyo ka qayb-galayaashuba ay ku dhaqmaan mabaadi'idani.

Ujeeddada ay UNODC barnaamijkani ka leedahay waa inay ka caawiso Dowladda Somaliland dhinaca farsamada iyo inay siiso adeeg la-talinneed si ay u samaysato nidaam Kaalmo sharci oo bisil oo ay kaabayaan hawl-wadeenno Kaalmada Sharci bixiya oo aqoon iyo xirfadba u leh.

## C.2. Qorshaha Tabobarka

Manhajka tabobarka waxaa loo qorsheeyey tabobar caadi ah oo kooban oo muddadiisu tahay 5 casho. Casharada tabobarka waxaa loo qaabeeyey qaybo, ay qayb kastaa waafaqsan tahay cutubyada la xidhiidha ee Buugga.

Cutubyada Buugguna waxay u habaysan yihiin sida ugu macquulsan ee ay u taxnaan karayeen iyadoo badankoogu ay xidhiidh la leeyihiin kuwooda kale. Sidaas darteed micno ayey samaynaysaa in qaar iyaga kamid ah la is kugu geeyo qayb iyadoo la qorshaynayo in intii arrimood ee xidhiidh leh ee isku arrin ku saabsanba isku maalin laga hadlo. Sidaas darteed tabobarayaasha iyo ka qayb-galayaasha tabobarku waa inay isla socodsiiyaan qaab-dhismeedka guud ee tabobarka iyo siduu xidhiidh ula leeyahay cutubyada kala duwan ee Buugga.

Bilowga tabobarka, tabobarayaashu waa inay wakhtiga ku qaataan inay dib u eegaan ujeeddooyinka iyo qaabka tabobarka iyo muqaalka guud ee Buugga iyagoo kala hadlaya ka qayb-galayaasha.

Qaab-dhismeedka tabobarka iyo Buugga oo qaabka isku xidhan ah waxaa looga dan leeyahay in laga helo waxooga fududayn ah jeedinta tabobarka. Koox kasta oo ka qayb-galayaasha kamid ahi waxay keeni doontaa khibradeeda, waayo-aragnimadeeda iyo xogtooda. Tusmada Buuggani waxaa looga dan leeyahay inay fududayso doodaha oo ay tahay inaan laysku yeedhin kolba jihada ay tahay in loo dhaqaaqo. Waxaa iman karta in loo baahdo in koox gaar ahi ay awoodda saarto arrimaha asaasiga ka ah deegaankooga ama aanay aad u danayn qaybta ay ka qayb-galayaashu aad xog-ogaalka ugu yihiin. Manhajku wuxuu siinayaa qaab aan laga tagi karin, haddana, wuxuu macalimiinta iyo ka qayb-galayaashaba u oggolaanaya inay noqdaan qaar ay hagayso habka waxbarasho ee kooxdu iyo inay kolba sidii loo baahdo u go'aamiyaan inay awoodda saaraan su'aalaha iyo caqabadaha ay la halgamayaan.

Bilowga casharada tabobarka, Macalimku waa inuu kala hadla ka qayb-galayaasha ujeeddooyinkooda waxbarasho iyo siday ukala mudan yihiin iyo sida looga martiyi karo manhajkani la soo diyaarshay. Tijaabo tabobarka ka horeysa ayaa la siin doonaa ka qayb-galayaasha si loo qiyaaso heerka aqoontooda, sidoo kale tijaabo tabobarka ka dambeysa ayaa la sameyn doonaa dhammaadka tabobarka si loo qiimeeyo in ujeeddooyinkii tabobarka la gaadhay.

Macluumaadkani hoos ku xusan ayaa soo koobaya qaybaha ugu muhiimsan ee manhajka iyo sida ay xidhiidhka ula leeyihiin cutubyada Buugga.

## Maalinta 1aad

Tijaabada hore ee lagu qiimaynayo heerka aqooneed ee ka qayb-galayaasha kadib, tabobarayaasha waxay soo bandhigi doonaan habka tabobarku u socon doono iyo qaybihiisa waxaanay ka qayb-galayaasha kala hadli doonaan sida dhacdooyinka tabobarka dib loogu qaabayn karo marka loo eego baahiyahooga.

Ka qayb-galayaasha waxaa la xasuusin doonaa doorkooda iyo masuuliyadahooda sharciyaqaannimo oo ay kamid tahay doorkooga marka ay difaacayaan dadka nugul. Waxaa la dhiirigalinayaa doodda ka dhaxeysa ka qayb-galayaasha ee khusaysa dhibaatooyinka iyo arrimaha ay la kulmaan hawl-maalmeedkooga caadiga ah markay bixinayaan Kaalmada Sharci.

Kadib, tabobarayaashu waxay qeexid iyo falaqayn ku samayn doonaan Kaalmada Sharci, ka qayb-galayaashuna waxay wax ka ogaan doonaan doorka iyo masuuliyadaha hawl-wadeennada bixinaya Kaalmada Sharci.

Waxaa ku xigi doonta in guud-mar shuruuceed lagu sameeyo xeerarka qaranka, gobol iyo caalimiga ahba. Intaa kadibna, waxaa la soo bandhigi doonaa Mabaadi'ida iyo Amaanka Kaalmada Sharci, xidhiidhada macmiilka iyo habka lagaga caban karo Qareenka.

Qoraallada 1 ilaa 9 (eeg lifaaqa) waxaa ka qayb-galayaasha la siin doonaa maalinta ugu horreysa ee tabobarka.

## Maalinta 2aad

Maalinta labaad waxaa lagu bilaabayaa Hababka Kaalmada Sharci iyo soo bandhigista nidaamka Kaalmada Sharci ee Somaliland. Ka qayb-galayaasha waxaa laga codsan doonaa inay ku shaqeeyaan nooca Somaliland uga shaqayn karaya sida ugu fiican.

Kadib ka qayb-galayaashu waxay ka hadli doonaan doorka Kaalmada Sharci ee marxaladaha kala duwan ee habka ciqaabta (marxaladda booliska; ka qayb-galka Kaalmada Sharci ee xilliyada baadhista, xadhiga dhageysiga ka horreeya, iyo xilliga dhageysiga). Ka qayb-galayaashu waxay fahmi doonaan sida loo dhiso macluumaadka dacwadda; waxay keeni doontaa inay fahmaan dhageystayaasha iyo danta macmiilka iyo muhiimada fasiraada.

Qoraallada 10 ilaa 23 (eeg lifaaqa) waxaa la siin doonaa ka qayb-galayaasha maalinta labaad ee tabobarka.

## Maalinta 3aad

Maalinta saddexaad ee tabobarka gelinka hore waxaa diiradda si gaar ah loo saari doonaa sida loo imtixaamo maragyada maadaama ay u taagan yihiin rukunka ugu muhiimsan maxsuulka dhageysiga dacwadaha ee Somaliland. Ka qayb-galayaasha waxaa laga codsan doonaa inay taagooga Qareennimo, caawiyeyaal Qareen

iyo hawl-wadeennada Kaalmada Sharciba ay iskugu geeyaan sidii ay xal ugu heli lahaayeen dadka xidhan inta lagu gudo jiro xadhiga dhageysiga dacwadda ka horeeya.

Gelinka dambe waxaa la sharaxi doonaa doorka khabiirada, ka qayb-galayaashuna waxay fahmi doonaan farqiga u dhaxeeya khabiirrada, khuburada farsamo iyo maragyada. Waxaa ku xigi doona, in ka qayb-galayaasha la baro sida gebogebada dacwadda loogu qanciyo maxkamadda inay siideyso macmiilka iyo doorka Kaalmada Sharci ee xilliga xadhiga, iyo sidoo kale marxalada dhageysiga dacwadda ka dambeysa iyo xilliga rafcaanka.

Ka qayb-galayaashu waxay fahmi doonaan sida loo jeediyo arrimaha la xidhiidha xadhiga xukunka dabadii iyo odhaahda macmiilka.

Qoraallada 24 ilaa 26 (eeg lifaaqa) ayaa ka qayb-galayaasha la siin doonaa maalinta saddexaad ee tabobarka

## Maalinta 4aad

Galinka hore ee maalinta afraad ee tabobarka waxaa loo qoondeeyey duruufaha dembiga fududeeya; falalka khasabka lagu galo iyo ka qayb-qaadashada xaddidan ee fal-dembiyeedka iyo Istaraatijiyada rafcaanka.

Tabobarayaashu waxay sharaxi doonaan duruufaha dembiga fududeeya ee keena dhimida ciqaabta, waxaanay ka qayb-galayaasha fahamsiin doonaan tallaabooyinka saamayn kara go'aaminta xadhiga marka aanay jirin duruufta dembiga fududdaysa. Gelinka hore waxaa lagu soo gunnaanadi doonaa falalka khasabka lagu sameeyo.

Gelinka dambe wuxuu ku bilaabmi doonaa sharaxaada dembiyada yar yar ee lagu galo gudaha ama dibeda maxkamadda. Sharaxaada marxalada dhageysiga dacwadda ka dambeysa iyo sida ay Kaalmada Sharci u waajahayso ayaa raaci doonta. Ka qayb-galayaashu waxay wax ka ogaan doonaan guud-marka shuruuceed ee shuruucda qaranka iyo kuwa caalmiga ah ee lagu dhaqmayo Kaalmada Sharci marxaladda dhageysiga dacwadda ka dambeysa, waxaana laga codsan doonaa inay taxaan dhibaatooyinka kala duwan ee la xidhiidha marin-u-helidda goobaha dadka lagu xidho ee ay la kulmaan Garyaqaannadu, iyo inay xalkooda ka shaqeeyaan.

Qoraallada 27 ilaa 33 (eeg lifaaqa) ayaa la siin doonaa ka qayb-galayaasha malinta afaraad ee tabobarka.

## Maalinta 5aad

Maalinta shanaad ee tabobarka waxaa loo gaar yeelay sharaxaada hab-raacyada Qareennada iyo hawl-wadeennada Kaalmada Sharci si ay u caawiyaan dhibaneyaasha iyo kooxaha nugul si waafaqsan hal-beegyada caalamiga ah. Noocyada kala duwan ee dhibannayaasha iyo heerarka nuglaanshiyahoogaba waxaa lafo-guri doona tabobarayaasha; iyo weliba muhiimada magdhowga iyo cawil-celinta dhibannaha. Guud-marka shuruucda caalamiga ah iyo kala mudnaanta ilaalinta qaybaha kala duwan ayaa la sharaxi doonaa, iyadoo diirada la saaro kuwa ay ugu muhiimsan yihiin:

- Carruurta sharciga khilaafta iyo carruurta dhibanneyaasha ah;
- Haweenka dhibaneyaasha ah iyo kuwa dhibka geystay;
- Dadka ku waxyeeloobay HIV/AIDS-ka;
- Dadka maskaxda ka jiran, iyo
- Qaxootiga, dadka gudaha ku barakacay & dadka ajaanibka.

Waxaa taxadir gaar ah la siin doonaa hababka lagu fahmo dhacdooyinka dhibannenimada la qarsado iyo qaababka loola tacaali karo xilliga baadhista iyo maxkamadda dhexdeedaba iyo ilaalinta dhibanneyaasha iyo maragyada. Maalinta shanaad wax Qoraallo ah la siin maayo ka qayb-galayaasha; hadalka in lagu hawl-galo uun hala filo.

Dhammaadka maalinta shanaad tijaabada tabobarka ka dambeysa ayaa la siin doonaa ka qayb-galayaasha si loo qiimeeyo in ujeeddooyinkii tabobarka laga lahaa la gaadhay.

# Qaybta I:
# Qaabka-Shaqo Ee Kaalmada Sharci

I

# Qaybta Iaad:
# Qaabka-Shaqo Ee Kaalmada Sharci

**Qaybtani waxay ka kooban tahay qaabka-shaqo ee ay Kaalmada Sharci ku shaqayn karto una noqon karto mid firfircoon. Isagoo ka bilaabaya qeexitaanka iyo daliilka loo hayo Kaalmada Sharci, Buuggu wuxuu dhigayaa mabaadi'ida iyo ammaanka Kaalmada Sharci; guud-marka xeerarka heer qaran, gobol iyo heer caalami; iyo hababka Kaalmada Sharci iyo noocyada Kaalmada Sharci iyo sidoo kale tusaalayaal ah noocyada Kaalmo sharci ee waddamo kale ku dhaqmaan.**

### Ujeeddooyinka Waxbarasho

Ka qayb-galayaashu waxay:

- Ogaan doonaan
  - Micnaha Kaalmo Sharci (Qeexitaanka iyo suurtogalnimada Kaalmada Sharci);
  - Guud-marka xeerarka qaran, gobol iyo caalami ee Kaalmada Sharci;
  - Ammaanka Kaalmada Sharci oo ah ilaalinta Qareennada iyo Eeddaysaneyaasha;
  - Mabaadi'ida khusaysa Kaalmada Sharci;
  - Mabaadi'ida khusaysa asluub wanaaga Qareennada;
- Ka qayb-galayaashu waxay baran doonaan sida loo dhiso xidhiidhada macmiilka iyo wareysiyada iyo sida looga feejignaado khilaafaadka;
- Ka qayb-galayaashu waxay ogaan doonaan habka looga cawdo Qareennada iyo
- Waxay baran doonaan hababka kala duwan ee Kaalmada Sharci iyo nidaamka Kaalmada Sharci ee imika ka shaqeeya Somaliland iyo
- Inuu soo baxo oo laysla qaato nooca Kaalmada Sharci ee Somaliland si fiican uga shaqayn kara.

# Cutubka Iaad: Qeexitaanka iyo Suurtogalnimada Kaalmada Sharci

### Ujeeddooyinka Waxbarasho

Cutubkani waxay ka qayb-galayaashu ka baran doonaan qeexitaanka iyo suurtogalnimada Kaalmada Sharci. Gaar ahaan waxay fahmi doonaan:

- Maxaynu uga jeednaa Kaalmo Sharci iyo
- Sababta loo danaynayo Kaalmada Sharci.

## 1.1. Maxaynu uga Jeednaa Kaalmo Sharci?

Kaalmada Sharci waa bixinta Kaalmo la siinayo dadka aan sinaba u awooddin kharashka wakiilnimada sharciga [Qareennimo] iyo marin-u-helidda nidaamka maxkamadeed. Kaalmada Sharci waxaa loo tixgaliyaa inay tahay xudunta bixinta marin loo marayo caddaaladda iyadoo la xaqiijinayo sinaanshaha sharciga hortiisa, xuquuqda inuu qof kastaa Qareen helo iyo xuquuqda dhageysi dacwadeed oo caddaalad ah.

Dadka qaar waxay ku doodan in xuquuqda Kaalmada Sharci ay tahay ta aasaaska u ah xuquuqaha aadamaha oo dhan[4]. Guddida Qareennada ee Xuquuqda Aadamahu[5] waxay u aqoonsatey xuquuqda inuu qofku Qareen helaa inay tahay *"Ta ugu qiimeynta badan ee damaanad qaadi karta dhageysiga dacwadeed ee gaarka ah caddaaladdiisa marka la qiimaynayo dacwadaha, sababtoo ah waxaa la ogaaday inay tahay ta ugu badan ee lagu xadgudbo"* Xuquuqda in Kaalmo sharci la helaa *"waa aasaaska ugu muhiimsan ee haddaan la tixgalin xuquuqaha kale ee la xidhiidha ku dhaqanka dhageysiga dacwadeed ee caddaaladda ahi gebi ahaantood ay noqonayaan kuwo aan qiimo lahayn"*[6]

Sida ku xusan Mabaadi'da iyo Habraacyada Qaramada Midoobey ee Marin-U-Helidda Kaalmada Sharci ee Nidaamka Caddaaladeed ee Ciqaabta dhexdiisa[7], Kaalmada Sharci waa rukun aasaas u ah caddaaladda, bini-aadamnimada iyo wax ku ool-nimada nidaamka caddaaladeed ee ku salaysan sareynta sharciga. Waa aasaaska helitaanka xuquuqaha kale ee ay ku jirto xuquuqda in la helo dhageysi dacwadeed oo caddaalad ah, sida lagu sheegay qodobka 11aad, faqradiisa 1aad ee Baaqa Caalamiga ah ee Xuquuqaha Aadamaha, waa shuruuda ka horreysa isticmaalka xuquuqahani kale, waana amni muhiim ah oo xaqiijinaya caddaaladda aasaaska ah iyo aaminaad ay dadku ku qabaan habka caddaaladeed ee ciqaabta. Si Kaalmada Sharci ay si wanaagsan loogu hirgaliyo oo ay wax ku oolna u noqoto, hay'adaha hoos ku xusani waa inay noqdaan qaar isku xidhan, waana inay si dhow u wada-shaqeeyaan oo midiba midka kale la shaqeysaa:

- Urrurada Qareennada
- Wasaaradda Caddaaladda

4 Richard J. Wilson in: National Legal Aid & Defender Association - NLADA (Nov.2010), *International Legal Aid & Defender System Development Manual. Designing and Implementing Legal Assistance Programs for the Indigent in Developing Countries,* p.15; http://hakinetwork.org/wp-content/uploads/2011/06/ International_Manual_2010.pdf.

5 Lawyers Committee for Humans Rights, *What is a Fair Trial? A Basic Guide to Legal Standards and Practice*, II.A.3, March 2000, http://www.humanrightsfirst.org/wp-content/uploads/pdf/fair_trial.pdf.

6 Ibid.

7 E/CN.15/2012/24, Commission on Crime Prevention and Criminal Justice, Twenty-first session, Vienna, 22-26 April 2012. The text was adopted by the UN General Assembly on December 20, 2012.

- BoolisBooliska
- Hay'adaha Garsoorka (Maxkamadaha iyo Xeer-Ilaaliyaha Guud)
- Ciidamada Asluubta
- Hay'adaha kale ee dowladda
- Kuliyadda Sharciga iyo Xarumaha Kaalmada Sharci.

Waxaa xusid mudan in hoosta laga xariiqo in Kaalmada Sharci aanay ku koobnayn wakiilnimada (Qareen) sharciga hortiisa, laakiin si ay wax ku ool u noqoto Kaalmada Sharci waxaa ku jirta barista sharciga iyo ku wacyi-gelinta bulshada xuquuqaha dastuuriga ah iyo kuwa sharciga ah.

Awood-siinta sharci micnaheeda rasmiga ahi waa bixinta macluumaadka aasaasiga ah ee sharciga, talo siinta iyo gacan siinta dadka lagu hago si loo sameeyo go'aanno laga warqabo iyo si loo awoodsiiyo inay dadku iskood ula macaamilaan nidaamyada caddaaladeed (Ilaa xadka ugu badan ee macquulka ah); waxbarasho sharci oo loo bixiyey hab dadka awoodsiinaya inay awoodaan inay sharciga ku dabaqaan duruufahooga gaarka ah iyo inay awooddaan inay sharciga u isticmaalaan sidii qalab isbadel ku keenaya duruufahooda.[8] Dadku iskood ayey u maareyn karaan arrimaha haddii ay garanayaan xuquuqahooda oo keliya. Wakhti yar oo uu qofku la qaato Qareen ama Caawiyaha Qareen ee bulshada u shaqeeya ayaa ka caawin karta inuu go'aansado tallaabada uu qaadayo ama qofkaasi awood u siin doonta inuu gudbiyo codsi midho-dhal ah ama inuu sameeyo cabasho habboon.

Marka loo eego habka caddaaladeed, baahida ugu wayni waa in si degdeg ah loo helo talo sharci iyo gacan siin xilliga saldhiga booliska la joogo iyo wakhtiga wareysiga, marka ugu horeysa ee maxkamadda la keeno iyo jeelka dhexdiisa. Waxaana tani bixin kara Qareennada, caawiyeyaasha Qareennada iyo ardayda sharciga baratay. Sidaas awgeed, Kaalmada Sharci waa in si balaadhan loogu qeexaa sida ku xusan Baaqa Lilongwe ee 2004: *"Kaalmada Sharci marka sida ugu balaadhan ee ugu macquulsan loo qeexo waa inay ku jiraan talo sharci, gacan siin, wakiil u noqosho, waxbarasho, iyo hababka kala duwan ee xallinta khilaafaadka; iyo inay kamid ahaadaan daneeyayaal noocyo kala duwan ah sida ururada aan dowliga ahayn, ururada bulsho, ururada samafalka ee diimeed iyo kuwa aan diinta ku xidhnayn, ururada iyo guddiyada mihnadlayaasha iyo xarumaha aqooneed.... Dowladdu waa inay fartaa maamulayaasha habka caddaaladeed ee ciqaabta waxtarka bulshada lagu tarayo Kaalmada Sharci ee wax ku oolka ah iyo isticmaalka waxyaabo xadhiga lagu beddeli karo. Waxyaabahani bulshada la tarayo waxaa kamid ah in meesha laga saaro xadhiga micno-darrada ah, dedejinta qaadista dacwadaha, dacwadaha cadaalad iyo sinaan iyo in la yareeyo dadka xabsiga ku jira"*

Waxaa intaa dheer, Kaalmada Sharci waa in laga helaa hababka caddaaladeed oo dhan ka rasmiga ah iyo hab dhaqameedka aan rasmiga ahaynba. Sidaas awgeed, Baaqa Lilongwe wuxuu aqoonsan yahay in: *"Hababka dhaqan iyo bulsho oo lagu bedalo nidaamyada caddaaladeed ee rasmiga ahi ay leeyihiin yididiilo ah inay xalliyaan khilaafaadka oo aanay cadawtinimo ka dhalan iyo inay soo celiyaan midnimadii bulshada dhexdeeda. Hababkani waxay leeyihiin sidoo kale yididiilada ah inay yareeyaan ku halayntii booliska uun*

8 Tusaale ahaan eeg Istaraatijiyada ay UNDP u diyaarisay Awood-siinta Sharci ee Somaliland 2012-2014.

*ay ahayd inuu sharciga dhaqan-geliyo, waxay yareeyaan buuqii badnaa ee maxkamadaha ka jiray, waxay sidoo kale yareeyaan aamminsanaantii xadhigu inuu yahay qaab lagu xalliyo khilaafaadka ka dhashay dembiyo dhacay. Daneeyeyaasha oo dhami waa inay aqoonsadaan faa'iidada ay tallaabooyinkani lagu door-bidayo hababkani u leeyihiin maamulista hab caddaaladeedka ciqaabta ee bulsho ama danaynaya dhibanaha, waana in taageero la siiyaa hababkani markay waafaqsan yihiin xuquuqaha bini-aadamka"*.

Haseyeeshee, Buuggani dhexdiisa waxaynu awoodda saari doonnaa Kaalmada Sharci ee ku taxaluqda nidaamka caddaaladeed ee rasmiga ah iyo dacwadaha ciqaabta, inagoo dabcan maskaxda ku hayna in dacwad kasta ay macquul tahay in si niyadsan loogu dhammeeyo qaab ka baxsan nidaamka caddaaladeed iyadoo ay shuruud u tahay in habkaasi aanu khatar gelin danaha eedeysanaha iyo dhibanaha.

## 1.2. Maxaa loo danaynayaa Kalmada Sharci?

Suurtogalnimada bixinta Kaalmada Sharci ee cahdi kasta waxaa si dhow loola xidhiidhiyaa bulshada, siyaasadda iyo falsafada sharci ee wakhtiga. Heshiisyada xuquuqaha dhexdooda, waxaa lagu aqoonsaday inaan horumar micno leh laga gaadhi karin haddaanay ku lamaanaan helitaanka marin loo maro adeegyada sharci oo laga faa'iidi karo in la dhaqan-geliyo xuquuqaha Jiil kasta si loo xaqiijiyo awood-siinta dadka oo dhan. Aragtida marin-u-helidda caddaaladdu waxay gaadhay derejada xuquuq ay bulshadu leedahay maanta maadaama ay dhiirigalinayso dhismaha dhaqan shuruuceed oo wax ka horseeda hababka horumarinneed. Awoodid la'aanta marin loo maro adeegyada Kaalmada Sharci waxay kordhisaa dareenno bulsho ka baxa iyo awood la'aanneed.

Markay noqoto Afrika[9], Kaalmada Sharci waa in loo tixgeliyaa inay tahay daruuriyaad ka dhashay habka caddaaladeed ee ciqaabta iyo xaaladda lagu shaqaynayo, astaanna ay u noqdeen heerka aqooneed oo hooseeya, heerka faqriga oo aad u sarreeya, iyo fogaanta dheer ee u dhaxaysa habka caddaaladeed ee ciqaabta iyo dadkii isticmaalayey. Sida loo qorsheeyey, bixinta adeegyada Kaalmada Sharci waxaa looga dan leeyahay in la caawiyo dadka bulsho ahaan iyo dhaqaale ahaanba liita. Dadka faqiirka ah ee kamidka ah bulshada ee sida dayacnaantu ka muuqato marinka ugu hela adeegyada sharci, badanaa si aan qumanayna loogaga shaqeeyaa habka caddaaladeed ee ciqaabta. Xaqiiqada waddamo badan ka jirta ayaa ah inkastoo dadka wax bartay ay galaan dembiyo, waxay u badan tahay inay garan karaan xuquuqahooda oo ay awoodaan inay si wanaagsan isku difaacaan ama ay kolba intay hantidoodu le'eg tahay ku khiyaameeyaan nidaamka. Kaalmada Sharci waxay sugeysaa xuquuqaha dhammaan dadka la macaamilaya sharciga, iyadoon loo eegayn halka ay bulshada kaga jiraan ama heerka dhaqaalahooda.

Kaalmada Sharci waxay faa'iido ugu leedahay dadka xidhan inay keento qaab lagu caddayn karo dembi-la'antooda. Kuwa lagu eedeeyey dembiyagana waxay caddaalad ku heli doonaan halbeeg sharci oo bulshadu ku kalsoonaan karto. Markay tani dhacdo, Kaalmada Sharci waxay faa'iido ugu leedahay dhibaneyaasha inay ugu shaqayeeyaan nidaam sharci oo ka hadlaya culayska dembiga iyo in lagu xukumo qofkii saxda ahaa ee dembiga galay. Dadka dembiyada geystayna sidoo kale waa la caawiyey. Haddii tani lagu guul-dareysto, natiijadu waxay noqon kartaa mid aad u xun.

9 UNODC, (2011) Buug-gacmeed kobcinta marin-u-helida Kaalmada Sharci ee Afrika, p.10.

Bixinta adeegyada aasaasiga ah ee caddaaladdu waxay caawinaysaa dadka faqiirka ah oo dareemaya inay aad ugu nabdoon yihiin awoodda garsoor, waxaanay kordhinaysaa kalsoonida ay ku qabaan nidaamka caddaaladeed. Marka si guud loo tiraabo, sida ku xusan Baaqa Lilongwe[10], daryeelka bulsho ee degdegga ah ee Kaalmada Sharci waxaa kamid ah joojinta xadhiga micno-darrada ah, dedejinta qaadista dacwadaha, dhegaysi dacwaddeed oo dhexdhexaad iyo caddaalad ah iyo yareynta dadka jeelasha ku xidhan.

Arrimaha daryeelka bulsho ee Kaalmada Sharci ee wax ku oolka ah waxaa lagu xusay Baaqa Lilongwe waxaana kamid ah:

- Dedejinta dhageysiga dacwadaha iyo yareynta duruufaha eedeysanaha iyo dhibaneyaasha qaraabadooda
- Horumarinta maareynta dacwadaha
- Yareynta arrimaha lays dul tuulayo iyo u sii kala jabinta inta hadhaaga ah tiro la maamuli karo
- Waxay garsoorka u madhxinaysaa maalmihii uu garsoorahu shaqayn lahaa iyo kharashkii ku baxayey dhageysiga dacwadaha.

Sida ku xusan Mabaadi'da iyo Habraacyada Qaramada Midoobey ee Kaalmada Sharci ee nidaamyada caddaaladeed ee ciqaabta *"Kaalmada Sharci waxay door muhiim ah ka qaadataa fududeynta doorbidista ciqaabta dadban iyo isticmaalidda tallaabooyinka iyo diidmooyinka bulshada ku xidhan oo ay kamid yihiin talaabooyinka aan xadhiga jeelka lagu dhameysto ahayn; ku talaabsiga ka qayb-qaadashada bulsho ee nidaamka caddaaladeed ee ciqaabta oo intii hore ka weyn; yareynta isticmaalka micno-darrada ah ee xadhiga iyo xabsiga; suurtogalinta siyaasadaha caddaaladeed ee ciqaabta; iyo xaqiijinta isticmaalka hufan ee kheyraadka qaranka"*.

Waa in aad loogu dhaqmaa Kaalmada Sharci (dhageysiga hortii iyo dabadiiba) gaar ahaan markay dadku xidhan yihiin, maadaama maxaabiis farabadani xidhnaadaan muddooyin dheer, xaalado bini-aadamnimada ka baxsan ah iyo jeelal ay maxaabiisi buux dhaafsisay dhexdooda oo aanay marin-u-helayn Kaalmo sharci. Kala badh kuwa la xidho ayuu Qareen ama Caawiye Qareen xor ka dhigi karaa marxaladda dhageysiga dacwadda ka horreysa.

Adeegga Caawiyaha Qareenku ku bixiyo xabsiga gudahiisa waxaa kamid ah:

- Waxbarasho sharci oo la siiyo maxaabiista si ay u fahmaan sharciga iyo habka oo ay ugu dabaqaan dacwaddahooga;
- Ka caawinta damaanada iyo aqoonsiga damiinnada macquulka ah;
- Ka caawinta rafcaannada;
- Caawimo gaar ah oo la siiyo kooxaha nugul, gaar ahaan haweenka, haweenka carruurta wata, dadka dhallinyarada ah, qaxootiga, dadka ajaanibka ah, waayeelka, maskaxda ka buka ama xannuunsan, iwm.

10 Baaqa Lilongwe ee Marin-u-helida Kaalmada Sharci ee Nidaamka Caddaaladeed ee Ciqaabta ee Afrika ka jira, Lilongwe, Malawi, November 22-24, 2004.

## 1.3. Masuuliyadaha hawl-wadeennada Kaalmada Sharci

Mabda'a Aasaasiga ee Qaramada Midoobey ee Doorka Qareennadu wuxuu si balaadhan u sheegayaa masuuliyadaha Qareenka:

- Inay kala taliyaan macmiishooda xuquuqahooda iyo waajibaadkooga sharci iyo siduu nidaamka sharci u shaqaynayo ilaa iyo inta ka khusaysa xuquuqahooda iyo waajibaadkooda;
- Inay ku caawiyaan macmiisha dariiq kasta oo haboon, iyagoo qaadaya tallaabooyin sharci oo ay ugu ilaalinayaan danahooga;
- Inay ilaaliyaan xuquuqda aadamaha iyo xorriyadaha aasaasiga ah, iyo
- Inay si daacadnimo ah u tixgaliyaan danaha macmiishooda[11].

Kuwani waxay odhaah guud oo muhiim ah u noqon karaan doorka hawl-wadeennada Kaalmada Sharci. Haseyeeshee, waxaa muhiim ah in la ogaado in doorka ugu muhiimsan iyo shaqooyinka hawl-wadeennada Kaalmada Sharci waa in wakhti hore la siiyo Kaalmada Sharci gaar ahaan dadka la tuhunsan yahay iyo eedaysaneyaasha saldhiga booliska ku xidhan, ama meelaha kale ee dadka lagu xidho oo ay caqabado gaar ahi ka jiraan.

Dadka la xidhay ama la xabsiyey arrintani waxay ku sababtaa inuu xaalad nuglaansho ah galo laakiin nuglaanshiyahu waxaa sii xumeeya xaaladdiisa qof ahaaneed ama xaaladaha lagu soo xidhay, kuwani oo uga muuqan kara dhawr hab.

Waxaa badanaa warwar ku abuurta xaaladda ay ku sugan yihiin, ama waxaanay fahamsanaynba sababta lagu soo xidhay ama waxa ku dhici kara sida inay ku dhibtoodaan xanuun ay qabaan ama dhib jidh ahaan iyo maskax ahaanba loogu geystay, ama waxay noqon kartaa inuu dhib kala kulmay maandooriye ama xashiishad si khaldan loo siiyey iyadoo uu kala kulmi karo caafimaad-darro. Hadday carruur yihiin, ama ay wax u yara dhiman yihiin iyagu way kasii nugul yihiin. Waxaa taasi ka dhasha, in eedaysanahu uu ka shakiyi karo ama necbaysan karo hawl-wadeennada Kaalmada Sharci, dabeecaddahoodu waxay noqon karaan caqabad aan la saadaalin karin ama ma garan karaan mana awoodaan inay fahmaan waxa hawl-wadeennada Kaalmada Sharci ay u qabanayaan, waxay ka hadlayaan, ama muhiimada talooyinkooda.

Booliska ama saraakiisha ka shaqaynaya meesha uu qofku ku xidhan yahay waxay diiddanaan karaan joogitaanka iyo soo fara-gelinta hawl-wadeennada Kaalmada Sharci, waxaanay ula dhaqmi karaan si bilaa qadarin ah ama waxaabay isku dayi karaan inay yasaan. Mararka qaarkoodna waxaabay tahdiidi karaan hawl-wadeennada Kaalmada Sharci.

Doorka hawl-wadeennada Kaalmada Sharci ee hore u bixinta Kaalmada Sharci waa inay ilaaliyaan dhammeystiraana xuquuqaha iyo danaha macmiishooda ee sharciga ah, sidaas darteed, hawl-wadeennada Kaalmada Sharci waa inay:

11 *Eighth United Nations Congress on the Prevention of Crime and the Treatment of Offenders*, Havana, 27. August - 7 September 1990: report prepared by the Secretariat (United Nations publication, Sales No. E.91.IV.2), Principles 13-15.

- Si daacadnimo ah u tixgaliyaan danaha macmiishooda oo ay qaadaan tallaabooyinka lagama maarmaan ah iyagoo tixgalinaya da'dooda, sinjigooda, nasabkooda ama sinjinimadooda;
- Inay xaqiijiyaan in macmiishoodu garanayaan oo ay fahamsan yihiin xuquuqahooga;
- Inay xaqiijiyaan in macmiishoodu loola dhaqmay si sharaf ah, in xuquuqahooga la qiimeeyey, iyo in loola dhaqmay si sharciga waafaqsan;
- Inay talooyin iyo gargaar siiyaan macmiishooda iyo (haddii ay habboon tahay) inay wakiil u noqdaan iyagoo ku xisaabtamaya baahiyagooga gaarka ah iyo wixii nuglaansho ah ee la xidhiidha;
- Inay xaqiijiyaan in go'aannada macmiishooda la tixgaliyey;
- Inay sida uga habboon uga horyimaadaan marka si aan caddaalad ahayn ama qayrul-sharci ah loola macaamilo macmiilkooda, iyo
- Inay xaqiijiyaan in macmiilkoodu uu weli u baahan yahay in la sii siiyo talo, gargaar ama wakiil loo noqdo ilaa iyo inta dacwaddiisu ay dhammaanayso oo ay ku jirto rafcaanku.

Tallaabooyinku uu hawl-wadeenka Kaalmada Sharci ku fulinayo doorkiisa muhiimka ah oo u qoran qaab siday u kala horreynayaan ahi waa:

- Inay sida ugu habboon ee ugu dhakhso badan uga jawaabaan marka la codsado Kaalmo sharci:
  - Jawaabta degdegga ahi waxay laga maar-maan u tahay laba sababood. Ugu horreyn, markay adeegsadaan xuquuqdooda inay Kaalmo sharci helaan, eedaysaneyaashu ma ogaan doonaan, Booliskuna uma sheegi doonaan waxa ku dhacay codsigoodii Kaalmada Sharci. Dib u dhacu wuxuu kordhiyaa nuglaanshahooga. Eedaysanayaasha waxaa madmadow ka geli doonaa inay heli doonaan Kaalmo sharci, gaar ahaan haddaan hore loo xidhin ama xuquuqda Kaalmada Sharci ay markaas uun barteen, ama waxaabay aamini karaan in dib u dhacaasi uu dheerayn doono wakhtiga ay ku qaadanayaan xadhiga (Fikir uu booliskuna dhiiri-galin karo). Taasi waxaa ka dhalan kara, inay badalaan go'aankoodii ahaa inay adeegsadaan xuquuqda Kaalmada Sharci. Laba, dib u dhaca waxaa ka faa'iideysan kara booliska oo sabab ka dhigan kara inay iska wataan wareysiga iyadoo eedaysanahu aanu helin talo sharci.
  - Jawaabta habboon waxay noqonaysaa qaabka talo sharci ama gargaar loo bixiyo (gaar ahaan, taleefan ahaan ama qof ahaan), ee ku habboon baahiyaha iyo xaaladda eedaysanaha (tusaale ahaan, hadday carruur ama dadka nugul yihiin), dabciga iyo khatarnimada dembiga lagu tuhmayo, iyo arrimaha jira ee ay ka mid tahay inay dhacdo xanuun u jirnaan ama laaluush ay boolisku ka qaataan.
- Inay urruriyaan macluumaad uu boolisku hayo ee:
  - Ku saabsaan sababta iyo xaaladaha dhaliyey xadhiga ama xabsi ku haynta;

– Ku saabsan cadaymaha gacmaha booliska ku jira iyo qodobbada kale[12], iyo sida ay baadhistu u socota.

- Ururinta macluumaad ay u sheegaan macmiishoodu ee ku saabsan duruufihiisa qofnimo; xogta ku saabsan duruufaha xadhiga iyo dambiga loo haysto iyo ururinta macluumaadka kale ee khuseeya;
- Ogaanshaha nuglaanshaha iyo baahiyaha gaarka ah[13], ee ay kamid yihiin: caddeynta inay carruur yihiin; hubinta inay ku hadli ama fahmi karaan luuqada fadhiyada dacwadda iyo inay akhrisan karaan qoraallada khuseeya; hubinta in ay jiraan waxyaabo kale oo nuglaansho keenaya; iyo qaadista tallaabooyinka habboon in la qaado;
- Hubinta sharcinimada tallaabooyinka ay booliska iyo hay'adaha kale qaadeen;
- La talinta macmiisha xilliga wareysiga hortii iyo dabadiiba;
- Xaqiijinta wakiilka u noqoshada haboon xilliga ay maxkamaddu dhageysanayso dacwadda, iyo siiba xilliga dhageysiga dacwadda ka horeeya isagoo xidhiidhinaya qaraabada macmiisha iyo dadka kale (haddii uu macmiilko oggol yahay),
- Keydinta macluumaadka kale ee khuseeya.

12 Sida ku xusan Mabaadi-da iyo Habraacyada Qaramada Midoobey hawl-wadeennada Kaalmada Sharci waa inay marin-u-helaan gar-maqalka dacwadda qofka xidhan, inkastoo Maxkamaddaha caalamiga iyo kuwa maxaliga ahiba ay qaateen nidaam aad u xadidaya waxyaabaha ay tahay in la sheego xiliyada hore habka ciqaabta. Tusaale ahaan, inkastoo Maxkamadda xuquuqda aadamaha ee Midowga Yurub ay go'aamisay in hay'adaha dacwad oogeyaashu ay dhinaca difaaca u sheegaan macluumaad difaac ee u dan ah ama aan u dan ahayn eedeysanaha (ECtHR 16 December 1992, *Edwards v. United Kingdom*, No. 13071/87), majiro sharci dacwad qudha laga soo saaray oo caddeynaya qaabkee ama xaalkee macluumaadka la sheegayaa. Haseyeeshee, waxay go'aamisay in eeddaysanahu uu marin-u-helo qoraalada baadhista ee aasaaska ah si looga horyimaad sharcinimadooda inta ka horeysa dhageysiga dacwadda (ECtHR 9 July 2009, *Mooren v. Germany*, No. 11364/03). Waxaa tani lagu xusay Xeer-nidaamiyaha EU-da ee xuquuqda macluumaad helista dacwadaha ciqaabta, Directive 2012/13/EU, 22 May 2012, art. 7(1).

13 Eeg Qaybta 3[aad] ee Buuggani.

# Cutubka 2: Guud-marista Sharcinimada Xayndaabka Sharci ee Kaalmada Sharci

**Ujeeddooyinka Waxbarasho**

Cutubkani ka qayb-galayaashu waxay ku baran karaan:

- Sharcinimada Kaalmada Sharci ee Xeerarka Caalamiga ah;
- Sharcinimada Kaalmada Sharci ee Xeerarka Gobol, iyo
- Sharcinimada Kaalmada Sharci ee Xeerarka Qaranka.

Kaalmada Sharci waxay ku shaqeysaa sharcinimadeeda ay kaga jirto heerarka qaran iyo caalami. Mabda'a Kaalmada Sharci waxaa sugay dastuurka Somaliland. Qodobbo kala duwan oo xusaya xuquuqda is difaac oo xeerar kala duwan ku jirana waa la dabaqaa. Heerka caalami, xitaa haddaanay jirin qoraallo Kaalmada Sharci khuseeya oo ay tahay in lagu dhaqmo, Mabaadi'da iyo Habraacyada Qaramada Midoobey waa in lala tixgaliyaa qoraallada ka dhashay go'aannada uu wadanku ka geystay heerarka gobol ama caalami.

## 2.1. Xeerarka Caalamiga ah ee Kaalmada Sharci

Sharciga caalamiga ahi wuxuu aqoonsan yahay doorka muhiimka ah ee Qareennada dadka difaacaa ay ku leeyihiin ilaalinta xorriyadaha aasaasiga ah iyo xuquuqda aadamaha. Waxaa xeerarka caalamiga ah ee ay ku jiraan qodobbo waajibinaya Kaalmada Sharci kamid ah:

- Heshiiska Caalamiga ah ee Xuquuqaha Madaniga iyo Siyaasaddeed[14],
- Heshiiska Caalamiga ah ee Xuquuqaha Carruurta[15],
- Heshiiska Tirtirida Dhammaan Noocyada Takoorka Haweenka loo Geysto[16], iyo
- Heshiiska lagaga soo horjeedo Jidh-dilka iyo noocyada kale ee Arxan-darrada, bini-aadam-darrada ama ula Macaamilka sida Bahdilan ama Ciqaabta[17].

Qoraallada sare ku xusani waxay abbuureen xuquuqda Kaalmada Sharci, waxaanay qabanayaan waddamadii ansaxiyey.

Heshiiska Caalamiga ah ee Xuquuqaha Madaniga iyo Siyaasaddeed (oo loo soo gaabiyo ICCPR) wuxuu xuquuqda in qofku helo Qareen difaaca ku damaanad qaaday qodobka 14.3 (d):

14 Golaha Guud ee Qaramada Midoobey waxay ansaxiyeen December 16, 1966 waxaanu dhaqan-galay ilaa March 23, 1976.

15 Waxaa lagu ansaxiyey, looguna baneeyey saxeex, ogolaansho iyo iska reebidba loogu ogolaaday Wareegtada Qaramada Midoobey 44/25 ee 20 November 1989 waxaanay dhaqan-gashay September 2, 1990.

16 Golaha Guud ee Qaramada Midoobey wuxuu ansaxiyey December 18, 1979 waxaanu dhaqan-galay September 3, 1981.

17 Golaha Guud ee Qaramada Midoobey wuxuu ansaxiyey December 10, 1984 (Wareegtada 39/46). Heshiisku wuxuu dhaqan-galay 26 June 1987.

*"Markuu ka baaraandego dacwadda ciqaabta ah ee loo haysto, qof walba waxaa la siiyey damaanado aan laga talaabsan karin, sinnaansho buuxa: In dacwaddiisa la galo isagoo goob joog ah, iyo inuu isku difaaco qof ahaan ama Kaalmo sharci oo la siiyey oo uu isagu iskii u doortay; in lagu wargeliyo, haddaanu haysanin Kaalmada Sharci ee xuquuqdani; iyo inuu helo Kaalmo sharci oo isaga la siiyey dacwad walba markay danta caddaaladdu ku jirto sidaasi iyadoonu waxba isagu bixinin haddaanu qofku sinaba iska bixin karin"*

Qoraallada caalamiga ah ee awoodda saaraya Kaalmada Sharci (haseyeeshee aan lagu qasbanayn in la dabaqo) waa:

- Mabaadi'da iyo Habraacyada Qaramada Midoobey 2012 ee Kaalmada Sharci ee Nidaamka Caddaaladeed ee Ciqaabta[18] iyo
- Mabaadi'da Aasaasiga ee Qaramada Midoobey ee Doorka Qareennada 1990[19].

Dabcan, marka laga yimaado labadaasi qoraal ee kor ku xusan ee Kaalmada Sharci khuseeya, qoraallo kale oo caalami ah oo dabaceeda in aan ku dhaqankooda lagu qasbanayn leh ayaa ka kooban qodobbo khuseeyaa xuquuqda inuu qofku helo Kaalmo sharci sida Baaqa Caalamiga ah ee Xuquuqaha Aadamaha ee Islaamka[20] oo dhigaya, *"Qofna dembiile laguma xukumi karo Ilaa marka dacwaddu caddaalad tahay oo fursad macquul ah oo uu isku difaaci karo la siiyey mooyaane"* (Qodobka V (b)), waa mabda' sidoo kale ku xusan Axdiga Xuquuqaha Aadamaha ee Carabta (Qodobka 7)[21]. Qoraallo kale oo iyaguna dabeecada inaan ku dhaqankooda lagu qasbaneyn leh ayaa ka kooban qodobbadani oo kale, sida dhokumentiga Mabaadi'da lagu Ilaalinayo Dhammaan Dadka Xidhan ama Xabsiga ku jira[22] (Qod.18).

Mabaadi'da iyo Habraacyada Qaramada Midoobey ee Kaalmada Sharci ee Nidaamka Caddaaladdeed ee Ciqaabtu wuxuu bandhigayaa qaab dhammeystiran oo uu qaranku ka dheegan karo hadduu dedaal ugu jiro inuu qoro siyaasad gaar ah ama dejinayo xeer khuseeya Kaalmada Sharci.

Mid kamid ah mabaadi'da ugu horreysa waa in Kaalmada Sharci lagu siiyo lacag la'aan kuwii aan sinaba u awooddin inay iska bixiyaan ama marka danaha caddaaladdu ay ku jirto. Sida ku xusan Mabaadi'da kor ku xusan Kaalmada Sharci waa in la siiyaa qofka iyadoon loo eegayn haynta qofka, haddiiba ay danta caddaaladdu ku jirto, tusaale ahaan xaaladaha degdegga ah, adag ama xadhiga la filayo inuu ku dhacaa uu aad u daran yahay. Waxaa intaa dheer, Kaalmada Sharci waxay door muhiim ah ku leedahay fududaynta qaabka ciqaabta loo dadbo iyo diidmooyinka bulshada ku xidhan oo ay kamid yihiin tallaabooyinka aan xadhiga

18 Golaha Guud ee Qaramada Midoobey wuxuu ansaxiyey December 20, 2012.

19 Waxaa lagu ansaxiyey Shirweynahii Sideeddaad ee Qaramada Midoobey ee ka Hortaga Dembiyada iyo la Macaamilka Eeddaysaneyaasha. Havana, Cuba, oo la bilaabay August 27 socday ilaa September 7, 1990. Xuquuqda in dadkoo dhami ay "*helaan gargaarka Qareen ay iyagu u doorteen inuu ilaasho xuquuqahooga iyo si uu u difaaco marxaladdaha dacwadda ciqaabta ahi"* Waa mabda'a ugu horeeya Mabaadi'da Aasaasiga ah ee Qaramada Midoobey ee Doorka Qareenadu.

20 Golaha Islaamku wuxuu ku ansaxiyey Paris on September 19, 1981/ 21 Dhul Qaidah 1401.

21 Axdiga waxaa ansaxiyey Golaha Guud ee waddamada Carabta on May 22, 2004, waxaanu dhaqan-galay March 15, 2008. Axdigu wuxuu qaatay mabaadi'da uu ku kooban yahay Axdiga Qaramada Midoobey, Baaqa Caalamiga ah ee Xuquuqaha Aadamaha, Heshiiska Caalamiga ee Xuquuqda Aadamaha iyo Baaqa Qaahira ee Xuquuqda Aadamaha Islaamka.

22 Golaha Guud ee Qaramada Midoobey ayaa ansaxiyey December 9, 1988, A/RES/43/173: http://www.un.org/documents/ga/res/43/a43r173.htm.

jeelka lagu dhammeysto ahayn; ku talaabsiga ka qayb-qaadashada bulsho ee nidaamka caddaaladeed ee ciqaabta oo intii hore ka wayn; yareynta isticmaalka micno-darrada ah ee xadhiga iyo xabsiga; suurtogalinta siyaasaddaha caddaaladeed ee ciqaabta; iyo xaqiijinta isticmaalka hufan ee kheyraadka qaranka. Sidaas darteed, Kaalmada Sharci waxay u baahan tahay in si muuqata loogu siiyo dadka hababka kala duwan ee lagu xalliyo khilaafka iyo hababka caddaaladda cawil celineed iyadoon lagu reebayn sinjiga, da'da ama rukun kale.

Mabaadi'da iyo Habraacyada Qaramada Midoobey ee Kaalmada Sharci ee Nidaamka Caddaaladda ee Ciqaabta ma dhigayo qaab gaar ah, laakiin wuxuu ku dhiirigalinayaa qaramada inay damaanad qaadaan xuquuqda aasaasiga ah ee Kaalmada Sharci ee dadka la tuhmayo, xidhan ama ku eedaysan dembi ciqaab ah, xukuman oo xabsiga ugu jira, iyadoo la gaadhsiinayo Kaalmada Sharci dadka kale ee la xidhiidha nidaamka caddaaladeed ee ciqaabta iyo kala duwidda Qaabka Kaalmada Sharci lagu bixinayo.

Mabaadi'da iyo Habraacyadu waxay ku dhisan yihiin aqoonsiga ay qaramadu ku qaadaan tallaabooyin xidhiidha oo inkastoo ayna si adag ula xidhiidhin Kaalmada Sharci, kordhin kara isbadalka taban ee dhismaha iyo dhaqan-galka nidaamka Kaalmada Sharci ee si wacan u shaqaynaya uu ku yeelan karo nidaamka caddaaladeed ee ciqaabta iyo marin-u-helidda caddaaladda.

Aqoonsiga in kooxo gaar ah la siiyo ilaalin dheeraad ah ama ay aad u nugul yihiin markay ku jiraan nidaamka caddaaladeed ee ciqaabta, Mabaadi'da iyo Habraacyada Qaramada Midoobey waxay hoosta ka xariiqeen baahida loo qabo in la siiyo caawimo gaar ah haweenka, carruurta, iyo kooxaha baahida gaarka ah qaba (Faqradda 12 ee Mabaadi'da iyo Habraacyada Qaramada Midoobey qaybteeda hordhaca).

Maadaama in marin loo helo gole difaac ay rukun aasaasi ah u tahay xuquuqda aadamaha aasaasiga ee dhageysiga dacwaddeed oo caddaalad ah, qodobbada qoraallada caalamiga ah ee xuquuqaha aadamahu waxay sidoo kale qabanayaan Kaalmada Sharci, sida kor ku xusan, xitaa haddaanay si cad uga hadlayn Kaalmada Sharci, waxay ku khusaynayaan ilaa xadka ay tixraacayaan mabda' dhegeysiga dacwadeed ee caddaaladda ah.

Qoraalladani waa in muhiimada la siiyaa gaar ahaan marka arrintu khusayso dadka xidhan ama carruurta sharciga khilaafta:

- Dhokumentiga Qaramada Midoobey ee Mabaadi'da lagu Ilaalinayo Dhammaan Dadka Xidhan ama Xabsiga ku jira 1988;
- Qodobbada Minqiyaaska aan laga Talaabsan karin ee Qaramada Midoobey ee la Macaamilka Maxaabiista 1955;
- Habraaca Qaramada Midoobey ee Hirgalinta Wax ku oolka ah ee Qodobbada Minqiyaaska aan laga Talaabsan karin ee la Macaamilka Maxaabiista (Waxaa lagu ansaxiyey Wareegtada Golaha ee 1984/47);
- Heshiiska Qaramada Midoobey ee Xuquuqaha Carruurta iyo Waxyaabaha lagu kordhiyey 1989;
- Habraaca Qaramada Midoobey ee Ilaalinta Carruurta Xorriyadda laga qaaday 1990 (Havana Rules ama JDL);

- Qodobbada Minqiyaaska aan laga Talaabsan karin ee Qaramada Midoobey ee Maamulista Caddaaladda Caruurta 1985 (Beijing Rules);
- Qodobbada Minqiyaaska aan laga talaabsan karin ee Qaramada Midoobey ee Tallaabooyinka aan Xadhiga Asluub Celinta ahayn 1990 (Tokyo Rules);
- Habraaca Qaramada Midoobey ee ka hawl-galka carruurta Nidaamka Caddaaladeed ee Ciqaabta dhexdiisa 1997 (Waxaa lagu soo jeediyey Wareegtada ECOSOC ee 1997/30 ee 21 July 1997);
- Qodobbada Qaramada Midoobey ee la Macaamilka Haweenka Maxaabiista ah iyo Tallaabooyinka aan xadhiga asluub celinta ahayn ee lagu qaado haweenka maxaabiista ah – Waxaa lagu ansaxiyey Wareegtada Golaha Guud 65/229 ee 16 March 2011 (the Bangkok Rules);
- Mabaadii'ida 1988 ee dhawrista dhamaan dadka xidhan oo dhan
- Soo Jeedinta Rec(2008)11 ee Guddida Golaha Wasiirrada ee Yurub ee Qodobbada Yurub ee in carruurta sharciga khilaafta lagu qaado xayiraaddo xorriyaddeed ama tallaabooyin oo la ansaxiyey 5 November 2008;
- Soo jeedinta Rec(2006)2 ee Qodobbada Jeelasha Yurub;
- Soo jeedinta Rec(2004)10 ee khusaysa ilaalinta xuquuqaha aadamaha iyo sharafta dadka maskaxda ka jiran.

## 2.2. Sharcinimada Kaalmada Sharci ee Xeerarka Gobol

Heerka gobol, marka laga yimaado Axdiga Afrika ee Xuquuqaha Dadka iyo Aadamaha[23] oo ay si guud u hirgaliso Guddida Afrika ee Xuquuqaha Dadka iyo Aadamaha oo ay waddamada Afrika (Marooko moyaane) ay xubin ka yihiin waxay ansaxisay mabaadi' iyo habraacyo xidhiidh ah oo lagu maamulaayo Kaalmada Sharci oo ay kamid yihiin:

- Baaqa Kampala ee Xaaladaha Xabsiga ee Afrika[24] (1996) iyo Qorshaha Waxqabadka (1997),
- Baaqa Kadoma ee Go'aannada Adeegga Bulsho ee Afrika[25] iyo Qorshaha Waxqabadka (1997),
- Baaqa iyo Soo-jeedimooyinka Dakar[26] (1999),
- Mabaadi'da iyo Habraacyada Xuquuqda Dhageysiga Dacwadeed oo Caddaaladda iyo Gargaarka Sharci ee Afrika[27] (2001),

23 Waxaa lagu qaatey Banjul, June 27, 1981, OAU Doc. CAB/LEG/67/3 rev. 5, 21 I.L.M. 58 (1982) waxaanu dhaqan-galay Oct. 21, 1986.

24 Waxaa la ansaxiyey intii u dhaxeysay 19-21 September 1996.

25 Waxaa lagu ansaxiyey Shirkii Caalamiga ahaa ee Go'aannada Adeeg Bulsho ee Afrika oo ka dhacay Kadoma, Zimbabwe, 24-28 November 1997.

26 Wareegtada Xuquuqda Dhageysi Dacwaddeed oo Caddaalad ah iyo Gargaarka oo Sharci Afrika oo lagu saxeexay Dakar, Senegal, 9 - 11 September 1999 iyadoo dabadeena ay wareegto ku ansaxiysay Guddida Xuquuqaha Dadka iyo Aadamaha Afrika, fadhigoodii 26[aad] ee caadiga ahaa November 1999.

27 Waxaa ansaxiyey Guddida Xuquuqaha Dadka iyo Aadamaha Afrika DOC/OS(XXX)247.

- Baaqa Ouagadougou ee Socod-siinta Dib-u-habaynta Ciqaabta iyo Xabsiga Afrika iyo Qorshaha Waxqabadka[28] (2002),
- Xeerka loogu Dhaqmayo Axdiga Afrika ee Xuquuqaha Dadka iyo Aadamaha ee Xuquuqaha Haweenka Afrika[29] (2003),
- Baaqa Lilongwe iyo Qorshaha Waxqabad[30] (2004)
- Wareegtada Axdiga Afrika ee Xuquuqaha Aasaasiga ah ee Maxaabiista oo lagu ansaxiyey Shir Goboleedkii Afrika ee loogu Diyaar-garoobayey Shirweynahii Kow iyo Tobnaad ee Qaramada Midoobey ee Ka-hortaga Dembiyada iyo Caddaaladda Ciqaabta (Addis Ababa, March 2004), iyo
- Baaqa Abuja ee Waxyaabaha Ciqaabta Xabsiga ah lagu badeli karo[31] (2000).

Qoraallo kale oo heer gobol ah sida Axdiga Xuquuqaha iyo Daryeelka Carruurta Afrika ee July 1990[32] ayaa ka kooban qodobbo xusaya waajibaadka waddamada xubnaha ka ahi inay xaqiijiyaan in ilmo kasta oo lagu eedeeyey inuu jebiyey xeerka ciqaabtu uu helo gargaar sharci diyaarinta iyo soo bandhigista difaaciisaba (Qodobka 17).

Sida ku xusan Baaqa Dakar (Qodobka 9) marin-u-helidda caddaaladdu waa rukunka ugu weyn ee xuquuqda dhageysiga dacwadeed ee caddaaladda ah. Eedaysaneyaal iyo dad badan oo wax loo geystay ayaan awoodin inay helaan adeegyo sharci sababtuna waa kharashka badan ee maxkamadda iyo gunnada mihnadlaha. Waa masuuliyadda dowladda inay siiso gargaar sharci dadka baahan si ay uga dhigto xuquuqda dhageysiga dacwadeed ee caddaaladda ah mid aad wax ku ool u ah. Wax ku kordhinta garsoorka, Urrurada aan Dowliga ahayn ee Xuquuqaha Aadamaha iyo urrurada mihnedlayaasha waa in la dhiiri-galiyaa.

Waxaa intaa dheer, Baaqa Lilongwe wuxuu aqoonsan yahay xuquuqda Kaalmada Sharci ee caddaaladda ciqaabta waxaanu gaadhsiiyey meel ka dambeysa odhaahda talo sharci iyo wakiil u noqoshada. Baaqu wuxuu awoodda saaray baahida in lagu baraarujiyo daneeyeyaasha caddaaladda ciqaabeed oo dhan doorka muhiimka ah ee Kaalmada Sharci. Wuxuu ambaqaaday horumarinta iyo ilaalinta nidaam caddaalad ciqaabeed oo caddaalad ah. Daryeelada bulsho ee ka dhashay tirtirida xadhiga aan loo baahnayn, dedejinta dacwadaha, dhageysiyo dacwadeed oo caddaalad iyo dhexdhexaad ah iyo yareynta dadka jeelasha ku jiraa way ku badan yihiin [awoodda] qaran.

Baaqu wuxuu dhigayaa in marin loo helo Kaalmada Sharci dhammaan marxaladaha nidaamka caddaaladdeed ee ciqaabta oo ay kamid yihiin baadhista, xadhiga, xadhiga dhageysiga dacwadda ka horreeya, damaanad qaadashada, waxaa intaa dheer marxaladaha dhageysiga dacwadda iyo hababka rafcaan qaadashada.

28 Guddida Xuquuqaha Dadka iyo Aadamaha Afrika ayaa Baaqa iyo Wareegtadooda 64 ku ansaxiyey fadhigoodii caadiga ahaa ee 34[aad] oo ka dhacay Banjul, Gambia, 6 - 20 November 2003.

29 Waxaa lagu ansaxiyey fadhigii 2[aad] ee Shirweynaha Midowga Afrika, Maputo, CAB/LEG/66.6 (Sept. 13, 2000).

30 Waxaa lagu ansaxiyey Shirkii Kaalmada Sharci ee Caddaaladda Ciqaabta: Doorka Qareennada, Kuwa aan Qareennada ahayn iyo Hawl-wadeennada kale ee Afrika intii u dhaxaysay 22[kii] ilaa 24[kii] November 2004[ta], Lilongwe Malawi.

31 Baaqii Abuja wuxuu ka dhashay shir qaran oo waxyaabaha lagaga kaaftoomi karo ciqaabta xabsiga ah ku saabsanaa oo ka dhacay Abuja intii u dhaxaysay 8[dii] and 10[kii] February 2000.

32 OAU Doc. CAB/LEG/24.9/49 (1990), *oo dhaqan-galay* Nov. 29, 1999.

Sida ku cad Baaqa Lilongwe ee Marin-u-helidda Kaalmada Sharci ee Nidaamka Caddaaladeed ee Ciqaabta ee Afrika iyo Qorshaha Waxqabad ee Lilongwe oo lagu hirgalinayo baaqa, Kaalmada Sharci waa inay ku socotaa fikrad balaadhan sida tani ay raaceen Mabaadi'da iyo Habraacyada Qaramada Midoobey ee Marin-u-helida Kaalmada Sharci ee Nidaamyada Caddaaladeed ee Ciqaabta.

## 2.3. Xayndaabka Qaran ee Kaalmada Sharci

Somaliland waxay dhaxashay shuruuc ka kooban mabaadi'da nidaamka sharci ee shuruucdu ay ka farcanto go'aannada garsoorka iyo nidaamka sharci ee *("Common Law-ga")*, iyadoo labada jeerba Shareecada iyo Xeer dhaqameedku lala dabaqo sharciga rasmiga. Somaliland waxay sameysatey Dastuurkeeda oo ah sharciga ugu sarreeya dalka. Nidaamyadani sharci badanaa way isku noqnoqdaan, midba midka kale ayuu ka horyimaadaa taasoo dhibaatooyin badan ku sababaysa cadaanta xeer ahaaneed iyo rajadii laga filayey. Waxaa kale oo in hoosta laga xariiqo u baahan in qaranku uu ku niyad-san yahay qaadashada caadooyinka iyo mabaadi'da caalamiga ah laakiin waxaa aad caqabad ugu ah khayraadkiisa iyo awoodda hirgalineed.

Xeerarkani Somaliland ayaa imika ka kooban qodobbo la xidhiidha Kaalmada Sharci:

- Dastuurka 2000;
- Xeerka Qareennada (Xeer Lr. 30/2004);
- Xeerka Habka Ciqaabta;
- Xeerka Nidaamka Garsoorka (Xeer Lambar 24/2003);
- Xeerka Xabsiyada (2012);
- Xeerka Nidaamka Garsoorka Carruurka [Xeerka Carruurta] (Xeer Lambar 36/2007) iyo
- Xeerka Anshaxeed ee Qareennada Kaalmada Sharci iyo

Waxaa intaa dheer, Qoraallada la rajeynayo:

- Mashruuc-sharciga Kaalmada Sharci;
- Xeerka Anshaxa Qareennada, iyo
- Siyaasadda Kaalmada Sharci.

### 2.3.1. Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland

Xuquuqda Kaalmada Sharci waxaa sugay qodobka 28aad faqradiisa 3aad ee Dastuurkii 2000 oo sheegaya *"Xaaladdaha xeerku tilmaamayo Qaranku wuxuu kafaalo qaadayaa in uu bixiyo difaac lacag la'aan ah; iyada oo saboolkana laga dhaafi karo ajuurada maxkamadda"*. Xuquuqdani gaarka ahi waxay ka farcantay xaqa dacwadda iyo isdifaaca xaaladda uu qof kastaaba xaq u leeyahay inuu iska difaaco maxkamadda horteeda (Qodobka 28aad faqrada 2aad ee Dastuurka).

Qodobka kor ku xusan waxa lala dabaqayaa qodobbada kale ee Dastuurka ee ilaalinaya mabaadi'da aasaasiga ah ee sharciga iyo sidoo kale xuquuqaha iyo xorriyaddaha dadka sida mabda'a sharcinimada tallaabooyinka

ciqaabeed (Qodobka 26, Faqrada 1), aqoonsiga dembilaawenimo (Qodobka 26, Faqrada 3), xaqa xorriyadda (Qodobka 25) iyo xuquuqaha qofka xorriyadda laga qaaday (Qodobka 27).

Qareenka difaaca waxaa looga baahan yahay inuu garab istaago qofka eedeysanaha ah si uu u xaqiijiyo in hay'adaha ay khuseeyaan ku dhaqmeen qodobbada sare ku xusan ee damaanad qaadaya xuquuqdiisa inta lagu gudo jiro dacwadda.

### 2.3.2. Xeerka Qareennada (Xeer Lr. 30/2004)

Xeerka Qareennadu kuma jiraan qodobbo gaar ah oo khuseeya Kaalmada Sharci. Haseyeeshee, qodobbo dhawr ah ayaa khuseeya Qareennada Kaalmada Sharci bixinaya, maadaama Xeerka Qareennadu uu u badan yahay qalab guud. Sidaas darteed, marka la qorayo Xeerka Kaalmada Sharci waa in maskaxda lagu hayaa qodobbadani soo socda si loo hubiyo inay waafaqaysan yihiin xeerarka caalamiga ah iyo midba midka kale.

Qodobka 18aad oo la xidhiidha masuuliyadaha iyo waajibaadka Qareennadu wuxuu sheegayaa:

1. Qareennadu waxaa waajib ku ah inay ku dhaqmaan oo ay adeecaan xeerarka qaranka iyo qodobbada xeerkani;
2. Inuu si daacadnimo iyo dhiiranaani ku jirto uu mihnadiisa ugu adeego macmiilkiisa, iyo
3. Inuu si cad u bixiyo qaadhaanka iyo cashuuraha uu sharcigu ku waajibiyey.

Qodobka 20aad oo ka hadlaya xuquuqda iyo dhawrsanaanta Qareennadu wuxuu dhigayaa in:

1. Marka lagu daro xuquuqaha aasaasiga ah ee muwaadiniinta, Qareenku waxuu xaq u leeyahay inay noqdaan Qareen mihnadiisa ku shaqaysta;
2. Qareennada lama xidhi karo, lamana xayiri karo haddaanay faraha kula jirin gelitaanka fal-dembiyeed ama aanay oggolaansho ku bixinin guddida ruqsad bixinta iyo anshaxu, iyo
3. Lama baadhi karo, lalamana wareegi karo Qareenka xafiiskiisa, guryahiisa, waraaqahiisa iyo Isgaadhsiintiisaa ilaa Garsoore uu amar sababaysan soo saaro mooyaane.

Ugu dambeyn, Qodobka 14aad faqradiisa 1aad waxay saadalinaysaa suurtogalnimada tirtirida ruqsada Qareennimo:

1. Marka mid kamid ah shuruudihii ruqsada loo bixiyey ay meesha ka baxdo;
2. Marka la caddeeyo in ruqsada lagu helay qaab khiyaamo iyo
3. Marka la caddeeyo inuu shaqeeyo iyadoo shaqo ka joojin lagu sameeyey.

Ugu dambeyn, Qodobka 14aad faqradiisa 2aad waxay saadalinaysaa suurtogalnimada joojinta ruqsada Qareennimo iyo sababaha lagu sameyn karo:

1. Marka la caddeeyo inuu ka qayb-galay dacwad aanu oggolaansho u haynsan iyo
2. Marka aan ruqsada la cusboonaysiin labadii sano ee u dambeysay ama aanu cashuurta u bixinin qaab cadaan ah.

Faqrada 3aad ee qodobkaasi kor ku xusan wuxuu dhigayaa in guddida ruqsada iyo anshax-marintu waxay qaadaysaa tallaabooyinka anshax-marineed ee uu dhigayo sharcigu haddaanu ahayn fal-dembiyeed culus oo ay guddidu u dirayso hay'adaha garsoorka si dacwadda loogu qaado maxkamadda awoodda u leh horteeda.

Waxaa kale, oo dabcan, xidhiidh la leh Kaalmada Sharci qodobka dhigaya tallaabooyinka anshax-marineed ee dhigaya ciqaabta Qareenka si sax ah u gudan waaya masuuliyaddiisa (Qodobka 13). Sidaas darteed, Xeerka Qareennada guud ahaantiis waa in la badelaa, qodobbo gaar ah oo Kaalmada Sharci khuseeyana waa in lagu abbuuraa Xeerka Kaalmada Sharci dhexdiisa.

### 2.3.3. Xeerka Habka Ciqaabta (Digreetada Sharci-dejineed Lr. 1 ee June 1, 1963)

Qodobka 15aad faqradiisa 1aad ee Xeerka Habka Ciqaabta wuxuu dhigayaa mabda'a difaaca qofka eedaysan: *"Eedeysanaha waxaa difaaci kara hal Qareen ama in ka badan"*.

Kaalmada Sharci waxaa si cad u sheegtay faqrada 2aad ee qodobka 15aad oo sheegaya in dacwadaha dembiyada culus ee ciqaabtu ay tahay xabsi daa'in, xadhig ilaa 20 sano ah ama ka badan, ama dil (Dacwadaha lagu sheegay qodobka 14aad faqrada 2aad xarafka (b) Xeerkii Nidaamka Garsoorka 1962[33]), haddii aanu eedaysanahu iskii u magacaaban Qareenkiisa, Qaranka ayeyna waajib ku tahay inuu u magacaabo Qareen waayo-arag ah eedeysanaha. Haddii aanu eedaysanahu iska bixin karin, dowladda waxaa waajib ku ah inay bixiso kharashka wakaaladda sharci (Qareennimo).

Waxaa intaa dheer, Qodobka 15aad faqrada 4aad wuxuu dhigayaa in laba eedaysane iyo wixii ka badan uu wakiil u noqon karo hal Qareen haddaanu danahoogu iska hor imanayn, halka dhibannaha uu wakiil u noqon karo hal Qareen oo qudha (Faqrada 6).

Mabaadi' iyo xuquuqo badan oo eedeysanaha iyo dhinaca dhibanaha oo la xidhiidha difaaca ayaa ku jira faqradaha kale ee qodobkani 15aad sida:

- Xuquuqda eedeysanaha la soo xidhay ee inuu si xor ah u qiraal u sameeyo iyadoo uu la joogo Qareenkiisu marxaladaha dacwadda oo dhan (faqrada 5).
- Xaqa Wakaaladda (Suurtogalnimada in Qareenku uu metelo oo uu maxkamada kahor difaaco dhinaca uu metelo), marka laga reebo, marka ay waajib tahay inuu dhinacu qof ahaan maxkamadda u horyimaado (faqrada 7).

Masuuliyadaha Qareenka difaaca waxaa lagu sheegay qodobka 16aad faqradiisa 1aad oo si cad u sheegaysa masuuliyadaha Qareenka difaac:

> *"Qareenka difaacu waa inaanu sabab la'aan u joojin masuuliyaddahiisa Qareen difaacnimo ama kaga habsaamin dhageysiga maxkamadda qaab xuquuqda eedeysanaha ee gargaarka sharci wax u dhimeysa."*

33 Waxaa lagu badelay Sharciga 1974.

Faqrada 2aad ee qodobka 16aad waxay sheegaysaa ciqaabaha haddii uu qofku la yimaado dabeecadda sare ku xusan: Haddii Qareen difaac kasta uu ku xadgudbo wajibaadkiisa oo uu ku kaco sida ku xusan faqrada 1aad ee qodobkani,

*"Maxkamaddu waxay amri kartaa in isagu:*

*a) Bixiyo wadar lacag ah, oon ka badnayn Sh.So. 5000/- uuna u siiyo eedaysanaha mag ahaan, iyo*

*b) Bixiyo wadar lacag ah, oon ka badnayn Sh.So. 2000/-, kuna shubo khasnada Qaranka; ama*

*c) Waxa laga mamnuucayaa ku shaqaysiga xirfadiisa muddo aan ka badnayn hal sano."*

Qodobka sare ku xusan waxaa si wadajir ah loola dabaqayaa tallaabooyinka anshax-marineed ee waajibinaya dabeecaddaas oo kale.

Faqrada 3aad ee qodobka 16aad waxay khusaysaa dhinaca dhibanaha iyo marka Qareenka Sharci uu joojiyo masuuliyadahiisa, markaas, waxaa waajib ah *"in aanu Qareenku kiiska sinaba ugu sababin inuu sii socon waayo"*.

Waxaa kale oo Kaalmada Sharci xidhiidh laleh qodobbo kale oo XHC, sida:

- **Qodobka 91aad ee XHC** ayaa sheegaya inay dacwaddu burayso haddaan wakiil u noqoshada eedeysanaha siddeeda loo fulin, marka ay tahay qasab inuu Qareen helo. Ku dhaqanka qodobkani waa qasab taasi oo macnaheedu tahay haddii taasi dhici weydo dhageysigu dacwaddaasi waxay noqonaysaa waxba Kama jiraan.
- **Qodobka 98 ee XHC** oo khuseeya dabeecadaha dadka ka soo qayb-galaya dhageysiga iyo
- **Qodobka 177 ee XHC** wuxuu sheegayaa sirta xirfadnimo ee bahda sharciyaqaanka ee aan la oggolayn in la sheego ilaa uu macmiilku oggolaado mooyaane:
  - Arrin kasta oo loogu sheegay si kalsooni ah;
  - Arrin kasta oo ay ogaadaan inta ay ku gudo jireen masuuliyaddooda sharciyaqaannimo.

### 2.3.4. Xeerka Nidaamka Garsoorka (Xeer Lambar 24/2003)

Mabda'a Kaalmada Sharci wuxuu ku jiraa qodobka 4aad faqradda 1aad oo la xidhiidha xuquuqda difaaca:

1. *Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay in uu ka furan karo Maxkamadda Awoodda u leh dacwadiisa si waafaqsan Xeerka.*
2. *Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay in uu iska difaaco Maxkamadda horteeda ee loo soo jeediyey.ama laga soo dacweeyey.*
3. *Qaranku wuxuu kafaala qaadayaa in qofka aan awood u lahayn inuu qabsado Qareen dacwad ciqaab ah oo culus oo uu xeerku khasbayo in Qareen difaaco, in uu u qabto Qareen. Iyadoo qofka saboolka ahna laga dhaafi karo ajuurrada kaga waajibtey dacwadda madaniga ah iyo kuwa la dabeecadda ah.*
4. *Qofka Saboolnimada ajuurradda lagaga dhaafayo ama Qareen loo qabanayo waxa go'aan qaraar ah ku soo saaraya Guddoomiyaha Maxkamadda dacwaddu hor taallo.*

5. *Saboolnimada ajuurada laga dhaafayo waa in loo raaco sidan:*
    a) *Waa in uu codsi u soo qorto Guddoomiyaha daxkamadda*
    b) *Waa in uu keensado laba markhaati oo lagu kalsoonaan karo oo caddeeya soboolnimadiisa.*

Qodobka 20aad Xeerkani wuxuu xadiddayaa tirada Qareennada ee eedeysanaha iyo dhinaca dhibanaha:

1. *Dhinac kasta waxaa u bannaan in uu u adeegsado Qareen waayo-aragnimo sharci leh dacwad kasta oo ku lid ah, ama dhinac ka yahay.*
2. *Dacwadaha ciqaabta ee lagu xukumi karo dil, xabsi daa'in ama xadhig ka badan Toban Sano (10) waa waajib in eedaysanuhu u adeegsado difaaciisa Qareen sharciga yaqaan.*
3. *Dacwadaha Maxkamadda Sare iyo maxkamadda Dastuuriga ah waxa ka doodi kara oo keli ah Qareen sharciyaqaan ah.*
4. *Cid kasta oo gacanta ku haysa qof xorriyadda laga qaaday waxa ku waajib ah in ay u oggolaato in uu adeegsado Qareen ka Kaalmeeya dacwadaha loo haysto inta baadhistu socoto.*
5. *Qofka la xidhay laguma qasbi karo in uu caddayn qiraal ah bixiyo haddaan Qareen la joogin, Qareenkiisuna waa in uu si madax bannaan ula kulmi karaa.*

Waxaa intaa dheer, Qodobka 36aad oo sidoo kale la xidhiidha Kaalmada Sharci maadaama oo uu fasaxayo in marin loo helo Maxkamadaha taasi oo ah shuruud ku xidhan jiritaanka Kaalmada Sharci. Qodobka 36aad faqraddiisa 1aad waxay sheegaysaa in *"Qof kasta uu xaq u leeyahay inuu halka ugu dhaw ka helo Maxkamad uu ka furan karo dacwaddiisa iyo cabashooyinkiisa."* Iyo faqrada 2aad oo sheegaysaa *"Degmo kasta oo ka mid ah JSL, waxay xaq u leedahay in laga furo Maxkamad degmo."*

Haseyeeshee, dhibaatadu waa in aanay Somaliland ka jirin Maxkamado ku filan, qodobkani waajibinaya in la helo marin u helidda caddaaladda lagagama dhaqmi karo meel bilaa maxkamad ah ilaa Maxkamado laga sameeyo degmo kasta oo Somaliland ku taal.

### 2.3.5. Xeerka Xabsiyada 2012

Xeerka Xabsiyada, Xeer-nidaamiyaha Xabsiyada iyo Siyaasadda Xabsiga Hargeysa imika ayaa la qorayaa/dib loo habaynayaa. Qabyo-qoraalka Xeerka Xabsiyada 2012 (Oo badelay Xeerka Xabsiyada 1971) si toos ah ugama hadlayo Kaalmada Sharci, haseyeeshe wuxuu meel u banneeyey in kaabis lagu sameeyo qodobbada imika jira.

Sidaas darteed, marka laga hadlayo xuquuqda maxaabiista ee in la soo booqdo, Qodobka 46aad ee Xeerka Xabsiyadu wuxuu sheegayaa in maxbuus kasta loo fasaxay inay soo booqan karaan bahda sharciyaqaanka (oo ay ku jiraan dadka kale). Qodobka 42aad wuxuu si cad u sharaxayaa booqashada noocan ah (ee Sharciyaqaanka) wuxuu sheegayaa in bahda Sharciyaqaanka ahi ay sababo kale oo khuseeya dacwad maxkamadda ka socota ama sabab kale *"oo ujeeddadeedu tahay niyad-samaan u wareysan karaan macmiilkooda saacad macquul ah, ama sida kale ee uu oggolaado Sarkaalka amarka bixin kara iyadoo ay arkayaan laakiin aanay maqlayn saraakiisha xabsigu"*.

Qodobka 75aad faqradiisa 3aad wuxuu u oggolaanayaa maxaabiista inay Qareenno yeeshaan dacwadaha lagu anshax-marinayo:

*"Maxbuusku waa in si buuxda loogu wargeliyaa falka loo haysto ee loo anshax-marinayo waana in la siiyaa fursad ku habboon oo uu ku soo bandhigi karo difaaciisa oo ay ku jirto xaqa inuu rafcaan ka qaadan karo amarka".*

Sida lagu bixiyey macluumaad guud ee uu qodobkani ku dhisan yahay, in keliya lagu xusay *"difaaca"* ayaa suurtogal ka dhigaysa in maxbuusku uu maxkamadda horyimaado isagoo Qareen difaac wata.

Nasiib-darro, ilaa iyo imika, qodobbadani aad looguma dhigin dariiq si cad u fasaxaya joogida Kaalmada Sharci. Xitaa hay'adaha Xabsiyada Somaliland siday ku heshiiyeen Jabuuti June 22, 2012 kama koobna qodobbo aad u sharaxaya arrintani. Qodobka 78aad ee nuqulada Xeer-nidaamiyaha. Qodobka 42aad ee booqashada bahda sharciyaqaanka.

Waxaa intaa sare dheer, waa in la ogaadaa iyadoo ay qodobbo kala filiqsan oo habka anshax-marinta ee saraakiisha xabsigu ay ku jiraan Xeer-nidaamiyaha Xabsiga, majiro qodob u suurtogalinaya maxbuuska inuu goob-joog noqdo isagoo Qareen wata marka la anshax-marinayo sarkaal xabsiga ka hawl-gala oo dabeecaddiisa/dhaqankiisu waxyeeleeyey xuquuqda maxbuuska.

### 2.3.6. Xeerka Nidaamka Garsoorka Carruurta (Xeer Lambar 36/2007)

Kaalmada Sharci meelna lagagama xusin Xeerkani Caddaaladda Carruurta. Waxa keliya oo qodobbo dhawr ah lagu xusay xuquuqda Qareen difaac qabsasho.

Qodobka 14aad wuxuu sheegayaa inay masuuliyadda Garsooraha tahay inuu Qareen u qabto ilmaha sharciga ku gefa (Qodobka 14.3) si uu u caawiyo ilmaha aan awoodi karin inuu caddeeyo aragtiyihiisa oo uu fursad u siiyo Qareenku inuu ka soo qayb-galo dhageysiga maxkamadda. Sida ku cad qodobka 14(4): *"Waxaa waajib ku ah Qareenka loo qabtay ilmaha farqada hore ku xusan in aanuu ka maqnaan fadhiyada dacwadda."*). Qodobka 44aad oo la xidhiidha habka cabashadu wuxuu siinayaa suurtogalnimada Qareen wakiilasho (iyadoo ay weheliyaan waalidka iyo maamulkiisu) si uu u caddeeyo cabashooyinka ilmaha (Qodobka 44.1). Qodobka 9 (1) (d) ee Xeerka Caddaaladda Caruurtu wuxuu sheegayaa xuquuqda ilmaha ee *"inuu yeesho Qareen sharci iyo inuu si xor ah ula xidhiidho la taliyihiisa sharci"*.

Sidaas darteed, sida uu u dhigan yahay qodobka 14aad waxay ina tusaysaa in haddii ilmahu uu si cad u sheegi karo fikirkiisa aan loo baahnayn Qareen; waxa kale oo tani laga fahmi karaa inaan joogitaanka Qareenka aan loo arag wax lagama maarmaan ah gudaha habkani. Sida uu u dhigan yahay qodobka 60aad (oo la xidhiidha dadka loo oggol yahay inay ka soo qayb-galaan dhageysiga hore), waxay u muuqataa in dadka sida sharciga ah u metelaya (Qodobka 60(1) (g)) ilmahu ay noqon karaan dad aan Qareen ahayn, taasoo dhalinaysa su'aasha: Maxaa Ilmaha loogu oggolaan waayey inuu Qareen caawiyo inta dacwaddu socoto oo dhan?

Majiro qodob si toos ah u sheegaya Kaalmada Sharci ee dacwadaha carruurta xitaa dembiyada culus sida uu Xeerka Habka Ciqaabtu u siiyey dadka caadiga ah. Haseyeeshee, waxaa loo fahmi karaa in maadaama aan

da'da lagu xaddiddin XHC-ta qodobbadiisu si wadajir ah ayey u qabanayaan haddaanu qodob gaar ah oo xeerkani carruurta ahi sidaasi khilaafayn.

Majiro xitaa qodob sheegaya joogista Qareenka sharci ee xilliga dhaqan celinta (Qaybta Afraad Xeerka Caddaaladda Carruurtu).

*Su'aalo*

1. *Waa maxay masuuliyadaha qasabka ah [lagama maarmaanka ah] ee sharciga dalku uu saaray adeegyada sharci ee ay dowladdu maal-geliso?*
2. *Waa maxay adeegyada ciqaabeed ee aad bixisaan? Gaar ahaan, adeegyadee ayaad bixisaan kahor intaan eedeysanaha lagu oogin eedda iyo xilliga uu boolisku su'aalaha weydiinayo?*
3. *Sidee bay adeegyada dowladdu maal-gelisaa ula xidhiidhaan qaababka kale ee xallinta khilaafka?*
4. *Miyaad ogoshihiin baahida in la bixiyo macluumaad iyo waxbarasho sharci oo ay dowladdu sameyso?*
5. *Maxaad u aaminsan tihiin inuu yahay adeegga ugu wacan ee dacwadaha ciqaabta la bixiyo? Ma waxaad tageersan tihiin inay ka shaqeeyaan dad gaar ah, kuwo mushahar la siiyo, qaab 'Urrur dowladeed oo dadka difaaca ah' mise qaab isku jir ah oo wax loo bixiyo? Waa maxay faa'iidooyinka iyo Khasaaraha nidaam kasta?*
6. *Guddidee [hay'addee] ay tahay inay maamusho adeegyada sharci ee ay dowladdu maal-geliso?*
7. *Sidee masuuliyadaha, maamulka iyo siyaasaddaba loo qaybsan karaa?*
8. *Waaxdee dowladda masuul uga ah siyaasadda adeegga sharci, sidee se aad ku xaqiijin kartaan inay hayso macluumaad ku filan oo ku saabsan waxa ay tahay saameynta siyaasad dhulka taala?*
9. *Tallaabooyinkee ay tahay in lagula xisaabtamo guddida maamulaysa?*
10. *Miyaad qiimeysaan wada shaqaynta mihnadlayaasha sharciga ee hadda jira, hadday sidaas tahay, sideed ku helaysaan taasi?*
11. *Waxyaabahee damaanad qaada tayada Kaalmada Sharci?*
12. *Sidee baad ku xaqiijin kartaan in siyaasadda adeegyada sharci ay la jaan qaadayaan marin u helidda siyaasadda caddaaladeed?*

# Cutubka 3:
# Mabaadi'da iyo Amaanka Kaalmada Sharci

## Ujeeddooyinka Waxbarasho

Cutubkani gudihiisa, ka qayb-galayaashu waxay:

- Ogaan doonaan amniyaadka lagu ilaasho Qareenka iyo eedeysanahaba;
- Fahmi doonaan mabaadi'da guud ee khuseeya Kaalmada Sharci;
- Fahmi doonaan mabaadi'da guud ee khuseeya asluubta Qareennada;
- Ogaan doonaan dhisida iyo ilaalinta aaminaada macmiilka;
- Ogaan doonaan sida loo bilaabo wareysiga macmiilka;
- Ogaan doonaan sida looga feejignaado isku dhaca danayowga,
- Ogaan doonaan arrimaha uu macmiilku kaga caban karo Qareenka.

Mabaadi'da sharcigu waa ilo sharci oo muhiim ah, sidoo kale waa saldhigyada aan laga talaabsan karin ee ay tahay in xeerka habka ciqaabtu uu waafaqsanaado. Waa inay sharciga ku dhisnaadaan, garsoorka iyo hay'adaha sharciga fuliyana ay tixgaliyaan, sidoo kale Qareennada difaac ee sharci si ay shaqadooda ugu gutaan si sax ah iyo si ay macmiilkooda uga ilaashaan go'aanno aan sharciga loo raacin.

Amniyaadka waxaa loo kala saari karaa:

- Kuwo ilaasha Qareennada si ay masuuliyadahooga ugu gutaan si xor ah sida madax-bannaani iyo amni;
- Kuwo ilaalinaya eedeysanaha sida dhageysiga dacwadeed ee caddaaladda ah iyo aqoonsiga dembilaawenimo, iyo
- Kuwa ay tahay in la tixgaliyo Qareennada iyo hawl-wadeennada Kaalmada Sharci iyo inay iyaguna tixgeliyaan macmiilkooda iyo kuwo la xidhiidha asluub wanaagooda.

## 3.1. Amaanka si loo Ilaaliyo Qareennada

### 3.1.1. Madax-bannaanida Hawl-wadeennada Kaalmada Sharci

Damaanada ugu horreysa ee ku xusan Mabaadi'da Aasaasiga ah ee Qaramada Midoobey ee Doorka Qareennadu[34] waa madax-bannaanshaha dadka Kaalmada Sharci bixiya.

34 Waxaa lagu ansaxiyey Shirweynahii Sideeddaad ee Qaramada Midoobey ee ka Hortaga Dembiyada iyo la Macaamilka Eeddaysaneyaasha. Havana, Cuba, oo la bilaabay August 27 socday ilaa September 7, 1990.

*"Dowladahu waa inay xaqiijiyaan in Qareennadu (b) ay awoodaan inay u gutaan shaqooyinkooda mihnaddeed si bilaa cadaadis, carqaladayn, qashqashaad ama faro-gelin aan haboonayn ah; (t) ay awoodaan inay si ay labadooduba xor yihiin ula socdaalaan ama ula taliyaan macmiilkooda dalkooda gudihiisa iyo dibeddaba; iyo (c) in aanay la kulmin ama loogu hanjabin dacwad ku oogis, maamul, dhaqaale ama tallaabo ka qaadis kale tallaabo uu si waafaqsan masuuliyaddiisa mihnaddeed, mabaadi'da iyo asluub wacnaanta u qaaday darteed.." (Tilmaanta 16).*

*Hawl-qabadka - Koowaad:*

- *Ayey tahay inuu ka madax-bannaanaado Qareenku?*
- *Maxaa madax-bannaanida looga baahan yahay?*

### 3.1.2. Ammaanka si loo guto masuuliyadaha sharci

Ammaanka dadka bixinaya Kaalmada Sharci waa in ay ilaashaan hay'adaha ay khuseeyaan heer walba si ay masuuliyaddahooga ugu gutaan si ku filan (Mabaadi'da Aasaasiga ah ee Qaramada Midoobey ee Doorka Qareennada, Tilmaanta 17).

Amniga waa in aan loo arag inuu yahay ka ilaalinta khataraha degdeg ah ee wax u dhimaya jidhka dhanaanshihiisa oo keliya laakiin sidoo kale waa ka ilaalinta khataraha iyo nooc kasta oo cadaadis ama carqaladayn ku ah wakaaladda iyo u hadalka macmiilka.

Nasiib-darro, Qareennada waxaa badanaa loo beegsadaa macmiilkooda ama waxa uu sababay macmiilkoodu taasi oo natiijadeedu ay noqoto in lagu qashqashaado ama noloshooda iyo jidhkoodaba khatar la galiyo. Arrintani darteed, Mabaadi'da Aasaasiga ah ee Qaramada Midoobey ee Doorka Qareennadu wuxuu sheegayaa:

- *"Qareennada waa in aan lala beegsanin macmiilkooda ama waxa uu macmiilkoodu sababay taasoo dhalinaysa inay joojiyaan shaqooyinkooda." (Tilmaamta 18).*
- *"Maxkamad ama hay'ad maamul oo horteeda laga aqoonsan yahay xuquuqda in Qareen la yeesho ma diiddi karto inay aqoonsato xuquuqda inuu Qareenku horteeda u yimaado macmiilkiisa dartii haddaan Qareenkaasi loo ruqsaynin qaab sharciga dalka, dhaqanka iyo mabaadi'da waafaqsan mooyaane." (Tilmaanta 19).*

Waxaa intaa dheer, ammaanku waa inuu la xidhiidhaa xasaanada Qareennada. Sida ku xusan Mabaadi'da Aasaasiga ah ee Qaramada Midoobey ee Doorka Qareennada:

*"Qareennadu waa inay yeeshaan xasaanad madani iyo mid ciqaabeed markay si niyadsan u sameeyaan odhaah qoran ama afka laga yidhaahdo iyagoo ku gudo jira mihnaddooda shaqo ee maxkamadda, guddida garsoor ama hay'adaha kale ee sharci ama maamul hortooda" (Tilmaanta 20).*

## 3.2. Ammaanka si loo Ilaaliyo Eedeysanaha

Xuquuqda difaacu waxay caddeynaysaa mabda'a inay sarreyso ilaalinta eedaysanahu taasi oo ay ka siman yihiin qaramada ilbaxa ah.

Sida ku xusan Heshiiska Caalamiga ah ee Xuquuqaha Madaniga iyo Siyaasadda (ICCPR), Xaqa in Qareen la yeesho waxaa lagu dhaqmayaa marxaladaha dacwadda ciqaabta ah oo dhan oo ay kamid yihiin bilowga baadhista iyo xadhiga dhageysiga dacwadda ka horreeya.

Xuquuqdani waxay si dhow ula xidhiidhaa aqoonsanaanta dembilaawenimo, loomana tixgaliyo inay ku lamaan tahay xuquuqda gargaarka sharci oo keliya ee sidoo kale xuquuqda in si cad loogu wargeliyo eedaymihiisa oo dhan[35]; xuquuqda inuu helo wakhti ku filan inuu qofku difaaciisa ku diyaarsado[36]; xaqa in loo sheego macluumaadka galka dacwadda ku jira oo dhan; xaqa isdifaac oo qofka; iyo xaqa imtixaamida (su'aalo weydiinta) maragyada[37].

### 3.2.1. Marin-U-Helidda Caddaaladda

Marin-u-helidda caddaaladda looma jeedo oo qudha suurtogalnimada inuu eedaysanahu marin-u-helo maxkamad awood u leh dacwaddiisa iyo dhageysi dacwaddeed oo caddaalad ah, balse waa in si degdeg ah uu Qareen u metelo. Sida ku xusan Mabaadi'da Aasaasiga ah ee Qaramada Midoobey ee Doorka Qareennada waxaa kale oo macnaheedu yahay in hay'adaha awoodda u lihi *"ay xaqiijiyaan in Qareennadu ay marin-u-heleen macluumaadka lama huraanka ah, galalka iyo qoraallada gacantooda ku jira ama ay wakhti ku filan ku kaantaroolaan si Qareennadu ay u awooddi karaan inay gargaar sharci siiyaan macmiilkooda. Marin-u-heliddaasi waa in la siiyaa wakhtigooda ugu horreeya ee ku haboon."* (Tilmaanta 21).

Xuquuqda goob-joognimada Qareenka difaacu, marka loo eego fasiraada damaanad qaadkani caalamiga ah, micnaheedu waxa weeyi in qofka eedeysanaha ah ay ugu horreynba suurtogal u tahay inuu marin-u-helo Qareen laga bilaabo marxaladda bilowga ah ee dacwadda ciqaabta ah; sida isla marka qofka loo aqoonsado oo keliya eedaysane iyo isla marka uu boolisku xidho[38]. Qareenka difaacu waa inuu mihnad ahaan noqdaa qof ku wanaagsan xirfadiisa.

Maxkamadda Yurub ee Xuquuqda Aadamahu waxay qabtaa ra'yiga ah *"Waxaa muhiimada ugu sarreysa leh xuquuqaha difaac ee ah in eedaysanahu uu marin-u-helo Qareen marxaladda bilowga ee su'aalaha booliska"*[39]. Waxa tani xidhiidh laleh xaqa uu eedaysanahu u leeyahay inuu aamusnaado.

35 ECtHR, *Brozicek v. Italy*, 19.12.1989, Series, no 167.

36 ECtHR, *Deweer v. Belgium*, 27.2.1980, Series, no 35.

37 Sida ku xusan ECtHR Qaranku waa inuu awood siiyaa eeedeysanaha inuu su'aalo weydiiyo maragyada wax ku furaya. Eeg, ECtHR, *Barbera, Messegué and Jabardo v. Spain*, 6.12.1988, Series A, no 146, p.33-34; ECtHR, *Sadak v. Turkey*, 10.7.2001, Applications no 29900 and 29903/96, para 67; ECtHR, *Luca v. Italy*, 27.2.2001, Application no 33354/96, para 41.

38 ECtHR, *John Murray v. U.K.*, 8.2.1996, Warbixinaha Xukunnada iyo go'aannada, 1996-I, p.54, markaas oo ay Maxkamaddu oggolaatay ku xad-gudubka xuquuqda gargaarka sharci waayo eedeysanaha ayaa diidday gargaarka sharci markii uu boolisku xidhay. Go'aan kani lamid ah: ECtHR, *Goedhart v. Belgium*, 20.3.2001, Application No 34989/97.

39 Isla macluumaadkani sare (ibid).

Waxaa meelo badan laga aaminsan yahay in qofka bilaa dembiga ahi aanu u baahnayn Qareen, sidaas darteedna qofkii dembiile ah oo qudhi uu u baahan yahay inuu mid kireysto.

Marka laga hadlayo xuquuqda in si cad loogu wargeliyo eedaha oo dhan, waa inaynu ugu horreyn ogaanaa inay aad muhiim ugu tahay difaaca eedeysanaha. *"Qoraalka eeddu wuxuu door muhiim ah ku leeyahay habka [socodka] dacwadda ciqaabta ah, waana in isla marka la keeno si rasmi ah loogu siiyaa qoraal ogeysiinaya dhacdooyinka iyo arrimaha sharci ee isaga/iyada lagu eedaynayo'*[40]. Muhiimada xuquuqdani waa gaar ahaan xilliga xadhiga, muhiimaduna ma aha in la ogeysiiyo eedaha oo qudha laakiin waa in si cad lagu ogeysiiyo. Tani ujeeddadeedu waa in eeedeysanaha la ogeysiiyo daahid la'aan taasoo sababi karta inuu xadhig aan caadi ahayn u xidhnaado wakhti dheer.

Waxaa intaa dheer, xuquuqda in si cad eedaha lagu ogeysiiyo waxaa ku jirta xuquuqda in eedeysanaha lagu ogeysiiyo luuqad uu fahmi karo, waxaanay sidaasi xidhiidh ula leedahay xaqa inuu turjumaan helo.

Mararka qaar waxaa soo baxda su'aasha ah in dib loogu sheego eedaha [loogu celiyo]. Xaqa in la ogeysiiyo kama mid aha oo qudha xuquuqda in la ogeysiiyo sababta eedaynta (oo macnaheedu tahay falalka lagu haytso inuu eedaysanahu ku kacay ee xaashida eeddu ay ku dhisan tahay), laakiin sidoo kale, in la faahfaahiyo shuruudaha sharci ee falalkani[41]. Waxaa sidoo kale ku jirta xuquuqda in qofku haysto wakhti ku filan oo uu ku diyaarasado difaaciisa[42].

### 3.2.2. Habka Sharciga Waafaqsan

Majiro hab sharci oo loo tixgalin karo inuu aasaas ahaan caddaali yahay haddaanu dhinacyada fursad u siinin inay qaab micno leh oo wax ku ool ah uga qayb-qaataan [dacwadda]. Xuquuqda ka qayb-galka micnaha leh oo uu ku cad Mabda'a Habka Sharciga Waafaqsan, waa xuquuqda la aqoonsan yahay ee qof kasta oo lagu soo eedeeyey dembi inay saaciddo dhageysi dacwadeed oo caddaalad ah oo leh dhinacyo noocyo badan sida amniyaadka guud ee xeerka iyo kuwo habka ah. Waa in lagu walaacaa in damaanadaha habka oo dhan lagu ilaalin karo oo qudha maamul sharci oo awood u leh. Mabda'a habka sharciga waafaqsan waxaa loo tixgaliyaa inuu yahay sida caadada aan la jebin Karin oo ku dhisan qaybaha mabda'a sinnaanshaha (oo ay weheliyaan mabaadi'da ka farcanta ee in loo sinnaado Marin-u-helidda Maxkamadaha iyo Caddaaladda; in Maxkamadahu si Siman ula Dhaqmaan; iyo) Sinaanta u dooddayaasha labada dhinac *('equality of arms')* iyo mabda'a sarreynta sharciga laftiisa.

Tiirarka habka sharciga waafaqsan badankoogu waxay dhaqan galaan isla marka qofka la soo xidho iyagoo ilaaliya eedeysanaha sida aqoonsanaanta dembilaawenimo, xaqa in la ogeysiiyo eedaha saxda ah, xuquuqda gargaarka sharci, xaqa inaan lagu qasbin inuu bixiyo qiraal ama caddeymo isaga wax ku caddeynaya. Dhageysiga dacwaddu noqon maayo mid caddaalad ah haddii xuquuqahani lagu xadgudbo.

40 ECtHR, *Kamasinski v. Austria*, 19.12.1989, Series A, no 168.

41 ECtHR, *Pelissier and Sassi v. France*, Application no 25444/99.

42 ECtHR, *Deweer v. Belgium*, 27.2.1980, Series, no 35.

Dastuurka (Qodobka 27); iyo XHC (tusaale Qodobbada 13, 15, 91.c, 150, 203, 209), ayaa damaanad qaadaya xuquuqaha habka [ciqaabta] ee qofka eedeysanaha ah iyagoo la dhaqan-galaya qodobbada qoraallada caalamiga ah ee xuquuqda aadamaha.

Haseyeeshee, sida dhaqanka ah, booliska, dacwad oogeyaasha iyo garsooreyaashuba badanaa ma tixgaliyaan (ama wakhtiyada qaarkoodna maba oga) xuquuqaha habka sharciga ah ku xusan xitaa marka si cad loogu sheego sharciga.

Ilaalinta [eedeysanaha] ee habka sharciga ah waxaa badanaa loo arkaa in aanay lagama-maarmaan ahayn, ama ay carqaladaynayaan baadhista iyo caddaynta dembiga halkii looga arki lahaa in caddaalad-darro lagaga ilaalinayo sida xadhiga dheer ee dadka bilaa dembiga ah.

### 3.2.3. Aqoonsanaanta Dembilaawenimo

Aqoonsanaanta dembilaawenimo waxaa loo arkaa inay tahay damaanad qaadka ugu weyn ee xeerka habka ciqaabta. Mabda'ani waxaa sugay qodobka 11aad, faqradiisa 1aad ee Baaqa Caalamiga ah ee Xuquuqda Aadamaha, Qodobka 14aad, faqradiisa 2aad ee Heshiiska Caalamiga ah ee Xuquuqaha Madaniga iyo Siyaasadeed iyo sidoo kale heshiisyo caalami ah. Waxaa u baahan in la ogaado in heshiisyada qaarkood si cad loogu sheegay inuu yahay xuquuq (sida qodobka 11aad, faqradiisa 1aad ee Baaqa Caalamiga ah ee Xuquuqda Aadamaha, Qodobka 14aad, faqradiisa 2aad ee Heshiiska Caalamiga ah ee Xuquuqaha Madaniga iyo Siyaasaddeed), halka kuwo kalena aan si cad loogu xusin (tusaale ahaan, qodobka 6aad faqrada 2aad ee Heshiiska Yurub ee Xuquuqda Aadamaha ama Qodobka 48aad faqradiisa 1aad ee axdiga Xuquuqda Aadamaha kuwaasi oo aan sidani wax u sheegayn).

Mabda'ani waxa lagu dhaqmayaa xitaa haddii dembiga uu yahay mid aan ciqaab lagu muteysan Karin saameynta dhacdooyinka dembiga fududeeya dartood, ama cudur-daar sharci uu keenayo in la sii daayo, ama haddii ay jirto dacwad la bilaabay[43].

Somaliland, mabda'ani waxaa lagu sugay Qodobka 26.3 ee dastuurka Somaliland oo sheegaya *"Eedaysanahu waa dembilaawe ilaa dembiilenimadiisa maxkamadda loo caddeeyo mooyaane"*. Waxaa sidoo kale lagu sugay Qodobka 13aad faqradiisa 2aad ee Xeerka Habka Ciqaabta (XHC) oo sheegaya in qofka eedeysanaha ee ku xadgudbay xeerka ciqaabta waa *"in la aqoonsanaadaa dembilaawenimada ilaa xukunku uu noqdo kama dambeys"*

Aqoonsanaanta dembilaawenimo waxay la xidhiidhaa culeyska caddeynta. Micnaheedu waa in eedaysanahu (maadaama la aaminsan yahay inuu bilaa dembi yahay) aanu caddeyn dembilaawenimadiisa. Balse, waa culeys saaran dacwad oogaha, maadaama uu metelo qaranka, inuu u caddeeyo si shaki la'aan ah in dembi dhacay iyo in eedaysanahu uu yahay qofka galay dembiga.

43 Sharciga dacwadaha ee ECtHR wuxuu u yaqaanaa aaminsannaanta dembilaawenimo tiir kamid ah fikirka guud ee dhageysiga dacwaddeed ee caddaaladda sida ku sugan Qodobka 6, faqradiisa 1 ee Heshiiska Yurub ee Xuquuqaha Aadamaha. ECtHR of 6.12.1988, *Barberà, Messegué and Jabardo v. Spain*, Collection Series, no 146.

Dacwad ooguhu waa inuu caddeeyaa dacwad si aanu shaki ka geli karin maxkamadda oo ka dhalan karta caddaymaha la soo bandhigay kuwaasi oo ay macquul tahay inay go'aamiyaan in aanu eedaysanahu dembiile ahayn oo aanu gelin eedaha loo haysto. Xeerka Habka Ciqaabta wuxuu ku sheegayaa Qodobka 110 iyo 163 in culeyska caddeyntu uu saaran yahay dacwad oogeyaasha oo ay tahay in lagu qanco si loo xukumo.

U aqoonsanaantu waxay shaqaysaa marka qaab dhab ah laysku saaro culeyska caddeynta iyo marka la damaanad qaado ilaalinta xuquuqaha xorriyadeed ee eedaysanayaasha inta ka horreysa dhageysiga dacwadda. Dacwadda ciqaabta ah dhageysigeeda, aqoonsanaanta dembilaawenimo waxaa xoojinaya waajibaadka dacwad oogista ee keenista caddaymo dembiilenimo, xuquuqda eedeysanaha inuu ka aamusnaado eedaha lagu sheeganayo oo dacwad oogista culeyskeedu yahay caddeynta si shaki la'aan ah.

Aqoonsanaanta dembilaawenimo micnaheedu waa in qofka laga aqoonsanaado inuu dembilaawe yahay ilaa lagu caddeeyo dembiilenimadiisa caddaymo sharci oo si sharci ah lagu keenay[44], waxa meesha ku qarsoon in caddaynta dembigu ay ku dhisan tahay caddaymo sifo sharci lagu helay taas oo micnaheedu yahay inay salka ku hayaan qodobbo sharci oo maxali ah. Sida kor ku xusan, waxa looga jeedaa in u aqoonsanaanta (u haysashada) dembiilenimo ay tahay mid aan la aqbali karayn[45] ilaa fal-dembiyeedka si cad loo caddeeyey oo shakiga ka dheer. Nasiib-darro mabda'ani waa mid badanaa lagu xadgudbo dhab ahaan iyadoo la tageero dembiilenimada sida fudud loo dhiso ama dedejinta hab dacwaddeedka. Qayb ahaan, aqoonsanaanta dembilaawenimo waxay hoos gashaa mabda'a dhexdhexaadnimada.

Haseyeeshe, Dastuurka iyo Xeerka Habka Ciqaabta midkoodna si cad umuu bixinin qaab-shaqo oo loogu dhaqmayo mabda'ani. Haddii si guud u hadalka Dastuurka la qaadan karo (Maadaama Dastuurrada oo dhan loo dhigo qaabkaasi), Qodobka 13 faqradiisa 2 ee XHC waxay u muuqataa inay dhib noqonayso. Tani wayska caddahay waayo waxay sheegaysaa *"Eedaysanahu waa dembilaawe ilaa xukunku uu noqodo kama dambeys"* XHC-tu si cad umuu mamnuucin in xukunku aanu ku dhisnaan caddaymo sharci-darro ah oo si sharci-darro ah lagu keenay. Xitaa Qaybta II ee XHC oo khuseeya keenista iyo saameynta caddaymaha ama Qodobka 203 oo khuseeya oggolaanshaha caddaymaha majirto mamnuucid ama soocid lagu sameeyey caddaymaha aan sharciga ku dhisnayn.

Iyadoo ay jirto maqnaanshaha qaab-shaqo oo loogu dhaqmayo mabda'ani, degdeg u bixinta gargaar sharci oo awood leh ayaa ah hababka ugu wanaagsan ee lagu taageerayo aqoonsanaanta dembilaawenimo. Aqoonsanaanta dembilaawenimo waa lagu xadgudbay haddii iyadoon eedaysanahu marka horeba aanu helin fursad uu ku adeegsado xuquuqdiisa difaac, go'aan garsoor oo isaga khuseeya ay ku caddahay ra'yi inuu dembiile yahay sheegaya.

Caqabada ugu wayn ee oggolaanshaha shaqeynta aqoonsanaanta dembilaawenimo waxay ku jirtaa isticmaalka balaadhan ee xadhiga ka hortaga ah iyo qaababka kale ee xadhiga dhageysiga dacwadda ka horreeya. Caadi ahaan, marka mabda'ani loo eeggo, xadhiga ka hortaga ah waa in laga feejignaadaa.

44 Eeg go'aanka ECtHR ee Gäfgen v. Germany, 1.6.2010 (Application no. 22978/05).

45 Eeg go'aanka ECtHR ee Minelli v. Switzerland, 25.3.1983, Series A, No 62; ECtHR, Salabiaku v. France, 7.10.1988, Series, No 141-A, para 27-28.

Xadhiga badan ee dhageysiga dacwadda ka horreeya ayaa wax aan macquul ahayn ka dhigaya diyaarsashada difaaca, maadaama marin-u-helidda eeddaysanahu ay xadidan tahay xabsiga ama jeelka dhexdiisa. Eeaysanahu ma awoodo inuu si wax ku ool ah u dhiso istaraatijad difaac iyadoonu marin-u-helin maragyada iyo caddaymaha uu awooddi karayey inuu helo[46].

- Xadka Mabda'ani:

Mabda'ani wuxuu khuseeyaa qof kasta oo degan dalka gudihiisa oo ku eedaysan gelista nooc kamid ah dembiyada waxaanu gaadhayaa gaar ahaan kuwa aan weli si rasmi ah loogu eedayn dembi laakiin aan haysan kharashkii ay ku kireysanayeen Qareenka. Sidaas darteed, tani micnaheedu waa in mabda'ani uu saameyn leeyahay laga bilaabo isla marka boolisku dadku xidhaan hab ciqaabeed gudihiisa oo dhan ilaa iyo inta laga soo saarayo go'aan aan la burin karin dacwadda. Qiraalka eedeysanaha ee la qaaday iyadoo la isticmaalayo xoog, dhibaatayn iyo qaab kale oo dhalinaya bini-aadam-darro ama macaamil bahdilan lama oggola waxaanu xadgudub ku yahay mabda'ani. Waxaanay ka dhigayaan tallaabooyinka la qaaday wax aan jirin.

- Marag-fur/Caddeynta beenta ah:

Sida ku xusan Qodobka 291 Xeerka Ciqaabta Guud: *"Qof kasta oo isaga oo markhaati ah ka bixiya Maxkamadda horteeda marag-furid kasta oo been ah, ee dafira waxa runta ah ama qariya dhammaan ahaan ama qeyb ahaan wixii uu ogaa ee ku saabsanaa xaqiiqada ee la xidhiidhay wixii la weydiiyey, waxa lagu ciqaabayaa xabsi ah Iix bilood ilaa saddex sano"*.

Tiirarka ay leedahay eedaynta noocan ahi waxay u kala baxaan qaybahani aasaasiga ah ee soo socda oo ay tahay in lagu caddeeyo dacwad oogis midho-dhal ah oo sida ugu habboon loo sameeyey:

- Falka waa inuu ku kacay qof marag furaya isagoo marag kahor ah maxkamadda rasmiga ah. Eedeysanaha waa in la tusaa inuu ka qayb-qaato dacwaddaas.
- Markuu furayo maraga, eedeysanaha waa in loo caddeeyaa inuu sheegay dhacdo uu garanayo eedaysanahu in aanay run ahayn; ama
- Markuu furayo maraga, eedeysanaha waa inuu dafiray sida inuu beeniyo macluumaad uu eedaysanahu garanayey inuu run yahay; ama
- Markuu maraga furayo, eedaysanahu haddii uu qariyo macluumaad ama dhacdooyin uu eedaysanahu garanayo runtooda oo eedeysanaha wax laga weydiiyey;

Ujeeddada mabda'eed ee fadhiyada maxkamadda laga leeyahay waa in loo oggolaado, ilaa iyo inta ay macquulka tahay, maxkamaddu inay wax baadho si ay u hesho runta xaaladda loo igmaday inay eegto. Baadhista maxkamaddu waa su'aalo weydiin iyo caddaymo ururin. Fal kasta oo loo qorsheeyey ama ujeeddadiisu tahay in la daciifiyo caddaaladda oo habka caddaaladdeed laga dhigo mid aan la heli karin wuxuu u baahan yahay in loola dhaqmo qaabkani.

46 Maxkamadda Xuquuqda Aadamaha ee Waddamada Ameerikaanka ah waxay ogaatey in xadhiga dhageysiga dacwadda ka horeeya oo dheeraadaa uu xadgudub ku yahay aqoonsanaanta dembilaawenimo Eeg, *Suárez Rosero v. Ecuador*, lagaga warbixiyey (ingiriisida) halkani: *Inter-American Court of Human Rights (IACourtHR), Costa Rica,* Judgment of 12 November, 1997: Suárez Rosero Case, *Human Rights Law Journal*, (19) 1998, p.229, 238.

*Dacwad sharci - kow:*
ECtHR, Gäfgen v. Germany, 1.6.2010 (Application no. 22978/05)[47]
[Soo xigasho]
[…]
11. 27kii Sebtember 2002da, codsaduhu wuxuu diley wiil, J., oo jiray koow iyo toban [sano] isagoo neefta ku xidhay. J., wuxuu ahaa wiilka ugu yar qoys Bangiile ka ahaa Frankfurt-am-Main oo Jarmalka ku taala. Wuxuu ku bartay codsadaha oo arday sharciga barta ahaa walaashii oo ay is yaqaaneen. Codsaduhu wuxuu ilmaha yar la galay gurigiisa isagoo uga dhigay in ilmaha walaashii ay jaakeet ku iloowday halkaasi.
12. Markuu ilmaha yar dilay kadib, Codsaduhu wuxuu dhigay qoraal lacag madax-furasho ah meesha ay degan yihiin J. waalidkiisu isagoo ku sheegay in J. la af-duubtay dalbanaya hal milyan oo Yuuro (euros) ah. Qoraalku wuxuu sii sheegay in haddii af-duubtayaashu ay helaan lacagta madax-furashada oo ay ku guuleystaan inay dalka ka baxaan, ay kadib waalidka ilmahu dib u arki doonaan ilmahooga. Codsaduhu wuxuu kadib gaadhi u kaxeystay har ku taalay meel hanti qof leeyahay ah, ku dhowaad hal saacad ayuu soo watay ilaa Frankfurt waxaanu meydkii J. ku hoos qariyey dhisme biyaha afkooda ka dhisan.
13. 30kii Sebtember 2002da ku dhowaad 1 [a.m.] saac Codsaduhu wuxuu lacagtii madax-furashada ka helay istaanka gaadiidka tamarta ku shaqeeya ee dadweynaha. Ilaa iyo markani boolisku way ku daba jireen isaga. Qayb lacagtii madax-furashada kamid ah wuxuu dhigtay sanduuqiisa xisaabeed ee uu bangiga ku leeyahay intii soo hadhayna wuxuu ku qariyey dhismaha qaybtii uu ka degganaa. Gelinkii dambe, waxaa lagu soo xidhay madaarka Frankfurt-am-Main iyadoo ay boolisku katiinadeeyeen isagoo wejigiisa hoos loogu jeediyey dhulka.
14. Markuu dhakhtar Isbitaalka madaarka joogay baadhitaan ku sameeyey in wax shoog ah ama xagtimo kaga yaalaan diirka kadib, waxaa Codsadaha loo soo qaaday Xarunta Booliska Frankfurt-am-Main. Sarkaalka Baadhista M. ayaa ku wargeliyey in lagu tuhunsan yahay inuu af-duubtay J. waxaana loo sheegay xuquuqdiisa eedaysanenimo, oo ay ugu mudan tahay xuquuqda inuu aamusnaado iyo inuu la tashado Qareen. Waxaa dabadeed su'aalo ka weydiiyey M. sida lagu helayo J. Wax yar kadib, Boolisku waxay baadheen qaybtii uu dhismaha ka degganaa Codsaduhu, waxaana laga helay qayb lacagtii madax-furashada kamid ah iyo qoraal khuseeya qorshihii dembiga. Codsaduhu wuxuu tibaaxay in ilmaha ay hayaan laba af-duube oo kale. Ilaa 11.30 [p.m) saac waxaa loo oggolaaday inuu la tashado Qareen afartan daqiiqo oo isagu codsadey. Wuxuu inyar kadibna tilmaamay in F.R. iyo M.R. ay af-duubeen wiilka oo ay ku qariyeen gudaha cariish ku garab yaala har.
15. Subaxnimadii hore ee 1dii Oktoober 2002da, Taliye ku-xigeenka booliska Frankfurt ayaa ku amray sarkaal inuu ugu hanjabo codsadaha jidh-dil ba'an, iyo haddii ay lagama maarmaan noqotana inuu sidaasi u xanuujiyo si uu uga soo saaro meesha uu wiilku jiro. Sarkaalkii baadhistu wuxuu markiiba ugu hanjabay codsadaha in xanuun ba'an ay u geysan doonaan gacmaha qof si gaar ah ugu tabobaran arrimahani haddii aanu sheegin meesha uu jiro ilmahu. Sida uu sheegay codsaduhu, sarkaalku wuxuu ugu sii hanjabay inuu qol kula qufuli doono laba nin oo madoow oo aad u quwad badan kuwaasi oo tacadi galmo u geysan doona. Sarkaalku wuxuu sidoo kale dhawr jeer gacantiisa kaga garaacay laabta waanu gilgilay taasoo uu hal mar madaxiisu ku dhacay gidaarka.

47 http://hudoc.echr.coe.int/sites/eng/pages/search.aspx?i=001-99015#{"itemid":["001-99015"]}

16. Isagoo ay cabsi geliyeen tallaabooyinkii loogu hanjabay oo soo cadaanaya, codsaduhu wuxuu toban daqiiqo kadiba sheegay meeshii uu jiray meydkii J.
17. Codsadaha waxaa loo soo kaxeeyey Birstein iyadoo ay la socdeen M. iyo tiro kale oo saraakiil boolis ah. Kadibna, codsadahu amar uu siiyey sarkaalka booliis ee amarka bixinayey iyo maadaama laga duubayey filim wuxuu tilmaamay meesha dhabta ah ee uu meydku yaalo. Booliskuna waxay ka heleen meydkii J. halkii uu tilmaamay codsaduhu. […] Markii baadhista sababta dhimasho lagu sameeyey meydii J. 2dii Oktoober 2002da waxaa caddaatey in J. uu u dhintay neefsasho la'aan.
19. Markii lagu soo celiyey saldhigii booliska, codsaduhu waxaa markana loo fasaxay inuu la tashado Qareenkiisa.
20. Qoraal ku jiray galka booliska oo ku taariikheysan 1dii Oktoober 2002da, Taliye ku-xigeenka booliska Frankfurt wuxuu ku sheegay inuu aaminsanaa in maalintaasi nolosha J., ay halis weyn ku jirtay, haddii uu markaasi weli noolaana aanu haysanin cunto iyo cimiladii dibadda. Sidaas darteed, si uu u badbaadsho nolosha ilmahaasi uu u amray inuu codsadaha ugu hanjabo sarkaalka boolis E., xunuun ba'an oo aan kaga tegi doonin wax dhaawacyo ah. Wuxuu xaqiijiyey in sida loola dhaqmay ay ahayd in lagu sameeyo baadhis caafimaad. Ku-xigeenku wuxuu weliba sii qirtay inuu sarkaal boolis oo kale ku amray inuu helo runtii lagu maareyn lahaa codsadaha. Sida lagu sheegay qoraalka, u hanjabaada codsadaha waxaa keliya oo looga jeeday in lagu badbaadsho nolosha ilmaha ee loogama jeedin in lagu sii dheereeyo dacwaddani ciqaabta ah ee khusaysa af-duubashada. Markuu codsaduhu sheegay meesha uu yaallo meyda J., markii lagu cabsi geliyey xanuujin, tallaabooyin kale lagama qaadin.
21. Shahaado caafimaad oo uu qoray dhakhtar boolis ah oo ku taariikheysan 4tii Oktoober 2002da, waxaa lagu xaqiijiyey in codsaduhu uu ku leeyahay guntin dhiig ah oo fadhiisatay (7 cm x 5 cm) lafta kalxanta hoosteeda, xagtimo diirka kasoo gaadhay iyo dhiig qolfo ah oo kaga yaalay gacantiisa iyo jilibkiisa bidix iyo barar dhiig fadhiistay ah oo cagta dusheeda ka soo baxay. Shahaado kale oo caafimaad oo ku taariikheysan 7dii Oktoober 2002da waxay sheegtay in markii baadhis lagu sameeyey codsadaha 2dii Oktoober 2002da, la xaqiijiyey in laba guntimood oo dhiig ahi ay fadhiisteen codsadaha dhinaca bidix ee laabtiisa oo dhexroorkoodu gaadhayey 5 cm iyo 4 cm, waxaa weheliyey xagtimo oogada sare diirka kaga yaallay ama dhiig qolofoobay oo dusha kaga yaalay gacantiisa bidix, jilibkiisa, iyo lugtiisa midig iyo barar xidhan oo ku yaalay cagtiisa. Sida lagu xusay shahaadadaasi, calaamadahan qarsoon ee dhaawacyada ahi waxay tilmaamayaan in dhaawacyadani la geystay dhawr casho kahor baadhista. Sababta dhaawacyada oo cadse lama ogaan karayn.
22. Su'aalo xidhiidh ahaa oo ay weydiiyeen booliska 4tii Oktoober 2002da, dacwad oogaha dadweynaha 4tii, 14kii iyo 17kii Oktoober 2002da, iyo Garsooraha Maxkamadda Degmadda 30kii Jenaweri 2003da codsaduhu wuxuu xaqiijiyey qiraalkii uu sameeyey 1dii Oktoober 2002da.
23. Jeenaweri 2003da, Xafiiska Dacwad Oogista ee Frankfurt-am-Main wuxuu furay baadhista dacwaddo ciqaab ah oo liddi ku ah Taliye ku-xigeenka booliska Franfurt, D., iyo sarkaalka baadhista E. oo salka ku haya cabashooyin uu codsaduhu la yimid.

Codsaduhu wuxuu ku dacwiyey in qaabkii loola dhaqmay xilligii ay boolisku weydiinayeen su'aalihii khuseeyey meesha uu joogo wiilkii, J., 1dii Oktoober 2002da ay u dhignaayeen jidh-dilka uu mamnuucayo Qodobka 3aad ee Heshiisku. Wuxuu sheegtay inuu dhibane u sii ahaa xadgudubyadaasi. Wuxuu weliba ku sii dacwiyey in xuquuqdiisii ahayd inuu helo dhageysi dacwaddeed oo caddaalad ah sida lagu damaanad qaaday Qodobka 6aad ee Heshiiska Yurub, oo u kala baxaysay xaqa inuu isku difaaco si wax ku ool ah iyo xuquuqdiisii ahayd

in aanu isagu marag isku furin lagaga xadgudbay caddeyntani lagu helay sidani xadgudubka ku ah Qodobka 3aad ee lagu oggolaaday dhageysigii dacwaddani ciqaabta ah.

[…]

25. Codsaduhu wuxuu soo gudbistay codsi ah qaab kale oo ah bilowga dacwadda oo ku doonayey baaq uu wax ugu yeelanayo saameynta joogtada oo hanjaabaadii tacadiga ahayd ee isaga lagula kacay 1dii Oktoober 2002da, in kelmadahii uu ku yidhi hay'adaha baadhista aan laga oggolaanin dacwaddani ciqaabta ah. Waxaa intaa u dheerayd, codsaduhu wuxuu baaqani ka rabay in iyadoo lagu xisaabtamayo ku xadgudubka Qodobka 136a ee Xeerka Habka Ciqaabta ee Jarmalka, in dacwaddani ciqaabta ah dhexdeeda isticmaalka waxyaabaha caddeynta ah sida meydkii ilmaha ee ay hay'adaha baadhistu ku ogaadeen qiraalkii laga soo saaray la mamnuucay.

[…]

Habraacii khaldamay ee ay sababtay isticmaalka qaabka baadhiseed ee la mamnuucay waxa keliya oo laga magdhabi lahaa haddii codsadaha lagu wargeliyey su'aalihii xidhiidhka ahaa hortood in hadalladiisii hore ee ay ka keentay hanjabaadii in xanuun ba'an loo geysan doono aan loo isticmaali karin caddeyn isaga liddi ku ah. Haseyeeshee, codsaduhu waxa keliya oo loo tilmaamay xuquuqdiisii in aanu marag-furin, iyadoon loo sheegin diidmada caddeyntii sida aan haboonayn lagu helay. Sidaas darteed isaga lama siinin tilmaamidii ku habboonayd oo lagama maarmaanka ahayd intaanu hadallo kale sii odhanin.

[…]

31. Haseyeeshee, Maxkamadda maxalliga ahi waxay ku soo koobtay diidmada caddeynta hadalkaasi kor ku xusan. Waxayna uga gudubtay diidmada codsigii codsadaha ee baaqa in iyadoo lagu xisaabtamayo qaababka baadhiseed ee la mamnuucay, inay tahay in laga reebo dacwaddani isticmaalka waxyaabaha caddeynta ah sida meydkii ilmaha ee hay'adaha baadhistu ku ogaadeen hadalladii ay ka soo saareen codsadaha. […]

Maxkamadda Yurub ee Xuquuqda Aadamuhu waxay xaqiijisay xitaa duruufaha ugu adag, sida dagaalka argagaxisada lagaga soo horjeedo iyo dembiyada abaabulan, Heshiisku kelmado dhammeystiran wuxuu ku mamnuucayaa jidh-dilka iyo bini-aadam-darrada ama si xun ula macaamilka ama ciqaabta, iyadoon loo eegayn dhaqanka qofka ay khusayso (eeg Chahal v. the United Kingdom, 15 November 1996, § 79, Warbiximaha Xukunnada iyo Go'aanada 1996-V, and Labita, la soo xigtay xagga sare, § 119). Ama dabciga dembiga lagu eedaynayo in la galay sidaas darteed codsaduhu xidhiidh lama leh ujeeddada Qodobka 3 (eeg V. v. the United Kingdom [GC], no. 24888/94, § 69, ECHR 1999-IX; Ramirez Sanchez v. France [GC], no.59450/00, § 116, ECHR 2006-IX; and Saadi v. Italy [GC], no. 37201/06, § 127, ECHR 2008...).

Marka la qiimeeyo qaabkii codsadaha loola dhaqmay 1dii Oktoober 2002da, Maxkamaddu waxay qortay in labada dhinac aanay isku haynin in maalintii su'aalaha la weydiinayey uu ugu hanjabay codsadaha sarkaalka baadhista E., xanuun aan loo dulqaadan karin sidaasi oo u ku amray taliye ku-xigeenka booliska Frankfurt-am-Main, D., hadduu diido inuu sheego meesha uu jiro J., Qaab aan kaga tageyn calaamado muuqda oo uu ku fulin doono sarkaal kale oo boolis ah oo si gaar ah ugu tabobaran arrimahani, oo isla markaasi helikobtor u soo saarnaa saldhiga booliska. Waxay ahayd in baadhis caafimaad lagu sameeyo. Tani waxaa, dhab ahaantii lagu caddeeyey Maxkamadda Gobolka Frankfurt-am-Main dacwadihii ciqaabta ee lidka ku kala ahaa codsadaha iyo saraakiisaha booliska. Waxaa intaa dheer, waxaa ku cad qoraalka D. ee booliska iyo siday maxkamadda maxalliga ahi ku ogaatay dacwaddii ciqaabta ahayd ee D., in D. u qasdiyey, haddii ay lama huraan tahay, in la

fuliyo hanjabaadaasi iyadoo la kaashayo "truth serum" iyo in codsadaha loogu digay fulinta hanjabaadaasi oo muuqatay.

Markay noqoto saameynteeda jidheed iyo maskaxeed, Maxkamaddu waxay qortay in codsadaha oo markii hore diiday inuu sheego meesha uu jiro J., uu qirtay markii loo hanjabay meesha uu ku qariyey meydka. Intaa kadib, wuxuu sii waday inuu si faahfaahsan uga sheekeeyo dhimashadii J., intii ay baadhistu socotay. Maxkamaddu sidaas darteed waxay tixgalisay in hanjabaadihii dhabta ahaa iyo si xun ula dhaqankii laga badheedhay inay dhacaan ee lagula kacay codsaduhu ay tahay in loo arko inay ku sababeen cabsi badan, walaac iyo maskax xanuun.

Maxkamaddu waxay oggolaatay niyad wanaagii dhaqanka saraakiisha booliska iyo inay sidani u sameeyeen si ay u badbaadshaan nolosha ilmaha. Haseyeeshee, waxaa lagama maarmaan ah in hoosta laga xariiqo, in marka la qiimeeyo Qodobka 3aad iyo dacwadahiisii wakhtiga hore ee sharciga noqday, mamnuucnimada si xun ula dhaqanka qofka waa lagu dhaqmayaa iyadoon loo eegayn waxa u saameeyey qofka dhibtani loo geystay ama niyad samaanta ay qabeen hay'adahu. Jidh-dilka, bini-aadam-darrada ama si xun ula dhaqanka laguma kici karo xitaa duruufaha ay qof noloshiisu khatar ku jirto. Wax bahdilaad ah lama oggola xitaa markay dhacdo duruuf dowladeed oo degdeg ah oo khatar ku ah nolosha qaranka. Qodobka 3aad, oo lagu dhigay kelmado aanu mugdi ku jirin, wuxuu aqoonsanayaa in qof kasta oo bini-aadam ahi uu leeyahay xuquuq dhammeystiran oo aan laga wareejin karin oo ah in aan loo geysan karin jidh-dil ama bini-aadam-darro ama aan si xun loola macaamili karin duruuf kasta oo jirta, xitaa ta ugu adag. Falsafada ka dambeysa inay dhammeystirnaato dabci ahaan xuquuqdani ku xusan Qodobka 3aad ma oggolaanayso wax ka reebitaan ah ama arrimo cudur-daar ah ama dano aysku dheeli-tirayo, iyadoon loo eegayn waxa uu ku kacay qofka ay khusayso iyo dabciga fal-dembiyeedka laysku hayo.

[…]

Codsaduhu wuxuu weliba sii gudbistay in xaqiisii inuu helo dhageysi dacwadeed oo caddaalad ah lagu xadgudbay, gaar ahaan, markii la oggolaaday lana adeegsaday caddeyntii lagu helay keliya qiraalkii laga soo saaray isaga iyadoo la jebiyey Qodobka 3aad[48].

[…]

Haseyeeshee, isaga laftirkiisa ayaa hore u sheegtay inuu sameeyey qiraal buuxa oo xor ah inkastoo aanu aqoonsanayn khatarta in aanay lahaan doonin (Khafiifin) saameyn xukunka dhageysiga dacwadda ee maxkamadda.

[…]

167. Markay noqoto isticmaalka caddeynta dhabta ah ee lagu helay si xun ula macaamilkii lagu jebiyey Qodobka 3aad, Maxkamaddu waxay tixgalisay in caddeynta dhabta ee wax lagu caddeeyey ee lagu helay ficilo

48 Si lamid ah Qodobkani 3 ee Heshiiska Yurub ee Xuquuqda Aadamaha, Qodobka 1 ee Heshiiska ka hortaga Jidh-dilka iyo Axmaqnimada, Biniaadam-darrada, Si xun ula Macaamilka ama Ciqaabta, oo Golaha Guud ee Qaramada Midoobey uu ansaxiyey 10 December 1984 (wareegtada 39/46) dhaqan-galay 26 June 1987, wuxuu odhanayaa: "1. Ujeeddada Heshiiskani, Kelmada 'Jidh-dil' micnaheedu waa ficil kasta oo xanuun ama dhibaateyn ah, jidh ahaan iyo maskax ahaan, oo loogu talogalay in loo geysto qof, ujeeddo ah in laga helo isaga ama qof saddexaad macluumaad ama qiraal, iyadoo lagu ciqaabayo fal isaga ama qof saddexaad uu ku kacay ama lagu tuhunsan yahay inuu galay, ama caadinta isaga ama qofka saddexaad sabab kasta oo ku xidhan nooc takoorista kamid ah, marka ay xanuujinta ama dhibaateyntani ku kacaan ama caawiyaan, ama ogol yihiin, ama la joogaan saraakiisha dowladdu ama qof kale oo ku hawl-galayey awood dowli ah. Kuma jiraan xanuujinta ama dhibaateynta ka dhalata ama laga dhaxlay tallaabooyinka sharciga ah.".

tacadi ah, haddii ugu yaraan ficilladaasi lagu soo sooci karo inay yihiin jidh-dil aan la adeegsan karin si loo caddeeyo dembiilenimada qofka dhibkani loo geystay, iyadoon loo eegayn ilaa xadka ay wax caddeynayaan. Go'aanka kale ee kastaa wuxuu keliya noqon doonaa in si dadban loo sharciyeeyo dhaqankani noocan ah ee curfi ahaan khaldan ee Qorayaasha Qodobka 3aad ee Heshiisku ay rabeen inay mamnuucaan ama, haddii si kale loo yidhaahdo, si ay *"U awooddaan axmaqnimo sharciga qarisa"* (eeg Jalloh, laga soo xigtay § 105). Xukunkeeda Jalloh, Maxkamaddu waxay iska dhaaftay si furan su'aasha ah in isticmaalka caddeynta dhabta ah ee lagu helay ficil lagu tirin karo inuu yahay bini-aadam-darro iyo si xun ula macaamil, laakiin lagu soo ururin karo Jidh-dil uu ka dhigayo dhageysiga dacwadda mid caddaalad-darro ah. Waxayse ogaatey in la jabiyey Qodobka 6aad xaalado gaar ah oo dacwaddaasi ah.

168. Markay noqoto isticmaalka caddeynta lagu helay iyadoo la jebiyey xuquuqdii aamusnaanta iyo xasaanadii ka hortaga in aanu qofku isku marag-furin, Maxkamaddu waxay ku celisay in kuwani [xuquuqaha] si guud loogu aqoonsan yahay heshiisyada caalamiga ah, kuwaasi oo ah wadnaha fikirka habraaca caddaaladda ah ee Qodobka 6aad. Aasaaskoodu wuxuu salka ku hayaa inay eedeysanaha ka ilaaliyaan cadaadista aan habboonayn ee hay'adaha, sidaas darteed waxay kaabayaan ka feejignaanta khaladdaadka caddaaladeed iyo fulinta ujeeddooyinka Qodobka 6aad. Xuquuqda in aanu qofku isku marag-furin, gaar ahaan, waxay ka dhigan tahay in dacwad oogista dacwadda ciqaabta ahi ay doonto inay ku caddeyso dacwadda eedeysanaha iyadoon qaadanayn caddeynta lagu helay qaababka cadaadinta iyo tacaddiga ah ee ka hor imanaya rabitaanka eedeysanaha (eeg, siday u taalo, Saunders v. the United Kingdom, 17 December 1996, § 68, Warbiximaha 1996-VI; Heaney iyo McGuinness v. Ireland, no. 34720/97, § 40, ECHR 2000-XII).

[…]

175. Dhinaca kale, Ka saarista dhageysiga dacwadda ciqaabta ah caddeyntii dhabta ahayd ee – la heli karayey laguna qanci karayey – waxay daciifinaysaa dacwad oogistii dembi ee wax ku oolka ahayd. Waxaan shaki ku jirin in dhibaneyaashii dembiga iyo qoysaskoodii iyo sidoo kale dadweynahu ay daneynayaan dacwad ku oogista iyo ciqaabista dembiileyaasha, dacwaddani imikana daneyntu aad bay muhiim u tahay. Waxaa intaa dheer. Dacwaddani waxaa sidoo kale u gaar ah in caddeyntani dhabta ah ee lagu muransan yahay lagu keenay qaab sharci-darro ah oo su'aalo weydiineed oo aan iyada lafteeda looga jeedin in lagu kordhiyo baadhista dembiyeed, laakiin loo qabanayey ujeeddooyin ka hortagis ah, oo marka la magac dhabo ah si loo badbaadiyo nolosha ilmaha yar, sidaas darteedna noqonaysa si loo sugo xuquuq kale oo muhiim oo uu damaanad qaaday Qodobka 2aad. Dhinaca kalena, eedaysanahu dacwadda ciqaabta dhexdeeda wuxuu leeyahay xaqa inuu helo dhageysi dacwaddeed oo caddaalad ah, taasi oo ay calaamatul su'aal saarmayso haddii maxkamadda maxalliga ahi isticmaalaan caddeyn lagu helay ku xadgudub lagu sameeyey mamnuucidii si xun ula macaamilka ee Qodobka 3aad, mid kamid ah kuwa ugu sarreeya ee dhammeyska-tiran xuquuqaha uu damaanad qaadayo Heshiisku. Dhab ahaantii, waxaa jira dane muhiim ah oo dadweynahu ka qabaan ilaalinta daacadnimada habka garsoor iyo sidoo kale qiyamka bulshooyinka ilbaxa ah ee ka dhashay sarreynta sharciga.

[…]

Maxkamaddu waxay sheegtay in oggolaanshaha caddeynta lagu helay dhaqanka sida dhammeyska-tiran uu u mamnuucay Qodobka 3aad, ay dhiirigalin u noqon karto saraakiisha sharciga fulisa inay isticmaalaan qaababkani iyadoon wax loo dhimayn mamnuucidaasi dhammeyska-tiran. Waxaa markaa loo baahanayaa in si wax ku ool ah dadka looga ilaasho, lana cadaadiyo isticmaalka qaababkani gefka ku ah Qodobka 3aad, xeer ahaanna, meesha laga saaro isticmaalka caddeynta dhabta ah ee la helay iyadoo lagu xadgudbayo

Qodobka 3aad, inkastoo caddeyntaasi ay aad uga fog tahay ku xadgudubka Qodobka 3aad caddeynta laga soo saaray inyar kadib, kana dhalatay ku xadgudubka Qodobkaasi. Haddii kale, dhageysiga dacwaddu gebi ahaantiisba wuxuu noqonayaa mid caddaalad-darro ah. Haseyeeshee, Maxkamaddu waxay tixgalinaysaa in caddaaladnimada dhageysiga dacwadda iyo ilaalinta wax ku oolka ah ee mamnuucidaasi dhammeyska-tiran ee Qodobka 3aad ee xaaladdani ay dhaawacmayaan oo keliya haddii la caddeeyo in ku xadgudubka Qodobka 3aad uu dhaliyey maxsuulka dhageysiga dacwadda ee lidka ku ah eedeysanaha, taasi oo ah inuu saameyn ku yeesho xukunkiisa ama xadhigiisa.

[…]

179. Maxkamaddu waxay sheegtay, in dacwaddani, Maxkamadda Gobolku ay si cad saldhig uga dhigtay [go'aankeeda] waxyaabahay ku ogaatey dhacdooyinka khuseeya qaabkii uu codsaduhu u fuliyey dembiga – sidaas darteedna waa waxyaabaha dhaliyey go'aanka ku xukumista codsadaha inuu dil geystay iyo af-duubasho uu weheliso baadid – oo u gaar ah qiraalkii cusbaa ee uu sida buuxda u sameeyey codsaduhu dacwadda dhexdeeda. Intaas waxaa dheer, Maxkamaddaasi waxay sidoo kale u tixgalisay qiraalkaasi cusbaa inuu yahay aasaaska, haddaanu ahayn ka keliya ba, ee ay ku dhistay waxyaabahay ka ogaatey dhacdada khuseysa qorsheyntii dembiga, oo iyadna sidaasoo kale door ku lahayd xukunka iyo xadhiga ku dhacay codsadaha.

Caddeyntii dheeraadka ahayd ee uu ku qirtay dhageysiga dacwadda dhexdeeda umay isticmaalin Maxkamadda maxalliga ahi codsadaha si ay ugu caddaato dembiilenimadu, laakiin waxay keliya oo ku tijaabisay runnimada qiraalkiisa. Caddeyntani waxaa kamid ahaa natiijooyinkii ka soo baxay baadhistii sababta dhimashada ee sababtay dhimashada J., iyo raadkii taayirada gaadhiga codsaduhu ay kaga tageen meel u dhow bartii ilmaha meydkiisa laga soo helay. Maxkamadda maxalliga ahi waxay sii tixraacaysay caddeyntii kaabista ahayd ee sida ka madax-bannaan qiraalkii ugu horreeyey ee codsadaha lagaga soo saaray hanjabaada, lagu ogaadey oo ah inay boolisku si qarsoodi ah u baadhayeen codsadaha ilaa markuu madax-furashada qaadanayey iyo in meeshii uu dhismaha ka degganaa la baadhay inyar kadib markii la soo xidhayba. Caddeyntani, oo aanay "waxba yeelin' ku xadgudubka Qodobka 3aad, waxay iskugu jirtaa marag-furkii J., walaashii bixisay, ereyeyntii waraaqdii baadda ahayd, qoraalkii laga helay meesha uu dhismaha ka degan yahay codsaduhu ee khuseysay qorshaha dembiga, iyo sidoo kale lacagtii madax-furashada ahayd ee laga helay meesha uu dhismaha ka degan yahay codsaduhu ama tii lagu bixiyey xisaabtiisa bangiga.

180. Sida xagga hore lagu sheegay, Maxkamaddu waxay tixgalisay in ay ahayd qiraalkii labaad ee codsadaha ee dhageysiga dacwadda ka – ay keligiis ama ku kaabtay caddeyn dhab ah oo aan waxba la yeelin – ku dhistay aasaaska ku xukumistiisa inuu dil geystay iyo af-duubka ay weheliso baaddidu iyo xadhigiisiiba. Caddeyntii dhabta ahayd ee lagu muransanaa may ahayn lagama-maarmaan loomana isticmaalin si loogu caddeeyo isaga dembiilenimadiisa ama si loo go'aamiyo xadhigiisa. Sidaas darteed waxaa la odhan karaa waxaa jiray kala go' isku xidhnaanta qaababka baadhiseed ee la mamnuucay iyo xukunka codsadaha ku dhacay iyo xadhigiisa marka loo eego caddeynta dhabta ah ee lagu murmay.

[…]

183. Waxaa intaa dheer, Codsadaha, oo uu wakiil u ahaa Qareen difaac, wuxuu ku walaacay hadalladiisii maalintii labaad iyo dhammaadkii dhageysiga dacwadda inuu u qiranayey si ka xor ah qoomamayn iyo inuu si uu u qaado masuuliyadda dembigiisa iyadoon loo eegayn dhacdooyinka 1dii Oktoober 2002da. Wuxuu sidani sameeyey isagoon u aabbo yeelin dhacdadii uu hore ugu guul-dareystay isku daygiisii ahaa in meesha laga

saaro caddeyntani lagu muransanaa. Majirto sabab, ay markaasi Maxkamaddu ay ugu qaadato in codsaduhu aanu run sheegayn ama aanu qirteen haddii Maxkamadda Gobolku ay go'aamin lahayd bilowgii dhageysiga dacwadda in meesha laga saaro caddeyntii dhabta ahayd ee lagu muransanaa iyo in qiraalkiisa sidaas darteed loo tixgaliyo mid ka dhashay tallaabooyin baabiiyey jiritaankii xuquuqdiisii difaac.
184. Dhacdo kasta, way ku caddahay sababaynta Maxkamaddani Gobol in codsadaha qiraalkiisa labaad ee maalintii ugu dambeysay dhageysiga dacwaddu uu muhiim u ahaa hubsashada xukunkiisa inuu dil geystay, fal-dembiyeedkani haddii kale aan lagu heleen dembiilenimadiisa. Qiraalka codsaduhu wuxuu xusay tiirar badan oo aan la xidhiidhin wixii lagu caddeyn karayey caddeyntani dhabta ah ee lagu murmay. Halka ay caddeyntani ka caddeysay inuu J., neef la'aan u dhintay, iyo in codsaduhu uu joogay barta ku taal Birstein, qiraalkiisu wuxuu si gaar ah u caddeeyey inuu u qasdiyey inuu dilo J., iyo sidoo kale sababta uu sidani u sameeyey. Marka la eeggo tiirarkaasi, Maxkamaddu kumay qancin in lagu guul-dareystay in meesha laga saaro caddeyntii dhabta ahayd ee lagu murmay bilowgii dhageysiga dacwadda, in aanu codsaduhu aamusnaan karayn oo aanu haysanin ikhtiyaar kale oo uu isku difaaco oo aan ahayn inuu qirto mooyaane. Sidaas darteed, Maxkamaddu kumay qancin in ku xadgudubka Qodobka 3aad ee baadhista dhexdeedu ay keentay qiraalkii codsadaha ee dhageysiga dacwadda iyo haddii kaleba.
185. Hadday tahay xuquuqaha difaac, Maxkamaddu waxay sii ogaatey in codsadaha la siiyey, oo uu iskii uga faa'iideystay, fursad uu ku diiddo oggolaanshaha caddeyntani dhabta ah ee lagu murmay dacwaddiisa dhexdeeda iyo in ay Maxkamadda Gobolku ikhtiyaar u lahayd inay meesha ka saarto caddeyntaasi. Sidaas darteed, Xuquuqihii difaac ee codsadaha layskama dhego-tirin.
186. Maxkamaddu waxay sheegaysaa in codsaduhu uu ku doodday in laga qaaday ilaalintii ay siinaysay xasaanada in aanu isku marag-furin dhageysiga dacwaddiisa dhexdeeda. Sida lagu caddeeyey xaga sare (eeg tudduca 168), Xuquuqda in aanu qofku isku marag-furin, waxay ka dhigan tahay in dacwad oogista dacwadda ciqaabta ahi ay ku caddeyso dacwadda eedeysanaha iyadoon qaadanayn caddeynta lagu helay qaababka cadaadinta iyo tacadiga ah ee ka hor imanaya rabitaanka eedeysanaha. Maxkamaddu, waxyaabaha u soo baxay ee sare ku xusan waxay ku xustay in maxkamadda maxalliga ahi ay saldhig uga dhigtay xukumista codsadaha qiraalkiisii labaad ee uu bixiyey xilligii dhageysiga dacwadda, iyadoon miciin bidin inay caddeyntii dhabta ahayd ee lagu murmay ay lagama maarmaan u tahay caddeynta dembiilenimadiisa. Sidaas darteed, Maxkamaddu waxay ku soo gebogebaysay in xasaanadii in aanu qofku isku marag-furin lagu dhaqmay intii dhageysiga dacwadda loo haysto codsaduhu socotay.
187. Maxkamaddu waxay ku soo gebogebaysay in duruufaha dacwadda codsadaha qaarkood ee, ku guul-dareysigii in meesha laga saaro caddeyntii dhabta ahayd ee lagu murmay ee lagu helay hadalkii lagaga soo saaray qaab ula dhaqanka bini-aadam-darro ahaa, aanay keenin xukumista codsadaha iyo xadhigiisa, maadaama la tixgaliyey codsadaha xuquuqihiisii difaac iyo xuquuqdiisii in aanu isku marag-furin, dacwaddiisa gebi ahaan waa in loo tixgaliyaa inay ahayd mid loo dhageystay si caddaalad ah.
188. Sidaas darteed, majiraan wax xadgudub ah oo ka dhan ah Qodobbada Article 6aad, 1aad iyo 3aad ee Heshiiska.
[…]

U aqoonsanaanta dembilaawenimo waxay qabanaysaa dadka ka qayb-qaadanaya dhageysiga dacwadda mansabkay doonaan ha joogaane: garsooreyaasha, dacwad oogeyaasha, saraakiisha qaranka, qareennada, karaaniyada ama u adeegayaasha bulshada. Mabda'ani wuxuu sidoo kale qabanayaa wariyeyaasha saxaafadda.

Waxa ka dhasha u aqoonsanaanta dembilaawenimo waa xuquuqda in aanu qofku isku marag-furin. Tani ayaa dhab ahaantii ah natiijada u aqoonsanaanta dembilaawenimo. Micnaheedu waa maadaama *"culeyska"* caddeyntu uu ku jiro waajibaadka hay'adaha dacwad oogista, eedaysanahu wuxuu xaq u leeyahay inuu aamusnaado. Sidaas darteed, wuxuu xaq u leeyahay inuu diido eedaymaha lagu haysto iyo inuu qirto [hadduu doono] dhacdo kasta oo isaga wax ku caddeynaysa. Aamusnaanta eedeysanaha waa in aan loo qaadanin inay caddeyn u tahay dembiilenimadiisa (xitaa hadday tani tahay wax dhab ahaan uga dhaca dacwadaha badankooga).

*Hawl-qabadka - Labaad*

Karim wuxuu ku eedaysan yahay inuu xaday gaadhi. Waa markii ugu horreysay ee isaga la soo eedeeya. Waxaa lagu arkay oo keliya meel u dhow gaadhi la xaday. Haseyeeshee, markay waxoogaa qaraaceen boolisku kadib wuxuu qirtay inuu ahaa kii xaday gaadhiga. Maxkamaddu waxay soo saartay amar xadhig dhageysiga ka horreeya, Karim imika wuxuu ku xidhan yahay xabsiga Hargeysa. Karim weli muu imtixaamin dacwad ooguhu. Dacwaddiisu waxay ku jirtaa baadhitaan lixdii bilood ee u dambeysay.

- *Miyaad aaminsan tahay in ay ahayd in Karim la xidho?*
- *Hadday haa tahay, waa maxay waxyaabaha aad ku kaabi karto dooddaadan?*
- *Miyaad ku arkaysaa mabda' (yo) lagu xadgudbay dacwaddani?*

*Hawl-qabadka - Saddexaad*

Maxamed waa wiil 15 sano jira. Waa wiilka ugu yar qoys 12 xubnood ka kooban oo aad u faqiir ah. Aad buu u shaqayn jiray si uu u caawiyo qoyskiisa. Muu haysanin wakhti uu ku tago iskuul. Waa qof aan waxba baranin. Imika wuxuu dil ugu xidhan yahay xabsiga Hargeysa. Waa markii ugu horreysay ee la xukumo. Maxkamadda Rafcaanku waxay isaga ku xukuntay 5 sano oo loogu xukumay dil uu u geystay xigtadiisa.

Wuxuu ku doodday inuu dembilaawe yahay. Waxay ahayd shil buu yidhi. Wuxuu la murmay ina-adeerkii. Inaadeerkii ayaa isaga caayey. Maxamedna wuu riixay ina-adeerkii oo intuu dhacay madaxa dhulku ku dhuftay, arrintaa darteedna u dhintay. Maxkamaddu isaga may aaminin waayo isagu muu haysanin wax maragyo ah.

- *Miyaad aaminsan tahay inay ahayd inay Maxkamaddu u fasaxdo Maxamed inuu hadlo xitaa haddii uu Qareen meteli lahaa?*
- *Miyaad u malaynaysaa in xadhigani uu caddaalad ku yahay dhimashada shilku sababay ee Maxamed ina-adeerkii?*
- *Miyey tahay in hab-nololleedka Maxamed uu door ku yeesho xadhigiisa?*
- *Ciddina miyey u sheegtay xuquuqihiisa intii uu xidhnaa?*

*Hawl-qabadka - Afarraad*

Abokor wuxuu ku eedaysan yahay inuu dhaawacay nin. Xilligii baadhista dacwad ooguhu wuxuu baadhay Abokor wuxuuna weydiiyey inuu sharaxaadiisa ka bixiyo dhacdooyinkani. Abokor halkii uu ugu iman lahaa isagu wuxuu u soo diray waraaq dacwad oogaha isagoo odhanaya in aanu rabin inuu yimaado oo isaga wax u sharaxo, sababtoo ah isaga waxaa loo aqoonsan yahay dembilaawe waana waajibaadka dacwad oogaha inuu caddeeyo dembiilenimadiisa.

- *Xitaa haddaanu dacwad ooguhu haynin caddeyn dhab ah oo dacwadda khusaysa, aragtida Abokor miyey saameyn doontaa go'aanka dacwad oogaha ee eedaynta?*
- *Aragtida Abokor miyey saameyn ku yeelan doontaa go'aanka dacwad oogaha ee xadhiga dhageysiga dacwadda ka horreeya?*

### 3.2.4. Xaqa Dhageysi Dacwaddeed oo Caddaaladda49

Aragtida dhageysi *"caddaalad ah"* waxay ku jirtaa Qodobka 14(1) ee Heshiiska Caalamiga ah ee Xuquuqaha Madaniga iyo Siyaasadda iyo sidoo kale heshiisyo goboleedka sida Qodobka 6(1) ee Heshiiska Yurub ee Xuquuqaha Aadamaha (inkastoo Qodobka 8(1) ee Heshiiska [Waddamada] Ameerikaanka ee Xuquuqaha Aadamuhu uu ka hadlayo *"[qaab] waafaqsan damaanad qaadka"*). Mararka qaarkood aragtida *"dhageysiga dacwaddeed ee caddaaladda ah"* waxaa lagu khaldaa aragtida *"habka sharciga waafaqsan"*.

*"Shuruudaha aan la dhaafi Karin ee dhageysiga dacwaddeed ee caddaaladda ah*[50]*"*, sida ku xusan Mabaadi'da Dhaqanka Garsoorka ee Bangalore waxay ka kooban yihiin ku dhaqanka garsooreyaasha ee xuquuqahani soo socda ee dhinacyada:

*"(a) Ogeysiin ku filan oo laga siiyo dabciga iyo ujeeddada dacwadda;*

*(b) Inay heli karaan fursad ku filan oo ay ku diyaarsadaan dacwadda;*

*(c) Inay soo bandhigaan dooddooda iyo maragyadooda, iyo inay ku waajahaan doodaha iyo caddeymaha ka soo horjeeda qoraal ahaan, af ahaan ama labadaba;*

49 Eeg, OHCHR, *Human Rights in the Administration of Justice: A Manual on Human Rights for Judges, Prosecutors and Lawyers, (Xuquuqaha Aadamaha Maareynta Caddaaladda dhexdeeda: Buugga Xuquuqaha Aadamaha ee Garsooreyaasha, Dacwad oogeyaasha iyo Qareennada),* Tabobar Xirfaddeed oo Taxane ah Lr. 9, 2003, Cutubka 7 – Xuquuqda Dhageysi Dacwaddeed oo Caddaalad ah: Qaybta II: Is barbardhig lagu Falan-qaynayo Sharcinimada dhageysiga dacwadeed ee caddaaladda ah., eeg: Nihal Jayawickrama, *Ku Dhaqanka Garsoorka ee Sharciga Xuquuqaha Aadamaha: Sharcinimada heerka Qaran, Gobol iyo Caalami,* Cambridge University Press, 2002, pp. 478-594.

50 Wareegtada 1994/35 ee 26 Ogost 1994, Guddi-Hosaadka Golaha Xuquuqaha Aadamaha ee Dhaqaalaha iyo Bulshadu waxay usoo jeedisay Guddida Xuquuqda Aadamaha inay tixgalinteeda siiso fadhigeeda laba iyo kontonaad dhismaha koox hawleed furan-xidhan ah si ay u sameeyaan qabyo-qoraalka kordhinta saddexaad ee Heshiiska Caalamiga ah ee Xuquuqaha iyo Madaniga iyo Siyaasadda ee looga jeedo damaanad qaadista duruuf kasta oo jirta Xuquuqda dhageysi dacwadeed oo caddaaladda iyo magdhowgeeda.

(E/CN.4/Sub.2/1994/24, Annex II); http://www.bayefsky.com/reform/e_cn4_1995_81.php.

*(d) Inuu la tashado ama uu metelo Qareen ama cid kale oo xeel-dheere ah oo uu isagu uu doortay marxaladaha dacwadda oo dhan;*

*(e) Inuu la tashado turjumaan marxaladaha dacwadda oo dhan, haddii isaga/iyada aanu fahmi Karin ama ku hadli Karin luuqada Maxkamadda lagu isticmaalayo;*

*(f) Inuu lahaado xuquuqdiisa iyo waajibaadkiisa oo uu saameynayo oo keliya go'aan ku dhisan caddeyn ay dhinacyadu ku ogaadeen dacwad furan oo qudha;*

*(g) Inay helaan go'aan la soo saaray daahid la'aan. Dhinacyada ay khusaysana waa in la siiyaa ogeysiin ku filan, iyo sababaha go'aanka, iyo*

*(h) Inay rafcaan uga qaataan, ama rafcaan loogu qaadi karo go'aannadooda Maxkamadda ugu sarreysa, marka laga reebo marka ay dacwaddu ku dhammeystiranto maxkamadda rafcaan".*

Waa in la ogaadaa in shuruuda ka horreysa xuquuqda dhageysiga dacwaddeed ee caddaaladda ah ay tahay hirgalinta mabda'a sinnaanshaha iyo takooris la'aanta[51] sida lagu ilaashay Qodobka 14aad ee Heshiiska Caalamiga ee Xuquuqaha Madaniga iyo Siyaasadda. Mabda'u wuxuu aqoonsan yahay in *"Dadka oo dhami"* ay *"siman yihiin"* maxkamadaha hortooda iyo inay xaq u leeyihiin *"caddaalad iyo dhageysi furan"* go'aan ka gaadhista *"dacwadda ciqaabta ah"* ama *"xuquuqahooga iyo waajibaadkooga si sharciga waafaqsan"* ee *"Maxkamadda awoodda u leh, madax-bannaan oo dhexdhexaad ah"* oo *"sharciga ku dhisan"*.

Kelmadda 'takoorid' sida loogu isticmaalay heshiiska gudihiisa waa in loo fahmaa inay u taagan tahay kala soocid, ka saaris, carqaladayn ama ka door bidid ku dhisan sabab kasta oo isir, midab, jinsi, luuqad, diin, siyaasad ama fikir kale, jinsiyad ama bulshada laga soo jeedo, hanti, dhalasho ama mansab kale, oo ujeeddadiisu ama saameytiisu tahay diiddis ama dhaawacida aqoonsiga ugu raaxeysiga ama u isticmaalka xuquuqaha iyo xorriyaddaha si isku mid ah dadkoo dhan"[52].

Haseyeeshee, sida ay sheegeen Guddida Xuquuqaha Aadamaha ee Heshiiska Caalamiga ah ee Xuquuqaha Madaniga iyo Siyaasadda, *"ugu raaxeysiga iyo u isticmaalka xuquuqaha iyo xorriyaddaha si isku mid ah … micnaheedu ma aha macaamil isku mid ah dhacdo kasta"*. Iyadoo hadalkani ku kaabaysa, waxay [guddidu] tilmaantay in qodobbo cayiman oo Heshiiska kamid ah laftooda ay ku jiraan kala soocis dadka ah, tusaale ahaan qodobka 6(5) oo mamnuucaya in xukunka dilka ah lagu xukumo dadka da'doodu ka hooseyso 18 sano jirka iyo ku fulinta haweenka uurka leh.

Mabda'a sinnaanshaha maxkamadaha hortoodu wuxuu ka kooban yahay saddex qaab:

- *U sinnaanshaha marin-u-helidda maxkamadaha;*
- *U sinnaanshaha macaamilka maxkamadaha hortooda;*

51 eeg, OHCHR, *Xuquuqaha Aadamaha Maareynta Caddaaladda dhexdeeda,* op. cit., Cutubka 13.

52 Ibid. bog..651.

- *Sinaanta u dooddayaasha labada dhinac*[53].

Waxaabay noqon kartaa in aragtida ugu badan ee sida ugu fudud loo aqoonsan karo ee xuquuqda sinnaanshuhu ay tahay aragtida in aan dadka lagu takoorin faqiirnimadooda darteed. Heshiiska Caalamiga ah ee Xuquuqaha Madaniga iyo Siyaasadda (Qodobka 2.1) iyo Heshiiska Caalamiga ah ee Xuquuqaha Dhaqaale, Bulsho iyo Dhaqan (Qodobka 2.2), waxay mamnuucayaan takoorida ku dhisan *"hantida… ama mansab kale"*. Mamnuuciddani cad ee takoorida ku dhisan lahaanshiyaha hantida ama mansabka, oo ay shaki la'aan tahay inay ku jiraan dakhliga maaliyadeed, waxay sidoo kale siinaysaa aasaaska xuquuqda gargaarka sharci (ee dacwadaha madaniga iyo ciqaabta).

**a) Mabda'a u Sinnaanshaha Marin-u-Helidda Maxkamadaha iyo Caddaaladda**[54]**:** Majiro Qodob cad oo heshiisyada xuquuqaha aadamaha ku jira oo ka hadlaya *"marin-u-helidda"* maxkamaduhu inay tahay mabda' sharciga caalamiga ee xuquuqaha aadamiga ah. Aragtidani waxay si qarsoon ugu jirtaa odhaahda ah *"dadka oo dhan way siman yihiin maxkamadaha iyo guddiyada garsoorka hortooda"* oo laga helo heshiisyada waa weyn ee xuquuqaha aadamaha badankooga. Sidaas darteed, in la sameeyo heshiis u gaar ah marin-u-helidda maxkamadda ee ragga iyo dumarku (Sidoo kale: wiilasha iyo gabdhahu) waxay ku xadgudbaysaa mabda'ani, haddii miisaan ka duwan kii la siiyey la saaro, ama loo eego doorkiisa sida markhaatiga oo kale.[55].

**b) Mabda'a u Sinnaanshaha la Macaamilka Maxkamadaha:** Waxaa jira laba fikradood marka laga hadlayo mabda'ani u sinnaanshaha la macaamilka maxkamadaha: i) Fikradda ah in labada dhinac ee iska soo horjeeda la siiyo fursad isku mid ah oo ay ku diyaarsadaan kuna soo bandhigaan dacwadahooga maxkamadda horteeda (oo loo yaqaano mabda'a u Sinaanta u dooddayaasha labada dhinac, sida hoos ku xusan) iyo ii) in dadka lagu soo eeddeeyey dambiyo iskumid ah loogu oogi doono qaab isku mid ah. Sidaas darteed, ilaa xad haddii dacwaduhu ay si cad isku mid u yihiin, maxkamaddu waxay ula macaamili doontaa si isku mid ah, iyadoon la tixgalinayn qofka uu eedaysanahu yahay, ama haddii dacwadda ay siyaasaddi dabada ka waddo iyo haddii kaleba.

**c) Sinaanta u dooddayaasha labada dhinac:** macnaha mabda'ani waa in dacwadaha madaniga iyo ciqaabtaba, *"dhinac kastaa uu helo fursad macquul ah oo ku soo bandhigi karo dacwaddiisa – oo ay kamid tahay caddeyntiisu – xaalado aan ku keenayn khasaare balaadhan isaga iyo dhinaca kale toona"*[56]. Dacwadaha ciqaabta ah, haseyeeshee, *"marka dabciga dacwadduhu uu ku qotomo sinnaanshe la'aanta dhinacyada"*, mabda'u wuu ka sii muhiimsanaanayaa[57].

Mabda'u wuu qabanayaa dacwadaha madaniga iyo ciqaabtaba. Dacwadaha ciqaabta ah wuxuu ka muuqanayaa

53 eeg, Richard J. Wilson, "Mabda'yada, Illaha iyo Magdhowyada ku xadgudubka Xuquuqda Gargaarka Sharci ee u Qoondeysan ee Sharciga Caalamiga ah ee Xuquuqda Aadamaha", February 5, 2002; nuqul elektoroonik ah ayaad halkani ka helaysaa: http://ssrn.com/abstract=1028900.

54 Carol Harlow, "Access to Justice as a Human Right: The European Convention and the European Union", in: *The EU and Human Rights,* 1999, p.187.

55 Amnesty International, *Fair Trials Manual,* 1998, Section 11.2.1.

56 Maxkamadda Yurub ee Xuquuqaha Aadamaha, *Dombo Beheer v. The Netherlands*, 27.10.1993, Series A, No 274. Waxaad ka heli kartaa: http://www.echr.coe.int.

57 P. Van Dijk & G.J.H. Van Hoof, *Theory and Practice of the European Convention on Human Rights,* 3d Ed. 1998, p.430.

mar kasta oo ay jiraan *"eedo"* liddi ku ah qof. Sida ku xusan dacwad-sharciyeedyada Maxkamadda Yurub ee Xuquuqaha Aadamaha *"eedo"* waxaa lagu qeexay "ogeysiinta rasmiga ah ee ay hay'adaha awoodda u lehi siiyaan qofka lagu eedaynaayo inuu galay fal-dembiyeed.[58]

*Dacwadda Sharci - labaad*

Dacwadda Sadak and Others v. Turkey[60] oo hortimid Maxkamadda Yurub ee Xuquuqaha Aadamaha, Codsadeyaashu waxay ku cawdeen in eedihii loo haystay la tirtiray dhageysigii [fadhigii] ugu dambeeyey ee dhageysiga dacwaddooda. Waxaa bilowgii lagu eeddeeyey kala saaris iyo wiiqida isku duubnaanta Qaranka. Isla maalintii falanqaynta, Maxkamadda Amniga Qaranku waxay ku amartay inay isla xilligaasi diyaarsadaan difaac ay iskaga difaacaan eedeyn cusub, oo ahayd lahaanshiyaha urrur hubaysan, laakiin waxay haddana diidday codsi ay ku doonayeen in wakhtiga loo kordhiyo si ay u diyaarsadaan difaac ay kaga hor iman lahaayeen dacwadda cusub. Codsadeyaashu waxay ku jireen xaalad aanay iyagu si habboon isku difaaci Karin. ECHR-tu waxay go'aamisay in lagu xadgudbay xaqa in qofku helo dhegaysi dacwadeed oo caddaalad ah, gaar ahaan xuquuqda wakhtiga ku filan ee [uu qofku] ku diyaarsan karo difaaca (sida lagu sugay Qodobka 6-3.b ee Heshiiska Yurub ee Xuquuqaha Aadamaha).

- *Qodobka 111aad XHC-ta ee Somaliland ma la xidhiidhaa dacwadda kor ku xusan marka loo eego maxkamaddaha?*

Waxaa jira xaalado dhawr ah oo inta dacwaddu socoto xadgudub ku noqon kara xuquuqda is difaacista. Waa lagu xadgudbay xuquuqda is difaacista iyo sidoo kale xuquuqda dhageysiga dacwaddeed ee caddaaladda ah haddii Maxkamadda dhageysanaysa dacwaddu ay ku guul-dareysatay "inay kaantaroosho jawiga colaaddeed iyo culayska ay abbuureen dadweynaha xarunta maxkamadda dhex jooga oo qayrul-macquul ka dhigaya in Qareenka difaacu uu si habboon su'aalo u weydiiyo maragyada dhinaca kale iyo si uu u soo bandhigo' difaaca dhinaciisa.[60]

*Hawl-qabadka - Shanaad*

Cabdulraxman wuxuu jiraa 20 sano. Waxaa loo soo xidhay dil. Waxay Maxkamadda Rafcaanku ku xukuntay 10 sano oo xadhig ah. Wuxuu ku eedaysnaa inuu dilay qof qaraabadiisa kamid ah xilli ay dagaalamayeen. Wuxuu jeclaa inuu rafcaan u qaato Maxkamadda sare laakiin waxaanu haysanin Qareen. Kii horena wuxuu kaga tegay dhageysiga dacwadda dhexdiisa markuu maqlay in aanu haysanin lacag uu isaga siiyo?

- *Dacwaddani sare ku xusan maxay tahay inuu Garsooruhu ka qabto?*

58 ECtHR, *Deweer v. Belgium*, 27.2.1980, Series A, no 35, p.22; ECtHR, Foti v. Italy, 10.12.1982, Series A, no 56, p.18; *Minelli v. Switzerland*, 25.3.1983, Series A, no 62, p.15.

59 ECtHR, *Sadak and Others v. Turkey*, 10.7.2001, Application no 29900/96 and 29903/96. Micnaha wakhti ku filan "adequate time" eeg sidoo kale, ECtHR, *Campfell and Fell*, 28.6.1984, Series A, No 80, p.45.

60 Communication No. 770/1997, *Gridin v. Russian Federation* (Views adopted on 20 July 2000), in UN doc. *GAOR*, A/55/40 (vol. II), p. 176, para. 8.2. Qoraagu wuxuu ku dacwooday in xitaa maxkamaddu ay buuq noqotay iyadoo dadku ay ku xanshaashaqayeen in dil lagu xukumo;; *United Nations Compilation of General Comments*, p. 173, para. 3.5.

*Hawl-qabadka - Lixaad*

Cabdullahi waxaa 4 sano ku xukuntay Maxkamadda Hoose kadib markuu iibiyey Maandooriye. Dalabkiisii ahaa inuu arko Qareen, boolisku waxay kaga jawaabeen in Qareenka loo oggol yahay marka la eedeeyo kadib. Waxay u sheegeen in inuu Qareen codsadaa ay iyada lafteedu tilmaan u tahay dembiilenimadiisa.

- *Miyaad ku raacsan tahay dooddaasi booliska? Haa ama Maya? Sharax sababta labada kii aad ku jawaabtayba.*

Sida kor ku xusan, aasaaska xuquuqda Kaalmada Sharci ee nidaamka caddaaladeed ee ciqaabtu wuxuu salka ku hayaa mabda'a caalamiga ah ee *"Dhageysiga dacwadeed oo caddaalad ah"*[61]. Sida ku xusan Mabaadi'da iyo habraacyada Marin-u-helidda Kaalmada Sharci ee Nidaamka Caddaaladeed ee Ciqaabta Kaalmada Sharci waa inay ku jirto talada sharci, gargaarrida iyo wakiil u noqoshada dadka la tuhunsan yahay, xidhan, eedaysan ama lagu oogey fal-dembiyeed, la qabtay oo lagu xukumay xadhig iyo ta dhibaneyaasha iyo maragyada nidaamka caddaaladeed ee ciqaabta, oo bilaa lacag u ah kuwa aan haysan wax ku filan ama marka danta caddaaladdu ay sidaasi ku jiro. Kaalmada Sharci waa inay ku jiraan aragtiyaha barashada sharciga, marin-u-helidda macluumaadka sharci iyo adeegyada kale ee ay dadku ka helaan hababka kala duwan ee xaklinta khilaafaadka iyo qaababka caddaaladda cawil-celinta ah.

Xuquuqaha aasaasiga ah ee dhageysiga dacwadeed oo caddaaladda ah ee uu ilaalinaayo Qareenka difaacu[62] waxaa loo kala saari karaa xuquuqaha dhageysiga dacwadda horteed, xuquuqaha wakhtiga dhageysiga dacwadda iyo xuquuqaha dhageysiga dacwadda dabadeed:

### Xuquuqaha dhageysiga dacwadda horteed

- Mamnuucnimada Xadhiga ama xidhista aan sharciga waafaqsanayn
- Xuquuqda inuu qofku ogaado sababta loo xidhayo
- Xuquuqda inuu qofku Qareen yeesho
- Xuquuqda in qofka si dhakhso ah Garsoore loo hor keeno si uu u hubiyo sharcinimada xadhiga iyo xidhista
- Mamnuucnimada Jidh-dilka iyo xuquuqda in dhageysiga dacwadda horteed qof ku xidhnaado xaalado bini-aadamnimada ku habboon
- Mamnuucnimada xadhiga qofka xidhiidhka dadka loo diido

### Xuquuqaha xilliga dhegaysiga

- U sinnaanshaha marin-u-helidda maxkamadda iyo sinnaanshaha maxkamadda horteeda
- Xuquuqda dhageysi caddaalad ah
- Xuquuqda dhageysi dadka u furan

61 eeg, UNODC (2011), Buug-gacmeedka marin-u-helida Kaalmada Sharci ee Afrika.

62 eeg, Guddida Qareennada ee Xuquuqaha Aadamaha (2000), Waa maxay dhageysi dacwaddeed oo caddaalad ah? Habraaca hal-beegyada sharci iyo dhaqanka (Practice ) ee aasaasiga ah, www.lchr.org.

- Xuquuqda Maxkamad awood u leh, madax-bannaan, dhexdhexaad ah oo ku dhisan sharciga
- Xaqa u aqoonsiga dembilaawenimo
- Xuquuqda in si degdeg ah loo ogeysiiyo dabciga iyo sababta eedaymaha ciqaabta ah
- Xuquuqda in qof helo wakhti ku filan iyo waxyaabaha u fududaynaya diyaarsashada difaaca.
- Xuquuqda dhageysiga dacwadda oo aan muddo-dhaaf ahayn
- Xuquuqda is difaacista ama inuu Qareen difaaco
- Xuquuqda su'aalaha la weydiinayo [su'aalo weydiinta] maragyada
- Xuquuqda Turjumaan yeelashada
- Mamnuucnimada ku dabaqaada xeerarka ciqaabta ah dhacdo ka horreysay
- Mamnuucnimada laba jeer ku eedaynta hal dhacdo
- Mamnuucidda inuu qofku is eedeeyo

### Xuquuqaha dhageysiga dabadii

- Xuquuqda rafcaan qaadasho
- Xuquuqda magdhowga ku guul-darraysiga caddaaladda.

Intaa kor ku xusan dhammaantood, xuquuqaha ugu muhiimsan (markay la jirto xuquuqda Kaalmada Sharci) ee noqda xuquuqaha ugu mudan ee lagu dhaqmo kaabayana marin-u-helidda caddaaladda iyo dhageysiga dacwadeed ee caddaaladda ahi waa:

- U aqoonsanaanta dembilaawenimo iyo xaqa aamusnaanta;
- Xuquuqda is difaacista iyo gargaarka sharci ee marxaladaha ugu horreeya baadhista iyo xuquuqda in qof helo wakhti ku filan iyo waxyaabaha u fududaynaya diyaarsashada difaaca;
- Xuquuqda helitaanka macluumaadka khuseeya xuquuqaha iyo eedaymaha, iyo marin-u-helidda cadaynta;
- Xuquuqda in xadhiga laga sii daayo oo uu dhageysiga dacwadeed socdo;
- Xaqa ka qayb-qaadashada dhageysiga dacwaddiisa oo bilaa muddo-dhaaf ah;
- Xuquuqda inuu [qofku] u yeedho maragyo iyo inuu su'aalo weydiiyo maragyada;
- Xuquuqda turjumaan iyo tarjumid xor ah, iyo
- Xuquuqda rafcaan qaadasho.

Sida ku xusan Mabaadi'da Aasaasiga ee Qaramada Midoobey ee Doorka Qareennada[63]:

> *"5. Dowladuhu waa inay xaqiijiyaan in dadka oo dhan ay sida ugu dhakhso badan ugu wargeliyeen hay'adaha awoodda u lehi xuquuqdooda in uu caawiyo Qareen ay iyagu doorteen isla marka la soo xidho ama qabto ama lagu eedeeyo fal-dembiyeed.*

63 Waxaa lagu ansaxiyey Shirweynahii Sideeddaad ee Qaramada Midoobey ee ka Hortaga Dembiyada iyo la Macaamilka Eeddaysaneyaasha. Havana, Cuba, oo la bilaabay August 27 socday ilaa September 7, 1990.

*6. qof kasta oo noocan ah oo aan haysan Qareen, dacwad kasta oo ay danta caddaaladdu ku jirto, waa in loo qabtaa Qareen leh waayo-aragnimo iyo karti u d higanta dabciga fal-dembiyeedka loo igmaday si uu u bixiyo gargaar sharci oo wax ku ool ah oo bilaa lacag ah haddii aanay dadku haysanin dakhli ku filan oo ay iskaga bixin karaan adeegyadani*

*7. Dowladduhu waa inay weliba xaqiijiyaan in dadka xidhan ama la qabtay oo dhami ay si degdeg ah marin ugu helaan Qareen, mar kasta muddo aan ka badnayn siddeed iyo afartan saac ah oo ka bilaabanta wakhtiga xadhiga ama qabashada.*

*8. Dhammaan dadka xidhan, la qabtay ama xadhiga lagu xukumay waa in la siiyaa fursado ama wakhti ku filan, waxyaabaha saacidaya booqashadooda iyo inay la xidhiidhaan lana tashadaan Qareen daahid, rabshid iyo faaf-reeb la'aan iyo xafidaad sirreed oo buuxda. Wada-tashigaasi way arki karaan laakin ma maqli karaan saraakiisha sharciga dhaqan-gelinaysa."*

### 3.3. Mabaadi'da Khuseysa Kaalmada Sharci

Kaalmada Sharci waa in la sii arki karaa marka hore ma aha keliya sida ku xusan Qodobka 28(3) ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland in marka ay dadka faqiirka ah ee aan kharashka Qareennada iska bixin karayni ay ku eedaysan yihiin dembiyo culus [uun la bixiyo Kaalmo sharci], laakiin sidoo kale, sida ku xusan Mabda'a 3.20 ee Mabaadi'da iyo Habraacyada Qaramada Midoobey ee Marin-u-helidda Kaalmada Sharci ee Nidaamka Caddaaladeed ee Ciqaabtu *"Iyadoon loo eegayn dakhliga qofka, haddii danta caddaaladeed ay sidaas farayso, tusaale ahaan mararka kediska ah, adag ama ay aad u xun tahay ciqaabta la filayo in qofka lagu xukumo"* waxaa intaa dheer, *"carruurtu waa inay marin-u-heshaa Kaalmada Sharci si la mid ah ama ka naxariis badan xaaladaha dadka waa weyn. Dacwadaha carruurta danta ilmaha ee ugu fiicani waa in mudnaanta ugu sarreysa la siiyo difaaca ilmaha"* (mabda'a 3.22).

Sida ku xusan Habraaca 8aad ee Habraacyada Qaramada Midoobey ee Marin-u-helidda Kaalmada Sharci ee Nidaamyada Caddaaladeed ee Ciqaabta, Kaalmada Sharci waa in la siiyaa dadka la tuhunsan yahay, eedaysan ama xadhiga ku xukuman iyo sidoo kale dhibaneyaasha iyo maragyadu hadday u baahdaan. Xaaladaha ay habboon tahay in la siiyo Kaalmada Sharci maragyada waxaa ku jira, oo aanayse ku koobnayn:

a) Markuu maraggu khatar ugu jiro inuu isku caddeeyo dembi;

b) Markay jirto khatar ku wajahan amniga iyo wanaaga maragyada oo ka dhalatay doorkoogani [marag ahaanneed], iyo

c) Marka maraggu uu gaar ahaan yahay mid nugul, oo baahiyo gaar ah qaba.

### 3.3.1. Macluumaad

Sida ku xusan Habraaca 2.41.(d) ee Mabaadi'da iyo Habraacyada Qaramada Midoobey ee Marin-u-helidda Kaalmada Sharci ee Nidaamka Caddaaladeed ee Ciqaabta Qaramadu waa inay qaadaan tallaabooyin lagaga warbixinayo suurtogalnimada Kaalmada Sharci marxaladaha dacwadda oo dhan:

> *"Macluumaadka xuquuqaha qofka lagu tuhunsan yahay ama lagu eedeeyey dembi habka caddaaladeed ee ciqaabta dhexdiisa iyo helitaanka adeegyada Kaalmada Sharci waa in lagu bixiyaa saldhigyada booliska dhexdooda, xarumaha dadka lagu xidho, maxkamadaha iyo xabsiyada; tusaale ahaan, in la siiyo waraaq ay ku qoran yihiin xuquuqihiisu ama loogu gudbiyo qaab kale eedeysanaha. Macluumaadkani waa in loo bixiyaa qaab daboolaya baahiyaha qofka aan wax baran, laga tiro badan yahay, dadka naafada ah iyo carruurta; iyo in macluumaadkani uu ku dhigan yahay luuqad ay dadkani fahmi karaan. Macluumaadka la siinaayo carruurta waa in loo bixiyaa qaab ku habboon da'dooda iyo qaan-gaadhnimadooda"*

Sida ku xusan Habraaca 3.42 Qaramadu waa inay qaadaan tallaabooyin:

> *"(a) ay sida ugu dhakhso badan ugu wargeliyaan qof kasta oo lagu tuhunsan yahay, loo hayso ama ku eedaysan dembi ciqaab ah, xaqiisa inuu aamusnaado, xuquuqdiisa inuu la tashado Qareen ama, haddii ay sharci tahay, iyadoo uu la joogo hawl-wadeen bixinaya Kaalmo sharci marxaladaha dacwadda oo dhan, gaar ahaan intaan la wareysanin kahor; iyo [in loo sheego] xuquuqdiisa inuu caawiyo Qareen ama hawl-wadeen bixinaya Kaalmo sharci marka la wareysanaayo iyo xilliyada kale ee tallaabooyin la qaadayo;*
>
> *(b) ay ku mamnuucayaan, markaanay jirin duruuf sidani kalifaysaa, inuu boolisku wareysto qof iyadoonu joogin Qareen, Marka uu qofku isagoo og iskii ugu qasdiyo inuu ka tanaasulo goob-joognimada Qareenka mooyaane iyo inay sameeyaan tallaabooyin lagu hubinayo sababta uu iskii qofku ugu qasdiyey. Wareysigu waa in aanu bilaabmin ilaa uu yimaado hawl-wadeenka bixinaya Kaalmada Sharci.*

### 3.3.2. Cadli

Mabda'a u sinnaanshaha marin-u-helidda Kaalmada Sharci waa inuu u sarreeyaa iyadoo ay weheliso xuquuqda ku wargelinta Kaalmada Sharcigu. Sidaas darteed, sida ku xusan mabda'a 10.32 iyo 10.33 ee Mabaadi'da iyo Habraacyada Qaramada Midoobey ee Marin-u-helidda Kaalmada Sharci ee Nidaamka Caddaaladeed ee Ciqaabta:

> *"Tallaabooyin gaar ah waa in la qaadaa si loo xaqiijiyo Kaalmada Sharci ee haweenka, carruurta, iyo kooxaha baahiyaha gaarka ah qaba oo ay ku jiraan aan se ku koobnayn waayeelka, dadka laga tirada badan yahay, dadka naafada ah, dadka maskaxda ka jiran, dadka la nool xanuunka HIV/AIDS-ka iyo xanuunnada kale ee lays qaadsiiyo ee khatarka ah, dadka maandooriyaha isticmaala, dadka dhulka loogu yimid, dadka aan dal lahayn, magan-geliyo doonka, dadka ajaanibka ah, tahriibayaasha iyo shaqaalaha qaxootiga ah, qaxootiga iyo dadka gudaha ku baro-kacay. Tallaabooyinkani waa inay ka hadlaan baahiyaha gaarka ah ee kooxahani, oo ay ku jiraan tallaabooyin da' ahaan ku haboon iyo kuwo ku wajahan xagga jinsiga.*

### 3.3.3. Madax-bannaani

Marka loo eego gudashada hawlaha sharciga, mabda'a 12aad ee Mabaadi'da iyo Habraacyada Qaramada Midoobey ee Marin-u-helidda Kaalmada Sharci ee Nidaamka Caddaaladeed ee Ciqaabta Qaramadu waa inay xaqiijiyaan in hawl-wadeennada bixinaya Kaalmada Sharci ay awoodaan inay shaqadooda u fuliyaan si wax ku ool ah, xor ah oo madax-bannaan. Gaar ahaan:

> *"Qaramadu waa inay xaqiijiyaan in hawl-wadeennada Kaalmada Sharcigu ay awoodaan inay gutaan dhammaan shaqooyinkooda mihnadeed iyadoonay jirin cadaadis, carqalad iyo carin ama faro-gelin aan haboonayn; inay awoodaan inay si xor ah ugu socdaalaan si ay ula taliyaan oo ay ula kulmaan macmiishooda iyo in si buuxda loo ilaashay khusuusiyaadkooda dalkooga gudihiisa iyo dibeddaba, iyo inay si xor ah marin ugu helaan dacwad oogista iyo faylasha kale ee la xidhiidha, iyo in aanay ka kulmin, ama aan loogu hanjabin dacwad ku oogis, tallaabooyin maamul, dhaqaale ama ciqaab kale oo ka dhalatay fal ay u qaadeen si waafaqsan asluubta, min-qiyaaska iyo masuuliyadaha mihnadeed ee la aqoonsan yahay."*

## 3.4. Mabaadi'da Khusaysa Asluubta Qareennada

Sida kor ku xusan, dadweynaha maskaxdoodu waxay badanaa Qareennada difaaca si khaldan ugu soo soocdaa dembiyada, ra'yiga iyo afcaasha macmiishooda. Waxaa intaa dheer, macmiishooduna waxay si khaldan ugu soo soocdaa Qareennada difaacu inay la jiraan Booliska, Dacwad oogeyaasha iyo Maxkamadaha. Ka shakiga Qareennada difaacu waxaa laga yaabaa inuu yahay natiijo aan laga baaqsan karin oo ka dhalata doorkooga adag ee murugsan ee ay ku leeyihiin maareynta caddaaladda. Mar haddii masuuliyadahoogu ay inta badan ku furayaan faham-darro, cadho ama dhaliil, waxaa khasab ah in Qareennada difaacu u dhaqmaan si waafaqsan min-qiyaaska asluubeed ee ugu sarreeya iyo in Urrurada ay Qareennadu ku midoobeen ay si adag u xukumaan tallaabooyinka mihnaddeed ee xubnahooga. Inkastoo aanay habboonayn in Qareennada difaacu ay filaan in si balaadhan loogu jeclaan doono ama lagu bogaadin doono gudashada shaqadooda, hadday si wacan u noqdaan kuwo asluub wacan, waa inay filaan in loola macaamilo doono si sharaf iyo qadarin leh oo ku habboon shaqadooda/mihnaddooda.

Aasaaska asluubta Qareenka difaacu waa inay ku jiraan Xeerka Anshaxa Qareennada ee dalka. In aqoon fiican loo yeesho mid kasta oo qodobbadani kamid ah iyo in la fahmo ujeeddadooduba waa muhiim.

Inaad wakiil u noqoto dhibanaha dembi laga galay wakhtiyada qaarkood way ka duwanaan kartaa inaad wakiil u noqoto qofka eedeysanaha ah. Dhibaneyaasha dembiga laga galay dhacdooyinka qaarkood, tusaale ahaan dacwadaha kufsiga ahi, waxay si ba'an uga dawakhsanaan karaan dhibanenimadooda aanay xitaa lahayn awood sharci ama kartiba. Markaas oo kale, Qareenku waa in aanu fikir taban ka qaadanin u magacaabista wakiil sharci ama ilaaliyaha macmiilka. Balse, Qareenku waa inuu raadiyaa inuu helo qofka ugu masuulsan uguna lexo-jeclo badan ee la heli karo oo ay maxkamaddo aqoonsato.

Qareennada dhibaneyaashu waa inay fahmaan in dhibanahu uu mararka qaarkood weli ka cabsi qabi karo qofkii/kuwii dhibka u geystay ama uu ku sii xidhnaan karo iyaga oo aanu awooddin inuu garto ama ilaashado

danihiisa. Marka qofka dhibka geystay uu kamid yahay qoyska dhibanaha, waxaa danta shakhsiyadeed ee dhibanaha ah in Qareenku uu ka taageero xubnaha qoyska oo dhan.

Mabaadi'da lagu waajibiyey Qareennada inay qadariyaan markay gudanayaan masuuliyadahooga waxaa loo qaybin karaa kuwo la xidhiidha:

- Mihnaddiisa guud ahaan iyo gudashada hawlahiisa sharci;
- Dabeecadda uu kula dhaqmayo macmiilka, iyo
- Dabeecaddiisa uu kula dhaqmayo hay'adaha.

Waa hoos ku cad qaar kamid ah mabaadi'dani oo ku jira Mabaadi'da Aasaasiga ee Qaramada Midoobey ee Doorka Qareennada iyo Mabaadi'da iyo Habraacyada Qaramada Midoobey ee Marin-u-helidda Kaalmada Sharci ee Nidaamka Caddaaladeed ee Ciqaabta.

### 3.4.1. Hufnaanta iyo Hawl-karnimada Mihnadlayaasha Sharciga

Mid kamid ah mabaadi'da ugu mudan ayaa ah in Qareenku uu badanaa ilaasho hufnaanta iyo hawl-karnimada mihnadda sharciga. Sida ku xusan Mabaadi'da Aasaasiga ee Qaramada Midoobey ee Doorka Qareennada[64], masuuliyadaha Qareennada ka saaran macmiishooda waa inay ku jiraan:

> *"13. (a) Kula talinta macmiishooda sida ay farayaan xuquuqahooga iyo waajibaadkoogu iyo siduu u shaqaynayo nidaamka sharci ilaa iyo inta la xidhiidha xuquuqaha sharci iyo waajiibaadka macmiishooda;*
>
> *(b) Ku caawinta macmiishooda dariiq kasta oo habboon, iyo qaadista tallaabooyin sharci oo ay ku ilaalinayaan xuquuqdooda;*
>
> *(c) Caawinta macmiishooda maxkamadda, guddiyada garsoor ama hay'adaha maamul hortooda, markii ay habboon tahay.*
>
> *14. Qareennadu, iyagoo ilaalinaya xuquuqaha macmiishooda iyo iyagoo kor u qaadaya nidaamka caddaaladeed, waa inay in doonaan inay difaacaan xuquuqaha aadamaha iyo xorriyaddaha aasaasiga ah ee ay aqoonsan yihiin shuruucda maxalliga iyo caalamiga ahba waana inay wakhti kasta ku dhaqmaan iyagoo xor ah oo taxadiraya si waafaqsan sharciga iyo min-qiyaasyada iyo asluubaadka la aqoonsan yahay ee mihnadda sharciga.*
>
> *15. Qareennadu waa inay badanaa si daacad ah u qadariyaan danaha macmiishooda,"*

### 3.4.2. Ilaalinta Sirta

Ilaalinta sirtu waa mid kamid ah waajibaadka asluubeed ee Qareen kasta ka saaran macmiilkiisa. Hadduu macmiilku uu faro mooyaane, waa wax aan ku habboonayn Qareenka inuu siiyo macluumaad kasta oo uu u sheegay macmiilkiisu dhinac saddexaad xilliga shaqada ama kadib. Waa in uu Qareenku ilaasho kalsoonida macmiilkiisa oo ka dhigan xogtiisa shakhsiyadeed iyo xogta ka dhalatay dacwad khusaysa qofkani ku lug

64 Waxaa lagu ansaxiyey Shirweynahii Siddeedaad ee Qaramada Midoobey ee ka Hortaga Dembiyada iyo la Macaamilka Eedaysaneyaasha. Havana, Cuba, oo la bilaabay August 27 socday ilaa September 7, 1990.

leh ama lahaa, dacwad ka socota garsoorka ama hay'ad aan garsoor ahayn iyo soo dhexgalka kaleba waa in la ilaasha marxaladaha dacwadda oo dhan, oo ay ku jirto in aan loo sheegin macluumaad kasta ama xog shakhsiyadeed saxaafadda ama warbaahinta.

Micnaha mabda'a ilaalintu sirtu waa in aanu Qareenku u isticmaalin macluumaadka uu helay intii wakiilashada macmiilku ay jirtay si khasaare ku ah macmiilka.

Waxaa u baahan in hoosta laga xariiqo in ilaalinta sirtu aanay ahayn arrin ay tahay inuu Qareenka oo qudhi keligii qadariyo, laakiin waa inay qadariyaan oo ilaashaan masuuliyiintu/hay'adahu. Sida ku xusan Mabaadi'da Aasaasiga ee Qaramada Midoobey ee Doorka Qareennada *"Dowladduhu waa inay aqoonsadaan una qadariyaan in isgaadhsiinta iyo wada tashiga Qareennada iyo macmiishooda ee xidhiidhkooga shaqo dhexdiisu ay yihiiin sir ay tahay in la ilaasho"* (Tilmaanta 22).

Waa aasaasi in la ilaasho kalsoonida ka dhaxeysa Qareenka iyo macmiilka iyadoo la hubinayo in wareysiga macmiilku (sida hoos lagu sameeyey) uu qarsoon yahay. Macmiisha ku jirta xabsiga badanaa way adag tahay in saraakiisha jeelka ama xabsigu ay siiyaan fursad lagula hadlo oo aan la maqlayn. Haseyeeshee, inkastoo ay masuuliyiinta xabsiga iyo jeelku ay caabin karaan, haddana Qareennadu waa inay ku adkeystaan inay wareysi gaar u ah la yeeshaan macmiishooda[65].

Waxaa lagu talinayaa in macmiilka la siiyo macluumaad badan oo ku saabsan dabciga eedaha uu wajahayo ilaa iyo inta macquulka ah iyo difaacyada la rajeynayo intaan la dhageysanin qaybtiisa dhacdooyinka. Markaad qaabkani u wada hadashaan waxaad badanaa ka feejignaan kartaa inaad wakhti badan ku lumiso sharaxaada dhacdooyin aan xidhiidh la lahayn iyo inaad ku hagto inuu kuu sheego dhacdooyinka inta badan kaa caawin doonaa difaaca dacwaddiisa. Tusaale aahaan, haddii macmiilkaagu uu ku eedaysan yahay khamaar waxa uu doonayo inuu ka hadlaana ay khusayso sidii uu ku waayey lacagta markuu khamaarayey (oo aan difaac ahayn) waxaa fiican inuu dhacdadaasi kugu wargeliyo inta hore ee wada hadalka.

Xubnaha qoysku badanaa waxay jecel yihiin inay goob joog ahaadaan marka la wareysanayo xigtadooda, haseyeeshee, xitaa xubnaha qoyska waxay burburin karaan ilaalinta sirta wareysiga. Waxa kale oo jirta mar aanu macmiilka awoodi doonin inuu runta sheego haddii xubnaha qoyskoodu ay goob-joog yihiin (gaar ahaan carruurta). Dabcan, duruufaha qaar waa muhiim in la wareysto xubnaha qoysku, iyadoo la door bidayo kadib wareysiga macmiilka. Guud ahaan, habka habbooni waa in ugu horreyn laga wareysto qoyska iyo macmiilkaba arrimo aan ahayn sir la ilaalinaayo kadibna loo gudbo wareysiyada kala gaarka ah ee macmiilka iyo qoyska.

65 Mabaadi'da Aasaasiga ee Qaramada Midoobey ee Doorka Qareennada Lr.8, wuxuu odhanayaa: *"Dhammaan dadka xidhan, la qabtay ama xadhiga lagu xukumay waa in la siiyaa fursado ama wakhti ku filan, waxyaabaha saacidaya booqashadooda iyo inay la xidhiidhaan lana tashadaan Qareen daahid, rabshid iyo faaf-reeb la'aan iyo xafidaad sirreed oo buuxda. Wada-tashigaasi way arki karaan laakin ma maqli karaan saraakiisha sharciga dhaqan-gelinaysa."*); Qodobka 14.3 ee ICCPR wuxuu dhigayaa in marin-u-helidda Qareenku ay noqoto *"xaaladdo la siinayo qadarin buuxdo ilaalinta sirta wada hadalkooga"*; eeg sidoo kale Dhokumentiga Mabaadi'da Ilaalinta Dhammaan Dadka U Xidhan Qaab Kasta oo xadhig ah ama xadhig ku xukuman, Mabaadi'da 17 iyo 18.

Ilaalinta sirtu waxay noqon kartaa mabda'a ugu muhiimsan. Haddii uu ku xadgudbo ilaalinta sirta macmiilka Qareenku waa inuu filaa ciqaabta uu saari doono ururka Qareennadu oo ah shaqo ka joojin wakhti dheer ah ama inuu waayo ruqsadaba.

### 3.4.3. Takoor la'aan

Mabda'a 6.26 ee Mabaadi'da iyo Habraacyada Qaramada Midoobey ee Marin-u-helidda Kaalmada Sharci ee Nidaamka Caddaaladeed ee Ciqaabta, Qareenku waa in aanu diidin difaacista macmiilka sabab uu wax kala ka door biday, ama salka ku haysa isirka, midabka, luuqadda, dhalashada, asluubta, qabiilka ama bulshada uu ka soo jeedo, jinsiyada ama meesha uu degan yahay, ku dhashay, waxbarashada, mansabka bulsho ama mansab kale ama hantiyeed, jinsiga, da'da, diinta ama aaminsanaan kale, siyaasadda ama fikir kale, jidhka ama maskaxda oo uu ka buko darteed ama sabab kale darteed.

*Hawl-qabadka - Toddobaad*

1. Waxaad ka habsaantay dhageysigii dacwadda ee maxkamadda sababtoo ah waxaad xalay xilli dambe ku raagtey xaflad aroos ah mana aad rabin inaad ka kacdo sariirta. Garsooraha (oo aad garanayso inuu musuq-maasuq badan yahay) ayaa ku weydiiyey sababta aad u habsaantay waxaanu ku sheegay inuu kugu xukumi doono gaanax haddaanad sabab fiican keenin. Waxaad raadyoowga ka maqashay in dariiqyada qaar ay xidhnaayeen subaxdaasi qaraxyo awgood.

- *Maxaad u sheegi lahayd Garsooraha?*
- *Miyaad aragtaa dhaqan lid ku ah mabda'a la xidhiidha anshaxa Qareennada?*

2. Sababtoo ah inaad ka habsaantay maxkamadda Garsoorahu wuu kuu cadhooday waxaanu ku sheegay in aanad ka bixi karin ilaa aad oggolaato dacwadaha toban eedaysane oo aanay cidi ka metelin maxkamadda maalintaasi sababtoo ah Qareenkoogii oo loo xidhay inuu maal-gelinayey argagaxiso. Waxaad aamintay in mid kamid ah tobankani la siin deyn doono haddaad iyaga caawiso laakiin imikaad mashquul tahay ba oo wakhti kugu filan uma haysid inaad si habboon u xaliso dacwadahaaga imika.

- *Miyaad oggolaan lahayd dacwadaha cusub?*
- *Maxay tahay inaad ku taxgaliso go'aankaaga?*

3. Waxaad joogtaa qolkii maxkamadda dhexdiisa markaad maqashay saxiibkaagii ugu fiicnaa ee Iskuulkii sharciga oo sidoo kale ah seedigaa oo weydiinaya macmiilkiisa laaluush uu siiyo Garsooraha. Gooni ayaad isaga ula baxday waxaanad u sheegtay in aanu oggolaanin lacagta laaluushka ah, laakiin wuu ku diiday waxaanu kuu sheegay inay tani tahay shayga qudha ee uu ku caawin karo macmiilkiisa oo uu hubo inuu dembilaawe yahay iyo inuu u baahan yahay qayb laaluushka kamid ah si uu siiyo ninka guriga ka kireeyey ama isaga, walaashaa iyo ilmahoogu ay bilaa guri noqon doonaan.

- *Qodob kamid ah Xeerka Anshaxu miyuu sharaxayaa masuuliyaddaada xaaladdani?*
- *Talaabadee aad qaadi doontaa?*

## 3.5. Xidhiidhka Macmiilka

Waxaan layaab lahayn in ku dhowaad kala badh mabaadi'da ay ka kooban yihiin Xeerarka Anshaxa ee waddamada badankoogu ay la xidhiidhaan xidhiidhka macmiilka, maadaama la macaamilka habboon ee macmiilku uu yahay ka ugu aasaasisan masuuliyadaha asluubeed ee Qareenka difaac. Badanaa Qareenka difaacu waa saaxiibka keliya ee la jira macmiilka markuu adduunku ka soo horjeesto. Masuuliyadda ugu horreysa ee Qareenka difaacu waa inuu qadariyo danaha ugu wacan ee macmiilkiisa. Haseyeeshee, arrimo badan ayaa ku adkayn kara Qareenka difaaca inuu si guul ah u qaado masuuliyaddani muhiimka ah.

### 3.5.1. Dhismaha Is-aaminaadda

Inkastoo helitaanka aaminaadda macmiilku ay badanaa adag tahay; Qareenku waa inuu isku dayaa inuu sidaasi sameeyo markasta oo ay macquul tahay. Macmiilka aan aaminsanayn waxay u badan tahay in aanu bixinin macluumaadka lagama-maarmaanka u ah difaaca dacwadda iyo in aanu raacin talada Qareenka. Macmiilka oo si qadarin leh loo dhageysto iyo is ilaalinta markasta lagu wargeliyo macmiilka ayaa aad muhiim u ah si loo kasbado aaminaadda macmiilka. Ka caawinta macmiisha arrimaha yar yar ee xaaladahooga maxbuusnimo (sida u soo iibinta bustayaasha xilliga jiilaalka, cunto badan oo fiican, , ama waxbarasho) ama ka caawinta inay la xidhiidhaan qoysaskooda ayaa wakhtiyada qaar loogu guuleysan karaa kalsoonida macmiilka shakisan. Badanaa isku dayga daacadda laga yahay ee loogu doodayo danaha macmiilka xitaa haddaan lagu guuleysanin ayaa loogu guuleysan doonaa aaminaada iyo qadarinta macmiilka.

Ka sii daynta macmiilka xadhiga xabsiga iyadoo ay shuruudi ku xidhan tahay sida dhigista damaanadda, u magacaabista damiinka, ama ballan-qaadka inuu imanayo ayaa ah dariiqa wanaagsan ee lagu kasban karo aaminaada macmiilka[66].

Haddii lagu guul-dareysto sii daynta macmiilka, Qareenku wuxuu weli sii wadi doonaa (iyadoo la filayo in macmiilku uu og yahay habka) inuu ka shaqeeyo danaha macmiilka iyadoo ay u badan tahay inuu macmiilku noqon doono mid si ka sii wanaagsan ula shaqayn doona Qareenkiisa inta ka hadhsan difaaca.

### 3.5.2. Ilaalinta Aaminaadda

Macmiishu waxay badanka ka walaacaan in Qareenku uu danahooga ka hor iman doono ama uu sheego doono sirtooda. Sidaas darteed waxaa muhiim ah inaad sida ugu dhakhso badan ugu sharaxdo isla marka aad la kulanto macmiilka siday kaaga go'an tahay masuuliyaddaaada inaad ilaaliso sirtiisu. U sheegista macmiilka in haddii uu jebiyo ilaalinta sirtiisu ay ku sababi karto Qareenka inuu waayo shaqadiisa ama dakhligiisa nololeed waxay kobcinaysaa kalsoonida uu macmiilku ku qabo Qareenkiisa waxaanay kordhisaa iimaanka uu ku qabo xidhiidhkooda.

Caadi ahaan xeerarka anshaxa Qareennada oo dhami waxay dhigayaan in Qareennadu ay masuuliyaddoodu tahay inay joojiyaan wakiilnimada macmiisha oo ay qaadaan tallaabooyinka lagu saxayo markasta oo uu

66 Min-qiyaasyada Caalamiga ahi waxay dhigayaan in la tixgaliyo sii deynta shuruuda leh ee dhageysiga dacwadda kahor, ICCPR, Qodobka 9.3.

ogaado in macmiilku uu ku kacay dembi ama khiyaamo. Si looga feejignaado duruufahaasi soo baxaya waxaa lagama-maarmaan ah in lagu wargeliyo macmiilka masuuliyaddiisa bilowga xidhiidhkaba. Haddii aad mar dambe ku tuhunto in afcaasha macmiilku ay sharci-darro yihiin, waxaa wanaagsan inaad mar kale ogeysiiso masuuliyaddiisa kuna dhiirigaliso in aanu ku kicin tallaabooyin sharci-darro ah.

Hanjabaadu waa mid kamid ah hababka uu ku dareemi karo Qareenku in sharci-darro ku soo fool leedahay. Macmiishu mararka qaar waxay u cadhaysnaan karaan qof eeddeyey ama Dacwad oogaha. Haddii uu macmiilku kuu sheego *"Waxaan doonayaa inaan ninkaasi dilo"* waxaa muhiim ah inaad kala hadasho macmiilka inuu arrintani keliya ay ka keentay cadhadu iyo inay si dhab ah ugu qorshaysan yahay dilkaasi inta aanad tirtirin wakiilnimada. Tusaale ahaan, *"Haddii aad ii sheegayso inay kuu qorshaysan tahay inaad disho dacwad oogaha, waxaa I saaran masuuliyadda ah inaan ka tanaasulo Qareennimadaada oo aan qaado tallaabooyin saxitaan ah, haddii aad keliya u leedahay cadho aad isaga u qabto markaa anigu waan kula fahmi karaa waynu ka wada hadli karnaa sida ugu fiican ee aynu isku difaaci karno"*.

Inkastoo ay habboon tahay inuu Qareenku ku dhiirigaliyo macmiilka inuu lahaado rajo wanaagsan, waxay noqon kartaa khalad weyn hadduu ku dhiirigaliyo rajo been ah maadaama ay u badan tahay inuu Qareenka ku eedayn doono haddii natiijadu ay noqon waydo sidii uu macmiilku rabay. Weligaa ha ballan-qaadin natiijooyin gaar ah, keliya samee dedaalka gaarka ah ee aad samayn doonto. Odhaahdaada ah: *"Waxaan rabaa inaan kuu xareeyo rafcaan kaasi oo laga yaabo in lagaaga sii daayo xadhiga"* wuxuu macmiilku u fahmi karaa *"rafcaankani ayaa lagugu sii deyn doonaa"* haddii aan wadahadal culus loogu sharaxin nidaamka rafcaannada loo fulin doono.

Macmiishu waxay ku weydiin doonaan inaad saadaaliso maxsuulka dhageysiyada kala duwan kahor inta aan la dhammeystirin. Jawaabta ugu fiican ee marka uu macmiilku ku weydiiyo *"Miyaan ku guuleysan doonaa dacwadayda?"* waa *"Ma garanayo"* oo uu Qareenku raacin karo *"ila shaqee waxaynu abbuuri doonnaa fursado badan oo guul ah"* ama *"Waxaan qaban doono wax kasta oo aan kuu qaban karo dacwaddani"*. Mararka qaar waxaa habboon in macmiilka loo sheego in fursadaha dacwaddiisu *"aanay wanaagsanayn"*. Haseyeeshee, haddii Qareenku oo u haysto inuu saadaalin karo maxsuulka dacwad kasta waxaa hubaal ah in khiyaaligaasi uu mar uun kala yaaci doono. Qareenka waxay masuuliyadi ka saaran tahay inuu ka shaqeeyo danaha macmiilkiisa dacwad kasta waxba kama gelin rajo xumada kiiskaasi ka muuqata, haddii Qareenku si iimaan qabta u fuliyo masuuliyadihiisa, mararka qaar Qareenku wuxuu la yaabi doonaa natiijada guusha iyadoonay cidina u arkayn inay macquul tahay.

Badanaa, kala daadsanaanta xidhiidhka macmiilka iyo Qareenku wuxuu ka dhashaa is faham la'aanta. Rajada ugu fiican ee looga feejignaan karo dhibaatadani waa in Qareenku uu kor u qaado heerka fahamka uu macmiilku ka haysto duruufahiisa iyo doorka Qareenka ee dacwadda. Macmiilka si fiican u wacyi gashani wuxuu abuuri doonaa dhibaatooyin aad u yar, rajada in shaqadaada badan iyo daacadnimadaada aad ku kasban doonto aaminaada macmiilkaaga iyo kalsoonidiisu way kordhi doontaa.

*Hawl-qabadka - Siddeedaad*

1. Macmiilkaaga (oo aad aaminsan tahay inuu dembiile yahay) waa dawarsade, waxaa la garanayaa inuu la socdo dembiileyaasha, ur qadhmuun ayuu leeyahay, kuma aaminsana waxaanu kuula hadlayaa si bilaa akhlaaq ah. Dacwad oogaha oo ay aabbahaa jaar yihiin cid kastaana ay qadariso, ayaa si sir ah kuu weydiiyey in aanad hor istaagin in la aqbalo caddeynta warbixinta khabiirka ee odhanaysa in xabada laga helay dhibanahu ay ka timid qoriga macmiilkaaga. Adiga iyo macmiilkaaga midkiina goob joog muu ahayn wakhtigii su'aalaha la weydiinayo ka khabiirka lagamana heli karo khabiirka maxkamadda dhexdeeda si aad su'aalo u weydiiso. Dacwad ooguhu wuxuu kuu sheegay in aanu weligii oggolaan doonin mid kamid ah maragyada iyo qoraallada aad keeni doonto dacwadahaaga mustaqbalka haddii aad imika hor istaagto warbixintani.

- *Mabda' anshaxeedkee ay tahay inaad tixgaliso?*
- *Tallaabooyinkii aad qaadi doontaa?*

2. Waxaad metelaysaa Nin ku dhex jira ganacsiga koontarabaanka ah, wuxuu ku eedaysan yahay inuu gacanta ka jebiyey shaqaalihiisa. La kulankaagii ugu horreeyey macmiilkaagu wuxuu kuu sheegay in aan lagu xukumi karayn. Wuxuu dabadeedna kuu sharaxay inuu berri walaalkii ku amri doono inuu u tago shaqaalihiisa oo ku wargeliyo in la dilo doono haddii uu sheego wax lid ku ah madaxdiisa. Dabadeedna macmiilkaagu intuu dhoolacadeeyey ayuu kuu sheegay in aanay jirin maragyo kale oo caddeynaya inuu garaacay shaqaalihiisa.

- *Talaabadee ayaad qaadi doontaa?*
- *Mabda' anshaxeedkee ay tahay inaad tixgaliso*

3. Macmiilkaaga waxaa lagu xukumay inuu abbaabulay koox koontarabaan ah, waxaana lagu xukumay 6 sano oo xadhig ah waxaanad u qaaday rafcaan aan weli la dhageysanin. Macmiilkaagu malaha wiilal iyo walaalo. Wuxuu kuu sheegay in xaaskiisa iyo gabadhiisu aanay maareyn karayn beerta isaga la'aantii waxaanu kaa codsaday inaad u soo hesho qof iibsada beerta. Waxaad og tahay in adeerka uu ku nool yahay isla tuuladaasi oo uu doonayo inuu iibsado beerta qoyska macmiilkaaga.

- *Maxaad u sheegi doontaa macmiilkaaga?*
- *Waa kuwee Qodobbada Xeerka Anshaxa ee aad tixgalinaysaa?*

Maalmo yar kadib adeerkaa wuxuu ku weydiiyey in macmiilkaagu uu wax fursad ah u haysto inuu ku guuleysto rafcaankiisa sababtoo ah wuxuu doonayaa inuu isku dayo inuu qiimo jaban ku helo beerta waxaanu rabaa in macmiilkaagu oggolaado inaad isku guuriso hablahiisa midkood iyo wiilka ugu yar wiilasha adeerka.

- *Maxaad u sheegaysaa deerkaa?*
- *Waa kuwee Qodobbada Xeerka Anshaxa ee aad tixgalinaysaa?*

4. Waxaad metelaysaa macmiil ku eedaysan khatar gelinta nolosha ilmo yar ee Qodobka 450 ee Xeerka Ciqaabta Guud. Intii aad metelaysay macmiilkani, wuxuu kuu sheegay tuuganimo uu ku kacay isagoo isticmaalaya furayaal uu sameystay sannad kahor intaan qofna ku tuhmin inuu sidaasi sameeyey.

- *Miyaad leedahay masuuliyad aad ku sheegto macluumaadka tuuganimooyinkaasi?*

- *Miyaad leedahay waajibaad aad kaga aamusto tuuganimooyinkani?*

5. Waxaad metelaysaa Xasan waxaanu kuu qirtay inuu galay dembi laakiin uu doonayo inaan lagu helin dembiga. Xasan wuxuu sidoo kale kuu sheegay inuu doonayo inuu ka furo dhageysiga dacwadda in Xakiim oo ay jaar yihiin uu galey dembiga.

- *Tallaabooyinkee aad ka qaadi doontaa dacwadda Xakiim?*

### 3.5.3. Wareysiga Macmiilka

Isagoo si fiican u gudanayo masuuliyadahiisa ilaalinayana danaha macmiilkiisa, Qareenku waa inuu badanaa la yeeshaa wareysi bilow ah macmiilkiisa. Himilooyinka wareysiga waxaa ku jira oo aanay se ku koobnayn:

a) Dhisida aaminnaada macmiilka,
b) Ku wargelinta macmiilka xidhiidhka ka dhaxeeya Qareenka iyo macmiilka,
c) Ku wargelinta macmiilka eedaymaha iyo difaacyada macquulka ah ee eedaymahaasi,
d) Barista macmiilka nidaamka sharci
e) Ogaanshaha baahiyaha, arrimahiisa iyo walaaca macmiilka, iyo
f) Ugu dambeyn, ogaanshaha macmiilka dhacdooyinkiisa iyo meelaha laga helo maragyada iyo caddeynta.

Qareenku wuxuu ku qasban yahay inuu joojiyo dooddiisa haddii uu jiro dane ka hor imanaya, ama kalsoonidiisu ay khatar ku jiri karto ama madax-bannaanidiisu ay gorgortan geli karto.

Waxaa intaa dheer, Qareenka waxaa saaran masuuliyadda inuu joojiyo wakiilnimada oo uu qaado tallaabooyinka lagama-maarmaanka ah markasta oo uu ogaado in macmiilku uu ku kacay dembi cusub ama khiyaamo. Waxaa intaa ka badan, Qareenka iyo qof kasta oo adeeg sharci bixinayaa waa in aanu ku lug lahaan khiyaamo, marin-habaabin ama fal sharci-darro ah dhageysiga dacwadda maxkamadaha sharciga ah hortooda xitaa hadday tani ay maslaxad u tahay macmiilka.

*Hawl-galka - Koowaad:*

fasalka waxaa loo qaybinayaa 3-6 kooxood. Koox kastaa way wada shaqaynaysaa si ay u sameeyaan jawaabo qoran oo liistaysan. Liistooyinka waxaa dabadeed lagu soo bandhigi doonaa fasalka oo dhan hortiisa si loo sameeyo liis iskujir ah oo si dhammeystiran uga jawaabaya su’aalaha hoose:

Macmiilkaaga Saddam wuxuu ku eedaysan yahay u hor kicida dembi gelineed ee Qodobka 320 ee Xeerka Ciqaabta Guud sababtoo ah carruur kala duwan oo jeeb-siibayaal ah oo dhowaan la soo xidhay ayaa sheegay inay isaga u shaqaynayeen. Waxaad markii ugu horreysay kula kulmaysaa jeelka.

- *Liis ku samee su’aalaha aad weydiin doonto isaga markaad la kulanto.*
- *Liis ku samee mawduucyada aad ku wargelin doonto macmiilkaaga kulankiina.*
- *Ma wanaagsanaan doontaa inaad ugala hadasho mawduucyada aad liistaysay nidaam gaar ah, hadday sidaas tahay, nidaamkee?*

- *Wakhti intee le'eg ayaad u oggolaan doontaa ka hadalka mawduuc kasta? Muxuu noqonayaa celcelis ahaan dhererka macquulka ah ee wareysigaaga ugu horreeya?*
- *Macquul ma tahay inaad si keligiin ah u wada hadashaan macmiishaada Jeelka ama Xabsiga ku jira? Caqabadahee haddiiba ay jiraan ayaa kaa hor istaaga inaad isgaadhsin sirteeda la ilaashay ama idinka oo qudha idinku kooban la yeelato macmiilkaaga xidhan? Sidee ayey Qareennadu uga shaqeyn karaan inay meesha ka saaraan caqabadaha hor taagan isgaadhsiinta sirteeda la ilaashay?*

### 3.5.4. Khilaafaadka Daneed

Markasta oo Qareenku uu yeesho dane khilaafaya danaha macmiilkiisa waxay daciifinaysaa imaanka daacadnimada iyo hufnaanta shaqada guud ahaan. Mabaadi'da ka dambeysaa waa in aanu Qareenku siin doonin daacadnimadiisa oo buuxda danaha macmiilkiisa haddii uu khilaafayo danahiisa, macmiilkuna kuma kalsoonaan karo Qareenka haddii uu khilaaf jiro.

Khilaafka danahu waa wax si caadi ah iskaga dhaca oo aanu khalad ku lahayn Qareenku, haseyeeshee, maadaama daawadu ay tahay in Qareenku uu ka tanaasulo wakiilnimada waxay danta dhinacyada ay khusayso oo dhami ku jirtaa in sida ugu dhakhso badan ee ugu macquulsan loo aqoonsado khilaafaadka danaha ee soo bixi kara. Sidaas darteed, waxyaabaha ugu horreeya ee Qareenka ku waajibka ah isla marka uu helo kiis cusub waa inuu dib u eego dacwadda si uu u qiimeeyo *haddii uu khilaaf daneed jiro ama ay u badan tahay inuu soo baxo.*

Khilaafka ugu badani wuxuu soo baxaa markaay Qareenka ama lamaanahiisu xidhiidh la leeyiihiin dhibanaha soo dacwooday ama mid kamid ah maragyada dacwadda. Tusaale ahaan, marag ayaa saaxiib, xigto, macmiil, ama macmiil hore u noqon kara Qareenka. Maadaama Qareenku uu u baahan yahay inuu weeraro aaminaada marag kasta oo ka soo horjeeda macmiilkiisa khilaaf daneed ayaa dhacaya markasta oo ay jirto ama ay muuqato in Qareenku uu waxoogaa daacad u yahay maragga. Khilaafka danahu wuxuu sidoo kale soo bixi karaa markasta oo uu jiro xidhiidh dhow oo ka dhaxeeya Qareenka iyo Garsooraha ama dacwad oogaha ku qoran dacwadda.

Waa dhaqan xun in Qareen qudhi uu metelo in ka badan hal shakhsi dacwad qudha. Inkastoo dacwad ooguhu uu wada eedayn karo laba iyo in ka badan oo shakhsiyaad ah oo si wadajir ah u galay dembi oo uu mid kastaaba leeyahay difaac gaar ah xilliga dhageysiga dacwadda. Xaqa difaacu waa xuquuq shakhsiyadeed. Ku dhowaad dacwad kasta oo hal eedaysane in ka badani ay ku eedaysan yihiin, eedaysane kastaa wuxuu leeyahay sabab uu awoodda u saaro dembiilenimada kuwa kale iyo inuu iska yareeyo masuuliyadda [dembi]. Qareenku si wadajir ah daacad uguma noqon karo laba macmiil oo leh laba dan oo is khilaafaya iyo shakhsiyaad kuwada eedaysan hal xaashi eedeed oo markay u dhowdahay danahoogu ay is khilaafayaan.

Tusaale ahaan, dacwadaha ka ganacsiga dadka oo ay ku lug leeyihiin in ka badan hal qof, waxaan laga baaqsan karin in khilaaf daneed uu ka dhex dhaco shakhsiyaadkaasi doorarka kala duwan ku leh nidaamka ka ganacsiga dadka. Kala duwanaanshe dhawr ah waa in lagu sameeyaa kuwa qorshaynayey ka ganacsiga

dadka, kuwa hirgalinaya nidaamka kuwa kale, iyo kuwa ka faa'iideysanayey hal Qareenna si wadajir ah uma metali karo kuwani leh xidhiidhada iska soo horjeeda.

*Hawl-qabadka - Sagaalaad*

1. Macmiilkaagu wuxuu ku eedaysan yahay inuu bambo ku xidhay masaajid oo uu ku dhintay Taliyihii Booliska ee Gobolka oo ku tukanayey. Adiga iyo Taliyaha Boolisku isku degmo ayaad ka soo jeeddaan, xaaskiisa ugu yarna waxaa eeddo u ah xaaska walaalkaaga kaa weyn. Waxaad magaalada ka soo guurteen markaad laba jirka ahayd, walaalkaana wuxuu ku nool yahay Itoobiya oo maad arag toban sano. Maragga yidhi waxaan arkay macmiilkaaga oo roogga hoostiisa ku qarinaya shay masaajidka dhexdiisa oo dabadeedna waxaa uu cararey debedda waa macalinka iskuulka ee wiilkaaga. Ninka askariga ah ee ku soo xidhay dibeda masaajidkuna waa adeerkaa.

- *Ma jiraan dannayoow is khilaafaya oo adiga kaaga baahan inaad joojiso u doodistu?*
- *Liis ku samee khilaafaadka macquulka ah [ee dhalan kara] Waxaanad tilmaantaa midka kaaga baahan inaad ka tanaasusho dacwadda haddiiba uu jiro, iyo sababta go'aan kasta [oo aad qaadatay].*

2. Macmiilkaagu waa wiilka ninka soo dejiya iibiyana taayirada gawaadhida yar yar ee magaaladiina, isaga iyo aabbihiiba waxaa lagu eedeeyey inay Somaliland soo geliyeen maandooriyeyaal. Aabbahaa waa ninka labaad ee ugu soo dejinta iyo iibinta balaadhan taayirada gawaadhida yar yar waxaanu jecel yahay inuu sii balaadhiyo ganacsigiisa.

- *Miyaad haysaa dano is khilaafaya oo kaaga baahan inaad kaga tanaasusho dacwadda?*

## 3.6. Ka Cabashada Qareenka

Haddiiba ay jirto cabasho liddi ku ah Qareenka oo khusaysa masuuliyadahiisa, waxaa laga arki karaa habka ciqaabka sida ku xusan Xeerka Ciqaabta ee 1962kii. Qodobka 299 ee Xeerka Ciqaabtu wuxuu si cad u sheegayaa in Qareenka aan daacadda u ahayn masuuliyadahiisa mihnadeed ee dhaawac ku keena danaha dhinacii uu difaacayey, Kaalmaynayey ama uu wakiilka u ahaa hay'adaha garsoorka hortooda in lagu ciqaabayo saddex sano oo xadhig ah iyo ganaax aan ka yareyn 5,000/- (5,000,000 SHSL). Sida ku xusan faqradda 2aad ee qodobka 299aad ciqaabta waa la kordhinayaa xaaladahani soo socda:

- Marka uu dembiilahu falka uu galo isagoo la safan dhinacii ka soo horjeeday;
- Haddii falka loo sameeyey si loogu xumeeyo qofka eedaysanahaeedeysanaha ah (Sida ku xusan Qodobka 299 faqraddiisa 3aad marka falka ku xumeynta ah laga galay qof ku eedaysan dembi ciqaabtiisu tahay Dil ama xabsi daa'in ciqaabta Qareenka difaaca waxaa loo kordhinayaa saddex sano ilaa toban sano iyo ganaax aan ka yareyn 10,000/-[10,000,000 SLSH])

Waxaa intaa dheer, Qodobka 300 ee Xeerka Ciqaabta oo sheegaya in Qareenka hay'adaha garsoorka hortooda u wareejiya adeegyadii mihnadiisa ama taladdii uu bixinayey dhinacii ka soo horjeeday lagu ciqaabayo xadhig dhan lix bilood ilaa saddex sano iyo ganaax aan ka yareyn 1,000/- [1,000,000 SLSH].

Sida ku xusan faqradda 2aad ee Qodobka 300 XC ciqaabtu waa ilaa saddex sano iyo ganaax dhan 500 ilaa 5,000/- [500, 00 ilaa 5,000,000 SHSL], haddii uu Qareenka ama la taliyuhu, kadib markii uu Kaalmeeyey

ama wakiil u noqday dhinac uu iyadoonu dhinacani ogayn isla dacwaddani ku kaco difaacista ama la talinta dhinaca ka soo horjeeda.

Weliba, Xeerka Ciqaabtu wuxuu ku ciqaabayaa Qodobka 301 musuqmaasuqa Qareenka isagoo odhanaya *"Qareenka iska dhigaya inuu duufsan karo Garsooraha ama Xeer-ilaalinta Guud ama marag, khabiir, ama turjumaan ee qaata ama lacag awgeed ama faa'iido kale oo uu siinayo ama u balan qaaday qofka uu wakiilka u yahay isaga ama qof saddexaad si uu ugu keeno tageerada Garsooraha iyo Xeer-ilaalinta ama khabiir iyo turjubaan ama uu iyaga wax u siiyo waxa lagu ciqaabayaa xabsi ah laba sao ilaa siddeed sanno 10,000/- [10,000,000]"*.

Waxaa u baahan in la ogaado in qofka lagu xukumo qodobbada 299, 300 faqradda 1aad iyo 301 ay ka dhalanayso ka xayirnaanta shaqada xafiiska dowladeed (Qodobka 302 XC).

Marka laga yimaado masuuliyadda ciqaabeed, cabashooyinka lidka ku ah Qareenka difaaca ee gudashada masuuliyadahiisu waxaa ka dhalata sidoo kale tallaabooyin anshax-marineed sida ku xusan mabda'a 13.37 Mabaadi'da iyo Habraacyada Qaramada Midoobey ee Marin-u-helidda Kaalmada Sharci ee Nidaamka Caddaaladeed ee Ciqaabta[67]: *"Cabashooyinka anshaxeed ee liddi ku ah hawl-wadeennada bixinaya Kaalmada Sharci waa in si degdeg ah loo baadhaa loogana gar-naqaa si waafaqsan xeerarka asluubta mihnadeed guddi dhexdhexaad ah hortooda oo dib u eegis garsoor lagu sameyn karo"*.

Sida ku xusan Mabaadi'da Aasaasiga ee Qaramada Midoobey ee Doorka Qareennada eedaymaha ama cabashooyinka la sameeyo ee lidka ku ah Qareennada awooddooda shaqo waa in loo wadaa si dhakhso ah caddaaladna ah iyadoo la raacayo tallaabooyinka ku habboon. Qareennadu waa inay badanaa helaan xuquuqda dhageysiga caddaaladda ah, oo ay ku jirto inay Kaalmaystaan Qareen ay iyagu iskood u doorteen (tilmaanta 27).

Dacwadaha anshax-marinta oo dhan waa in looga go'aan qaata si waafaqsan xeerka anshaxa mihnadda iyo min-qiyaasyada kale ee la aqoonsan yahay iyo asluubta mihnadda sharciga iyo iyadoo loo eegayo mabaadi'idani (tilmaanta 29).

*Su'aalo:*

1. *Muxuu macmiilku sameyn karaa haddii uu cabasho ka qabo Qareenkiisa?*
2. *Guddidee ayaa awood u leh inay wax ka qabato falalka anshax-marineed ee Qareenka?*
3. *Anshax-xumada Qareenka ma lagu dhameyn karaa qaab ka baxsan nidaamka garsoorka?*
4. *Qareenku ma u baahan yahay Qareen matela wakhtiga tallaabooyinka anshax-marineed?*

67 Sidaas oo kale Mabaadi'da Aasaasiga ee Qaramada Midoobey ee Doorka Qareennada waxay sheegayaan: *"Dacwadaha anshax-marineed ee Qareennada lidka ku ah waa in la keenaa guddi anshax-marineed oo dhexdhexaad ah oo ay sameeyeen Mihnadlayaasha sharcigu horteeda, hay'adda madax-bannaan oo sharci ah horteeda ama maxkamad horteeda, waana in dib u eegis garsoor lagu sameyn karaa"* (Tilmaanta 28).

# Cutubka 4:
# Hababka Kaalmada Sharci

## Ujeeddooyinka Waxbarasho

Cutubkani dhexdiisa ka qayb-galayaashu waxay:

- Ogaan doonaan Qaababka Kaalmada Sharci ee kala duwan;
- Fahmi doonaan nidaamka Kaalmada Sharci ee imika Somaliland ka shaqeeya, iyo
- Isku dayi doonaan inay helaan qaabka Kaalmada Sharci ee Somaliland ku habboon.

Shuruucda maxalliga ah iyo sida loo dhaqmaa si cad bay u kala duwanaan karaan inkastoo ay guud ahaan waafaqsan yihiin min-qiyaasyada caalamiga ah ee xuquuqaha aadamaha iyadoo ay sabab u tahay falsafada ('margin of appreciation' doctrine') oo aaminsan inay awoodda xukumadda qaranka tahay ta go'aaminaysa sida loo qorshaynayo bixinta Kaalmada Sharci ee deegaannada ay khusayso. Qodobbada lagu maamulayo xaaladaha ay 'khasabka tahay' iyo kuwa ay 'Ikhtiyaarka tahay' waxaa laga keeni karaa waajibaadyada caalamiga ah ee qabanaya qaranka ama sharciga maxalliga ah. Aragti ahaan, sharciga maxalliga ahi waa inuu waafaqsan yahay waajibaadyada caalamiga ah ee qaranka qabanaya haseyeeshee arrintu badanka tani uun ma aha.

Kolba sida ay yihiin noocyada adeegyada la heli karaa, iyagoo ku xidhan xaaladaha, waxay noqon karaan adeegyo ku kooban (talo sharci, diyaarinta qoraallada la xidhiidha, iwm), iyo wakiil u noqosho buuxda, oo ay ku jirto ka qayb-galka Qareenka ee dhageysiyada dacwadda. Noocyada adeegyada la bixinayaa way kala duwanaan karaan marxaladaha kala duwan ee dacwadda iyagoo ku xidhan culayska eedaymaha iyo dabeecadda shakhsiyadeed ee qofka adeegyada la siinayo. Sidaas darteed, nidaamyada badankooga, tusaale ahaan sida kuwani ka shaqeeya Kanada, UK, iyo Netherlands talada sharci waxaa loo heli karaa si fudud, oo ay ku jiraan adeegyada sida tooska ah ('online') loo sameeyo iyo kuwa iyadoo taleefanka la isticmaalayo la isla taliyo, halka inaad hawaysato Qareen wakiil kuu noqdaa ay u baahan tahay inaad marto tallaabooyinka codsashada iyo tijaabinta.

### 4.1. Kala duwanaanshaha Hababka Kaalmada Sharci

Adduunkoo dhan, waxaa jira Qaababka Kaalmada Sharci oo aad u kala duwan sida:

- Kaalmada Sharci ee taburicidda waajibka ah ('pro bono') oo ay fuliyaan Qareennada madax-bannaani;
- Qareenno magacaaban oo uu qaranku maal-geliyo iyo difaacayaasha dadweynaha;
- Qareennada shaqada ku tabobaranaya ee uu qaranku maal-geliyo oo lagu qoro shirkadaha sharciga ee baadiyaha;
- Xarumo adeegyada sharci bixiya oo uu qaranku maal-geliyo;
- Xarumo caddaaladeed oo uu qaranku maal-galiyo;
- U doodidda danaha dadweynaha oo uu qaranku maal-geliyo;
- Heshiisyada wada-shaqayneed ee uu qaranku maal-geliyo;
- Shirkadaha sharciga ee danaha dadweynaha;

- Xarumaha Kaalmada Sharci ee Jaamacadaha;
- Xarumaha nooca adeegga sharci ee dadka bilaashka lagu siiyo (street law), iyo
- Talada xafiisyada kaaliye qareen (‘Paralegal’).

### 4.1.1. Tabarucista Qareennada (‘Pro bono’)

Waddamo badan oo ah kuwa soo koraya waxaa ka jiri karta in Qareennadu ay dhaqan u leeyihiin inay bixiyaan tabarucaad Kaalmo sharci ah laakiin way yar tahay inta ay qasab tahay (marka la barbar dhigo Maraykanka oo tusaale ahaan, Qareennada oo dhan ay tahay inay dhammeystiraan tiro saacado ah sannadkiiba oo ku tabarucis Kaalmo sharci ah) haseyeeshee, dhowaanahan waxaa jira kor u kac ku yimid sameynta tabarucidda Kaalmada Sharci oo waajib lagaga dhigay Qareennada sharciga ku shaqeeya. Bahda sharciga ee Koonfur Afrika (‘The Cape Law Society in South Africa’[68]) waxay waajib kaga dhigtay xubnaheedu inay qabtaan shaqo ku taborucid Kaalmo sharci ah. Kiiniya waxay waajib kaga dhigtay qabashada ku taborucid Kaalmo sharci xubnaha mihnadlayaasha sharciga oo looga baahan yahay inay caddeynteeda keenaan inay shaqadani qabteen si loogu cusbooneysiiyo ruqsadaha, halka Nayjeeriya uu qorshaha dib u dhisku soo jeediyey qabashada ku taborucidda Kaalmada Sharci inay shuruud u noqoto magacaabista Qareenka sare.

Qaababka ku tabarucista Kaalmada Sharcigu qiimo aan qaali ahayn ayey ku shaqeeyaan, haddii ay taageeraan mihnadlayaasha sharciguna, waxay kicin karaan ruuxda adeegga dadweynaha. Haseyeeshee, macmiisha ku tabarucista Kaalmada Sharci wax uma helaan ilaa heer lamid ah macmiisha kale ee wax iska bixisa. Waxaana intaa dheer, Qareennada badankoogu waxay ka cago-jiidaan inay qabtaan dacwadaha lagu tabarucayo Kaalmada Sharciga kuwaasi xitaa haddii ay qasab ku tahay ‘iibsada’ wakhtiga loo qoondeeyey inay ku bixiyaan arrintani (Maraykanka dhexdiisa Qareenku wuxuu kharash siin karaa Urrurka Qareennada si looga dhaafo qabashada ku tabarucista Kaalmada Sharciga).

Ku tabarucista Kaalmada Sharciga waxaa loo isticmaali karaa in lagu kaabo adeegyada Kaalmada Sharciga ee uu qaranku maal-geliyo, laakiin waa in loo arkaa inay ka farcanto.

### 4.1.2. Xarumo Adeeg sharci lagu bixiyo (‘Law Clinics’)

Xarumaha adeegga sharciga lagu bixiyo ee Jaamacadaha waddamada soo korayaa waxay door muhiim ah ka qaadan karaan kaabista shaqooyinka ay qabtaan guddiyada qaran ee Kaalmada Sharcigu, iyo dhammeystirka kor u qaadista iyo ilaalinta xuquuqaha aadamaha. Ka qayb-qaadashada ardayda sharciga baranaysa ee bixinta Kaalmada Sharciga, oo si habboon loo hagay loona kormeeray, keliya ma balaadhinayso adeegyada Kaalmada Sharciga laakiin waxay quluubta jiilka dambe ku beeraysaa dareenka masuuliyadda bulshada ka saaran iyo inay fahmaan yididiilada in sharcigu yahay qalabka bulshada caddaaladeeda iyo dib u dhiskeeda. Mid kamid ah ujeeddooyinka ugu waa weyn ee barashada sharcigu waa in la tabobaro Qareennada

68 Koonfur Afrika ayaa ah tusaale fiican u ah Kaalmada Sharci sababta oo ah waxay soo tijaabisay adeegsiga kaalmo sharci oo adeegyada kaalmada sharci ee dawliga ah iyo kuwa aan dawliga ahayn ee la siinayo dadka faqiirka ah marka lagu jiro dacwada madaniga iyo ciqabtaba iyadoo loo marayo hababka kaalmo sharci oo kala duwan. Eeg David McQuoid-Mason, *The Legal Aid Board and the Delivery of Legal Aid Services in South Africa*: www.legalaidreform.org

mustaqbalka, ma aha keliya si ay u noqdaan kuwa awood leh, laakiin sidoo kale inay ka go'naato baahida loo qabo in la kobciyo nidaamka caddaaladeed ee jiraa inay masuuliyaddooda mihnaddeed tahay. Tusaale ahaan, xarumaha Kaalmada Sharci ee Jaamacaduhu waxay ahaayeen ururadii ugu horreeyey ee waddamo kala duwan oo Afrikaan ah awoodda saaray inay siiyaan marin ay ku helaan caddaalad dadka Afrikaanka ah ee faqiirka ahi.

Haseyeeshee, haddaan xarumaha sharciga ee Jaamacadaha lagu darin miisaaniyadaha Jaamacadahooga, ama miisaaniyadda guddiyada qaran ee Kaalmada Sharciga, heerkooga maaliyadeed khatar buu ku jiri doonaa maadaama ay ku xidhan yihiin deegaanka ama deeqda lacageed ee ajaanibka. Guddiyada qaran ee Kaalmada Sharci oo la sameeyo ayaa maaliyad ahaan u taageeri kara iyagoo heshiisyo wada shaqayneed la galaya. Tusaale ahaan, Koonfur Afrika, xarumo sharci oo badan waxaa maal-gelisa Kaalmada Sharci ee Koonfur Afrika. Wakhti yar kadibna, xarumahani sharci waa laga madax-bannaanaysiiyey Jaamacadahii waxaana lagu daray xarumaha caddaaladeed inkastoo waxoogaa xarumo sharci oo Jaamacadeed ahi ay weli u jiraan si madax-bannaan.

### 4.1.3. Barnaamijyada Barista/ku Wacyi-gelinta Sharciga

Barnaamijyada barashada sharcigu waxay door muhiim ah ka qaataan kordhinta adeegyada sharciga ee dadka faqiirka ah waana in loo arkaa inay qayb muhiim ah ka yihiin qaabka Kaalmada Sharci ee qaran kasta. Mashruuca[69] adeegga sharci ee bilaashka ah ee Koonfur Afrika ('Street law Project') waa barnaamij ka hortag ah oo sharciga dadka lagu barayo kaasi oo dadka faham ka siinaya xuquuqahooda sharci iyo xuquuqaha aadamaha iyo siday u dhaqan-gelin karaan xuquuqahaasi. Ardayda adeeggani sharci ee bilaashka ah ee Jaamacaddu waxay barteen sida loo isticmaalo qaabka wada shaqayneed ee waxbarasho markay sharciga barayaan carruurta iskuulada, maxaabiista iyo dadka caadiga ah. Barnaamijkani waxaa laga qabtay boqolaal dugsi sare dhammaan Koonfur Afrika[70] waxaanu iskugu jiraa tabobarida ardayda sharciga oo wax ka dhigaya Buuggaagta sharciga ee ardayda loo sameeyey iyo macallimiinta dugsiyada oo Buugga macalimiinta loogu talogalay isticmaalaya.

Sida xarumaha sharciga oo kale, haddaan barnaamijyada adeegga sharci ee bilaashka ah ee Jaamacadaha ('University street law programmes') lagu darin miisaaniyadaha Jaamacadahooga, ama miisaaniyadda guddida qaran ee Kaalmada Sharci, heerkooda maaliyaddeed wuxuu ku jiri doonaa khatar.

### 4.1.4. Bixiyeyaasha Kaalmada Sharci ee aan Dowliga ahayn

Waddama badan oo qaranku aanu haysanin dakhli ku filan oo uu ku bixiyo gargaar sharci, ururada aan dowliga ahayn ayaa isku daya inay buuxiyaan kaalintaasi bannaan. Badanaa shuruudahooga siinta Kaalmada Sharci waxay awoodda saaraan in la siiyo dadka ugu nugul, xadka shaqadooduna wuxuu ku egyahay wakiilnimada sharci, talada iyo wacyi-gelinta sharci, wacyi-gelinta bulshada iyo marar qaarkood waxooga adeegyo aan sharciga la xidhiidhin ah sida kala talinta dhaqan-bulsho ah ('psychosocial counseling'). Waxay

69 http://www.streetlaw.org.za/.

70 David McQuoid-Mason, ibid.

ku koobnaan karaan deegaannadooda ama nooca dacwadeed/arrimaha ay ka hadlayaan (tusaale ahaan, urrurada aan dowliga ahayn ee Kaalmada Sharci wuxuu keliya ka shaqayn karaa guriyeynta, dhulka iyo arrimaha hantida, ama keliya wuxuu qaadi karaa dacwadaha ciqaabta ah). Urruro badan oo aan dowli ahayn oo aan faa'iido doon ahayn ayaa ku xidhan maal-gelinta deegaanka ama deeqda caalamiga ah, iyadoo uu kordhayo walaaca laga qabo inay wakhti dheer sii waari doonaan.

Shaqada muhiimka ah ee ay qabtaan ururo badan oo aan dowli ahayni waa bixinta gargaar sharci dadka xidhan xilliyada dhageysiga dacwadda ka horreeya saldhigyada booliska dhexdooda, ama rumaanka ama rafcaanka marka uu jeelka ku jiro. Urrada aan dowliga ahayn qaarkood sida Machadka Adeegga La talinta ee Caawiyeyaasha Sharciga (Paralegal Advisory Service Institute (PASI)) ee Malawi wuxuu ku qabtaa jeelasha casharo barasha sharciga ah si ay maxaabiista u baraan sharcigooda ciqaabeed iyo habkiisa, si ay maxabiistu u fahamto sharciga dabadeedna ugu dabaqaan dacwadahooga fadhiyada dambe ee maxkamadda – tusaale ahaan inay sameyn karaan codsigooda damaanadeed, u oggolaan lahaayeen dembiilenimada, una dhigi lahaayeen dhibcahooga kuwa khafiifinaya ciqaabta lagu xukumayo, ama ay qabsan lahaayeen difaacooga. Ururada Malawi iyo Kiiniya ba waxay la shaqeeyaan Garsooreyaasha degaanka kuwaasi oo booqasho ku sameeya Xabsiyada halkaasi oo ay Garsooreyaashu ku shaandhayn karaan culayska dacwadaha dhageysiga dacwadda kahor iyagoo meesha ka saara kuwa sharci-darrada ah ama aan lagama-maarmaanka ahatb iyo si ay u muddeeyaan dhageysiga dacwadaha. Hawl-galkani wuxuu wax ku ool ku noqday inuu dhimay qayladii iyo buuqii maxbaabiista markii dib loo soo celiyey kalsoonidii maxaabiistu ay ku qabeen nidaamka caddaaladeed mar haddii ay arki karaan in aan iyaga la ilaawin.

Ururada aan dowliga ahayni waxay bixin karaan talooyin iyo gargaar sharci oo aasaasi ah kaasi oo ka caawinaya inay dadka ku tilmaamaan ikhtiyaarkooda ugu sokeeya iyo si ay u awoodaan s inay dhex mushaaxaan nidaamka caddaaladeed. Iyagoo dadka baraya sharciga, urrurada aan dowliga ahayni waxay awood-siin karaan inay dadku sharciga ku dabaqaan duruufahooga gaar ah iyo inay sharciga u isticmaalaan sida kabaalkii ay wax ku badali lahaayeen. Markay noqoto caddaaladda ciqaabta, in si degdeg ah marin loogu helo talada iyo gargaarka sharci saldhiga booliska dhexdiisa isla marka qofka la xidho iyo wakhtiga wareysiga, horkeenista hore ee maxkamadda iyo xabsiyada dhexdooda waxay qaranka ka caawinaysaa inuu raaco xuquuqaha aadamaha ee balaadhan iyo waajibaadkiisa dastuuriga ah ee xaqiijinta in eedaysane kastaa uu marin-u-helay Qareen sida ugu dhakhso badan kadib markii la soo xidhay[71] iyo inay heleen wakhti ku filan iyo waxyaabo saacidaya inay diyaarsadaan difaacooga[72].

Hadalkoo kooban, iyadoo ay sabab u tahay sumcaddooda iyo waayo-aragnimadooda ku dhisan bixinta Kaalmada Sharci, qaab kasta oo Kaalmo sharci oo cusub waa inuu ogaadaa hababka uu si rasmi ah ama aan rasmi ahayn ba ugula shaqayn karo Kaalmada Sharci ee Ururada aan dowliga ahayn ka jirta. Habab tixraac ah ayaa la sameysan karaa marka guddida Kaalmada Sharcigu ay tilmaamayso dacwadaha aanay awoodin inay qabato, haseyeeshee waxaa loo baahan yahay in la helo sugnaanshaha ah in la xaqiijiyo in Ururada aan dowladda ahayn ee Kaalmada Sharcigu aanay la dawakhin dacwadaha loo soo tilmaamay iyo inay yeeshaan

71 Dastuurka Somaliland, Qodobka 27(1).

72 International Covenant on Civil and Political Rights (ICCPR), article 14(3)(b).

xaqa inay diiddi karaan haddii macmiilku aanu buuxinayn shuruudahooga ama uu yimaado khilaafaad daneed iwm. Haddii maal-gelin loo helo, guddida qaranka ee Kaalmada Sharcigu waxay ku taageeri kartaa ururada aan dowliga ahayn maaliyad ahaan iyadoo la galeysa heshiisyo wada shaqayneed si ay uga qabtaan hawsha gargaarka sharci ee degaan gaar ah (tusaale ahaan meelaha baadiyaha ah) ama dad gaar ah (tusaale ahaan dadka gudaha ku baro-kacay) ee aanu qaabka qaranku gaadhi karayn, ama bixinta adeegyada qaabka qaranku aanu awood u lahayn inuu fuliyo (tusaale ahaan dacwadaha madaniga iyo dhexdhexaadinta).

### 4.1.5. Caawiyeyaasha Bulsho ee Sharciga

Caawiyeyaasha sharciga ee bulshadu waa dad caadi ah (badanaa aan qaadanin tabobar sharci ama qaatay tabobaro sharci oo aan dhammeystirnayn), oo ka yimid bulshada ay doonayaan inay u adeegaan lana siiyey tabobar aasaasi ah oo xeerarka lagu shaqeeyo ah iyo xirfadaha sida dhexdhexaadinta, wareysiga iyo u hadalka/doodidda. Waxay dadka awoodsiiyaan inay aqoon balaadhan u yeeshaan sharciga, xuquuqahooga iyo waajibaadkooga. Waxay siiyaan hagid ah sidii ay u fahmi lahaayeen xuquuqahaasi waxaanay keenaan xalka dhibaatooyinka shaqsiyaadka deegaanka ah iyo bulshadaba. Caawiyeyaasha sharci ee bulshadu waxay badanaa ka shaqeeyaan dhulka baadiyaha ah ee bulshooyinku ay sida kooban marin ugu helaan nidaamyada caddaaladeed, oo ay ku jirto marin-u-helidda Qareennada, iyo meesha ay u badan tahay in khilaafka lagu xalliyo nidaamyada dhaqanka. Caawiyeyaasha sharci ee bulshadu ma sameeyaan wakiil u noqosho, laakiin waxay fuliyaan hawlo kala duwan oo heerka bulsheed ah oo ujeeddadoodu ay tahay inay si dhammeystiran u xalliyaan dhibaatooyinka dadka ama bulshada, sida siinta macluumaadka sharci iyo go’aan qaadashada dacwadeed, fulinta wacyi-gelin sharci iyo waxbarista bulshada dhexdhexaadinta, u hadalka/doodista, taageerista isku keenista bulshada iyo tallaabada loo dhan yahay, iyo ka caawinta dadka iyo bulshadaba inay dhaqaajiyaan hay’adaha maxalliga ah, oo ay ku jiraan booliska iyo waaxaha dowladaha hoose. Caawiyeyaasha sharci ee bulshadu waxay awoodaan inay ka dhaxeeyaan nidaamyada caddaaladeed ee rasmiga ah iyo dhaqankaba ah. Waxay fahmaan bulshada waxaanay la hawl-geli karaan odayaasha degaanka iyo hoggaamiyeyaasha diimeed si loo xaqiijiyo in go’aan qaadashada heerka degaanku ay tixgaliyaan xuquuqaha aasaasiga ah ee dadka oo dhan.

Caawiyeyaasha sharci ee bulshadu waxay badanaa wax ku ool noqdaan markay ku xidhmaan Qareennada sidaas darteed waxay siin karaan xubnaha bulshada ikhtiyaar dacwadeed (badanaa waxa la fuliya hawl-wadeennada degaanka ama urrada aan dowliga ahayn ee bixiya Kaalmada Sharci). Waxay door muhiim ah ka ciyaaraan qaababka Kaalmada Sharci iyagoo:

- Bulshooyinka bara xuquuqaha aadamaha iyo shuruucda;
- U gudbinta macaamiisha xafiisyada Kaalmada Sharci iyo Qareennada, iyo
- Barista oday dhaqameed xuquuqdooda iyo waajibaadkooga sharciga hortiisa.

Tusaale ahaan, Koonfur Afrika dhexdeeda, caawiyeyaasha sharcigu waxay ku jiraan Xarumaha Qaranka ee Caddaaladda iyo heshiisyada wada shaqayneed. Malaawi dhexdeeda, xeerka cusub ee Kaalmada Sharciga ayaa loogu aqoonsaday inay yihiin hawl-wadeeno bixinaya Kaalmo sharci.

Waddamo badan gudahooda, qaababkaasi sare ayaa ka jira iyagoo u kala baxa hababkani Kaalmada Sharci ee soo socda:

- Sarkaal garsoor oo hore/qaabka Qareennada ay maxkamaddu magacowdo[73];
- Qaabka [Qareenka] difaac ee dadweynaha[74], iyo
- Qaabka isku dhafka ah[75].

Marka laga yimaado qaabkani ay qaateen kuwani sare ku xusani, waxaan aad macquul u ahayn in qaran uu haysan karo kheyraadkii uu ku siin lahaa Kaalmo sharci oo ku filan dhammaan dadka u baahan. Xitaa nidaamyada Kaalmada Sharci ee ugu da'da weyn aadna u horumaray ayaa waxay u halgamayaan maal-gelin ku filan Kaalmada Sharci ee wajahaysay dalabaadkani faraha badan. Sidaas darteed, waxaa faa'iido badan in la tixgaliyo hawl-wadeennada kale iyo qaababka kale ee la isticmaali karo sidii loo kordhin lahaa Kaalmada Sharci, gaar ahaan muddada gaaban ('short term').

### 4.2. Nidaamka Kaalmada Sharci ee hadda Somaliland ka jira

Imika Somaliland waxaa la soo jeediyey qaabka isku dhafka ah ee gaar ahaan Kaalmada Sharci ee uu qaranku kafaalo qaaday oo ay imika hirgaliso Kooxda ka tirsan Wasaaradda Caddaaladda ee Somaliland (oo maamusha Kaalmada Sharci ee uu qaranku maal-geliyo) iyo qaabka difaacayaasha dadweynaha. Hawl-wadeennada Kaalmada Sharci waxay u shaqaynayaan qaranka ama si gaar ah [dad gaar ah], ama waxay Kaalmada Sharci u bixinayaan iskood. Difaacayaasha dadweynahu waa inay buuxiyaan shuruudaha lagu

73 Qaabka Qareennada ay maxkamaddu magacoowdo wuxuu 30[kii] sano ee ka dambeeyey Dagaalkii II ee Adduunka ku sii caan baxay Yurub, Uustareeliya iyo Maraykanka, waxaanu ahaa qaabka ugu badan ee loo bixiyo Kaalmada Sharci wadamo badan gudahooga. Maalmahani, waxaa laga isticmaalaa waddamo badan oo soo koraya oo Afrika, Eeshiya iyo Bariga Yurub ah. Ilaa muddooyinkani, wuxuu yahay qaabka ugu horeeya ee loo bixiyo Kaalmada Sharci ee uu qaranka Koonfur Afrika kafaalo qaado.

74 Qaabka difaacaha dadweynaha waxaa lagu qeexa Kaalmada Sharci ee Qareenno mushahar qaata oo ay shaqaalaysiisay hay'adda Kaalmada Sharci (dowladdu) ay siiyaan dadkii loogu talo-galay.
Qaabka difaacaha dadweynaha wuxuu markii ugu horeysay soo baxay sanadahii 1940naadkii, tusaale ahaan, Maraykanka iyo Uustareeliya. Dhammaadkii sanadahii 1940naadkii, qaramo badan ayaa bilaabay tallaabooyin ay dib ugu dhisayeen qaababkooga Kaalmada sharc, iyagoo sameeyey nidaamyada Qareennada ay maxkamaddu magacoowdo iyo qaabka isku dhafan iyagoo markii ugu horreysay adeegyo dhammeystiran oo Kaalmo sharci la siiyey muwaadiniinta faqriga ah ama dakhligoogu hooseeyo. Labaatankii sano ee u dambeeyey, dimuqraadiyadii ka soo baxday iyo waddamada koraya ee Bariga Yurub, Laatiin Ameerika iyo meelo kale, oo ay ku jiraan Luusaaniya, Bulgaariya, Meksiko, Nikaraagu, Koloombiya, jili, Maangooliya, iyo Koonfur Afrika ayaa dhammaantood bilaabay oo keenay qaabka difaacaha dacweynaha iyagoo ka jawaabaya daldalooladii ay ogaadeen ee qaabkii hore ee ay maxkamaddu magaacaabi jirtay sida kharashkii maaliyaddeed iyo walaacii dadka faqiirka ah ka haystay tayada wakiiladooda. Waxyaabaha aasaasiga u ah inuu qaabkani guuleysto waa inuu ka madax-bannaan yahay faro-galin siyaasadeed ama garsoor. Doorashada, maal-galinta iyo wax siinta Qareenka difaacu waa inay madax-bannaanaadaan. Difaacayaasha dadweynaha waa inay awooddaan inay si buuxda ugu doodaan danaha macmiilkooga dartii, oo badanaa wajahi doona qaranka oo dhinaca kale ee dacwadaha ciqaabta ah. Haseyeeshee, ilaa iyo imika majiro qaran si gooni ah u qaatay qaabka difaacaha dadweynaha.

75 Habka guud ee la qaatay waa in la fuliyo "nidaam isku dhaf ah" oo muhiimada siinaya in la isticmaalo difaacayaasha dadweyne oo shaqaalaha qaranka ee saacadaha buuxa shaqeeya ah laakiin sidoo kale waxaa ku jira Qareennada gaarka ah oo heshiis la gali kara xafiiska difaacista dadweynaha si ay wakiil ugu noqdaan eedaysaneyaasha faqiirka ah marka difaacayaasha dadweynahu aanay awoodin, heerka xirfaddeed ama uu jiro dano is khilaafaya. Qaramo badan xitaa nidaamkani isku dhafka ah ayaa markii dambe lagu kaabay qaabab kale oo kala duwan oo loo bixiyo adeegga Kaalmada Sharci.

diiwaangeliyo Qareenka ama lagu magaacaabo dacwad oogaha sida uu sheegayo sharcigu ama uu dhigayaba. Caawiyeyaasha sharcigu waxay bixin karaan Kaalmada Sharci sida uu dhigayo sharcigu.

Ilaa iyo imika qaabkani wuxuu ku kooban yahay Qareenno ay Wasaaradda Caddaaladdu kula heshiiso dacwad-dacwad si ay Kaalmo sharci u bixiyaan dacwadaha dembiyada culus marka uu eedaysanahu uu faqiir yahay. Sida ku xusan sharciga, Garsooraha guddoominaya maxkamadda ay khusayso ayaa magacaaba Qareen wax lagu siinaayo qoraalka qaan-sheegta ah ee uu Garsooruhu ku soo ansaxiyey in Qareenku uu dhammeystiray hawshii wakiilnimada sharci. Qareennada waxaa wax lagu siiyaa tirada inta jeer ee ay maxkamaddu dhageysatay dacwadda ee uu Qareenku ka soo qayb galay. Qiimahana waxaa lagu xaddiday 30,000 oo Shilinka Somaliland ah (ku dhowaad 5 dollar) dhageysi (fadhi) kasta.

Ilaa iyo imika qaabkani malaha tallaabooyin lagu kaantaroolo tayada, daah-furnaan la'aanta [ay wax kastaaba cad yihiin), nidaam loo raaco magacaabista iyo codsiga lacag bixinta oo aan jirini waxay ka dhigeen qaabkani mid u nugul eedaymo musuq-maasuq iyo eex.

Qabyo-qoraalka Xeerka Kaalmada Sharcigu wuxuu soo jeediyey in la dhiso Golaha Difaaca Dadweynaha oo ah xafiis qaran oo madax-bannaan oo bixinaya Kaalmada Sharciga; ka soo dhammeystiraya adeegyada (la bixinayey in yar kahor dhaqan-galka xeerkani) mana baddelayo qaab ama nidaam kale oo bixinaya ama fududdeynaya marin-u-helidda Kaalmada Sharciga. Masuuliyadaha ugu mudan ee Golaha Difaaca Dadweynahu waa ka shaqaysiinta xafiisyada difaaca dadweynaha meel kasta oo ay maxkamadi ku taalo, iyo haddii lagama-maarmaan tahay, xabsiyada gudahooda iyo bixinta Kaalmada Sharci ama heshiis la gelida Qareennada gaar ah si ay u bixiyaan adeegyada Kaalmada Sharci ee degdegga ah iyago metalaya qaabka difaaca dadweynaha.

Ilaa iyo imika Kaalmada Sharci ee urrurada aan dowliga ahayn ee madaxa-bannaan (hawl-wadeennada bixiya Kaalmada Sharci) oo ay taageeraan hay'ado caalami ah oo kala duwan ayaa waxaa bixiya:

- Urrurka Qareennada Somaliland (SOLLA) (wuxuu ka shaqeeyaa gobollada Somaliland oo dhan marka Sool laga reebo);
- Urrurka Haweenka Qareennada Somaliland (SWLA) (oo ka shaqeeya Hargeysa iyo Gebiley);
- Jaamacadda Hargeysa, Xarunta Adeegga Sharciga (oo ka shaqeysa Hargeysa);
- Jaamacadda Camuud Xarunteeda Adeegga Sharciga (oo ka shaqeysa Borame).

Ururada kor ku xusani waxay bixiyaan gargaar sharci waxayna dacwadaha ciqaabta iyo madaniga ahba wakiil u noqdaan xubnaha bulshada ee nugul, iyagoo si gaar ah awoodda u saara baahiyaha haweenka, carruurta, dadka gudaha ku baro-kacay, dadka rumaan gareysan iyo dadka saldhigyada booliska ku xidhan. Kaalmada Sharci waxaa bixiya Qareenno iyo caawiyeyaal sharci[76] waxaana ku jirta wakiilnimada sharci, siinta macluumaadka sharci iyo talooyin sharci, dhexdhexaadin iyo adeegyo wacyi-gelin sharci ah. Waxaa intaa dheer, Xarumaha adeega sharci ee Jaamacadaha Hargeysa iyo Camuud waxay waxbarasho dhinaca sharciga ah ku siiyaan ardeyda sanadaha saddexaad iyo afaraad ee Jaamacadda oo si waayo-aragnimo sharci loogu

76 Qareennada [Kaalmada Sharci] SOLLA waa 11, SWLA waa 5, Hargeisa Legal Clinic waa 9 iyo Amoud Clinic oo 3 ah. Caawiyeyaasha sharci waa 22 SOLLA ah, 6 baa SWLA ah, 13 baa Hargeisa Legal Clinic ah iyo 4 Amoud Clinic ah.

kaabo barashadii sharciga ee sharaxaada uun ahayd. Kormeerka tayada iyo xadka shaqada hawl-wadeennada Kaalmada Sharci waxaa sameeya deeq-bixiyeyaashooda oo ay u diraan warbiximaha waxqabadkooda bil walba ama saddexdii biloodba. Ilaa iyo imika, shaqada saddexdani adeeg bixiye badankeega waxaa lagu fuliyaa Hargeysa, Caasimadda Somaliland iyo agagaarkeeda iyadoo SWLA iyo SOLLA ay si kooban ugu sugan yihiin gobollada kale. Xarunta Kaalmada Sharci ee Camuud waxay u shaqeysa bulshada Borame guud ahaanteed.

Laba daraasaddood oo Somaliland lagu qabtay sanadkii 2012 ayaa ku saabsanaa arrinta marin-u-helidda caddaaladda iyo Kaalmada Sharciga[77]. Labada daraasadoodba waxaa lagu wareystay qayb dadweynaha kamid ah isla markaana ahaa daneeyayaasha kala duwan ee qaybtani caddaaladda waxaanay khuseeyeen baahiyahooga caddaaladeed, aragtiyaha ay ka haystaan iyo waayo-aragnimadooda nidaamka caddaaladeed ee Somaliland.

Daraasadda 'Caddaaladda iyo Boolisboolisku waxay go'aamisay inay bulshada dhexdeeda ka jiraan aaminaad la'aan laga qabo nidaamka caddaaladeed. Sababaha ugu weyn ee aaminsanaan la'aanta booliska, Maxkamadaha iyo Qareennada waxaa u sabab ah musuqmaasuqa ragaadiyey dhammaan qaybaha nidaamka rasmiga ah ee caddaaladeed. Waxaa la ogaaday inay jirto aragti guud oo dadweyne oo ah in musuqmaasuqu ku baahay nidaamka rasmiga ah oo dhan iyo in dadka lacagta haysta oo qudhi ay heli doonaan ilaalinta sharciga.

Qayb kamid ah Daraasaddani 'Caddaaladda iyo Booliska', ra'yi ururin aragtida dadweynaha ah ayaa lagu sameeyey Diisambar 2011ka 120 qof oo haween, dhallinyaro, iyo dadka gudaha ku baro-kacay ah oo ah gobolka Hargeysa ee Somaliland. Natiijadii ra'yi ururintu waxay daaha ka rogtay in ku dhowaad marka saddex qaybood laga dhigo 120ka qof meel ahaani ay la kulantay dhibaato caddaaladeed ama sharci intii u dhaxaysay Janaayo ilaa Diisambar 2011. Marka laga yimaado qoladani, koox kale oo 45 qof oo hawl-wadeennada Kaalmada Sharci ee kor ku xusani[78] ay siiyeen adeegga Kaalmada Sharci, waxaa lagu ogaaday in baahiyaha dhinaca sharciga ay ugu muhiimsan yihiin dhibaatooyinka qoysku (oo ay ku jiraan xadgudubyada lamaanaha iyo muranada dhaxalku) iyo muranada dhulka, iyo arrimaha dembiyada khafiifka ah sida weerarka (Dagaalka). Arrimahani la ogaaday waxay faa'iido u noqonayaan hagida doodaha ku saabsan baahida iyo xadka macquulka ah ee bixinta gaargaarka sharci ee ay dowladdu kafaalo qaado dacwadaha madaniga ah.

77 Tii ugu horreysay waxay ahayd "Xoojinta Tayada iyo Xadka Bixinta Caddaaladda iyo Booliska Somaliland' (Strengthening the Quality and Scope of Justice Provision and Policing in Somaliland) oo ahayd daraasad bilow ah oo ay samaysay Kuliyadda Sharciga ee Jaamacadda Hargeysa. Waxaa daraasadda maaliyad ahaan iyo farsamo ahaan ka caawiyey UNDP Barnaamijkeeda Dowladnimada iyo Sarreynta Sharciga. Ta labaad waxay ahayd daraasadda Kaalmada Sharci oo bar bilow ahayd oo ay samaysay Wasaaradda Caddaaladda Kooxdeeda Kaalmada Sharci oo si balaadhan loo faafiyey Ogos 2012.

78 Mid kasta oo hawl-wadeennadani Kaalmada Sharci bixiya ee Hargeysa kamid ah – Ururka Qareennada Somaliland (SOLLA), Ururka Qareennada Haweenka Somaliland (SWLA) iyo Jaamacadda Hargeysa Xarunteeda Kaalmada Sharciga – waxay soo gudbiyeen liiska macaamiisha ay diiwaan-geliyeen intii u dhaxaysay Jeenaweri ilaa Maarso 2012. Iyadoo la isticmaalayo qaabka qayb dadka kamid ah sida talantaaliga loogala soo baxo tirada guud ee dad cayiman, 45 macmiil (15kiiba ay urrur ka yimaadeen) ayaa loo doortay in laga wareysto waayo-aragnimadooda adeegga Kaalmada Sharci.

Ugu dambeyn, waxaa la ogaaday inkastoo dadka, gaar ahaan dhallinyaradu ay si guud tallaabooyin firfircoon ugu qaadaan ka hadalka dhibaatooyinkooda sharci, in aanu qofna isagoo madax-bannaan raadin macluumaadka sharci si uu wax uga ogaado nidaamka. Haddana waxaa jira korodh ah in si dadban loogu xidhnaado gargaarka odayaasha, Booliska ama maxkamadaha. Marka laga yimaado dhaliilahaasi la sheegay ee qayb kasta, daraasadda waxaa lagu soo jeediyey in oggolaanshahani dadban ee *xaaladdani imika lagu jiro* ay tahay in loo badelo in si firfircoon looga gilgisho nidaamkani khariban iyadoo la kordhinayo aqoonta loo leeyahay xuquuqaha sharci iyo taageero dheeraad ah oo la siiyo dadka si ay uga horyimaadaan siyaasadaha iyo dhaqannada ku guul-dareystay inay taageeraan oo ay ilaashaan xuquuqahani.

Dadkii ka qayb-qaatay ra'yi urrurinta waxaa kale oo la weydiiyey aragtidooda, fikirkooga iyo aqoontooda nidaamka caddaaladeed ee Somaliland. Waxaa si gaar ah dadka loo weydiiyey ra'yigooda marin-u-helidda iyo wax ku oolnimada Qareennada bulshadooda. Ku dhowaad 71% dadkii wax la weydiiyey kamid ah ayaa sheegay in bulshadoodu aanay Qareenno lahayn. [Inta kale] 29%ka sheegay in bulshadooda ay Qareenno ka jiraan, ku dhowaad saddex meeloodoow-laba meelood oo kamid ah (61%) ayaa aaminsan in aan [kharashkooda] layska bixin karin. Ku dhowaad kala badh dadka la siiyey Kaalmada Sharci ee la wareystay waxay sheegeen in arrinta koowaad ee ku dhiirigalisay inay u yimaadaan hawl-wadeennada Kaalmada Sharciga bixiya si ay u gargaaraan ay ahayd in aanay si kale iskaga bixin kareen gargaarka sharci. Arrinta awoodista iska bixinta gargaarka sharciga waxay sidoo kale ka muuqatay daraasadda Wasaaaradda Caddaaladda (MoJ) oo maxaabiistii la wareystay badankoogu oo aan wakiil lahayni ay sheegeen inay sababtu tahay inay iska bixin kari waayeen wakiilnimada. Xogtani oo kale waxay muujinaysaa baahida jirta ee dhabta ah ee ah in la bixiyo gargaarka Kaalmada Sharci, gaar ahaan tan la siinayo kooxaha nugul sida maxaabiista.

Dadka ku nool meelaha ka baxsan magaalo madaxyada gobollada Somaliland marin uma helaan nidaamka Kaalmada caddaaladeed ee rasmiga ah[79].

Qareenno la'aanta dacwadaha maxkamadaha guura badankoogu waxay muujinaysaa arrinta dhabta ah ee ah in dadka nugul ay ka qayb-galaan nidaamka sharci ee rasmiga ah iyagoon gargaar sharci haysanin.

Daraasadda MoJ waxay tirakoob dheeraada ka heshay hay'adaha kala duwan ee dowladda kaasi oo khuseeya tirada dembiyadii cuslaa ee la soo oogay 2010kii iyo 2011kii. Sida uu sheegay Xafiiska Xeer-ilaaliyaha guud, waxaa la soo oogay 1,053 dembi oo culus sanadkii 2010ka lixda gobol ee Somaliland oo dhan, iyo 983 la soo oogay sanadkii 2011ka. Sida ku xusan daraasadda, sidaas darteed bay, hawl-wadeennada Kaalmada Sharci oo lagu daray saddex Qareen oo ay maxkamaddu magacoowday oo la wareystay waxay awooddeen inay wakiil u noqdaan ku dhowaad 39% kamid ah eedaysaneyaashii la soo eedeeyey 2010ka iyo 43% kamid ah kuwii la soo eedeeyey 2011ka.

79 Sanadkii 2008, Xukumadda Somaliland iyo UNDP waxay bilaabeen mashruuca maxkamadaha guura oo ujeeddadiisu ay tahay in kor loogu qaado marin-u-helidda caddaaladda ee dadka ku nool meelaha aanay marin loo heli karin nidaamka maxkamadaha rasmiga ah iyadoo kor loo qaadayo aqoonta ay bulshadu u leedahay sharciga iyo iyadoo laga gar-naqayo dacwadaha. Intii u dhaxaysay Abriil ilaa Julaay 2012, shaqaalaha UNDP waxay qaadeen kormeer lagu booqday 18 fadhi oo maxkamadaha guura ah gobolka Hargeysa. Shaqaalahu waxay qiimeeyeen todobba dacwadood, oo dhammaantood ahaa dacwado lagu muransanaa hanti ama dhul, iyo 11 dacwadood oo ciqaab ah oo koontarabaanin maandooriye, kufsi iyo dil ah.

Daraasaddani lafteeda waxaa ku jira wareysiyo lala yeeshay 78 maxbuus oo ku xidhnaa xabsiyada Hargeysa, Burco, Berbera, Borama, Gebiley iyo Ceerigaabo.

Laba iyo labaatan kamid ah maxaabiistii rumaan gareysnaa waxay ku eedaysnaayeen dembiyo culus, lix iyo kontona waxaa lagu xukumay inay galeen dembiyo culus.

Kuwani rumaan gareysnaa, 41% ayaa sheegay in aanay Qareenno lahayn, waxaanu midkood sheegay inay sababtu tahay in aanay iska bixin karayn kharashka Qareennada. Inta kale oo ahayd 59% oo Qareenno lahayd, dhammaantood waxay heleen wakiilnimo sharci oo bilaash ah oo ay siiyeen hay'ado kala duwan: hawl-wadeennada bixiya Kaalmo sharci (Lix la wareyste (maxbuus); Qareen gaar ah oo *ku taborucay Kaalmo sharci* (Shan la wareyste (maxbuus) iyo Qareen ay maxkamaddu magacoowday (Hal la wareyste (maxbuus).

Waxaa ka sii dhib badan, 56 la xukumay ee la wareystay, 25 ayaan haysan gargaar sharci xilligii dhageysiga dacwaddooda iyadoon dacwadahani midkoodna aanu Garsoorahu weydiinin bal in eedaysanahu uu Qareen u baahan yahay, umana magacaabin Qareen. Kuwani Qareenka helay, in ka badan (17) waxaa wakiil u noqday Qareen Kaalmo sharci bixinayey oo ka socday mid kamid ah hay'adaha bixiya aadeegga Kaalmada Sharci. Sagaal dadka la wareystay kamid ah waxaa wakiil u noqday Qareen gaar ah oo *ku taborucayey Kaalmo sharci* iyadoo Shan kalena ay maxkamaddu u magacawday Qareen.

Arrimahaasi kor ku xusani waxay ina tusayaan sida ilaa iyo hadda loogu guul-dareystay qaabkani Qareennada ay maxkamaddu magacawdo iyo doorkii Garsoorka ee ahaa inuu xaqiijiyo in waajibaadka sharci ee dowladda ka saarnaa bixinta Kaalmada Sharci la ilaashay oo taasina ay ka dhalatay qaabka imika la soo jeediyey.

## 4.3. Tusaalayaal Kaalmada Sharci ee Waddamo kale

Dalalka qaarkood Kaalmada Sharci ee uu qaranku maalgeliyo lama helo dacwadaha ciqaabta ah oo keliya, laakiin waxaa kale oo heli kara dacwadaha maamulka ah iyo noocyadda kale ee dacwadaha. Tani waxay waafaqsan tahay min-qiyaasyada la aqoonsan yahay ee caalamiga ah ee uu dhigayo Heshiiska Caalamiga ah ee Xuquuqaha Madaniga iyo Siyaasaddu (ICCPR) iyo Heshiiska Yurub ee Xuquuqda Aadamaha, iyadoo kelmadda *"dacwadaha ciqaabta ah"* ee lagu isticmaalayo Qodobka 14 ICCPR iyo Qodobka 6 ECHR ay tahay in si balaadhan loo fasiro.

### 4.3.1. Koonfur Afrika

Ilaa iyo aasaaskeedii 1971, Guddida Kaalmada Sharciga ee Koonfur Afrika waxay ahayd qaabka ugu mudan ee loo bixiyo Kaalmada Sharciga ee uu qaranka Koonfur Afrika maal-geliyo[80]. Waxay markii ugu horreysay qaadatay nidaamka Qareennada ay Maxkamaddu magacoowdo, oo ka hawl-gala dacwadaha ciqaabta iyo madaniga. Qareennada u bixiya adeegyada Kaalmada Sharci si waafaqsan xeerarka Guddida Kaalmada Sharci waxaa la siin jiray qaddar go'an.

80 David McQuoid-Mason, *The Legal Aid Board and the Delivery of Legal Aid Services in South Africa*: www. legalaidreform.org.

Sanadkii 1990kii, waxaa la bilaabay barnaamijka difaacaha dadweynaha si uu wax uga qabto dalabaadkii Kaalmada Sharci ee dacwadaha ciqaabta ah. Sanadkii 1994, Guddida Xarumaha Sharciga ah ee Kaalmada Sharciga oo ka shaqaynayey dacwadaha ciqaabta iyo madaniga ah, ayaa iyagana isla ujeeddadaasi loo aasaasay. Intii u dhaxeysay 1970kii ilaa 1998kii Guddida waxay ku qortay Qareennada 997,707 dacwadood oo Kaalmo sharci la siiyey. 56% ama 559,238 oo dacwadahani kamid ah waxaa lagu qoray intii u dhaxaysay 1994kii iyo bilowgii Dastuurkii cusbaa ee Koonfur Afrika (oo dhaqan-galey sanadkii 1996). Markii dacwadaha in wax laga qabto u baahani ay sidani u kordheen, Guddidu waxay faraha ka qaaday qaabka Qareennada ay maxkamaddu magacoowday oo ahaa qaabka ugu badan ee lagu bixiyo adeegyada Kaalmada Sharci.

Sanadkii 1995kii, waxaa la qiyaasay in halka celceliska qiimaha Qareenka ay maxkamaddu magacawdaa uu ahaa R822 (ku dhowaad 98 Dollar) celceliska qiimaha difaacaha dadweynaha ee dacwadda ciqaabta ahina uu ahaa R555 (ku dhowaad 66 Dollar). Guddida Kaalmada Sharci waxay raadinaysay hababka lagu yareyn karo qiimaha dacwadaha Qareennada ay maxkamaddu magacoowdo iyadoo la tixgalinayo in dacwad kastaaba qiimo go'an yeelato ama la sameeyo heshiis qiimo go'aan ah, halka laga bixinayo qiimo go'an saacaddiiba. Ugu dambeyntii, Guddidu waxay go'aan ku qaadatay in aad loo yareeyo culayska la saarayo Qareennada ay maxkamaddu magacoowdo iyo in loo bato dhinaca qaabka difaacaha dadweynaha.

Qaabkani Koonfur Afrika waa mid faa'iiddo badan, maadaama uu xaqiijinayo waxa lagu heli karo marka halkii qof kharashkiisa Kaalmada Sharci ee sanadku uu ku dhow yahay 2 Doollar.

Casharka guud ee laga baran karo waayo-aragnimada Koonfur Afrika waa in qaabka [Kaalmada Sharci] ee Qareennada ay maxkamaddu magacowdaa uu si fiican u shaqayn karo marka tirada dacwadduhu ay yar tahay iyo marka ay jirto guddi madax-bannaan oo leh kheyraadkii ay si wanaagsan ugu maamuli lahayd qaabkani. Haseyeeshee, qaabkani looma baahna, mana wacna marka dacwadaha u baahan in wax laga qabto ay tiradoodu badan tahay iyo/ama marka ay Qaranka soo wajahaan caqabado maaliyaddeed oo ay qayrul-macquul tahay in si sax ah loo saadaaliyo kharashka mustaqbalka lagama-maarmaanka u ah, gaar ahaan marka la qaato nidaamka qiimaha saacaddiiba [wax lagu bixiyo].

### 4.3.2. Ustareeliya

Ustareeliya, waxay leedahay nidaam dowladeed oo federaali ah oo ka kooban maamulo federaal, goobl iyo degaan. Xukuumadaha Ustareeliya (Barwaaqo-sooranka), gobolka iyo degmooyinku waxay mid kastaaba masuul ka tahay inay arrimaha shuruucdooda ka soo baxa Kaalmo sharci ku bixiyaan.

Kaalmada Sharci ee arrimaha barwaaqo-sooranka iyo qaranku waxaa bixiya guddiyada Kaalmada Sharci ee Gobolka iyo Degaanka, kuwaasi oo ah hay'ado sharci ah oo madax-bannaan oo lagu dhisay sharci-dejinta Gobolka iyo Degaanka[81]. Xukumadaha Ustareeliya ayaa maal-geliya bixinta Kaalmada Sharci ee arrimaha qoyska, madaniga iyo ciqaabta ah ee Barwaaqo-sooranka iyadoo heshiis lala galo xukumadaha Gobolka iyo Degaanka iyo guddiyada Kaalmada Sharciga. Arrimaha Barwaaqo-sooranka badankoogu waxay galaan awood-garsoorka xeerka qoyska.

81 Siyaasadda qaran ee Kaalmada Sharci ee Uustareeliya: http://www.nationallegalaid.org/.

Guddiyada Kaalmada Sharcigu waxay isticmaalaan qaabka isku-dhafka ah si ay u bixiyaan adeegyada wakiilnimada sharci. Bixinta Kaalmada Sharci waxaa loo qoodeyn karaa Qareen guri oo mushahar qaata ama Qareen gaar ah oo madax-bannaan. Qaabkani isku-dhafka ahi wuxuu si gaar ah faa'iiddo ugu yahay in adeegyo la siiyo macaamiisha jooga meelaha gobollada ah iyo mararka khilaafka daneed uu noqdo in aanu Qareen qudhi wada metelin labada dhinac.

Xukumadda Ustareeliya iyo Xukumadaha Gobollo iyo Degmooyin badani waxay sidoo kale maal-geliyaan xarumaha sharci ee bulshada oo ah urruro madax-bannaan oo aan faa'iido-doon ahayn oo dadka dhibaatooyinka sharci ay haystaan siiya talo, gargaar ama meelo kale u gudbiya. Waxaa intaa dheer, waxay gargaar maaliyadeed siiyaan adeegyo sharci oo nidaamyo sharcigu dhigayo ah iyo adeegyo sharci oo la siiyo dadka dhaladka ah ee Uustareeliya loogu yimid.

Taariikh ahaan, Dowladda Ustareeliya waxay tallaabadii ugu balaadhnayd u qaaday nidaamka qaran ee Kaalmada Sharciga markii la abbuuray Xarunta Adeegyada Sharci sanadkii 1942kii. Haseyeeshee, waxaa sanadahii 1970kii hore loogu socday inay adeeg bixiyaan gobollada iyo degmooyinku (ma aha xukumadda federaalka ah). Sanadkii 1977kii, dowladda Uustareeliya waxay sameysay *Xeerka Guddida Kaalmada Sharciga ee Barwaaqo-sooranka* 1977 (LAC Act) oo dhigaya qaabab wada shaqayneed oo ka dhaxeeya Xukumadda Ustareeliya iyo xukumadaha gobollada iyo degaannada oo ah inay Kaalmada Sharci bixiyaan guddiyo madax-bannaan oo lagu aasaasi doono sharci-dejimaha gobollada iyo degaanada. Tallaabooyinkii lagu sameynayey guddiyaddani ayaa qaatey sanado dhawr ah. Waxaanay bilaabeen sanadkii 1976kii oo la abbuuray Guddida Kaalmada Sharci ee Galbeedka Ustareeliya, sanadkii 1978kii Guddida Kaalmada Sharci ee Fiktooriya (LACV), iyo ugu dambeyntii, sanadkii 1990kii oo la abbuuray Guddida Kaalmada Sharci ee Tasmaaniya. Qaabab wada shaqayneed oo lagu abuuray Xeerkii Guddida (LAC Act) oo dhigayey heshiisyada maal-gelineed ee Barwaaqo-sooranka, Gobollada iyo Degaannada oo bilaabmay sanadkii 1987kii.

Bishii Julaay 1997kii, Xukumadda Barwaaqo-sooranku waxay badeshay nidaamyadeedii si ay toos ugu maal-geliyaan adeegyada Kaalmada Sharci ee arrimaha sharciga Barwaaqo-sooranka. Nidaamkani gobollada iyo degaannadu waxay maal-gelinayaan gargaarka si waafaqsan shuruucdooda.

### 4.3.3. Maraykanka

Dhawr qaab oo Kaalmada Sharci loo bixiyo ayaa ka soo baxay Maraykanka[82]. Qaabka 'Qareenka shaqaalaha ah' Qareenno ayaa la shaqaalaysiiyaa oo mushahar lagu siiyaa oo keliya si ay gargaar sharci u siiyaan macaamiisha ku habboon ee dakhligoodu hooseeyo, waxaa lamid ahaa dhakhaatiirka shaqaalaha ka ah Isbitaalada dadweynaha. Qaabka 'judicare', Qareennada gaarka ah iyo shirkadaha sharciga ayaa wax lagu siiyaa inay wax ka qabtaan dacwadaha ka yimaad macaamiisha shuruudaha buuxiya iyadoo ay wehelinayaan dacwadaha macaamiisha kharashka iska bixiyaa, sidaasi oo kale ayaa dhakhaatiirta wax loogu siiyaa inay bukaannada wax ugu qabtaan [adeegga] Medicare ee Maraykanka. Qaabka 'adeegga sharci ee bulshadu' wuxuu ka kooban yahay xarumo bulsho gaar ah ugu adeegayo sharci oo balaadhan (tusaale ahaan,

82 Kaalmada Sharci ee Maraykanka, eeg: http://legalaid.uslegal.com/.

wakiilnimada, barista iyo dib u dhiska sharciga) oo ay bixiyaan dad Qareenno ah iyo aan ahayn ba sida xarumaha adeegyada caafimaadka ee bulshada oo kale.

Eedaysaneyaasha lagu oogay dacwad ciqaab ah ee aan kireysan karayn Qareen looma damaanad qaadayo Kaalmada Sharci ee la xidhiidha eedaha oo keliya, laakiin waxaa sidoo kale loo damaanad qaadaya wakiilnimada sharci ee qaabka difaacayaasha dadweynaha oo kale.

Dacwado taxnaa kadib, Maxkamadda Sare ee Maraykanku waxay xukuntay in dadka Ameerikaanka ah ee faqiirka ahi ay leeyihiin xaqa inay Qareen helaan, laakiin waa dacwadaha ciqaabta ah oo keliya[83]. Gobollo tiro yar (sida Kalafoorniya) ayaa sidoo kale damaanad qaaday xaqa inuu qofku Qareen helo ee dadka faqiirka ah ee haeedeysanaha ka ah dacwadaha 'dembi u ekaha' ah sida afcaasha aabbenimo.

Qareennada oo dhami waa inay dhammeystaan saacado ay *ku taburucaan Kaalmo sharci* sanadkii. Haseyeeshee, waxaa aad u hooseysa maal-gelinta Kaalmada Sharci. Dhibaatadani maal-gelinta daciifka ah ee ba'ani waxay dhigtay dabaqadii hoose ee faqriga ahayd meel aan cidina u maqnaanayn: shuruudihii Kaalmada Sharciga way ka taajirsan yihiin [oo ma buuxin karaan], mana awoodaan inay iska bixiyaan Qareen gaar ah. Si looga baxo yaraanshaha adeegyada Kaalmada Sharciga ee jirta, dadka falan-qeeya qaarkood waxay soo jeediyeen in *ku taborucista Kaalmada Sharci* waajib lagaga dhigi karo dhammaan Qareennada, sida dhakhaatiirta ka shaqaynaysa qolka gargaarka degdegga ah looga baahan yahay inay daweeyaan bukaannada oo dhan iyagoon u eegayn awoodda uu wax iskaga bixin karo[84]. Haseyeeshee, qorshayaal noocan ahaa oo kale waxaa la dagaalamay oo ku guuleystay Urrurada Qareennada. Waxaase aan ku jirin urrurka Qareenadda ee Orlando, Florida ('Orange County Bar Association in Orlando, Florida'), oo ku waajibiyey xubnaha urrurka oo dhami inay ka qayb-qaataan Isku-tagooda Kaalmada Sharci, iyagoo fulinaya *ku taborucista Kaalmada Sharci* ama ku deeqaya kharash lagu qabto adeega. Xitaa marka uu jiro waajibaadka *ku taborucista Kaalmada Sharcigu*, maal-gelinta Kaalmada Sharci waxay ahaanaysaa mid aan ku filnayn in lagu siiyo gargaar dadka baahan badankooga.

### 4.3.4. Midowga Yurub[85]

Qodobka 47aad ee Axdiga Xuquuqaha Aasaasiga ah ee Midowga Yurub wuxuu dhigayaa in Kaalmada Sharci ay helaan dadka aan haysanin kheyraad ku filan ilaa iyo xadka ay Kaalmadani lagama-maarman u tahay xaqiijinta marin-u-helidda caddaaladda. Marka laga yimaado 27ka dal ee xubnaha ka ah Midowga Yurub, waxaa hoos la inagu siiyey tusaalayaal dhawr ah oo nidaamyada Kaalmada Sharci ah, sida Faransiiska, Giriiga, Talyaaniga, iyo Jarmalka.

83 Eeg go'aanka Maxkamadda Sare ee Maraykanka ee *Gideon v. Wainwright*, 372 USA 335, of 18.3.1963: https://supreme.justia.com/cases/federal/us/372/335/case.html. dacwaddani, Maxkamadda Sare waxay go'aan laysku raacay ku go'aamisay in maxkamadaha gobollada oo dhan looga baahan inay sida ku xusan wax ka badelka dastuurka ee 14[aad] u qabtaan Qareenn eedaysaneyaasha dacwadaha ciqaabta ah ee aan iska bixin karayn kharashka Qareenka.

84 Helynn Stephens, "Price of pro bono representations: examining lawyers' duties and responsibilities", *Defense Counsel Journal,* 71, no. 1 (January 2004), p. 71-79.

85 Kaalmada Sharci ee ka jirta Dalalka Yurub halkan ka eeg: http://ec.europa.eu/civiljustice/legal_aid/legal_aid_ ger_en.htm.

### 4.3.4.1. Faransiiska[86]

Qaabka Kaalmada Sharci ee Faransiisku imika leeyahay (oo lagu badelay kii hore ee sharcigiisa la dejiyey 1972kii) waxaa lagu maamulaa Xeerka Kaalmada Sharci (Lr. 91-647 ee 10 Julaay 1991) and Wareegto Lr. 91-1266 ee 18 Diisember 1991. Waxay ka hadlaysaa:

- *Kaalmada Sharci ee habboon:* Kaalmada maaliyadeed ee dacwadaha maxkamadda iyo dacwadaha maxkamadda dibedeeda lagu soo dhammeeyo;
- *Kaalmada gunnada Qareenka* ee qaababka la heli karo ee lagaga maarmi karo dacwad oogista (heshiisiinta iyo dhexdhexaadinta), gargaarka sharci ee dadka ay boolisku su'aalaha weydiinayaan, iyo dacwadaha anshaxa ee xabsiyadda dhexdooda, iyo
- *Marin-u-helidda sharciga* (macluumaadkiisa, haggidda [guidance], kala talinta sharciga ee bilaashka ah). Kaalmada Sharci waxay siinaysaa qofka la siinayo gargaar sharci oo bilaasha oo uu ka helo Qareen ama qof kale oo sharciga ku shaqeeya (gaadhsiiyaha, notaayo, naadiyaha, iwm.) iyo in laga dhaafo kharashka maxkamadda.

Kharashka maxkamaddu wuxuu ku xidhan yahay dabciga iyo adayga dacwadda iyo habka la raacayo iyo maxkamadda dhageysanaysa dacwadda.

Waxaa la kala sooci karaa saddex qaybood oo kharashka ah:

- *Gunnada Qareenka* oo aan lahayn qadar go'an – Qareenka iyo macmiilka ayaa xor u ah inay cayimaan qadarka ay tahay inuu macmiilku bixiyo hadduu shuruudaha Kaalmada Sharci buuxinayo mooyaane;
- *Kharashka Maxkamadda*, waxaa lagu xusay Qodobka 695 ee Xeerka cusub ee Habka Madaniga oo ka kooban:
  a) Kharashaadka Qareennada (waa kharash aan ahayn gunnada caadiga ah);
  b) Kharashka gaadhsiiyaha maxkamadda;
  c) Kharashka raadinta iyo baadhista garsoor;
  d) Kharashka maragga (qadar go'an);
  e) Gunnooyinka Qareenka ee dhageysiga;
  f) Kharashka la sii bixiyo: waa kharashaad lamid ah kharashaadka dacwadda la xidhiidha oo mararka qaarkood qadar go'an qofka loo soo celiyo.

Kharashka maxkamaddu wuxuu dushiisa yahay dhinaca guul-dareysta sida uu dhigayo Qodobka 696 ee Xeerka cusub ee Habka Madaniga. Laakiin maxkamaddu waxay go'aan sababaysan ku amri kartaa inuu dhinaca kale wada bixiyo dhammaantood ama qayb kamid ah markay caddeyso siday u kala qaybsanayso.

- *Kharashaadka kale* ee ay galaan dhinacyadu: sida sharciga ah iyaga ayaa isku qaba dacwadaha ciqaabta iyo madaniga ahba, hadday maxkamaddu si kale go'aamiso mooyaane. Maxkamaddu waxay go'aankeeda

86 http://ec.europa.eu/civiljustice/legal_aid/legal_aid_fra_en.htm.

ku soo saaraysaa qaab caddaalad ku dhisan, markay qiimeyso awoodda dhinaca guul-dareystay uu ku bixin karo. Maxkamaddu waxay awood u leedahay inay amarto inaan wax kharash la bixinin.

Dacwadaha ciqaabta ah Qaranka ayaa bixinaya kharasha caddaaladda. Dadka dembiyada lagu helaa waa inay bixiyaan qiimo go'an oo dacwadda ah, oo ku xidhan culayska dembiga.

Kaalmada Sharci waxa Maxkamadda Gobolka ku bixisa xarunta Kaalmada Sharciga iyadoo shuruud looga dhigayo kheyraadka, dhalashada, deggaankiisa iyo ogolaanshaha.

Codsadaha waxaa Kaalmo sharci la siinayaa hadduu Faransiiska u dhashay ama muwaadin Midowga Yurub ah yahay ama ajaanib dalka u dhashay oo si sharci ah ku degan Faransiiska. Waxaa kaloo ajaanibka la siinayaa Kaalmada Sharci ee dacwad ka socota maxkamad Faransiis ah, inkastoo ay yihiin ajaanib dalka kale u dhashay oo aan deganayn Faransiiska, waxay noqon karaan muwaadiniinta dal heshiis caalami ah ama heshiis laba dal ah la galay Faransiisku uu siinaayo xuquuqda Kaalmada Sharci.

Kaalmada Sharci waxaa la siinayaa marka dacwadda aan si cad loo diidi karayn ama aanay wax madhan ahayn. Shuruudani ma qabanayso eedaysaneyaasha, dadka masuuliyadeeda leh, maragyada, dadka la baadhayo, eedaysan ama eed lagu oogay, ama la xukumay.

Waxaa Kaalmada Sharci la siinayaa dacwoodaha iyo dacweysanaha arrimaha muranka dhaliya iyo kuwa aan muranka dhalin ee maxkamadaha.

Waxaa la bixin karaa qaybaha dacwadda oo dhan iyo si loogu caawiyo heshiinta intaan dacwadda la gaadhsiinin dhageysiga dacwadeed.

Kaalmada Sharci waxaa sidoo kale la siin karaa marka ujeeddadu ay tahay in lagu raadinayo fulinta xukun ama qoraal kale oo la fulin karo.

Dacwadaha ciqaabta ah, habka ciqaabtu wuxuu oggolaanayaa in Kaalmada Sharci la bixiyo xaaladaha degdegga ah (xadhiga booliska, su'aalaha bilowga, dhegeysiga hore ee dacwadda iyo xaaladaha la midka ah). Waxaa la bixinayaa dhammaan inta dacwaddu socoto waxaanay daboolaysaa tallaabooyinka dacwadda oo dhan.

Dacwoodayaasha oo dhami waxay xor u yihiin inay doortaan Qareenkooga. Hadday dooranayaan Qareenkooga, waa inay magaciisa ku xusan foomka codsiga Kaalmada Sharciga. Haddaanay garanayn Qareen, Guddoomiyaha Urrurka Qareennada ayaa Maxkamadda Gobolka mid ugu xilsaari doona codsadaha.

Kaalmada Sharci waxaa dib loo bixin karaa marka uu dhinac dacwad bilaabay kuna guuleystay, laakiin Kaalmada Sharciga loo diiday sababtoo ah in dacwaddu aanay u muuqanin in lagu guuleysan doono.

### 4.3.4.2. Giriiga[87]

Kaalmada Sharci ee Giriigu waxay codsadaha ka dhaafaysaa dhammaan kharashaadka sharci oo dhan, oo ay ku jirto cashuurta maxkamadda, masuuliyadda samanka fulinta ah, kharashaadka soo raaca cashuurta,

87 http://ec.europa.eu/civiljustice/legal_aid/legal_aid_gre_en.htm.

gunnada Qareenka iyo gaadhsiiyaha, kharashka la xidhiidha maragyada iyo khabiirrada, iyo gunnooyinka Qareenka ama wakiilka. Helitaanka Kaalmada Sharcigu waxay wanaajinaysaa marxaladaha habka [dacwadda] (rafcaannada) iyo saxsanaanta maxkamadda ilaa iyo fulinta xukunnada.

Kaalmada Sharci waxaa laga heli karaa maxkamadaha oo dhan hortooda, madani, ciqaab iyo maamul. Waxaa loo heli karaa dacwadaha laysku diiddan yahay ama aan laysku diiddanayn. Waxaa jira hab gaar u ah xaaladdaha degdegga ah ee la codsan karo Kaalmada Sharciga. Ma jiro foom gaar ah oo lagu codsado Kaalmada Sharci. Kaalmada Sharci waxaa go'aamiya bixinteeda: (a) Maxkamadda Degmada, (b) Maxkamadda Gobolka (Garsooraha keliya) ama (c) Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka ee buuxda ee dacwadda laga furtay ama ay ka socoto; arrimaha aan xidhiidh la lahayn dhageysi dacwadeed, Kaalmada Sharci waxaa go'aaminaya bixinteeda Maxkamadda Degmadda ee meesha uu degan yahay codsadahu.

Dadkani soo socda ayaa xaq u leh inay helaan Kaalmo sharci:

a) Qofkasta (Muwaadin kasta) oo caddeyn kara in iska bixinta kharashka sharcigu ay ku sababi karto isaga iyo qoyskiisu inay waayaan dakhligii lagama-maarmaanka u ahaa daryeelkooga;

b) Hay'adaha ganacsiga ee ka shaqeeya danaha dadweynaha ama aan faa'iido-doonka ahayn iyo dadka kooxda ah ee leh xuquuqda inay ka qayb-qaataan dacwadaha maxkamadaha haddii la caddeeyo in bixinta kharashaadka dacwaddu ay qayrul-macquul ka dhigi doonto ama iyaga ku adkayn doonto inay ka dhabeeyaan ujeeddooyinkoogii;

c) Iskaashatooyinka iyo urrurada aan iska bixin karin kharashaadka dacwadda ee aanay xubnahooguna sidaasi samayn karin iyagoon qoysaskooga iyo iyaguba aan iska qaadeyn dakhliga lagama-maarmaanka u ah daryeelkooda;

d) Ajaanibka wadamo kale u dhashay markay jiraan qaabab ka dhaxeeya, iyo dadka bilaa dalka ah oo isla shuruudaha muwaadiniinta Giriigu ay iyagana qabanayaan. Urrurada Qareennada qaarkood ayaa leh mashaariic ay Kaalmo sharci ku siiyaan dadka magan-galiyo doonka iyo qaxoontiyada.

Si ay u caddaato xaaladda dhaqaale ee codsadaha aan u saamaxayn inuu bixiyo kharashka dacwadda, codsaduhu waa inuu soo gudbiyaa:

a) Shahaado maayarka ama guddoomiyaha dowladda hoose ka soo baxday oo sheegaysa maaliyaddiisa iyo duruufhiisa qoys iyo shaqada, iyo caddeynta in aanu awoodi karin inuu bixiyo [kharashka] haddaanu khatar gelin naftiisa iyo qoyskiisa. Markay noqoto hay'adaha ganacsiga, waa in la caddeeyaa in gaadhista ujeeddooyinkoogu ay qayrul-macquul noqon doonaan ama ay adkaan doonaan, markay noqoto iskaashatooyinka ama urrurada aan bixin karayn kharashka dacwadaha oo aanay xubnahooguna aanay sidani qaban karayn haddaanay khatar gelin dakhliga daruuriga u ah daryeelkooda ama qoysaskooda;

b) Shahaado ka soo baxday xafiiska cashuuraha ee degaankiisa oo caddeynaysa in saddexdii sano ee ugu dambeeyey uu codsaduhu soo gudbiyey u soo celinta cashuurtii dakhliga iyo soo celinta cashuurihii kale ee laga doonayey iyo in soo celimahaasi uu hubiyey xafiiska cashuurahu;

c) Markay noqoto ajaanib dalalka kale u dhashay, shahaado ka soo baxday Wasaaradda Caddaaladda oo caddeynaysa in qaabab ka dhaxeeyaan waddanka uu ka soo jeedo.

### 4.3.4.3. Talyaaniga[88]

Kaalmada Sharci ee Talyaaniga oo loo yaqaano *(“Patrocinio a spese dello Stato” )* waxaa dhigaya Qodobbada 74-141 ee Wareegtada Madaxweynaha ee n. 115/2002 (faafinta sharciga lr. 139/2002). Ujeeddadeedu waa in la fuliyo Qodobka 24aad ee Dastuurka Talyaaniga iyo in la xaqiijiyo xuquuqda difaaca (ee dacwadaha madaniga, maamulka, iyo ciqaabta) ee dadka aan awooddin inay si madax-bannaan u helaan adeega Qareenka sababtoo ah in aanay awoodin inay dakhligooda wax ka siiyaan Qareennada.

Dastuurka Jamhuuriyadda Talyaaniga, Qodobka 24aad wuxuu sheegayaa: *“Qof kasta waxaa loo oggol yahay inuu qaado tallaabo sharci si uu u ilaaliyo xuquuqdiisa iyo danahiisa sharciga ah. Difaacu waa xuquuq aan laga talaabsan karin heer kasta oo ay dacwaddu tahay. Kharashka dacwadda iyo difaaca ee maxkamadaha oo dhan hortooda waxaa dadka faqiirka ah u damaanad-qaaday hay’adaha dowladda. Sharciga ayaa xusaya shuruudaha iyo qaababka sharci ee looga cawil-celinayo khaladdaadka caddaaladda”.*

Kaalmada Sharci ee Talyaanigu waa adeeg loogu oggolaanayo qof kasta inuu Qareen kaashado ama khabiir marag ah si xor ka ah gunnada sharci oo dhan iyo kharashaadka dacwadaha ciqaabta, madaniga, maamulka, dacwadaha xisaabaadka ama maaliyadeed iyo ‘awood-garsoorka sababta ku yimaad’ iyo markasta oo joogista Qareenka iyo khabiirka maraga ah si sharci ah loogu baahdo. Kaalmada Sharci waxaa la bixiyaa heer kasta iyo marxalad kasta oo dhageysiga dacwadda ah oo ay ku jiraan dacwadaha xidhiidhka la leh ee ka farcama. Waxaa lagu bixiyaa maxkamadaha hoose hortooda, Maxkamadaha Rafcaanka, Maxkamadda Sare, Maxkamadaha iyo Garsooreyaasha baadhista, Guddi Garsoorka Maamulka ee Gobolka, Guddida dib u eegista Garsoorka, Guddiyada Maaliyadeed ee Degmo ama Gobol iyo Maxkamadda Hanti-dhawrka Qaranka.

Kaalmada Sharcigu waxay daboolaysaa:

- Gunnada iyo kharashka Qareenka;
- Kharash socdaalka iyo kharashaadka ay galaan garsooreyaasha, saraakiisha iyo saraakiisha garsoorku si ay u gutaan masuuliyadahooga maxkamadda dibadeeda ah;
- Kharash socdaalka iyo kharashaadka ay galaan maragyada, Saraakiisha maxkamadda iyo khabiirrada maragyada ah ee kharashkani galay iyagoo gudanaya masuuliyadahooga waa loo celinayaa;
- Kharashka daabacaada ogeysiin kasta oo uu garsooruhu amro, iyo
- Kharashka ogeysiimaha rasmiga.

Qof kasta oo dakhligiisa la cashuuri karaa uu dhaafayo 9269.22 Yuuro (Euros), sida ku cad cashuur bixintiisii ugu dambeysay wuxuu xaq u yeelanayaa Kaalmo sharci. Bar-bilowga dakhliga waxaa lagu fadhiisiyaa amarka Wasaaradda Caddaaladda labadii sano ee kasta si loogu xisaabtamo kala duwanaanshaha xogta qiimaha macaamiisha ee Machadka Xog-Urrurinta ee Qaranka.

Majiro hab u gaar ah arrimaha degdegga ah. Haseyeeshee, waa in la sheegaa inay tahay in go’aannada loo gaadho si degdeg ah (10 casho gudahood) iyo inuu jiro mabda’a guud oo laga dheehan karo qodobbada lagu

88 http://ec.europa.eu/civiljustice/legal_aid/legal_aid_ita_en.htm.

maamulayo Kaalmada Sharci oo dhigaya in hay'adda masuulka ka ah bixinta Kaalmada Sharcigu ay qaadato go'aan dhakhso badan markay jiraan arrimo degdeg ahi.

Codsadayaasha la siiyey Kaalmada Sharcigu waxay Qareen ka magacaaban karaan liiska Qareennada Kaalmada Sharci bixiya ee ururka Qareennadu ku dhajiyey dhismaha maxkamadda rafcaanka ee Garsooraha dacwadda xogogaalka u ah ama Garsooraha dacwadda haya.

Codsadeyaasha la siiyey Kaalmada Sharci waxay magacaaban karaan khabiir marag u ah markuu sharcigu u oggol yahay.

Haddii ay dacwaddu marayso marxaladda difaaca, Qareenka waxaa laga dooran doonaa liiska uu ururka Qareennadu ku dhajiyey dhismaha maxkamadda rafcaanka meesha Garsooraha soo saaray xukunka laga horyimid uu fadhiisto.

Liiska Qareennada Kaalmada Sharcigu wuxuu ka kooban yahay mihnadlayaasha ka shaqeeya fulinteeda oo leh waayo-aragnimadii/bisaylkii uu ku meteli lahaa macmiilka.

### 4.3.4.4. Jarmalka[89]

Jarmalka waxaa kala duwan gargaarka *Xeerka Qaabka Talada Sharci* iyo gargaarka kharashaadka maxkamadda. *Xeerka Qaabka Talada Sharci* wuxuu siinayaa dadka dakhligoodu hooseeyo inay helaan gargaar kharashka la talinta iyo wakiilnimada maxkamadda dibedeeda ah. Dadka baahani waxay gargaar ku helaan fadhiyadda maxkamadda qodobbada gargaarka kharashaadka maxkamadda.

Dacwadaha madaniga ah oo ay ku jiraan dacwadaha shaqada, maamulka, dastuuriga iyo bulshadu waxaa la siiyaa gargaarka Xeerka Qaabka Talada Sharci (talada iyo (marka ay lagama-maarmaanka tahay) wakiilnimada). Dacwadaha ciqaabta ah iyo dacwadaha ku taxaluqa dembiyada maamulka talo keliya ayaa la siiyaa ma aha se wakiilnimo.

Codsaduhu wuxuu Qareenka ka dooranayaa kuwa uu Xeerka Qaabka Talada Sharcigu dhigayo inay ka helaan gargaar. Magaalooyinka Bremen iyo Hamburg muwaadiniintoodu waxaa talo sharci siisa xarumaha talooyinka. Waxayse diidi karaan inay qabtaan dacwadda keliya markay jiraan sababo adag oo sidaas loo sameyn karo. Doorashada Qareenka ee codsadaha ayaa sidoo kale ugu jirta marka qofka la siiyo gargaarka kharashaadka maxkamadda. Marka uu codsadaha awoodi waayo inuu helo Qareen u diyaar ah inuu wakiil u noqdo oo keliya ayuu garsooraha kiiska hayaa ugu qaban karaan.

Qareenka bixinaya talada sharci wuxuu xaq u leeyahay inuu codsadaha weydiisto inuu siiyo qadar yar oo gunno ah (10 euros), iyadoo in laga dhaafi karaana ay ku xidhan tahay duruufaha codsadaha. Heshiisyada kale ee khuseeyaa mushahar bixintu wax qiimo ah kuma laha sharciga dhexdiisa. Haddii gargaarka kharashaadka maxkamadda la siiyo, dhammaan kharashaadka tallaabooyinka codsadaha oo dhan waa laga daboolayaa marka laga reebo kharashaadka aan la xidhiidhin soo bandhigidda dacwadda. Majiraan kharashaad intaas dheer oo la siinayo dhinaca baahan.

89 http://ec.europa.eu/civiljustice/legal_aid/legal_aid_ger_en.htm.

Marka codsiga Kaalmada Sharciga la qaato, codsaduhu kharashaad kale ma geli karo. Kharashaadka ka dhasha fadhiyadda ayaa laga qaabilayaa marka la ansixiyo Kaalmada. Haddii codsaduhu uu haysto dakhli maaliyadeed oo uu qayb dakhligiisa kamid ah ku dabooli karo qayb kharashaad kamid ah, waxaa loo baahan yahay inay dib ugu bixiyaan kharashkaasi qasnada dadweynaha kolba qayb.

Ansixinta gargaarka kharashaadka maxkamaddu ma daboolaya rafcaannada. Ka bixintuna waxay ku eg tahay marka go'aanka ugu dambeeyaa uu soo gebogabeeyo dacwadda. Haseyeeshee, waxaa lagu samaysan karaa codsi cusub in laga daboolo dacwadaha rafcaanka. Maxkamadda rafcaanka ayaa baadhaysa in dhinacani uu weli u baahan yahay, in rafcaanka uu u qasdiyey ama uu nacayb uun ka yahay iyo inuu haysto fursad uu ku guuleysto. Haddii shuruudahaasi lagu qanco, dhinacaasi wuxuu xaq u yeelanayaa gargaarka kharashaadka maxkamadda si looga bixiyo rafcaankana.

*Hawl-galka - Labaad:*

Fasalka waxaa laga codsanayaa inay darsaan qaababka [Kaalmada Sharci] ee kor ku xusan oo ay xusaan waxyaabaha ay ku taageersan yihiin iyo waxyaabaha ay ku diiddan yihiin nidaam kasta. Kadibna waa inay doortaan ka ugu faa'iido badan qaababkaasi kor ku xusan ee dhiirigalinaya marka dookhooga loo eego.

# Qaybta II:
# Wakiil U Noqoshada Iyo Difaacista Dembiilaha Marxalad Kasta Oo Habka Caddaaladeed Ee Ciqaabta Kamid Ah

II

# Qaybta II:
# Wakiil U Noqoshada Iyo Difaacista Dembiilaha Marxalad Kasta Oo Habka Caddaaladeed Ee Ciqaabta Kamid Ah

### Ujeeddooyinka Waxbarasho

Ka qayb galayaashu waxay:

- Fahmi doonaan shaqada Kaalmada Sharci ee hab socodka caddaaladda marxaladaheega oo dhan. Gaar ahaan ka qayb-galayaashu waxay:
- Fahmi doonaan mabaadi'da guud ee Kaalmada Sharci ee marxaladda booliska waxaanay baran doonaan himilooyinka ku luglahaanshaha difaaca ee xilliga baadhista;
- baran doonaan doorka Kaalmada Sharci ee xilliga tallaabooyinka maxkamadda;
- baran doonaan doorka Kaalmada Sharci ee xilliga xukunka, dhageysiga dacwadda dabadii iyo xilliga rafcaanka.

Barnaamijka Kaalmada Sharci waa inuu ku jiraa gargaarka sharci oo marxaladaha dacwadda ciqaabta oo dhan ah oo ay ku jiraan xadhiga, baadhista, xadhiga baadhista ka horreeya, dhageysiga damaanada, dhageysiga dacwadda, rafcaannada iyo tallaabooyinka kale ee keenaya in la xaqiijiyo in xuquuqaha aadamaha la ilaashay.

Dadka la tuhunsan yahay, dadka eedaysaneyaasha ah iyo maxaabiistu waa inay marin-u-helaan gargaarka sharci inyar kadib marka la qabto ama la xidho. Sida ku xusan Mabaadi'da iyo Habraacyada Qaramada Midoobey ee Kaalmada Sharci ee Nidaamka Caddaaladeed ee Ciqaabta, *"nidaamka Kaalmada Sharci ee shaqaynaya, sida qayb kamid ah nidaamka caddaaladeed ee ciqaabta oo shaqaynaysa wuxuu yareyn karaa dhererka wakhtiga qofka la tuhunsan yahay uu ku xidhnaanayo saldhigyada booliska iyo goobaha wax lagu xidho, waxaa intaa dheer wuxuu yareyn karaa dadka ku xidhan xabsiga, dadka sida khaldan loo xukumo, buuxdhaafka xabsiyada iyo buuqa maxkamadaha, iyo yareynta dib u gelista dembiga iyo dib ugu gefidda dhibane. Sidoo kale waxay ilaalin kartaa oo ay sugaysaa xuquuqaha dhibannayaasha iyo maragyada nidaamka caddaaladeed ee ciqaabta. Kaalmada Sharci waxaa lagaga faa'iideysan karaa ka hortagista dembiyada, kordhinta barashada sharciga [tusaale ahaan gaadhsiinta macluumaad ee uu qaranku dadka gaadhsiinayo]."*

Fikirkaasi oo kale ayuu baaqa Lilongwe wuxuu darayaa in Kaalmada Sharci oo ka qayb ah nidaamka caddaaladeed ee ciqaabta oo shaqaynaya ay sidoo kale yareyn karto kharashka maamulka nidaamka caddaaladeed ee ciqaabta iyo xadhigaba.

Qofka loo haysto dacwad ciqaab ah waa in aan marnaba laga hor istaagin inuu helo Kaalmo sharci waana in badanaa loo oggolaadaa xuquuqda inuu arko oo la tashado Qareen, Caawiye sharci oo ku habboon, ama kaaliye sharci. Sida ku xusan Mabaadi'da iyo Habraacyada Qaramada Midoobey ee Kaalmada Sharci ee Nidaamka Caddaaladeed ee Ciqaabta, dowladduhu waa inay xaqiijiyaan in barnaamijyada Kaalmada Sharci ay muhiimada saarayaan dadka eed la'aanta xidhan, ama xadhigoodii oo dhammaaday, ama la xidhay ama jeelka ku jira isagoon marin-u-helin [aan la hor keenin] maxkamadaha. Dareen gaar ah waa in la siiyaa haweenka iyo kooxaha kale ee nugul, sida carruurta, dadka da'da yar, waayeelka, dadka naafada ah, dadka la nool xanuunka HIV/AIDS-ka, dadka maskaxda ka jiran iyo dadka si xun u xanuunsanaya, qaxootiga, dadka gudaha ku baro-kacay, iyo ajaanibka dalalka kale u dhashay.

Sida ku xusan baaqa Lilongwe waa in qaabab isku gudbineed laga dhex abbuuraa maxkamadda iyo dacwadaha tuulada. Qaababkani waxaa kamid noqon Kara:

- Inay maxkamaddu u wareejiso dembiilaha tuulada si uu raali gelin u sameeyo ama ugu qayb-galo dhexdhexaadinta dhibanaha iyo dembiilaha;
- Gudbinta maxkamadda ee tuulada si ay u samayso magdhaw ama u soo jeediso rafcaano magdhaw oo ay tuuladu u dirto maxkamadda.

Sida kor ku xusan, Kaalmada Sharci sidoo kale waa in la bixiyaa xilliga tallaabooyinka heshiisiinta ee dacwadaha tuulada. Haseyeeshee, arrintani lagagama hadlin Buuggani.

# Cutubka 1:
# Kaalmada Sharci ee Marxaladda Booliska iyo Wakhtiga Baadhista

**Ujeeddooyinka Waxbarashada**

Cutubkani, ka qayb-galayaashu waxay:

- baran doonaan doorka muhiimka ah ee Kaalmada Sharci ee marxaladda Booliska iyo wakhtiga baadhista, gaar ahaan dadka xidhan, gaar ahaan waxay;
- baran doonaan mabaadi'da la dabaqayo marxaladdani, iyo
- baran doonaan suurtogalnimada baadhista difaaca.

## 1.1. Mabaadi'da Guud

Xuquuqda gargaarka sharci ee xilliga xadhiga, su'aalaha iyo baadhista bilowga ah[90] waxaa xuquuq aasaasi ah oo ku xusan wareegtooyin badan oo Qaramada Midoobey iyo sidoo kale Guddida Afrika ee Xuquuqaha Dadka iyo Bini-aadamka.

Si waafaqsan Mabaadi'da Aasaasiga ah ee Doorka Qareennada, dadkoo dhan waxay xaq u leeyihiin inuu Qareen gargaaro dhammaan marxaladaha dacwadaha ciqaabta ah (mabda'a 1); inuu marin-u-helo isla wakhtiga la soo xidhay in yar kadib (mabda'yada 1 iyo 17) iyo, markasta, in aanay ka dambeyn 48 saacaddood wakhtiga xadhiga (mabda'a 7).

Sida ku xusan Mabaadi'da iyo Habraacyada Guddida Afrika ee Xuquuqaha Dadka iyo Bini-aadamka ee Xuquuqda Dhageysiga Dacwadda ee Caddaaladda ah iyo Marin-u-Helidda Caddaaladda ee Afrika 2001, *"qof kasta oo la qabtay ama la xidhay waa inuu isla markaaba marin-u-helaa Qareen, qofka oo xuquuqdani qoraal kaga tanaasula mooyaane, waa in aan lagu qasbin inuu ka jawaabo su'aal ama ka qayb-qaato wareysi aanu Qareenkiisu goob joog ka ahayn."* (Qodobka M.2.f).

Waddamo badan, dad badan oo la tuhunsan yahay ayaa ku xidhnaada muddooyin dheer saldhigyo boolis oo buux dhaafay. Xadhiga dheeraada ee dadka la tuhunsan yahay iyadoon la siinin inuu marin-u-helo Kaalmada Sharci ama maxkamaddu waxay xadgudub ku tahay mabaadi'da aasaasiga ah ee sharciga caalamiga ah iyo xuquuqaha aadamaha. Sidaas darteed, talada sharci iyo gargaarista waa aad loogu fuliyaa saldhigyada booliska.

Waa masuuliyadda Qaranka inuu qaado tallaabooyin uu ku xaqiijinayo in aanay boolisku carqaladdayn marin-u-helidda Kaalmada Sharci.

Sida ku xusan Habraaca 4.43.a. ee Mabaadi'da iyo Habraacyada Qaramada Midoobey ee Kaalmada Sharci ee Nidaamka Caddaaladdeed ee Ciqaabta si loo xaqiijiyo in dadka xidhani ay isla markaaba marin-u-heleen

90 Maxkamadda Yurub ee Xuquuqaha Aadamahu waxay sheegtay in xuquuqda dhageysiga dacwadeed ee caddaaladda ahi ay caadi ahaan u baahan tahay in eedaysanahaeedeysanaha loo oggolaado Qareen sharci marxaladaha hore ee baadhista booliska, *Murray v. United Kingdom* (1996) 22, EHRR, 29, para. 66.

Kaalmada Sharci si waafaqsan sharciga, qaramadu waa inay qaadaan tallaabooyin marxaladda ka horeysa dhageysiga dacwadda:

*"In la xaqiijiyo in booliska iyo hay'adaha garsoorku aanay si sharciga khilaafsan u carqaladayn xuquuqda ama marin-u-helidda Kaalmada Sharci ee dadka xidhan, la qabtay, la tuhunsan yahay ama ku eedaysan dembi, gaar ahaan saldhigyada booliska dhexdooda".*

Waddamadu sidoo kale waa inay *"ka codsadaan ururada sharciyaqaannada iyo hay'adaha kale ee shuraakada ah inay abbuuraan liis Qareenno iyo caawiyeyaal sharci ah si ay ugu taageeraan nidaam sharci oo dhammeystiran dadka xidhan, la qabtay, la tuhunsan yahay ama ku eedaysan dembi, gaar ahaan saldhigyada booliska dhexdooda".* (Habraaca 4.43.f.).

Sida ku xusan baaqa Lilongwe marxaladda booliska adeegyada sharci ama caawiyeyaasha sharci waa in lagu bixiyaa saldhigyada booliska iyadoo lala tashanayo shaqada Booliska, Bulshad Sharciga, xarumaha sharciga ee Jaamacadda iyo ururada aan dowliga ahayn. Adeegyadani waa inay ku jiraan:

- Siinta talada guud iyo gargaarka eedaysanahaeedeysanaha iyo dhibanneyaasha dembiga saldhiga
- Booqashada saldhigyada wax lagu xidho ('cells or lock-ups')
- Kormeeridda wakhtiga xadhiga saldhiga booliska kadib marka qofka la horkeeno maxkamadda horteeda
- Ka qayb-galka wareysiga booliska.
- U raadinta barnaamijyo carruurta loogu badelayo ciqaabta.
- Xidhiidhinta / isku haynta waalidka / ilaaliyeyaasha / damiintayaasha.
- Ka caawinta damaanada ee saldhiga booliska

Waxaa intaa dheer, in booliska looga baahan yahay inay la shaqeeyaan adeeg-bixiyeyaasha oo ay baahiyaan adeegyadani iyo sida looga heli karo saldhiga booliska.

Sida ku xusan Mabaadi'da iyo Habraacyada Qaramada Midoobey ee Kaalmada Sharci ee Nidaamka Caddaaladdeed ee Ciqaabta, (Mabda'a 3.20) *"qof kasta oo la qabtay, la xidhay, la tuhunsan yahay ama lagu eedeeyey dembi ciqaabtiisu tahay xadhig ama ciqaab dil ah waxay xaq u leeyihiin Kaalmo sharci marxaladaha nidaamka caddaaladeed ee ciqaabta".*

Waa masuuliyadda booliska, dacwad oogaha iyo garsooreyaasha inay xaqiijiyaan in dadka hortooda yimid ee aan iska bixin karin Qareen ama nugul la siiyey marin-u-helidda Kaalmada Sharci. (Mabda'a 3.23).

91 See, UNODC (2011), *Handbook on improving access to legal aid in Africa*, p.50.

*Tusaale:*

Malawi[92], Caawiyeyaasha sharciga ee doonaya oggolaanshaha saldhigyada booliska si ay u caawiyaan eedaysanahu marxaladda wareysiga ama su'aalaha waxay la kulmaan caabbin qaddimaadda. Carruur badan oo sharciga khilaaftaa waxay khatar ugu jiraan in loola macaamilo sida dadka waa weyn markay gacmaha booliska ku jiraan sababtoo ah waxaa adag in go'aan laga gaadho da'dooda haddaanay jirin shahaado dhalasho. Haseyeeshee, wakhti gaaban gudihii, ayuu Machadka Adeega La Talinta Caawiyeyaasha Sharcigu la kulmay saraakiisha booliska oo ay isku raaceen xeer anshax oo lagu maamulayo soo gelitaanka iyo ka shaqaynta saldhiga booliska ee caawiyeyaasha sharciga. Tani waxay keentay in qayb ahaan la aqoonsado caawiyeyaasha sharci iyagoo la hoos geeyey maamulka booliska (marka la joogo dhismaha booliska) oo uu bilaabmo in nidaam lagu dhiso xoogaa is aaminaad ah. Waxaa laysku raacay foom wareysiga lagu qaado, oo caawiyeyaasha sharcigana loo oggol yahay inay isticmaalaan marka qof kasta oo dhallinyaro ahla keeno saldhiga booliska.

Ilaa 2004ta, caawiyeyaasha sharci ee Malawi waxay nidaam kale u xaliyeen 77 boqolkiiba carruurtii sharciga khilaaftay si ka duwan nidaamka caddaaladeed ee ciqaabta.

Malawi, Caawiyeyaasha sharcigu waxay sidoo kale ku waajaheen tabobarayaasha booliska ee mashaariicda dib u dhiska booliska ee ay maal-geliso Waaxda Horumarinta Caalamiga ah ee UK inay keenaan qaababka loogu tabobari karo caawiyeyaasha sharciga xirfadaha wareysiga ee ay siiyeen saraakiisha booliska ah ee baadhista. Tabobarayaasha boolisku waxay ku raaceen inay tabobar siiyaan caawiyeyaasha sharciga kooras tabobar saddex casho ah oo xirfaddaha wareysiga baadhista ahaa oo ay [hore] u siiyeen saraakiisha booliska ee baadhista. Kooraska ujeeddadiisu waxay ahayd in saraakiisha la siiyo xirfaddo ay si wax ku ool ah wareysiga u sameeyaan halka ay cadaadis ka samaynayaan. Tani waxay dabadeed caawiyeyaasha sharci u furtay dariiq ay ku helaan marin-u-helidda eeddaysaneyaasha marxaladda wareysiga ama su'aalaha. Tabobarayaasha boolisku waxay u doodeen joogitaanka caawiyeyaasha sharci ee su'aalaha booliska kadib markii ay booqdeen saldhigyada booliska iyagoo kooros tabobar ah bixinaya.

Tusaalahani kor ku xusani wuxuu ina tusayaa in marka albaab furmo, fursadahu ay xitaa meel aan fogayn ka soo baxaan si loo horumariyo hal abuurnimada ku cusub adeegga booliska.

Qodobka 27aad faqraddiisa 1aad ee dastuurku waxay eedaysanahaeedeysanaha siinaysaa xuquuqda magacaabashada Qareenka laga bilaabo wakhtiga la soo xidho iyadoo sheegaysa: *"Qof kasta oo xorriyadda laga qaaday wuxuu xaq u leeyahay inuu sida ugu dhakhso badan ula kulmo wakiilkiisa sharci"*. Waxaa lamid ah, Qodobka 15aad faqraddiisa 5aad ee Xeerka Habka Ciqaabtu oo abuuraya xuquuqda in Qareenka difaacu uu goob joog ahaado dhammaan marxaladaha dacwadda.

Qareenno badan ayaa si khaldan u aaminsan in ka qayb-galka baadhistu ay tahay qayb aan muhiim ka ahayn masuuliyaddooda iyo in damaanad-qaadka Xeerka Habka Ciqaabtu ay ilaalin doonaan xuquuqaha macmiilkiisa hadday maqnaadaan. Runtii, sida loo sameeyo qaybaha hore ee baadhista ayaa badanaa kaga khatar badan maxsuulka dacwadda wax kasta oo dhaca inta dambe ee maxkamadda. Tusaale ahaan, wax cusub ma aha inuu macmiilku inuu u sheego Qareenkiisa difaaca in qiraalkii uu booliska siiyey uu ku yimid garaacis oo aanu ahayn hadal run ah. caddeynta in garaacisi dhacday, in garaacistuna ay sababtay qiraalka,

iyo in qiraalku uu been ahaa, badanaa aad bay u adag tahay maadaama la fili karo in aanu booliskuna waxba qiran doonin. Haddii marka dhinaca kale laga eego, Qareenku uu ka soo qayb-galo su'aalaha/wareysiga, garaacista iyo qiraalka beenta ahba waa laga hortagi karaa waana laga feejignaan karaa in macmiilka ay wax kasoo gaadhaan Qareenkana ay wax ku qalafsanaadaan.

Waxaa jira dhibaatooyin dhawr ah oo la arki karo oo waajib tahay inuu waajaho Qareenka ay ka go'an tahay inuu wakiil u noqdo macmiilkiisa dhammaan marxaladaha baadhista. Caqabada ugu weyn ee Qareenka ka qayb-qaadanaya baadhista hore waa in badanaa aan la magacaabin ilaa xilliga dambe dacwadda la gaadho.

Faa'iiddo uma laha Qareennada inay aragti iska caadi ah ka qaataan qaabka loo magacaabo. Haddii Qareennadu ay keliya sugaan inta taleefankooga ay soo garacayaan booliska, dacwad oogaha, ama maxkamadda waxaa la filayaa in eedaysanayaal badan ay sii ahaadaan kuwo aanay cidi metelin wakhtiyada adag.

*Doodda - Koowaad:*

- *Sidee laguugu magacaabaa dacwadaha?*
- *Baadhistu ma waxay dhammaataa kahor inta aan laguu magacaabin dacwadda?*
- *Sidee lagugu magacaabi karaa wakhtiyada hore ee dacwadda?*
- *Barista dadweynaha xuquuqda ay Qareenka u leeyihiin ma saameyn kartaa wakhtiyada magacaabista?*
- *Ogeysiisyada sida loola xidhiidhi karo Qareennada difaaca ma lagu dhejin karaa saldhigyada boolis? Jeelasha? Xarumaha carruurta lagu xidho?*
- *Maxaa lagu kobcin karaa?*

Marka lagu qoro dacwadda badanaa waxaa jira caqabado dheeraada oo soo wajaha Qareenka raba inuu wakiilnimo macno leh siiyo macmiilkiisa wakhtiga baadhista. Mabda'a ahaan, sida ku xusan Xeerka Habka Ciqaabta waxaa jiraa ogeysiimo la filayo in la gaadhsiiyo eedaysanahaeedeysanaha (Tusaale ahaan, Qodobka 215 ogeysiinta rafcaanka); mid uu boolisku siinayo xeer-ilaaliyaha guud iyo maxkamadda (tusaale ahaan, Qodobka 24.1 dhicitaanka dembiga), laakiin toos looguma geeyo Qareenka difaaca. Marka qudha ee Qareenka difaaca ogeysiin la siinayaa sida ku xusan XHC waa dacwadda Kaalmada Sharci ay maxkamaddu magacoowdo sida uu dhigayo Qodobka 75 (d) XHC. markasoo, Garsooraha awoodda u lihi, isla marka uu helo eedda iyo codsiga muddaynta taariikhda dhageysiga dacwadda ay tahay inuu *"eedeysanaha u magacaabo Qareen difaaca dacwadaha hoos imanaya xarafka b) ee faqradda 2 ee qodobka 14 ee Xeerka Nidaamka Garsoorka, markaanu eedaysanahu magacaaban Qareen, waana inuu toos ugu diraa oo la gaadhsiiyaa eedeysanaha iyo Qareenkaasba ".*

Xaaladaha kale, markuu Qareenku ka war helo dhacdo, waxaa mararka qaarkood kahor istaaga ka qayb-galkeeda booliska ama Xeer-ilaaliyaha.

Haddii ay ka baqaan in ay la waayo shay caddeyn Qodobka 58.1.(a) XHC wuxuu u fasaxayaa inay ka tagaan masuuliyaddii i booliska wax qabanaya ama baadhayaa ay waaran soo qaataan ahayd. Dembiyada culusna waxaabay u badan tahay in dacwadaha badankooga in qodobkani laga talaabsadoba. Haseyeeshee, Qareenku

waa inuu ka dalbadaa Garsooraha oggolaaday in laga tago [waaranka] inuu caddeeyo jiritaanka dhacdooyinka keenay *"cabsida in la waayo dhacdooyin caddaymo ah"* oo macquul ah.

*Doodda - Labaad:*

- *Miyaa lagu ogeysiiyaa tallaabooyinka baadhista oo dhammeystiran?*
- *Sidee laguu ogeysiiyaa?*
- *Tallaabooyinka ayey Qareennadu qaadi karaan si ay u xaqiijiyaan in si haboon loogu wargeliyo tallaabooyinka baadhista?*
- *Badanaa miyaa laguu fasaxaa inaad aragto, su'aalo weydiiso, diidmooyin aad sameyso wakhtiga tallaabooyinka baadhistu socdaan?*
- *Miyaad kala kulantaa wax caqabad ah ka qayb qaadashada tallaabooyinka baadhista*

Sida caadiga ah Qareenku waa inuu marin-u-helaa natiijada baadhista, ashyaada la qabtay iyo qoraallada uu ka kooban yahay galka. Shaqo ahaan, u fududaynta eegista qoraalladani iyo ashyaadani kuma filnaan doonaan rabitaanka Qareenka. Qareenku wuxuu u baahan yahay inuu lahaado qaab uu ku qaato waxa faylka ku jira si uu u awoodi karo inuu si faahfaahsan u derso. Haseyeeshee, caqabadda ugu horreysaa waa in dacwad oogaha laga helo inuu Qareenka u oggolaado inuu marin-u-helo galka[92]. Dacwad oogayaasha qaarkood ayaa aaminsan in looga baahan yahay oo keliya inay Qareenka siiyaan nuqulka eedda inkastoo Xeerka Habka Ciqaabtu ay ku caddahay in marin-helidda galka la siiyo.

Sida caadiga ah, dacwad ooguhu wuxuu siinayaa Qareenka nuquladda shay kasta oo galka ku jira isagoo u oggolaanaya inuu si bilaa caqabad ah u baadho alaabta caddeymaha ah. Habka kale ee ku xigaa waa inuu dacwad ooguhu fursad u siiyo marin-u-helidda galka isagoo qalabka wax lagu koobiyeeyo isticmaalaya. Haseyeeshee, awoodda korontada oo aan badanaa ka jirin xafiisyada dacwad oogeyaasha iyo qalabka wax lagu koobiyeeyo iyo waxyaabihii ka shaqaysiin lahaa oo ka maqan ayaa [sababay] in aan sidani weli loo shaqan karin. Qareenno badan ayaa doorbida inay gacantooda ku qortaan waxaa galka ku jira. Qoraalka gacantuna kuma filnaan karo inuu noqdo badelka nuqulka qoraalka rasmiga ah maadaama qoristu ay wakhti qaadanayso ama ay u badan tahay in macluumaad muhiim ah ku dhaafi karaan ama khaladaad la sameyn karo. Haddii ay tahay inuu Qareenku qoraal sameeyo, inta uu le'eg yahay wakhtiga galka loo siiyey iyo nooca ay tahay meesha loogu dhiibay galka si uu u baadho ayaa xaddidi kara tayada iyo tirada qoraalka ay macquulka tahay inuu Qareenku soo saaro. Xalka ugu wanaagsani wuxuu noqon karaa in la isticmaalo kamarad dhijital ah si loogu sawiro bog kasta oo galka kamid ah oo marka dambe koombuyuutar lagu eego laguna daabaco haddii ay lagama-maarmaan noqoto.

92 Qodobka 134 faqraddiisa 2 XHC ayaa u oggolaanaysa eedaysanahu inuu qaato nuqulka gar-maqalka "isagoo bixinayaa kharashka iyo khidmada lagu goynayo wareegtada Wasiirka Awqaafta iyo Caddaaladda, taasi oo bixinaysa Maxkamaddii lagu oogay ama Maxkamad ka sarraysaa ay amri karto in dhammaan nuqulka galka dacwada Maxkamadda lagu siiyo eedaysanaha lacag la'aan haddii Maxkamadu tixgeliso in sidaasi ay lagama maarmaan u tahay rafcaanka.".

*Doodda - Saddexaad:*

- *Waa kuwee caqabadaha kaa soo wajahay marin-u-helidda galka iyo caddaymaha kale?*
- *Qaababkee aad kaga gudbi jirtay caqabadahani?*
- *Waa maxay xalalka aad adiga iyo Qareennada kale gaadhi kartaan?*

## 1.2. Baadhista Difaac ('Defense Investigation')

Qareennada difaacu waxay si fudud u aamini karaan in ujeeddada shaqadoodu ay tahay oo keliya inay gartaan khaladaadka caddeynta ay soo urruriyeen boolisku iyo asbaabta uu soo bandhigo dacwad ooguhu. Xaqiiqo ahaan, Qareenku wuxuu awoodaa oo masuuliyaddiisa ah inuu isku keeno soona bandhigo caddeyn wax baraxaysa iyo maragyo ay dayaceen ama iska indho-tireen booliska iyo dacwad ooguhu.

Waxaa jira laba dariiq oo uu qaadi karo Qareenku si uu u xaqiijiyo in caddeyntii iyo maragyadii u wanaagsanaa difaaca ay maxkamaddu u tixgalisay si buuxda ama iska caadi ah:

- Inuu ku qanciyo maxkamadda inay baadho caddeynta iyo maragyada muuqda ee wax baraxaya iyadoo isticmaalaysa awooddaheega, iyo
- (Qareenku) inuu si madax-bannaan u baadho dhacdooyinka iyo maragyada oo uu dabadeedna keeno maxkamadda horteed.

Nidaamyada sharci ee adduunka ka jiraa aad bay ugu kala duwan yihiin ilaa iyo inta ama qaabka ay ugu oggolaadaan inuu Qareenku ka qayb-galo ama ka horyimaado baadhista rasmiga ah ee lidka ku ah macmiilkiisa iyo ilaa iyo inta ama qaabka ay u aqoonsadaan xaqa dhinaca difaacu uu u leeyahay inuu soo gudbiyo caddeyntooda iyo maragyadooda.

Inkastoo taariikh ahaan nidaamyada sharci ee adduunyadu ugu waa weyn: Sharciga Islaamka, Sharciga Ingiriiska ka soo jeeda ('Common law'), Sharciga Roomaaniyiinta ka soo jeeda ('Civil Law') uu mid kastaa si ka madax-bannaan ka kale uu u soo baxay, mid kastaaba ka kale ayuu wax ka baranayey oo ka soo qaadanayey oo waxaa yaraanayey kala duwanaanshahooga waxaana kordhayey qaabka ay ka siman yihiin.

Qaabka aasaaska u ah nidaamka sharci ee Somaliland wuxuu ku arooraa nidaamka sharci ee romaaniyiinta laga dhaxlay ('Civil law') marka loo eego nidaamka sharci ee laga dhaxlay Ingiriiska[93]. Haseyeeshee, xeerarka habka ee imika jiraa waxay balaadhinayaan awoodaha Qareenka difaaca si ka baxsan kuwa laga helo waddamada nidaamka sharci ee roomaniyiinta laga dhaxlay ('Civil Law') waxanay muujinaysaa horumarka

93 Sharcigani (Civil Law) wuxuu ka soo jeedaa sharcigii Roomaaniyiinta iyo Xeerkii Naabiliyoon waana halka ay kasoo jeedaan nidaamka casriga ee imika ka jira Faransiiska, Jarmalka, Talyaaniga, iyo waddamo badan oo kale. Sharciga (Common Law) wuxuu ka soo jeedaa maxkamadaha Ingiriiska (inkastoo ay jiraan khuburo sheega in qaabab badan oo nidaamkani sharci ku jira laga soo qaatay sharciga Islaamka) waxaanu kusii horumaray waddamada luuqada Ingiriisida ku hadla iyo meelihii uu adduunka kamid ah ee uu guumeystay Ingiriisku. (Common Law) waxaa imika ku arroora nidaamyada casriga ah ee imika ka jira UK, USA, Hindiya, Baakistaan, Malaysiya iyo waddamo kale oo badan.

casriga ah ee nidaamkani sharci ee romaaniyiinta laga dhaxday uu ku qaatay tallaabooyin lagu ilaalinayo eedeysanaha oo markii hore lala xidhiidhinayey nidaamka sharci ee Ingiriiska laga dhaxlay[94].

Sida ku xusan qodobka 116 ee qodobka Xeerka Habka Ciqaabta dhinaca difaacu waxay xaq u leeyihiin inay soo bandhigaan caddeyn, sidaas darteed waxaa tani ku jira maragyada iyo khabiirada ay iyagu wataan.

Qofna si adag uguma doodi karo inay booliska Somaliland sameeyaan baadhista macquulka ah oo dhan oo ay daaha ka qaadaan caddeynta wax baraxaysa. Booliska marka ugu horreysa yimaada meesha dembiga lagu galay waa kuwo aan si habboon loo tabobarin si ay u urruriyaan caddeymaha ama si ay u ilaaliyaan meesha dembiga lagu galay. Boolisku mararka qaar waxay samayn doonaan khaladaad ama waxay iska indho-tiri doonaan caddeyn muhiim ah, ama waxaabay badanaa joojin doonaan baadhista marka ay u gudbiyaan Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud.

Sidaas darteed, waxaa caddaanaysa in ay tahay in Qareennadu ay ku degdegaan baadhista rasmiga ah si ay u qabato shaqo caawinaysa difaaca ama ay tixgalinta siiyaan inay sameeyaan raadinta caddeynta wax baraxaysa iyo maragyada (tusaale ahaan, baadhista difaaca)[95].

Himilada ka qayb qaadashada difaaca ee baadhistu waa:

- In daaha laga rogo khaladaadka baadhista booliska;
- Inay daaha ka rogaan dhacdooyinka ay ka tagtay ama ka maqan baadhista booliska;
- In la ogaado eexda iyo kala jeclaysiga, ama khaladaadka dhinaca maragyada dacwad oogista, iyo
- In la sameeyo keydin iyo ilaalinta dhacdooyinka iyo caddeynta danta u ah difaaca si loogu soo bandhigo maxkamadda.

Sida himilooyinkan lagu xaqiijnayaa aad bey saameyn yar tahay hubinta natiijo caddaalad ku dhisan oo uu helo macmiilka marka la barbardhigo xaqiiqda ah in la xaqiijiyey

Haseyeeshee, waxa cad haddii uu Qareenku marag ka noqdo dhacdooyinka dacwadda ku jira oo ay tahay inuu ka marag-furo inuu abuurmayo khilaaf daneed oo uga baahan Qareenka inuu ka tanaasulo dacwadda. Sidaas darteed, waddamo badan haddii tallaabooyinka baadhista qaarkood, haddii aanay boolisku awooddin fulintooda waxaa si fiican u qabta qof la shaqaynaya Qareenka, halkii uu Qareenka laftiisu ka sameyn lahaa, siiba baadhe mihnadle ah.

94 Hal qaab oo lagu kala sooci karo habka sharciga (Civil Law) iyo sharciga (Common Law) waa in sharciga (civil law)-ga lagu yaqaan "Baadhis" sharciga (Common Law)-gana "dooddid" fikirka ka dambeeya kala soocistoodu waa in nidaamkani "baadhista" go'aanku wuxuu ka dhashaa baadhista waxa runta ah oo uu guddoomiyo Garsoore, halka nidaamka "dooddista" go'aanku wuxuu ka dhashaa dagaal ka dhaxeeya laba dhinac oo iska soo horjeeda oo runta ah oo uu Garsoorahu siidhiwade ka yahay. Dabcan kala soocistani waxay guudmar u tahay laba nidaam oo adag (ama sida saxda ah nidaamyo daraasiin ah). Waddamada Sharciga (Common Law)-gu, Garsoorahu wuxuu leeyahay awood uu kaantaroolo marin-u-helidda maragyada iyo caddeynta oo ka badan inuu noqdo shiidhiwade, sharciga (Civil Law)-ga majiro xidhiidhka dooddeed ee ka dhaxeeya dacwad oogaha iyo difaacu.

95 Qaabkani isku dayaya inuu ku cadaadiyo garsooraha, dacwad oogaha iyo boolisku inay sameeyaan baadhis dhammeystiran waa mid asal ahaan lala xidhiidhiyo nidaamka sharci ee (Civil Law)-ga. Qaabkani qabashada baadhista madax-bannaani waa mid asal ahaan lala xidhiidhiyo nidaamka sharci ee (Common Law)-ga.

Hawlaha gaarka ee ay qaban karaan baadheyaashu waxaa ku jira:

- Inay sameeyaan jaantusyada meesha dembigu ka dhacay iyo sawirrada;
- Inay helaan qoraallada iyo diiwaannada rasmiga ah
- Inay sameeyaan baadhista macluumaad dhibannaha iyo eedeysanaha;
- Wareysiyada maragyada;
- Aqoonsashada maragyada cusub;
- Qorista warbixinnada iyo
- Marag-furista xilliga dhageysiga dacwadda.

Waxaa jira caqabado dhawr ah oo daciifinaya in Qareenno badan ay sameeyaan baadhis difaac. Caqababada ugu muhiimsani waa in Qareennadu ay ku guul-dareystaan inay fahmaan faa'iidada cajiibka ah ee hawsha noocan ahi ku yeelan karto dacwaddooda. Qareennadu sidoo kale waxaanay hubin sida loo sameeyo baadhista difaaca, oo waxay aaminsan yihiin in aanay haysanin wakhtiga loo baahan yahay in lagu qabto. Arrinta kale ayaa iyadna noqon karta caabiga kaga yimaad booliska, dacwad oogayaasha iyo garsooraha oo aan fikirkani waxba ka ogayn. Mar haddii aanay Somaliland imika lahayn baadheyaal gaar ah, in mid la kireystaa meesha ma taalo. Sidaas awgeed, baadheyaasha difaacu waa inay arrintani ku tabobarnaadaan.

*Doodda - Afarraad:*

- *Miyaad weydiisaan Garsooraha, Booliska iyo Dacwad oogaha dacwadihiina dhexdooda in la idiin oggolaado ama ay qabtaan hawlo baadhiseed oo dan u noqonaya difaaca?*
- *Miyey Garsooreyaasha, Booliska, ama Dacwad ooguhu dacwaddahiina dhexdooda doonaan inay idiin oggolaadaan ama qabtaan tallaabooyin baadhiseed oo looga dan leeyahay in la keeno caddeyn faa'iiddo u ah macmiilkaaga?*
- *Waa kuwee caqabadaha jira helitaanka wadashaqaynta Garsooreyaasha, Booliska, iyo Dacwad oogeyaashu si u qabtaan tallaabooyin baadhiseed oo faa'iiddo u ah difaaca?*
- *Weligaa miyaad sameysay baadhis difaac dacwadahaaga midkoodna?*
- *Sidee isticmaalka baadhaha difaacu ay faa'iiddo ugu yeelan kartaa dacwaddaada?*
- *Waa kuwee caqabadaha kaa soo wajahay ama aad arki karto isticmaalka baadhaha difaaca?*

*Hawl-galka-Saddexaad*

Ugu horreyn galaaska waa in loo qaybiyaa kooxo midkiiba tahay 4 ilaa 8 ka qayb-gale. Koox kastaa waa in kala badh xubnahooga ka dhigaan Qareenno badhka kalena boolis. Tabobarayaashu waxay noqon doonaan garsooreyaal iyo dacwad oogayaal.

Mid kasta oo xaaladahani hoose ah, Qareennadu waa inay iyaga dhexdoodu ka doodaan waa maxay caddeynta ama maragyada ay doonayaan inay soo bandhigaan iyo siddee?

Hadday doonayaan inay raadiyaan shay ku jira galka booliska waa inay qoraal ku codsadaan oggolaanshaha tabobareyaasha oo metalaya garsoore iyo dacwad ooge oo dabadeed go'aamin doona hawsha ay qabteen ka qayb-galayaasha metalaya boolisku. Bileykuna waxay diiwaangelin doonaan tallaabooyinka ay qaadi doonaan iyo sababta. Markay dhammeeyaan diiwaan-gelinta dhammaantood waxaa is barbardhigi doonaa kana doodi doonaa galaaska oo dhan.

1. Macmiilkaaga Cabdul wuxuu ku eedaysan yahay Qodobka 460 ee XC wuxuu qabsaday Jacfar oo 19 sano jir ah. Cabdul wuxuu sheegay in Jacfar uu iskii ula joogay sababtoo ah waxay is khilaafeen aabbihii. Wuxuu sheegay inuu Jacfar been sheegayo sababtoo ah wuxuu ka cadheysan yahay in Cabdul uu diiday codsigiisii ahaa inuu iibiyo ri'diisa.
2. Macmiilkaaga Maxamuud wuxuu ku eedaysan yahay inuu ka ganacsanayey maandooriyeyaal ee ku xusan Qodobka 342 ee XC. Weligii hore looguma eedayn dembi. Wuxuu sheegay in qiraalkiisu been yahay oo uu u oggolaaday sababtoo ah waa la garaacayey. Macmiilkaagu wuxuu kuu sheegay in sababta runta ee loo soo xidhay ay tahay inuu nin boolis ah u diiday inuu guursado walaashii
3. Macmiilkaagu Rashid waa sarkaal dowladeed oo ku eedaysan musmaasuqa ku xusan Qodobka 246 ee XC. Wuxuu sheegay inay tani tahay eedayn been ah oo ay sabab u tahay inuu xukumadda ka soo horjeedo.

# Cutubka 2:
# Kaalmada Sharci ee Xilliga Maxkamadda

## Ujeeddooyinka Waxbarasho

Cutubkani ka qayb-galayaashu waxay ogaan doonaan doorka Kaalmada Sharci ee xilliga maxkamadda iyo gaar ahaan:

- Sidii loo dhisi lahaa doodda dacwadda;
- Waxa ay tahay baahida fasiraadu;
  - Waxay baran doonaan qaabab kala duwan oo wax loo fasiro;
  - Sida loogu qanciyo maxkamadda inay qaadato fasiraad gaar ah oo qodob ama xeer
  - Waxay baran doonaan qodobbada ay isticmaalaan dadka wax fasiraa;
  - Waxay fahmayaan marka ay tahay in la helo qof wax fasira;
  - Aqoonta lagama-maarmaanka ah ee qofka wax fasiraya;
  - Sida wanaagsan ee loola shaqeeyo qofka wax fasiraya;
- Sida loo imtixaamo maragyada;
- Waxay baran doonaan waxyaabaha gaarka u ah iyo waxyaabaha ay ku liidato goob-joognimadu;
- Waxay fahmi doonaan habka su'aallaha la weydiinayoka iyo noocyada su'aalaha la weydiinayo maragga;
- Waxay fahmi doonaan si maragga loogu diyaariyo inuu marag-furo;
- Waxay fahmayaan sameeyo su'aalaha la weydiinayo ka dhinaca kale, iyo
- Waxay fahmi doonaan sida loo isticmaalo maraga kugu cadowga khabiirada;
- Waxay baran doonaan qaababka khabiirada;
- Waxay fahmayaan doorka khabiirka;
- Waxay baran doonaan kelmada gebogebaynta; Waxayna baran doonaan qaababka sida wanaagsan ee maxkamadda lagu qanciyo sii deynta macmiilka;
- Waxay fahmayaan sida looga hadlo arrimaha la xidhiidha xadhiga xukunka ka dhashay iyo odhaahda macmiilka;
- Waxay fahmi doonaan duruufaha keena yareynta ciqaabta;
- Waxay baran doonaan tallaabooyinka saameyn kara go'aaminta xadhiga ee aan ahayn duruufaha dembiga khafiifiya;
- Waxay baran doonaan Istaraatijiyada rafcaanka waxayna baran doonaan sida loo isticmaalo caddeynta cusub si waafaqsan XHC, iyo
- Waxay baran doonaan sida looga jawaabo dembiyada lagu galo wakhtiga dhageysiga dacwadda gudaha ama dibedda maxkamadda.

Sida ku xusan baaqa Lilongwe, dowladduhu waa inay keenaan tallaabooyin:

- Kor loogu qaadayo in si balaadhan loo isticmaalo qaabab kale ee xalinta khilaafaadka iyo qaab kale u dhammeynta dacwadaha ciqaabta ah kuna dhiirigaliyaan garsoorka inay u tixgaliyaan qaababkani inay yihiin tallaabada ugu horreysa arrimaha oo dhan;
- In si joogto ah loo sameeyo dib u eegista dacwadaha si loo dhammeeyo dacwadaha soo noqnoqda, dacwadaha yaryar ama dacwadaha ay habboon tahay qaab kale loo gudbiyo si loo dhexdhexaadiyo iyo inay abaabulaan shirar joogto ah oo hay'adaha nidaamka caddaaladeed ee ciqaabta ah si dhibaatooyinka maxalliga ah loogu helo xal maxalli ah, iyo
- In lagu dhiirigaliyo dadka aan Qareennada ahayn, caawiyeyaasha sharci iyo hay'adaha dhibannaha taageera inay bixiyaan talo aasaasi ah iyo gargaar iyo inay ku sameeyaan qiimeyn joogto ah tallaabooyinka dhageysiga dacwadda.

Sidaynu hore u soo sheegnay qofku wuxuu xaq u leeyahay inuu Kaalmo sharci helo dhammaan marxaladaha nidaamka caddaaladeed ee ciqaabta. Mabaadi'da iyo Habraacyada Qaramada Midoobey ee Nidaamka Caddaaladeed ee Ciqaabta habraaca 5.44. (d). wuxuu sheegay in Qaramadu ay qaadaan tallaabooyin lagu sugayo Kaalmada Sharci ee dacwadaha maxkamaddda, gaar ahaan:

> *"In la xaqiijiyo in Qareenka eedaysanahu uu joogo marxaladaha adage e dacwadda oo dhan. Marxaladda adag waa marxalad kasta oo dacwadda ciqaabta ah kamid ah oo ay lagama-maarmaan tahay talada Qareenku si loo xaqiijiyo xuquuqda eeedeysanaha ee dhageysiga dacwadeed ee caddaaladda ah ama marxalad kasta oo maqnaanshaha Qareenku ay kala dhantaali karto diyaarinta iyo bandhigista difaaca."*

Isla habraacyadani waxay sidoo kale sheegayaan in: *"Maxkamaddu iyadoo eegaysa duruufaha gaarka ah ee qofka iyo kadibna tixgaliso sababta uu [qofku] ku diiday Kaalmada Sharci, waxay amri kartaa in qofkaasi la siiyo Kaalmo sharci haddii uu la shaqeeyo iyo haddii kaleba, markay danta caddaaladdu sidaasi farto."* (Habraaca 1.40.(e)).

Marxaladda maxkamaddu waa marxaladda uu dhinaca difaacu soo bandhigo dooddiisa dacwadda, maragyada iyo khuburadana la imtixaamo iyo marka uu dhiibto odhaahdiisa gebogebada. Waxaa loo tixgaliyaa inay tahay ta ugu muhiimsan uguna qiimo badan natiijadda marxaladda dhageysiga dacwadda, maadaama natiijada dacwado badani aanay ku xidhnayn oo keliya diyaaranta dacwadda wakhtiga baadhista (ururinta caddeynta), laakiin sidoo kale ay ku xidhan tahay aftahannimada Qareenka iyo qaabka uu u doodayo.

## 2.1. Doodda dacwadda

Doodda dacwaddu waa doodda sharci ee ah in macmiilku aanu gelin dembiga lagu soo eedeeyey. Dacwad kasta dhexdeeda Qareenku waa inuu ku dedaalaa inuu la yimaado dooddani oo kale.[96] Waa inay macquul noqotaa in doodda lagu sheego odhaah kooban. Tusaale ahaan: *"Macmiilkaygu ma aha dembiile ku kacay*

96 Dacwado tiradoodu ay aad u yar tahay uun baanay macquul ahayn in la helo arrimo sal u ah in lagu andacoodo in macmiilku aanu dembiile ahayn, markaasoo ay tahay in doodda dacwadda lagu sharaxo sababta uu macmiilku ugu qalmo ciqaab intani ka yar ama qaab kale oo loo xabsiyo.

*weerar sababtoo ah wuxuu xaq sharci ah u lahaa inuu naftiisa difaaco sida uu dhigayo Qodobka 34 ee Xeerka Ciqaabta Guud"*. Doodda dacwaddu waxay noqon kartaa wax iska fudud sida aqoonsiga qofka oo lagu khaldamo (sida *"Boolisku way ku khaldameen xadhiga macmiilkayga sababtoo ah wuxuu u ekaa ama u lebisnaa sida qofkii dembiga galay"*) ama waxay u adkaan kartaa sida adigoo ku andacoonaya in baadhitaanka sawirka faraha ee sheegaya in sawirka faraha macmiilkaagu uu ku yaalo hubkii wax lagu dilay uu khalad ahaa sababtoo ah qofkii baadhayey wuxuu isticmaalay qaab khalkhalsan oo lagu qiyaaso sawirka gacmaha.

Dooddu waxay hagaysaa baadhista iyo diyaarinta dacwadda waxaanay hagtaa soo bandhigista dacwadda ee marxaladda dhageysiga dacwadda.

Tusaale ahaan: Haddii dooddaada dacwaddu ay tahay in macmiilkaagu aanu dembiile noqon karin sababtoo ah wuxuu joogay Puntland markii uu dembigani dhacay, markaa baadhistu waa inay awoodda saartaa helitaanka caddeyn ama maragyo muujinaya in macmiilku uu Puntland joogay wakhtigii uu dembigu dhacay, dhageysiga dacwaddana sharaxaaddaada waa inaad ugu talo gashaa inay iftiimiso caddeynta taageeraysa go'aankaasi oo kale.

Haseyeeshee, dooddani oo kale waxaa la abuuraa oo lagu dhammeystiraa marxaladda maxkamadda. Qareenku waa inuu diyaar u ahaadaa inuu dib u qiimeeyo oo uu badelo doodda dacwadda inta ka horreysa iyo xilliga dhageysiga dacwaddaba haddii aanay waafaqsanayn dhacdooyinka aan lagu muransanayn ee caddeynta ku dhex jira. Waa in hoosta laga xariiqaa in *doodda dhammeyska-tiran la go'aamin karo oo keliya markuu Qareenku si guud cilmi baadhis ugu sameeyo sharciga oo uu baadho dhacdooyinka*.

### 2.1.1. Fahmida Dhageystayaashaada

Dooddaada dacwaddu waxay qiimo leedahay haddii ay tahay mid awood u leh inay qanciso Garsoorayaasha dacwadda dhageysanaya. Nooca doodda uu qofku ku qancayaa badanaa waxay ka xidhan tahay sida caadooyinka iyo waxyaabaha la aaminsan yahay ay ula xidhiidhaan doodda marka loo eego doodda lafteeda.

Tusaale ahaan: Waxaa jira dad badan oo Tansaaniya dhexdeeda aaminsan in lafaha jajaban ee harimacadku dawayn karaan xanuunka iyo damqashada inkastoo aanay jirin caddeyn cilmiyeysan oo taageeraysa waxani la aaminsan yahay. Haddii aad cilmi baadhis ku sameyn lahayd in lafahaasi ay dawo wax ku ool ah yihiin, koox ka kooban dhakhaatiir Somaliland ka socota iyo koox kale oo ah beeralay Tansaaniya ka timid, waxaad si caddaalad ah uga saadaalin kartaa jawaabahooga meelaha ay ka kala yimaadeen. Xitaa Qareenka aad wax u qancin og ayaanay u muuqanin inuu badeli karo maskaxda kooxnaba.

Waxaa xikmad badan in la doorto doodda dacwadda ee ay is qabanayaan caadooyinka iyo waxyaabaha ay aaminsan yihiin Garsooreyaasha dacwadda ka go'aan gaadhi doona. Sidaas darteed, way faa'iiddo badan tahay *inaad inta ugu badan ee macquulka ah ka ogaato dadka ku dhageysan doona taariikhdooda*. Waxaa jira meelo badan oo aan tiro lahayn oo saameyn kara Garsoorayahaasha fikirkooda laakiin macquul maaha in la ogaado shay kasta oo faa'iido lahaan kara.

Dhacdooyinka nooca faa'iiddada leh macquulkana ay tahay in la ogaado waxaa ku jira:

- Aqoonta Garsooraha;
- Gobolka, nasabka iyo diinta u ka soo jeedo Garsooruhu;
- Xulufadiisa siyaasadeed;
- Qoyska iyo xigtadiisa dhow;
- Waxyaabaha qofka dhiirigaliya;
- Waxyaabaha uu qofka shakhsi ahaan aaminsan yahay, iyo
- Sida uu Garsooruhu uga go'aan qaatey dacwadihii hore ee lamid ahaa dacwaddaadani.

Haddii fal-celinta Garsoorahaaga laga filayo ee doodo kala duwan aanay adiga kuu caddeyn waxaad isku dayi kartaa inaad ku tijaabiso kuwa kale ee ay asal ahaan astaamaha isku midka ah leeyihiin. Dabcan [arrimaha] sare ku xusani waxay sababi karaan sabab in la duro Garsooraha sida ku xusan Qodobka 10 ee Xeerka Habka Ciqaabta Somaliland.

### 2.1.2. Fahamka naftaada iyo danta macmiilkaaga

Doodda dacwaddu kama dhigna aragtida Qareenka ee macmiilka iyo dembiga. Sida Garsoorayaasha oo kale, Qareennaduna waxay leeyihiin caadooyin, eexashooyin, iyo soo kala dhoweysasho saameyn ku leh aragtiyahooga. Haseyeeshee, Qareennada waxaa saaraan masuuliyad ah *inay si xirfaddaysan u soo bandhigaan* difaaca ugu qiimo badan ee macmiilka loo helo karo, iyadoon loo eegayn aragtiyahooga shakhsiyeed ee dembiilenimada ama dembilaawenimada macmiilka. Si ay si dhammeystiran ugu tixgaliyaan masuuliyadahooga Qareennadu waa inay baadhaan caadooyinkooga iyo soo kala dhoweysashadooda oo ay ka go'naataa inay tahay masuuliyadda shaqo ta uu ka dhalanayo go'aankooga dacwadda macmiilku ee aanay ahayn aragtida shakhsiyadeed.

Haseyeeshee, *daacad u ahaanshaha masuuliyadda shaqo* way ka duwan tahay *dacaadnimada shakhsiyadeed* waxaanay Qareenka uga baahan kartaa inuu sameeyo tanaasulaadyo lid ku ah danta macmiilka si uu u kobciyo meesha uu macmiilku ka taagan yahay arrimo sharci oo muhiim ah.

Waa wax caadi ahaan la aqbali karo in la yeesho dood dacwadeed oo aan macmiilkaaga ka muujinayn sharaxaad togan ilaa iyo inta ay dooddu tahay mid lagu qanci karo oo ay dhalinayso go'aan ay danta sharci ee macmiilkaagu ku jirto. Tusaale ahaan, haddii aad meteli lahayd nin hore in badan loogu xukumay budhcadnimo oo uu dacwaddanina ku eedaysan yahay inuu qoday gidaar hoostii si uu u galo guri oo uu u xado alaab dooddaadu waxay noqon kartaa *"macmiilkaygu ma qoto wasakhda dhexdeeda, qodistu waa hawl aad u badan, u dhiib majarafad wuxuu kugu sugi doonaa dibedda gurigaaga si uu kuugu garaaco iyada oo uu lacagtaada u qaato, isagu ma galo dembiyada uga baahan hawsha adag, dembigani ma ahaa kiisii"*.

### 2.1.3. Hagaajinta Dooddaada

Doodda wanaagsani waa ta koobsata ee ay ku jiraan dhammaan dhacdooyinka aan si dhammeystiran layskugu khilaafi karin. Haseyeeshee, doodda ugu wanaagsani waa ta u baahan khilaafka dhacdo ee ugu yar

in lagu xalliyo maslaxdaada. Doodda dacwaddu waxay ka koobnaan kartaa dooddo dhawr ah, haseyeeshee ta fudud ayaa wanaagsan. Doodda ugu dhammeyska-tirani waa ta dhageystayaasha loogu talo galey uga baahan deddaalka maskaxeed ee ugu yar ama/iyo fikirka maskaxeed.

*Hawl-qabadka-Tobnaad:*

Ka qor hal iyo wax ka badan oo *"doodo dacwadeed ah"* mid kasta oo dhibaatooyinkani hoose kamid ah.

1. Macmiilkaaga Maxamed wuxuu ku eedaysan yahay Koontarabaanin. Ciidamada ilaalinta xuduudka Somaliland ayaa ka helay dheeman iyo dhagaxaan kale oo macdan ah iyagoo ku guntan buste laga dhex helay alaab uu Maxamed lahaa markii lagu baadhayey xuduudka oo uu isku dayayey inuu Somaliland ka soo galo Itoobiya. Maxamed wuxuu ku nool yahay Hargeysa waxaanu wiig kahor u baxay Addis Ababa si uu u booqdo xigtadiisa.
2. Macmiilkaaga Xakiim waxaa istaajiyey isagoo gaadhigiisa ku dhex jira sarkaal boolis ah oo baadhay kana helay hal kiiloo oo xashiishad ah kursi uu rakaab fadhiyey hoostiisa. Macmiilku wuxuu dafiray inuu wax ka ogaa maandooriyahaasi.
3. Macmiilkaaga Cabdulraxmaan waa maareeyaha hudheel faa'iiddo badan soo saara oo badanka u adeega ajaanibka. Wuxuu ku eedaysan yahay inuu si khaldan ula dhaqmay dhaawacna uu u geystay sarkaal shaqo dowladeed haya isagoo si ula kas ah u aflagaadeeyey ulana dagaalamay sarkaal boolis oo sheegaya inuu su'aalo isaga ku weydiinayey suuqa dhexdiisa sababtoo ah wuxuu u muuqday inuu cabsanaa. Markii aad la kulantay Cabdiraxmaan waxaa ku yaalay caalamadahii garaacista xun. Boolisku muu diiwaangelin magacyada wax maragyo ah.

## 2.2. Baahida Fasiraada

Macnaha qodobbada ama xeerarka qaarkood badanaa ma cadda. Xitaa markay muuqato in qoraalku uu cadyahay ku dabaqista qodobka ee dhacdooyinka dacwadda ayay su'aalo ka dhalan karaan. Fasiraada waxaa badanaa loogu baahan yahay in si cad loo fahmo macnaha iyo xadka qodobka. Hadday Garsooreyaashu sidaasi oggol yihiin iyo haddii kaleba waxa looga fadhiyaa go'aanno khuseeya fasiraada qodobbada markasta oo ay sharciga ku dabaqayaan dhacdooyinka dacwadda. Qareennadu waa inay awoodaan inay si wax ku ool ah ugu doodaan fasiraadaha caawinaya macmiilkooga kana horyimaadaan kuwa iyaga waxyeelaynaya.

### 2.2.1. Qaababka Fasiraada

Nidaamka sharci ee Roomaaniyiinta laga dhaxlay ('civil law tradition') wuxuu abuuray qaabab gaar ah oo [sharciga] loo fasiro mar haddii Garsooreyaal tiro yar oo Somaliland ah lagu wargeliyey inay si cad u raacaan qaababkani tallaabooyinkoogu badanaa waxay ku dhisnaan doonaan sababayn lamid ah. Inuu qaababkani fahmaana waxay Qareenka siin doontaa faham fa'iiddo badan oo ah nooca doodaha ay u badan tahay inay wax ku ool noqon doonaan marka laga hadlayo macnaha xeerarka.

Mabda'a ugu horreeya ee fasiraadu waa in haddii weedhaynta qodobka ama xeerka aanay wax aan la fahmi karin ku jirin looma baahna wax fasiraad ah haddii kale tani waxay sababi kartaa natiijo aan macquul ahayn.

Marka natiijada aan macquulka ahayn laga keeno macnaha cadaanka ah ee qodobka ama xeerka, fasiraad ayaa loo baahanayaa[97].

Marka uu qoraalku yahay mid aan la fahmi karin, Garsooreyaashu waa inay raadiyaan ujeeddadii sharci-dejinta. Sida meel kasta ka jirta, shuruucda Somaliland waxaa qarqiyey waxyaabo aan la fahmi karin. Waxyaabaha aan la fahmi karin waxay ka soo bixi karaan qaar kamid ah xeerarka Somaliland marka qaybaha xeer qudha ay u kala duwanaadaan si loo fahmi karo inay arrin qudha ka leeyihiin macnayaal kala duwan oo macquul ah.

Marka la baadhayo ujeeddadii sharci-dejineed ee qodob xeer kamid ah, maxkamaddu waa inay marka ugu horreysa la baadho qoraalka laftirkiisa, cutubka oo dhan, iyo haddii ay lagama-maarmaan tahay, xeerka oo dhan iyo faallooyinka laga qoray xeerka.

Haddii daraasadda noocani ahi ay xallin weydo faham la'aanta, maxkamadahu waa inay eegaan taariikhdiisa sharci-dejineed. Taariikhda sharci-dejineed waxay ka hadashaa horumarkii xeerka ee nidaamka sharci-dejinta iyo dhokumentiyadii laga abuuray xilligii hab socodkaasi. Baarlamaanku waa inuu caawiyaa maadaama uu hayo oo uu urruriyey dhokumentiyadii kal-fadhiyada oo dhan iyo diiwaannada kale ee khuseeyaa talooyinkiisa.

Marka aanu jirin qoraal xaliya su'aasha ujeeddada sharci-dejinta, maxkamaddu waa inay adeegsataa mabaadi'da guud ee sharciga si ay go'aan uga gaadho dacwaddani. Ugu dambeyn, marka taariikhda sharci-dejineed lagu dawakho ama xeerku uu aad u da' weyn yahay maxkamaddu waxay markaasi eegaysaa ujeeddadii sharcigani loogu samaynayey bulshada waxaanay u xallin kartaa qabyooyinka iyo faham la'aanta qaabka sida ugu fiican kor ugu qaadaya ujeeddadii sharcigani loogu sameynayey bulshada.[98]

### 2.2.2. Illaha Sharciga

Ma aha in su'aal kasta oo sharci ah oo la xidhiidha sharciga dembiyada laga jawaabi karo oo qudha marka loo noqda Xeerka Ciqaabta ama Xeerka Habka Ciqaabta. Cilmi-baadhis dheeraad ah ayaa badanaa loo baahan yahay. Inkastoo aanu ahayn liis si buuxda kama dambeysa u ah, aad bay u faa'iido badan tahay haddii loo tixgaliyo illaha soo socda in lagu kaabo doodda Garsooraha hortiisa:

- Dastuurka;
- Qoraallada Caalamiga ah;
- Kitaabka Quranka iyo qoraallada Sharciga Shareecada;
- Qaamuusyada sharciga;
- Buuggaga waxbarasho iyo macluumaadkii aad ka heshay casharadii aad Jaamacadda ku qaadatay;
- Maqaal;ada wargeysyada Jaamacadeed ee sharciga;
- Maqaallada iyo macluumaadka laga helo xarumaha sharciga;

97 See, J.Mazaud & Francois Chabas, Leçons de Droit Civil, T.1 (12th ed. 2000), p.182.

98 See, E. Steiner, French Legal Method (2002), p.64.

- macluumaadka lagu bixiyo tabobarada garsoorka ee ay diyaariyaan Ururada aan dowliga ahayn ee maxalliga iyo caalamigaba ah iyo ururada caalamiga ah ee taageera mashaariicda tabobarada garsoorka;
- Macluumaadka Wasaaradda Caddaaladda,
- Waxyaabaha ay daabacaan ururada caalamiga ah.

### 2.2.3. Soo Bandhigida doodda ('argument')

Inaad maxkamad ku qanciso inay qaadato fasiraad gaar ah oo qodob ama xeer mar mar uun bay fududdahay. Maxkamaduhu badanaa arrimahani ma tixgaliyaan; sidaas darteed, qaabka ugu fiicani waa inaad dooddaada qoraal ugu keento maxkamadda adigoo ka soo hor qadimaya taariikhda dhageysiga dacwadda iyadoo ah qayb kamid ah odhaahdaada difaaca. In qaabkani loo soo bandhigo dooddu waxay maxkamadda u oggolaanaysaa inay hesho wakhti ay si haboon ugu tixgaliso dooddaada halkii ay caddaadis ka dareemi lahayd in looga baahan yahay go'aan degdeg ah.

*Doodda - shanaad:*

- *Miyaad kaga dooddday garsoore hortiisa macnaha qodob ama xeer?*
- *Noocee ayay ahaayeen doodaha fasiraada ah ee aad sameysay?*
- *Ma jiraan caqabado ay la kulmaan Qareennada isku daya inay ku doodaan fasiraad gaar ah oo qodob ama xeer?*
- *Waa kuwee noocyada doodaha aad u malaynayso inay u badan tahay inay wax ku ool noqon doonaan?*

## 2.3. Adeegsiga Turjumaannada

### 2.3.1. Xaqa in Turjumaan la helo

Sida ku xusan Qodobka 207 ee Xeerka Habka Ciqaabta, Maxkamaddu waxay magacaabi kartaa Turjumaan, iyadoo isaga ka dooranaysa, haddii ay macquul tahay dad ay labada dhinac si wadajir ah iskugu raaceen dhexdooda *"Marka ruuxa doonaya ama u baahan inuu sameeyo hadal caddayn ah ama bixiyo marag muujin aanu garanayn luuqada ay Maxkamadda isticmaalayso"* iyo sidoo kale marka Qodobka 183 maraga dhegaha la', aan hadli karayn ama dhegahana la' aan hadli karina. Luuqada qodobka waxaa laga fahmi karaa in macnahiisu yahay in aan turjumaan loo baahnayn qayb kasta oo dhegaysiga dacwadda iyo baadhista kamid ah laakiin keliya loogu baahan yahay inuu sharaxo eedda iyo qoraalka eedda iyo xilliga su'aalaha iyo iska horimaadka. Haseyeeshee, qoraalka noocan ahi wuxuu ka horimanayaa Qodobka 8 ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland oo mamnuucaya nooc kasta oo takoorid ah iyo kala saraysiin muwaadiniinta Somaliland dhexdooda ah.

Si isku mid ah si loola macaamilo eedaysanayaasha waa in la siiyaa fursad ay ku fahmaan ugana qayb qaataan dacwadaha lidka ku ah iyaga si lamid ah sida uu awoodi karo qofka luuqada waddankiisa ku hadlayaa.

Heshiiska Caalamiga ah ee Xuquuqaha Madaniga iyo Siyaasadda (ICCPR) Qodobka14 wuxuu sidoo kale farayaa *"Dhammaan dadku waa inay siman yihiin maxkamadaha iyo guddiyada Garsoorka hortooda..."*

iyo ICCPR Qodobka 14.3(f) oo si gaar ah u sheegaya in eedaysanahu uu marin-u-helo *"Gargaar bilaash ah oo turjumaan ah haddii aanu fahmi karin kuna hadli karin luuqada laga isticmaalayo maxkamadda dhexdeeda"*. Waxaa intaas dheer, Habraaca 3.42.f. ee Mabaadi'da iyo Habraacyada Qaramada Midoobey ee Marin-u-Helidda Kaalmada Sharci ee Nidaamka Caddaaladda ee Ciqaabta oo dalbanaya in Qaramadu *"ay siiyaan adeegyada Turjumaan madaxa-bannaan, markii ay lagama-maarmaan noqoto, iyo u turjumidda dhokumentiyada markay habboon tahay"* dhammaan dadka la tuhunsan yahay, la soo qabtay, xidhan, ku eedaysan oo loo haysto fal-dembiyeed ciqaab ah.

### 2.3.2. Goorta ay tahay in Turjumaan la helo

Markasta oo uu Qareenku tuhmo in macmiilkiisu aanu lahayn xirfaddii luuqadeed ee uu ku fahmi lahaa dacwadda waxaa fiican inuu xaqiijiyo in turjumaan la isticmaalo. Badanaaba markay habboon tahay inuu la isticmaalo Turjumaan maxkamadda dhexdeeda sidoo kalena waa lagama-maarmaan in loo haysto turjumaan xidhiidhka Qareenka iyo macmiilkiisa.

### 2.3.3. Aqoonta Turjumaanka Maxkamadda

Shaqada turjumaanka maxkamaddu waa xirfad sare oo aad u adag waxaana la siiyaa wax u qalma. Waddamo badan gudahooda in la noqdo turjumaan maxkamadeed waxay u baahan tahay in laga gudbo su'aalo adag oo la weydiinayo oo si wadajir ah loogu tijaabinayo degdegga iyo saxsanaanta turjumidda, aqoonta erey-bixinta sharciga ee qarsoon, iyo asluubta turjumaanka. Sababtoo ah turjumaanku wuxuu badanaa dhinac ka noqonayaa ilaalinta sirta xidhiidhka Qareenka iyo macmiilkiisa, turjumaanka maxkamaddu waa inuu jecel yahay inuu aaminsan yahay waajibaadka ah inuu ilaaliyo sirta macmiilka.

Habboonaanta darteed iyo si kharashka looga badbaado waxaa badanaa la doonaa in loo isticmaalo saaxiibka ama qaraabada eeedeysanaha ama oday degaanka ah turjumaan ahaan; haseyeeshee, tani badanaa waxay noqotaa fikrad xun. Xitaa haddii noocani turjumaanka aan caadiga ahayn uu aad ugu hadli yaqaan luuqada maxkamadda iyo luuqada eeedeysanahaba waxaan weligood sidoo kale laysla heli karayn inuu aqoon u yeesho erey-bixinta sharciga, xor ka ahaado khilaaf daneed, ama uu ilaasho kalsoonida macmiilka. Waxaa gaar ahaan muhiim ah in la feejignaado in la adeegsado turjumaan si uun ugu xidhan eedaysaneyaasha dacwadaha uu macmiilkaagu dhibanaha yahay.

Turjumaanku wuxuu noqon karaa mid uu macmiilkaagu fahmi karo una han weyn inuu caawiyo, laakiin weli ku sababi kara dhibaatooyin Qareenka haddii aanu fahamsanayn arrimaha sharciga ah iyo masuuliyaddooda. Tusaale ahaan, xanuunka maskaxeed mararka qaarkood wuxuu noqon karaa difaaca dembiga waana shay uu Qareenku doonayo in la ogaado, laakiin turjumaanka aan shaqadani garanayni badanaa wuu qarin karaa calaamadaha isku dhexyaaca maskaxeed ee macmiilka isagoo ku fikiraya inay caawinaayaan macmiilka. Turjumaanadu ma jecla inay turjumaan waxyaabaha aan muhiimka ahayn, turjumaanka aan tabobarnayna wuxuu isku dayi karaa inuu macmiilka ka dhigo mid aad u caqli badan oo sababi karta in dhibaatooyin caafimaad oo aad u ba'an oo dhinaca maskaxda ah aanay ogaanin Qareenka iyo maxkamaddu.

## 2.3.4. Si Wanaagsan ula Shaqeynta Tarjumaanka

Markuu turjumaanku joogo garsooreyaasha, dacwad oogeyaasha, Qareennada iyo eedaysanahu badanaa waxay bilaabaan inay u dhaqmaan sidii oo ay ilaaweenin loo baahan yahay in turjumaad la sameeyo. Turjumaanada sida u wanaagsan hadalka ula socon kara ayaa haddana weli mararka qaarkood u baahanaya in wax loo iftiimiyo ama inuu gaadho qofka hadlaya. Haddaanay dadka hadlaya oo dhami aayar hadlin, aanay hadalka joojin marmarka qaarkood oo aanay ka feejignaan inay iskumar hadlaan, shaqada turjumaanka waxay noqonaysaa qayrul-macquul. In la xaqiijiyo inuu turjumaanku isagoo mabsuud ah ka dhexgali karo qofka hadlaya, weydiin karo inay hadalka joojiyaan, ama inay ku soo celiyaan hadalkii hore ayaa lagaga hortagi karaa inay dhibaatooyin badani dhacaan.

Waxaa sidoo kale lagama-maarmaan ah in la kormeero tallaabooyinka turjumaannada si loo xaqiijiyo inay si fiican u turjumayaan wax kasta. Badanaa turjumaanku wuxuu qaadan doonaa qaabka ah inuu qaato fikirka guud ee waxa markaas socda oo aanu ka werwerin wixii faahfaahin ah ee uu u arko in aanay muhiim ahayn. Tani waa wax aan la aqbali karin waana in laga hortagaa mar haddaanay turjumaanka meelna uga baanaanayn inuu go’aamiyo waxa muhiimka ah iyo waxaan ahayn. Haddaad ogaato in dhererka turjumaadu uu aad uga duwan yahay waxa la turjumayo ama haddii kelmadaha ka muuqda turjumaado aanay ku jirin odhaahda asalka ah ama dhinaca kaleba waxaa [markaasi] si cad u jirta dhibaato.

Dhibaatooyinku way yaraanayaan haddii Qareenku uu turjumaanka kala hadlo rajooyinkooda marka hore. Waxaa sidoo kale aad u wanaagsan inuu si wacan marka hore ugu sii sharaxo turjumaanka waxa ay rajeynayaan markay noqoto kelmadaha aan la isticmaalin ama kelmadaha farsamo ee qarsoon sababtoo ah kelmadaha ama aragtiyaha qaarkood ayaan si toos ah looga heli karin luuqada macmiilka turjumaankuna wuxuu u baahanaya wakhti uu ku helo weedh ku habobon ama turjumaada kelmada ama aragtida saxda ah.

Markasta oo ay jiraan luuqado kala duwan oo la isticmaalayo waxaa jira dhaqanno kala duwan oo ay tahay in sidoo kale la tixgaliyo. Markasta oo laga hadlayo mawduucyada sida diinta, qaybaha jidhka, shaqooyinka jidhka, luuqada xun ama waxyaabaha kale ee dhaqan ahaan xasaasiga ah Qareenku waa inuu uga digaa turjumaanka suurtogalnimadani oo uu qorshe ka lahaado si loo dhammeeyo mawduucyadani haddii ay la xidhiidhaan dacwadda. Haddii turjumaanku uu ku guul-dareysto inuu turjumo marag-furista sababtoo ah wuxuu ka yaabay, ka murugoodoy ama ka walaacay in dad kale laga galo fal-dembiyeed waxay u badeli kartaa natiijada dacwadda qaabab aanu turjumaanku fahmayn.

*Doodda - Lixaaad:*

- *Miyaad wax caqabad ah kala kulantaa inaad turjumaan u hesho macmiishaada?*
- *Maaliyad miyaa loo helaa turjumaannada?*
- *Maxay ahayd aqoonta turjumaannadii aad kula kulantay maxkamaddu?*
- *Maxay Qareennadu sameyn karaan si ay u xaqiijiyaan in macmiishoodu ay yeeshaan turjumaanno aqoon leh oo ay ku helaan kharash la’aan?*

## 2.4. Su'aalaha la weydiinayo Maragyada

Sida ku xusan turjumaada Qodobka 14(3) (e) ee ICCPR xuquuqda su'aalaha la weydiinayo maragyada waxaa looga jeedaa in xeer-ilaalintu ay ku wargeliso dhinaca difaaca maragyada ay rabaan inay u yeedhaan xilliga dhageysiga dacwadda muddo macquul ah oo dhageysiga dacwadda kahor ah si uu eedaysanahu u heli karo wakhti ku filan oo uu ku diyaarsan karo difaaciisa[99]. Eedaysanahu wuxuu sidoo kale xaq u leeyahay inuu joogo marka uu maragu sheegayo marag-furkiisa waxaa keliya oo xuquuqdani la xaddidi karaa markay jiraan duruufo gaar ahi, sida markay macquul tahay inuu maragu ka cabsanayo inuu eedaysanahu ka aarsan doono.

Awooddista in si wax ku ool ah wax loo su'aalo maragu waa mid kamid ah xirfadaha ugu muhiimsan ee Qareenka. Kuwa aan lahayn xirfadahani waxay wakhtiyada qaarkood ku andacoonayaan in isticmaalka in si farsamaysan wax loo su'aalaa ay tahay nooc kamid ah khiyaamaynta iyo siyaasadaynta. Xaqiiqo ahaan, ujeeddada ugu weyn ee in si farsamaysan wax loo su'aalaa waa in la ogaado runta haddii kale ay qarinayso eexashada, soo kala dhoweysashada, jaahilnimada ama khaladdaadka maraggu. In si farsamaysan wax loo su'aalo waxaa sidoo kale looga jeeddaa in laga feejignaado wakhtiga maxkamadda ee lumaya iyo in taxadirka Garsooreyaasha lagu jeediyo dhacdooyinka aad u caawinaya dacwaddaada. Maadaama Maxkamadduhu ay muhiimada ugu weyn u siiyaan marag-furka maraga goob-jooga ah, haddii aad awooddo inaad fagto marag-furka maragga goob-jooga ah waxaa burburaya isku xidhnaanta caddeymaha oo dhan dacwadduna dhankaaga ayey u badan doontaa.

Sida ku xusan Qodobka 189 ee XHC:

"1. Maraggu, marka uu ku jiro su'aalaha la weydiinayo ee ay Maxkamadduna oggoshahay, wuxuu dib usoo celin karaa xasuustiisa khusaysa arrimaha wax laga weydiinayo, isagoo u noqonaya:
   a) Qoraal kasta oo uu isagu sameeyey;
      i. Wakhtigii dhicitaanka dhacdada khuseysa ta isaga la su'aalay;
      ii. Wax yar kadib dhicitaanka dhacdo ay Maxkamaddu u tixgalinayso inay u badan tahay in;
   b) Qoraal kasta oo caynkaasi ah oo uu sameeyay qof kale oo uu akhriyay maragu markuu ku dhex jiray wakhtigaa aynu soo sheeganay, haddii, markii uu maragu akhriyay qoraalka uu garanayay inay ahayd sax;
   c) Qoraallo shaqo, hadduu maragu yahay khabiir ama la taliye xagga farsamada ah.

2. Markasta oo maraga loo oggolaado inuu dib usoo celiyo xasuustiisa isagoo u noqonaya dhokumenti ama qoraal kasta, markay Maxkamaddu u oggolaato wuxuu u noqon karaa nuqulka dhokumentigaasi ama qoraalkaasi haddii in aan la soo saarin asalka si buuxda loogu qancay.

3. Maragu waxa kale oo uu ka marag kici karaa xaqiiqooyin ku dhex xusan dhukumanti iyo qoraal kasta oo sidan ah sida ay ugu xusan tahay shaygani, inkastoo aanu isagu lahayn xusuus gaar ah oo xaqiiqooyinka laftooda ah, haddii uu isagu hubo in xaqiiqahaasi si sax ah loogu diiwaan galiyay dhokumentiga.

99 See Lawyers Committee for Human Rights (2000), What is a Fair Trial?, p.18.

4. Dhukumenti ama qoraal kasta oo lagu xusay faqradaha Qodobkani waxa la keeni doonaa Maxkamadda horteeda waana in la tusaa dhinaca kale, hadduu dhinacaasi sidaasi doono.

### 2.4.1. Goob-joognimada

Waxaa loo arkaa in haddii uu qof si toos ah u ogaa dhacdo, ay tahay inuu awoodo inuu si sax ah u sheego waxa dhacay. Haseyeeshee, dad badan ayaa lagu xukumay dembiyo kala duwan marag-furka goob-jooge dhab ah.

Sidaas darteed, sidee buu sax u yahay marag-furka goob-joogahu? Waxaan hubaa inaad soo marteen xaalado garashadaadu aanay lamid noqonin waxa ay dadka kale sheegeen inay arkeen.

Waxaad kolay u malaynaysaa in dadka kale ay ku khaldanaayeen garashadooda. Haseyeeshee, waxaan kula doonayaa inaad tixgaliso inaad adigu khaldanaan karto – sidaas darteedna, waxaad qayb ka noqon kartaa 80% maragyada caalamka. Taasoo, qaar idinka mid ahi ay cadhoon doonaan oo ku dhawaaqi doonaan, *"Annigu ma khaldanaan karo. Waxaan ku arkay indhahayga."*

Haseyeeshee, markani waxaa muhiim ah in hoosta laga xarriiqo in xasuusta [maskaxda] loogu talo galay inay shaandhayso adduunka oo dabadeedna tuurto wixii ay u aragto in aanay xidhiidh la lahayn. Haddii ay maskaxaheenu noqon lahaayeen kamarado muuqaalka duuba waxaa curyaamin lahaa macluumaadka buux-dhaafka ah. Waxaynu doonnaa inaynu abuurno xaqiiqooyinka dhacdada loo yaqaan: *("arm focus")*; si aynu u xasuusano xaqiiqooyinka qoriga la inagu hayo, laakiin ma xasuusan karno wejiyada tuugta ama dadka kale ee [joogay] bakhaarka ay ka dhacday budhcadnimo hubaysani.

Sidaas darteed, waxay u muuqataa in xasuustu aanay siday ahayd u duubin dhacdada oo xasuusaha ay badeli karaan macluumaad kale oo dhacay dhacdada kadib[100]. Xaqiiqada in xasuusaha ay tirtiri karaan saameyno dibedda ah waxaa aad u qaatay saynisyahanada[101].

Dib udhiska dhacdada runta ahi waxay ku xidhan tahay garaadkeena iyo awooddeena xafidaadeed. Haseyeeshee, xasuustu waxay ku xidhan tahay arrimo dhex ah ('Objective') iyo arrimo gaar ah ('Subjective') oo taxan. Waxa ku jira arrimaha dhexda ah:

- Sida wanaagsan ee ay u shaqaynayaan dareemayaasha maragu (aragga, maqalka, iwm.);
- Xaddiga iftiinka (tusaale ahaan, hadday ahayd habeen);
- Xawaaraha shayga ay arrintani khusaysaa uu ku socdo;
- Soo jeedistiisa iyo maskax furnaanta

100 Yuille, J. C., & Cutshall, J.L. (1986), "A case study of eyewitness memory of a crime", *Journal of Applied Psychology,* 71, pp.291-301.

101 Schacter, Daniel L. (2001), *The Seven Sins of Memory: How the Mind Forgets and Remembers* (Houghton Mifflin Co.); Loftus, Elizabeth F. (1980), *Memory: Surprising New Insights Into How We Remember and Why We Forget* (Reading, Mass.: Addison-Wesley Pub.). Loftus waxaa aad loogu yaqaan qoraalladeeda saameynta macluumaadka khaldan iyo xasuusta goob-joogaha.

- Xaaladdiisa maskaxeed (waa arrin dhex ah sababtoo ah waxaynu halkanu ku qiyaasaynaa awooddiisa maskaxeed iyo/ama xanuun).

Waxaa ku jira arrimaha gaarka ah:

- Taariikhdiisa shakhsiyadeed (tusaale ahaan, waayo-aragnimadiisa, aqoonta);
- Taariikhdiisa shaqo (tusaale ahaan, Injineerka gaadhigu wuxuu si fudud u aqoonsan karaa nooca Injiinka markuu gaadhigu dhaafo);
- Eexashadiisa shakhsiyaddeed ama soo kala dhowaysashadiisa (tusaale ahaan, haddii uu u malaynayo in dumarka oo dhami ay isku mid yihiin);
- Taxadirka uu u yeesho dhacdooyinka;
- Dedaalkiisa dacwadaha madaniga (ku xidhnaantiisa bulshada), iyo
- Arrinta culayskeeda (tusaale ahaan, haddii qof aad u qiimo badan la eedayey waxaa looga baahan yahay waa inuu sharaxo tallaabooyinkiisa).

Haseyeeshee, hadday dareemayaasha maragu ay yihiin sidii ugu fiicnayd ee ay noqon karayeen, waxaa jirta awood la'aan caadi ah oo dadkoo dhan ah [aanay awoodin] in si sax ah loo qiyaaso cabiraada qaarkood, sida:

- Xawaaraha (badanaa waxaa jirtaa qiyaas aan la dhaafin);
- Wakhtiga;
- Fogaanta;
- Muqaalka (tusaale ahaan, wejiga);
- Dhererka (Qiyaas dhaafin 12cm ah), iyo
- Da'da (Qiyaas sare/hoose ah ugu badnaan 8 sano).

Sidaas darteed, hadduu farqi jiro, waa iska caadi xaqiiqo ahaan xitaa haddaanu maragu aanu doonayn inuu been sheego ama dhibanahu aanu khalkhalin.

Qaar idinka mid ah ayaa naftooda ku odhan kara, *"Inkastoo goob-joogayaashu ay noqon karaan kuwo aan saxsanayn marka ay caadifad ahaan kacsan yihiin, way la socon karaan xaaladaha maalinlaha ah"*. Aqoonyahannada cilmi nafsiga ee Elizabeth Loftus waxay ogaatey inay xasuusta badeli karaan dhacdooyin dhacay dhacdada dabadeed[102]. Mid daraasadaheega kamid ah, dad baa waxay fiirsadeen filin uu gaadhi duqaynayo gaadhi kale. Filinkii markay daawadeen kadib, kala badh dadkii kamid ah ayaa la weydiiyey, *"Xawaare intee leeg ayuu gaadhiga hore ku socday markuu ku dhacay ka kale?"* dadkii soo hadhay ayaa

102 Loftus, E.F. (1980), *Memory*, ibid. See also, Loftus, E.F., Doyle, J.M. & Dysert, J. (2008), *Eyewitness testimony: Civil & Criminal, 4th edition.* Charlottesville, Va: Lexis Law Publishing; Loftus, E.F. & Palmer, J.C. (1974), "Reconstruction of auto-mobile destruction: An example of the interaction between language and memory", Journal of Verbal Learning and Verbal Behaviour, 13, pp.585 -589; Gershaw David (1996), "I Saw It With My Own Eyes!": http://virgil.azwestern.edu/~dag/lol/EyesSawIt.html. Zaragoza, M. S., Belli, R., & Payment, K. E., (2007), "Misinformation effects and the suggestibility of eyewitness memory", in: M. Garry & H. Hayne (Eds.), Do Justice and Let the Sky Fall: Elizabeth F. Loftus and Her Contributions to Science, Law, and Academic Freedom (pp. 35-63), Mahwah, NJ: Lawrence Erlbaum Associates.

la su'aalay, Xawaare intee leeg ayuu gaadhiga hore ku socday markuu burburiyey ka kale?" Qiyaasaha xawaaraha gaadhiga waxaa ku sarreeyey gaadhiga *"burburiyey"* oo gaadhiga kale ka sarreeyey.

Sidaas darteed, haddii su'aalaha la badelo oo qudha ayaabay maragyadu kuu sheegayaan waxyaabo aan xitaa jirin. Sanadkii 1978, *Loftus* waxay dad tustey sawiro is daba socda oo muujinaya *gaadhi (Datsun)* ah oo ku beegan meel isgoys ah, waxay u leexanaysaa midig, oo wuxuu jiidhay qof ka talaabay waddada iyadoo ay taalo caalamaddii socodka lagaga talaabayey waddada. Kala badh dadku waxay ku arkeen isgoyska calaamadda socoshada, halka inta kalena ay arkeen calaamada joogsashada, (haddii kale, sawiradu isku mid ayey ahaayeen). Su'aalahii sawirada khuseeyey, kala badhka koox kasta oo dadka kamid ah ayaa la weydiiyey, *"Gaadhi kale miyuu weydaartay gaadhiga (Datsun) intii ay taagnayd calaamadda joogsashada?"* hadhaagii koox kastana waxaa la su'aalay, *"Gaadhi kale miyuu weydaartay gaadhiga (Datsun) intii ay taagnayd calaamadda socoshada?"* dhammaan dadkii ayaa mar dambe la tusay sawiro isku lamaan. Waxaana la weydiiyey inay aqoonsadaan sawirka ay hore u arkeen. Cilmi-baadheyaashu waxay xiisaynayeen sida dadku ay ugu jawaabi doonaan sawirradda tusinaya gaadhiga (Datsun) oo joogta calaamadda socoshada ama joogsatada. Kuwii la weydiiyey wax ka soo horjeeda wixii ay arkeen, 80% ayaa doortey calaamada ku jirta su'aasha – oo aan se ku jirin wixii ay hore u arkeen. Si kale haddii loo dhigana, haddii aad aragtay sawirka caalamada joogsashada oo lagu weydiin lahaa su'aal ay ku jirto calaamadda *socoshada*, waxaad u dhow dahay inaad doorato in calaamadda *socoshadu* ay tahay waxaad aragtay!

Markasta oo aynu urrurino waayo-aragnimo (oo ay dhammaanteen samayno) garashadeena ayeynu ku kala shaandheynaa. Haddaynu xasuusanay kelmad kasta ama dhammaan xaqiiqooyinka, waxaynu seegi karnaa macnaha. Haddaan idhaahdo *"Annigu runtii waan daaley maanta sababtoo ah ilmahu wuxuu igu kelifay in aan sare u taagnaado habeenka oo dhan"*, maxaad ku xasuusan kartaa waxa aan kuu sheegay? Sida ay u badan tahay inuu ilmahu ooyayey habeenka oo dhan.

Waxa muuqata in aynu leenahay kalsooni si xun ugu abuurantay xasuusaheena, sababtoo ah waxeynu si joogto ah u dhisnaa wax aan jirin oo aynaan xitaa garanayn. Markaynu wax xasuusano dib ayeynu u dhisnaa waxaynu xasuusanay. Markaynu dib u daalacano dhacdo, daalacashadaaasi ayaa noqota xasuusteena ugu dambeysa. Sida sawirka markaynu eegno badanaa aynaan u xasuusan xaqiiqooyinka xasuustii asalka ahayd.

Markaynu waxba garan weyno waxaynu isku daynaa inaynu qiyaasno. Haddaynaan qiyaasi karin waxaynu haysanaa kala doorashada soo socota:

- nidhaahno: *"ma garanayo"*;
- inaynu dhisno wax aan jirin,
- buuxbuuxino meelaha maqan.

Sidaas awgeed, maxaa dhacaya haddii xasuustaasi aan lagu qancin karin? In wax aan jirin la dhisaa waxay dhacdaa markay maskaxdu la halgamayso inay dib u abuurto dhacdo, laakiin maadaama oo aanu awoodin faahfaahinta, badanaa wuxuu ku daraa faahfaahinta xasuusaha kale ee ku jira. Khuburada waxay maanta aaminsan yihiin in xasuusto ay dib ugu noqon karto xitaa xaaladdii uur-ku-jirta marka la kiciyo.

Dhacdada khalkhalka ah – ee uu ku jiro kufsigu – fal-celintu waa laba qaab oo u dhaxeeya:

- *"Hypermnesia"* (xasuusta sida qayrul-caadiga ah u wanaagsan): Tani waa xasaasiyada xad dhaafka ah ee laga qaaday dhibta ay wax ka dhasheen iyo waayo-aragnimada dib u dhibaateynta ah ee ay la jirto bilaa dareenka nafsadeed, iyo
- *"Ka feejignaan ('Avoidance')"*: Tani waa ilawshiyaha iyo farxad la'aanta *"anhedonia"* (awooddis la'aanta in farxad la dareemo).

Xasuusta lunta ee ka dhalata naxdintu waa cajaa'ib si wanaagsan loo yaqaano[103]. Waxay jiri kartaa saacado, todobbaadyo, ama sanado. Sida xagga hore lagu sheegay kala daadsanaanta xilliga naxdinta ayaa la og yahay inay sababto xasuus kala go'a. Maxaa tani looga jeedaa?

Marka qof kasta (oo aad adigu ku jirto) uu khatar ku jiro maskaxdu way xidhantaa. Wakhtiga ay xaaladdeedii caadiga ahayd ku soo noqonaysaana waa maalmo, usbuucyo iyo xitaa sanado… soo dhexgalistuna waxay ku xidhan tahay xaaladda dhibanaha. Marka ay dadku doonayaan inay ka feejignaadaan inay wax ka hadlaan – sababo awgood – waxay isticmaalaan kelmado qarinaya oo aan sheegayn waxa ay xilligaasi xamili karaan.

Dabadeed, fal-celimaha naxdineed waxay si xun u saameyn karaan shaqadii jidhka (garaaca wadnaha, neefsiga, indhaha oo aad u kala qaadma, qalaylka afka, khalkhal caloosha ah; jawaabaha caadifadeed ee la xidhiidha xaaladda dabeecadeed, baqdinta, jilicsanaanta, cabsida), iyo qaabkii fikirka (xasuus burburta ama nidaamka ka baxsan, khalkhalka aragtida wakhtiga, wax aan jirin oo layska yidhaa). Arrimahaasi sare dartood buu marag-furku isku badelayaa iyadoo aanu maragu jeclayn inuu sidaasi sameeyo.

### 2.4.2. Habka Su'aalo weydiinta Maraga

Sida ku xusan Qodobka 188 ee XHC:

> *"1. Maraga waa in marka ugu horraysa la weydiiyaa su'aalaha tooska ah; kadib, haddii ay dhinaca kale rabaan, maraga waxaa la waydiinaya su'aalaha dhinaca kale; kadib, haddii dhinacii u yeedhay maragu uu doono, maraga waxay weydiin su'aalo ku celis ah.*
>
> *2. Su'aalaha tooska ah iyo su'aalaha ku celiska ahi waa inay la xidhiidhaan xaqiiqooyinka dacwadda laakiin su'aalaha dhinaca kale waxay u baahan yihiin in aanay ku koobnaan xaqiiqooyinka uu maragu kaga marag kacay su'aalahiisii tooska ahaa.*
>
> *3. Su'aalaha ku celiska ahi waa inay ku jihaysnaayeen sharaxaadda arrimaha lagu xusay su'aalaha dhinaca kale; iyo haddii arrin cusub la keenay, iyadoo ay maxkamaddu oggoshahay, su'aalihii ku celiska ahaa, dhinaca kalena arrintani su'aalo ayey kasii weydiin doonaan."*

Weedha *"Su'aalaha tooska ah"*, Qodobka 187 ee XHC wuxuu ku qeexayaa *"su'aalaha uu maragu weydiinayo dhinicii u yeedhay"*. *"Su'aalaha uu maragga weydiinayo dhinicii u yeedhay"* waxaa sidaas darteed loogu yeedhaa *"su'aalaha tooska ah"*. Himilooyinka su'aalaha tooska ahi waa inaad faa'idada ugu weyn ee dacwaddaada ka hesho marag-furka maraga, iyo inaad marag-furka ka dhigto wax ku ool iyo mid xiiso leh.

103 See, Van der Kolk Bessel A. & Fisler Rita, (1995), "Dissociation and the fragmentary nature of traumatic memories: Overview and exploratory study", *Journal of Traumatic Stress*, Vol.8, Issue 4, p.505.

### 2.4.2.1. Noocyada Su'aalaha

Sida ku xusan Qodobka 191 ee XHC:

> *"1. Su'aalaha jawaabta ku hoggaaminaya maraga lama weydiin karo xilliga su'aalaha tooska iyo ku celiska ah, maxkamadda oo oggolaata mooyaane.*
>
> *2. Maxkamaddu waxaa keliya oo ay oggolaan kartaa su'aalaha jawaabta ku hoggaaminaya maraga xilliga su'aalaha tooska iyo ku celinta ah arrimaha hordhaca ah ama aan laysku khilaafsanayn ama ra'yigeedu hore si ku filan loo caddeeyey."*

Qodobka 187 (d) wuxuu ku qeexayaa *"su'aal jawaabta ku hoggaaminaysa maraga"* inay tahay *"su'aal kasta oo maraga loogu dhigo qaab u soo jeedinaya jawaabta uu dhinaca su'aasha weydiinayaa rabo ama filayo inuu ka helo"*.

Nooca ugu fiican ee su'aasha ay tahay in la weydiiyo xilliga su'aalaha tooska ahi waa ta maraga ku hagaysa mawduuca laga hadlayo, laakiin u baahan in lagaga jawaabo qaab ka warbixin ah. Tani oo ay sabab u tahay marag-furka oo noqon doona ka ugu qancinta wanaagsan haddii uu maragu ku sheego sheekada kelmadahiisa.

Badanaa, waxaa wanaagsan in la weydiiyo: *"Bal noo sheeg wixii dhacay habeenkii May 12, 2013?"* halkii laga weydiin lahaa: *"Ma wax baa dhacay habeenkii May 12, 2013?"* Nooca su'aasha hore ayey u badan tahay inay ka dhalato jawaab dheer oo faahfaahsan, halka nooca su'aasha labaad uu badanaa laga heli karo oo qudha jawaab ah *"haa"* ama *"maya"*.

Waxaa sidoo kale wanaagsan in laga feejignaado su'aalaha u muuqda inay soo jeedinayaan jawaabta, tusaale ahaan, waxaa wanaagsan haddii la weydiiyo: *"Kumaad la joogtay fiidnimadii May 12, 2013"*, halkii laga weydiin lahaa: *"Miyaanay run ahayn inaad Maxamed la joogtey fiidnimadii May 12, 2013?"*.Su'aasha hore ayey u badan tahay inay ka dhalato jawaab faahfaahsan, oo toos uga imanaysa xasuusta maraga halka su'aasha labaad ay u muuqato sidii oo uu Qareenku xasuusinayo maraga waxa uu odhanayo.

Si aad uga feejignaato inuu maragu akhriyo arrimo aan dhammaanayn oo aan dacwadda la xidhiidhin, weydii su'aalo maraga ku hagaya arrimaha la xidhiidha dacwadda.

Tusaale ahaan: *"Miyaad ku arkaysay wax calaamad ah oo muujinaysa inuu Maxamed u baqayo ammaankiisa kahor intaanu tooganin ninka?"*

### 2.4.2.2. Balaadhinta Faahfaahinta Dhacdooyinka ku Caawinaya

Si aad uga hesho faa'iiddada ugu weyn caddeynta ku caawinaysa, diyaar garee maraga si uu u bixiyo faahfaahin dheeraad ah. Tusaale ahaan, *"Waxaad tidhi wuxuu u muuqday inuu aad u cabsanayo, noocee ayey ahaayeen caalamadaha jidheed ee cabsida ahaa oo aad ku aragtay?"* Su'aashani waxay ku hagaysaa maraga inuu bixiyo isla nooca faahfaahinta aad adigu xiisaynayso.

Waxaa faa'iido badan inaad ku soo celiso maraga hadalkiisii ku jiray su'aasha aad daba socoto si aad u hesho faahfaahin dheeraad ah. Ku celintu waxay xoojinaysaa marag-furka maraga waxaanad ka feejignaanaysaa

inuu maragu ku murmo weedhaynta su'aasha. Tusaale ahaan, *"Waxaad tidhi midabkii ayaa ka guuray wejigiisa, gacmahiisuna way gariirayeen, Ma sheegi kartaa sida gacmahiisu ay u gariirayeen?"* haddii su'aashu ay si sax ah u akhrido maraga kelmadahiisa jawaabtu waxay awoodda saari doontaa inay bixiso faahfaahin badan, halka isticmaalista su'aasha badelaysa maraga kelmadahiisu ay inagu hoggaamin karto dawakhaad.

### 2.4.3. Saadaalinta Su'aalaha Dhinaca Kale

Sida ku xusan 187(b) ee XHC su'aalaha dhinaca kale waa qaabka su'aalaha loo weydiiyo maraga uu dhinaca kale keenay si uu u furo marag. Markaad dhammeysato su'aalahaaga tooska ah waxaad filan kartaa in Dacwad ooguhu uu sameyn doono inuu su'aalo weydiiyo maragaaga isagoo isku dayaya oo dhaawacaya ama daciifinaya saameynta uu leeyahay marag-furka maragaaga. Sidaas darteed, waa xariifnimo inaad eegto in su'aalahaaga tooska ahi ay dhaawaci doonaan ama ay ka caawin doonaan maragaaga inuu ka gudbo su'aalaha uu dhinaca kale weydiinayo.

Hal qaab oo lagu yareeyo saameynta su'aalaha uu dhinaca kale maragaaga weydiinayaa waa inaad sheegto dhacdooyinka xun ee uu kolayba soo saari doono dhinaca ka soo horjeedaa, adigoo ku sameynaya sharaxaad badan oo togan. Tusaale ahaan, dacwadda aad doonayso inaad xuquuqda sharciga ah ee difaaca u abbuurto si waafaqsan Qodobka 34 ee Xeerka Ciqaabta Guud waxaad isku dayi kartaa si aad u daciifiso saameynta taban ee toogashada uu hore ugu kacay macmiilkaagu adigoo weydiinaya su'aalaha soo jeedinaya in waayo-aragnimadu ay isaga ka dhigtay mid kasii taxadir badan:

- *"Maxamedoow, miyaad garanaysay in haddii aad toogatid ninkani ay iman doonto baadhista boolisku?*
- *"Ma waxaad u garanaysaa tani sababtoo ah baadhis ayaa jirtay wakhtigii ugu dambeeyey ee aad qof toogatid?"*
- *"Adigoo garanaya inay iman doonto baadhista boolisku miyaad toogan lahayd isaga haddaanad naftaada u baqayn?"*

Waxaa sidoo kale muhiim ah in laga feejignaado su'aalaha dhalinaya odhaahda guud ee balaadhan taasoo arrin laga hadlo ka dhigaysa aaminaada maragaaga soona faqaysa macluumaad khatar ah oo arrintani la xidhiidha. Tusaale ahaan, haddii su'aashaadu ay dhaliso jawaab sidani oo kale ah *"Annigu ma ahi nin rabshad badan"* ama *"Weligay maan cadhoonin"* waxaad u yeedhatay caddeyn khatar kugu ah. Dacwad ooguhu wuxuu dabadeed soo saari doonaa caddeynta wakhti kasta oo maragaagu uu ahaa rabshadoole ama cadhooday iyadoon loo eegayn in dhacdadaasi ay si kale ula xidhiidho dacwadda sababtoo ah waxay imika taagan tahay aaminaada maraga.

Waxaa sidoo kale lagu darayaa in sida ku xusan Qodobka 194 ee XHC, ay macquul tahay in su'aalaha dhinaca kale maraga wax laga weydiiyo qoraalkiisa: *"Maraga wuxuu dhinaca kale wax ka su'aali karaa hadallo uu hore ugu sameeyey qoraal ama lagu soo koobay qoraal, iyadoon qoraalkaasi la tusayn isaga ama aan loo caddeynayn."*

### 2.4.4. Diyaarinta Maraga

Inkastoo qaabka uu Qareenku iskugu xidho su'aalahiisu ay kobcin karto tayada marag-furka, maraga dhinaca difaaca ee aan aqoonta u lahayn nidaamka dhageysiga dacwaddu wuxuu weli dhaawici karaa dacwadda difaaca waxaanu abuuri karaa faham-darro. Sidaas darteed, inta ka horraysa dhageysiga dacwadda Qareenku waa inuu kulan la yeeshaa oo u sharaxaa doorka u leeyahay maragu. Isla markaas Qareenku waa inuu u sharaxaa maraga dhaarta maraga iyo nidaamka maxkamadda.

Haddii maragu aanu fahamsanayn ujeeddada marag-furkooda ee doodda dacwadda dhibaatooyin ayaa soo bixi doona.

*Tusaale:*

Dooddaada dacwaddu waa in qofka galay dembigu aanu noqon karin macmiilkaaga sababtoo ah dhammaan maragyadu waxay yidhaahdeen dembiilahu wuxuu ka booday gidaar laba mitir sare u jooga si uu u baxsado macmiilkaaguna aad buu uga buuran yahay inuu ka boodo joogaasi. Waxaad u yeedhay saaxiibkii ugu wanaagsanaa ee macmiilkaaga si uu uga marag kaco inuu macmiilkaagu aad u buurnaa intaanu jeelka gelin. Saaxiibkaasi wuxuu si gaar ah kuugu sheegay in macmiilkaagu uu 25Kg ka cuslaa kahor intaan la soo xidhin, laakiin xilligii dhageysiga dacwadda saaxiibkii wuxuu ka masuugay inuu sidani yidhaahdo. Markii aad weydiisay culayskii macmiilka ee xilligii la soo xidhayey wuxuu isaga ku sheegay inuu "cuslaa" iyo "dhinacuu u weynaa", laakiin wuu diiday inuu isticmaalo kelmada "buurnaa" ama uu ku qiyaaso kiilooyo.

Haddii aad la qaadato wakhti yar kahor intaanu maraga furin, oo aad u sharaxdo doorka maragyada ee doodda dacwadda, dhibaatadani ma soo baxayso.

Waxaa sidoo kale lagama-maarmaan ah in maragyada waxoogaa faham ah laga siiyo nooca su'aalaha kulul ee ay ka filan karaan Dacwad oogaha. Maragyada waa in lagula taliyaa in aanay muran kala yeelan Dacwad oogaha arrimo aan khuseyn ama in aanay weligood ka jawaabin su'aal aanay si buuxda u fahmin. Maragyada difaaca waa in lagula taliyaa inay xaq u leeyihiin inay ka codsadaan sharaax dheeraada su'aal kasta oo aanay fahmin. Qareenka si fiican u diyaarsani waa inuu fikrad aad u fiican ka haystaa nooca su'aalaha maraga ka soo wajahi doona Dacwad oogaha waanu inuu kala hadlaa maraga meelaha gaarka ah ee ay isaga su'aaluhu ka soo wajahi doonaan. Ku guul-dareysiga in la diyaariyo maragu waxay khatar uga dhigaysaa marag-furkiisa in si aan lagama-maarmaan ahayn loo qiimo tiro.

*Tusaale ahaan:*

Maragaaga, Cabdul, waxaa hore diiwaanka dembiyada ugu galay inuu tuug ahaa. Cabdul wuxuu si run ah uga marag kacay dacwaddani dilka ah ee imika socota, laakiin markii Dacwad ooguhu uu wax ka weydiiyey wakhtigiisii hore ayuu been sheegay oo uu yidhi waxay igu khaldayaan qof kale. Garsoorihii ayaa aqoonsaday in Cabdul uu ka been sheegayo wakhtigiisii hore oo sidaas darteed aamini waayey dhammaan marag-furkiisii. Dhibaatada noocan oo kale ah waxaa keliya oo lagaga feejignaan karaa haddii Qareenku uu inta hore maraga kala hadlo su'aalaha ka iman kara Dacwad oogaha.

## 2.4.5. Marag-furka Macmiilkaaga

Sida ku xusan Qodobka 185 XHC *"Qaybaha la xidhiidha su'aalo weydiinta maragyada ayaa la dabaqi doonaa, ilaa iyo xadka lagu dhaqmi karayo, su'aalida, waraysashada iyo dhaar ka qaadista ama xaqiijin samaynta eedaysanaha"*.

Caadi ahaan, waxaa aad u wanaagsan inaad ka feejignaato inuu macmiilkaagu marag-furo. Waa Qareenka caajiskaah ka u oggolaada macmiilkiisu inuu furo marag ee haddana ku eedeeya xukunka ku dhaca haddalada xun ee macmiilku yidhaahdo markuu maraga furayo. Haddii macmiishu ay xariifiin iyo ilbax yihiin oo ay si ku filan iskaga caabin karaan su'aalaha Dacwad oogaha, dee umabay baahdeen Qareenno. Nasiib-darro, waxaa badanaa dhacda in eedaysanahu uu yahay ka keliya ee haya dhacdooyin gaar ah oo fure ah sidaas awgeed marag-furkoodu uu aasaas u yahay doodda dacwadda. Waxaa intaa dheer, eedaysanayaashu waxay xaq u leeyihiin inay marag furaan iyagoon tixgalinayn talada Qareennadooda, badanaana macquul ma aha in lagu qanciyo in aanay sidaasi samayn.

Sababtoo ah eedaysanayaashu waxay badanaa dareemaan caddaadis aad u badan inay ka marag furaan dacwadahooga waxayna u badan tahay in diyaarintooda si ay u marag furaan aanay iyaga ku dhalin doonin inay taladaaada si habboon u raacaan. Macmiisha badankoogu ma noqon karaan qaar si ku filan ugu diyaar ah inay marag furan waxaanay ku dhaqmi doonaan sidoodii iyagoo shakhsiyad ahaantooda u walaacsan. Waxaa jira eedaysanayaal badan oo jeel loogu soo diray oo aanay sababtu ahayn in ay jirto caddeyn xooggan oo dembiilenimadooda ah, laakiin sababtu ay tahay in dabeecaddooda markay maraga furayaan ku qancin doonto maxkamadda inay been sheegayaan oo ay yihiin dad aan u qalmin in la rumaysto. Qareenku waa inuu miisaamaa dhammaan arrimahani mudnaanta leh markuu kala talinayo macmiika inuu maraga furo iyo in aanu furin xilliga dhageysiga dacwadda.

*Hawl-qabadka-Kow iyo tobnaad:*

1. Dooddaada dacwaddu waa in macmiilkaaga Xuseen uu dembilaawe yahay sababtoo ah wakhtigii uu dembigani dhacayey isagu wuxuu joogay Berbera oo uu ku booqday Adeerkii Cali. Markuu Cali yimaado xafiiskaaga si aad ugala hadashid marag-furkiisa waxa keliya ee uu doonayo inuu ka hadlaa waa sida ay ninka Booliska ah ee Xuseen xidhay uu uga soo jeedo qabiil ka soo horjeeda iyo sida uu doonayo inuu ugu dhaleeceeyo ninka booliska ah maxkamadda dhexdeeda.

- *Tallaabooyinkee aad qaadi lahayd markay noqoto marag-furka Cali?*

2. Macmiilkaaga Jaamac wuxuu ku eedaysan yahay inuu diley nin xili uu isku dayayey inuu af-duubto. Jaamac wuxuu sheegay inuu ninku isku dayey inuu dhaco isaga, laakiin aanu qofna arag markay tani dhacaysay. Booliskuna waxay yidhaahdeen ninka dhintay waxaa hore loogu xukumay budhcadnimo waxaana jirtay toorey dheer oo gashanayd suunkiisa. Jaamac wuxuu rabaa inuu maraga furo, laakiin wuxuu noqonayaa bilaa dulqaad iyo cadho wakhti kasta oo aad kala hadlayso marag-furkiisa mana garanaysid waxa uu sheegi doono.

- *Maxaad kula talin lahayd Jaamac xagga marag-furkiisa?*

3. Macmiilkaaga Cabdulxakiim wuxuu saxeexay qiraal afar iyo labaatan saac kadib markii la xidhay. Cabdulxakim wuxuu sheegay in la garaacayey ilaa uu qiranayey, laakiin aanay jirin caalamado isaga ku yaala wakhtigii maxkamadda la horkeenayey. Xaaska Cabdulxakiim ee Leyla waxay kuu sheegtay inay isaga aragtay inyar kadib markii ay boolisku sii daayeen isaga iyo inuu ku lahaa meelo kuus kuusan oo dhalaalaya iyo dhaawacyo huruud ahaa dhammaan jidhkiisa korkiisa. Waxay soo qaaday sawir isaga ah, laakiin aad uma fiicna oo wuxuu muujinayaa qayb dhabarkiisa ah. Qor su'aalaha aad weydiin lahayd.

- *Layla si aad ugu diyaariso iyada inay sharaxaad dhammeystiran ka bixiso dhaawacyada Cabdulxakiim.*

## 2.4.6. Su'aalaha la weydiinayo Dhinaca Kale

Markaad su'aalaha weydiinayso maraga dhinaca kale maraga aad wax weydiinaysaa cadaw buu adiga iyo macmiilkaagaba idinku yahay iyo in sidaas darteed ay lagama-maarmaan tahay inaad qaadato qaab aad su'aalaha u weydiiso oo aanu si fudud kaaga hor iman karin maragu.

Sida ku xusan Qodobka 195 faqradda 1 ee XHC:

*"Marka maragga uu su'aalo weydiinayo dhinaca kale, waxaa la weydiin karaa su'aal kasta oo looga jeedo:*

a) *Si loo tijaabiyo runnimadiisa,*

b) *Si loo ogaado ka uu yahay isagu iyo waxa uu yahay mansabkiisa nolosha dhexdeedu,*

c) *Si loo gilgilo mudnaantiisa,*

*Inkastoo jawaabta su'aashani oo kale ay si toos ah ama aan toos ahaynba ugu keeni karto inay ku caddeyso isaga dacwado ciqaab ah ama tallaabo madani ah oo mag-dhow ah."*

Caadi ahaan, su'aalaha ugu fiican ee su'aalaha la weydiinayo dhinaca kale waa cakiska su'aalaha tooska ah ee fiican. Intii aad ka codsan lahayd maragyada inay sheegaan sheekadooda (oo uu Dacwad ooguhu marka horeba la sameeyey iyaga), su'aalaha la weydiinayo maraga dhinaca kale ee habbooni waxay weydiiyaan maraga keliya inuu ayido ama dafiro hadalka Qareenka.

*Tusaale ahaan:* (dacwadda laba nin oo istoogtay)

- *"Qori ma leedahay?"*
- *"Qorigu ma AK 47 baa?"*
- *"Maalintii lagu toogtay, boolisku waxay ka heleen gaadhigaaga dhexdiisa AK 47?"*
- *"Qoriga ma waxa laga helay qaybta rakaabka ee gaadhigaaga?"*
- *"Ma rakaab baad gaadhiga dhexdiisa ka ahayd maalintaasi?"*
- *"Ma dhiig baa ku yaalay qoriga dushiisa?"*
- *"Ma dhiiggaaga ayuu ahaa kaasi?"*
- *"Ma qorigaaga ayuu ahaa kaasi?"*
- *"Miyaad haysatay qorigaaga markii lagu toogtey?"*

- *"Qorigaaga qasnad baa ku jirtay?"*
- *"Qasnadu miyey buuxday?"*

Su'aal kasta waa inay ku jirtaa keliya hal dhacdo oo cusub oo maragu aanu hore u ayidin. Haddii aad ku darto laba dhacdo ama in ka badan hal su'aal dhexdeeda maragu wuxuu diidi karaa su'aasha oo dhan iyadoo ay sabab u tahay mid kamid ah dhacdooyinka.

*Tusaale:* (dacwadda kor ku xusan):

Q *"Qorigaaga oo buuxa miyaanad ku qaban Maxamed kahor intaanu ku tooganin?"*

W *"Maya, ma samayn."*

Maragu wuxuu odhan karaa maya ugu yaraan afar sababood. Wuxuu diidi karaa:

- In qorigu uu kiisa yahay;
- Inuu ku qabtay;
- In aanu Maxamed ahayn ka uu qoriga ku qabtay, ama
- Inuu buuxay.

Sidaas darteed, su'aashu waxay abuurtay dawakhaad in ka badan halkii ay ka caddeyn lahayd wax dhacay.

Waxa ugu xariifnimo badan in aanad weligaa xilliga dhageysiga dacwadda weydiinin su'aal aanad marka horeba haynin jawaabteeda[104]. Waxaa intaa dheer, Qareenku weligii ma qiyaasi karo in sababtoo ah inuu garanayo jawaabta saxda ah ee su'aasha uu maragu ka bixin doono jawaabtani marka su'aashaasi la weydiiyo. Sidaas darteed, Qareenku wuxuu ku nabad galayaa in aanu weligii weydiinin xilliga su'aalaha la weydiinayo maraga dhinaca kale su'aal aanu jawaabteeda ku caddeyn karin qaabab kale. Run ahaantii, tani macnaheedu waa in markasta oo aad su'aal weydiiso marag kugu cadow ah inaad diyaar u ahaato inaad ku deedaayn karto maragaasii qaabab kale oo caddeyneed inuu bixiyey jawaab khaldan.

Way faa'iido badan tahay inaad ogaataan in sida ku xusan Qodobka 195 faqradda 3 XHC:

*"Haddii su'aal kasta oo noocan ah oo la xidhiidha arrin aan khusaynin dacwadda lana doonayo inay saameyso mudnaanta maraga oo keliya, Maxkamaddu waa inay go'aamisaa inay tahay ama aanay ahayn in maraga lagu khasbo inuu ka jawaabo. Iyadoo ikhtiyaarkeeda ku dhaqmaysa, Maxkamaddu waa inay tixgelisaa ahmiyadahan hoos ku qoran.*

a) *Su'aalahani waxay habboon yihiin haddii ay leeyihiin dabciga in runta eedda ay iyagu soo qaadeen si ba'an u saameyn doonto fikirka maxkamadda ee mudnaanta maraga ee arrimaha uu ka marag furayo;*

b) *Su'aalahani waxaanay habboonayn haddii:*

104 Tani waa mid kamid ah sababaha ay baadhista difaacu u tahay muhiimka.

i. *Eedda ay iyagu soo qaadeen la xidhiidho arrimo wakhti ahaan fog ama ay leeyihiin calaamadda in runta eedda aanay saameyn doonin, ama ay saamayn doonaan xaddi yar, fikirka maxkamadda ee mudnaanta maraga ee arrimaha uu ka marag furayo;*

ii. *Ay jirto kala sarreyn u dhaxeysa muhiimada eedda la sameeyey ee lidka ku ah dhaqanka maraga iyo muhiimada caddeyntiisa.*

*Maxkamaddu waxay, hadday u aragto inay habboon tahay, uga digi kartaa maragu in aanu ku qasbanayn inuu ka jawaabo su'aal".*

Caddeynta ka hor imanaysa hadalka maraga dhinaca kale waa caddeyn casilaadeed[105]. Waxaa jira meelo aan tiro lahayn oo laga helo caddeynta casilaadda, il kasta oo la heli karo oo uu Qareenku qaadan karo ka bilow ilaha durugsan sida qoraallada wax laga bartay ilaa iyo marag-furka uu sameeyey marag kale ayaa soo geli kara ujeeddadani. Mid kamid ah ilaha ugu waxtarka badan ee caddeynta casilaaddu waa hadallo hore oo uu maragu yidhi. In hore loo wareysto maragyada wakhtiga baadhista difaaca oo loo duubo jawaabahooga qaab loo isticmaali karo caddeyn ahaan waa faa'iiddo gaar ah. Isticmaalka hadallada ay ka qaadeen booliska ama dacwad ooguhu badanaa wuu caqabad badan yahay sababtoo ah badanaa way ka aamusaan ama ka boodaan meelaha caawinaya difaaca ama xaqiiqo ahaanba ma aha kelmadahii maragyada.

Sida ku xusan Qodobka 197 XHC:

*"Mudnaanta maraga waxaa casili kara dhinaca aan ahayn dhinaca u yeedhay ama, markay maxkamaddu oggolaato dhinicii u yeedhay isaga:*

a) *Caddeynta dadka ka marag kacaya in marka loo eego aqoonta ay u leeyihiin maraga ay aaminsan yihiin in aanu u qalmin in mudnaan la siiyo;*

b) *Caddeynta in maragu, si uu u bixiyo marag-furkiisa:*

   i. *Uu sababay, ama ku dhaliyey qof kale inuu siiyo, ama u soo bandhigo inuu siiyo isaga ama qof saddexaad wax laaluush ah ama ku dhiirigalin kale oo musuq-maasuq, ama*

   ii. *Uu oggolaaday bandhiga laaluushkani oo kale ama ku dhiirigalin kale oo musuq-maasuq;*

c) *Caddeynta hadallada hore, ee aan waafaqsanayn qayb walba oo caddeyntiisa ah oo uu masuuliyadeeda leeyahay inay iska hor yimaadaan;*

d) *Marka qof lagu soo eedeeyo dembiga ama isku day dembiga:*

   i. *dembiga ama isku day dembiga xad-gudubka galmo, ama*

   ii. *dembiga ama isku day dembiga dhawrsanaanta ama u galmoodka sharafeed;*

*Gabadha da'deedu ka wayn tahay 16 sano, waxaa la keeni karaa caddeyn in gabadhu ay ahayd mid dhaqankeedu xun yahay."*

105 Something "impeaching" cast doubt on something else "eedayn", gaar ahaan marka la waajahayo aaminaaddeeda iyo saxsanaanteeda. Erayga waxaa si balaadhan looga isticmaalaa nidaamka sharciga caadiga ah halkaas oo hababka ku saabsan weydiintu ay ka soo billaabantay.

Markaa haysato caddeynta casilaadda oo la heli karo si fiicana kuugu habeysan yihiin si aad u isticmaasho, su'aalo weydiinta maraga dhinaca kale waxay xor ka noqonaysaa walaaca Qareenka.

- Haddii maragu uu bixiyo jawaabta saxda ah: waxaad abuurtay dhacdadii aad la rabtay dacwaddaada, iyo
- Haddii maragu uu bixiyo jawaab aan sax ahayn: waxaad haysataa fursadii aad ku abuuri lahayd dhacdada aad rabto adoo haysta caddeyntii casilaada waxaanad isla markaasi si toos ah u tusin karaa maragu inuu khaldan yahay ama uu beenaale yahay.

Xaqiiqo ahaan, iyadoo ay ku xidhan tahay doodda dacwadda, waxaa mararka qaarkood u faa'iiddo badan difaaca in Dacwad oogaha maragyadiisu ay been sheegaan oo la casilo halka ay runta ka sheegayaan, maadaama oo been kasta oo si guul ah lagu casilaa, ay dhaawacayso mudnaanshaha meelaha aanad u haynin caddeyn aad ku casisho.

Waxaa jira duruufo xaddidan oo lagu dhaqmi karo in la weydiiyo su'aal adigoon awoodayn inaad ku casisho maraga bixinta su'aal khalad ah. Xaqiiqo ahaan, su'aalaha qaarkood waxaan jirin jawaab waxyeeli karta dacwaddaada. Tusaale ahaan, haddii aad ku guuleysato inaad marag ka hesho inuu qirto in lacag lagu siiyey si uu bixiyo caddeyn aan jirin waa iska amni inaad weydiiso inta la siiyey. Haddii qadarka la siiyey yar yahay waxaad ku doodi kartaa qiimaha runtu aad buu u yahay, haddii qadarku sarreeyana waxaad ku doodi kartaa inuu haystay dhiirigalin xooggan si uu been u sheego. Waxaa sidoo kale jira xaalado aad si buuxda u abuuratay aasaaska eedaynta lidka ku ah maraga oo su'aasha ugu dambeysa eedaynta lagu sameeyo.

Tusaale:

Q *"Kama aad soo warbixin inaad shaqaysay May 12, 2013?"*

Qareenku wuxuu diyaar u yahay inuu ku casili diiwaannada loo shaqeeyaha

Q *"Waxaad tidhi ma xasuusatid halkaad joogtay intaanad iman meeshii ay toogashadu ka dhacday?"*

Caddeynta casiladdeed ee ay uu ku jiro haddalka maragu u sheegay baadhaha difaaca.

Q *"Waxaad tidhi ma xasuusatid qofka aad la joogtay maalintaasi kahor?"*

Caddeynta casiladdeed ee ku jira haddalka maragu u sheegay baadhaha difaaca.

Q *"Boolisku waxay qori ka heleen gaadhigaaga dhexdiisa?"*

Caddeynta casilaadda ee ku jirta warbixinta booliska.

Q *"Jidhkaaga oo dhan baa urrayey maandooriye?"*

Caddeynta casilaadda ee ku jirta haddalka dhakhtarka daweeyey maragu.

Q *"waad cabsanayd"*

Caddeyn casilaadeed looma baahna, Qareenku wuubu sameeyey wixii uu baahnaa iyadoon loo eegaynba jawaabta ay bixinayaan maragyadu.

Waxaa u baahan in la ogaado in sida ku xusan Qodobka 195 faqradda 5 ee XHC:

*"Maxkamaddu:*

a) *Waxay mamnuuci kartaa su'aal kasta ama baadhis kasta oo ay u tixgaliso inay yihiin xushmad-darro ama fadeexadayn, inkastoo su'aalahani iyo baadhistani ay wax ka tarayaan su'aalaha maxkamadda horyaalla, haddii ay la xidhiidhaan dhacdooyinka laysku hayo ama arrimaha ay lagama-maarmaan tahay in la ogaado si looga go'aan gaadho in dhacdooyinku ay khuseeyaan arrimaha taagan iyo in aanay khusaynin,*

b) *Waxay mamnuucaysaa su'aal kasta iyo baadhis kasta oo ula muuqata in looga jeedo oo keliya in la caayo ama in laga cadhaysiiyo ama inkastoo ay laf ahaantoodu habboon tahay, ula muuqata Maxkamadda in qaab aan loo baahnayn loogu weerarayo."*

### 2.4.7. Dhammeystirka Casilaada Maraga

Waxaa jira qaabab badan oo loo dhammeystiro casilaada maraga cadowga kugu ah. Nooca caddeynta casilaaddeed ee aad heli karto ayaa badanaa ah arrinta ugu weyn ee la tixgaliyo marka la go'aansanayo sida loo dhammeystirayo casilaadda, inkastoo markaad helayso dhawr qaab oo casilaaddeed ay tahay inaad sidoo kale tixgaliso walaacyada qaabka iyo qorsheyaashaba.

#### 2.4.7.1. Isticmaalida Qoraallada/Hadalka hore ee aan Saxda ahayn

Waxaa laga yaabaa in qaabka casilaadda ee ugu fudud uguna wanaagsani uu yahay isticmaalka hadallada maraga, sababtoo ah maraga si toos ah ayaa loo casilayaa iyadoonu dib udhac jirayn.

*Tusaale ahaan:*

Cali oo marag ahaa wuxuu furay inuu go'aansaday inuu qaato qori maalintaasi sababtoo ah wuxuu aaminsanaa in macmiilkaagu uu nin khatar ah yahay.

Q *"Markii hore ma booliska ayaad kala hadashay dhacdadani?"*

W "Haa"

Q *"Waxay qoreen haddalladaadii?"*

W "Haa"

Q *"Waxay ku tuseen waxay qoreen?"*

W "Haa"

Q *"Kani waa saxeexaagii oo ku yaala xagga hoose ee qoraalka?"*
*(Adigoo qoraalka tusaya maraga)*

W "Haa"

Q *"Saxeexidaadu waxay ahayd inaad ku dhaarsantahay runnimada iyo saxsanaanta hadalladaada?"*

W *"Haa"*

Q *"Haddalkaagani waxaad booliska u sheegtay inaad qaadato qoriga maalin kasta meel kasta oo aad tegayso?"*

W "Haa"

Markasta oo caddeyn qoraal ah loo isticmaalo casilaadda tooska ah nidaamku asal ahaan waa lamid.

### 2.4.7.2. Isticmaalida Maraga si aad u Casisho Marag kale

Maragyada badanaa si toos ah looma casili karo. Badanaa casilaadda waa in lagu dhammeystiraa marag lagu kaabay ama caddeyn kale kadib marka maraga aad casilaysaa uu dhammeysto marag-furkiisa.

*Tusaale ahaan:*

*Maragu wuxuu furay sida tusaalaha sare oo kale marka laga reebo in aanu jirin hadal laga saxeexay oo ay boolisku ka qaadeen sidaas darteed waa inaad isticmaashaa marag kaabis ah si aad u dhammeystirto casilaadda.*

Q *"Aqoon sidee ah ayaad u leedahay Cali?"*

W "Waxaanu wada shaqaynay tobankii sano ee ugu dambeeyey"

Q *"Sidee baad badanka isku arki jirteen"*

W "Maalin kasta, marka laga reebo Jimcaha, dhawr jeer maalintii"

Q *"Weligaa isaga qori ma ku aragtay?"*

W *"Haa, mid buu sidan jiray markuu shaqada yimaad. Wuu sidan jiray ama gaadhigiisa dhexdiisa ayuu kaga iman jiray".*

*Hawl-galka-Afraad:*

*U qaybi galaaska kooxo saddex ilaa lix ka qaybgale ah. Adigoo isticmaalaya dhacdooyinka hoos ku xusan, koox kastaa waxay ka samayn doontaa liis qoran oo su'aalaha la weydiinayo maragga dhinaca kale ah sida la sheegay. Marka kooxahu ay shaqadooda dhammeeyaan xubin kamid ah ayaa sameyn doonta metelaad isagoo su'aalo weydiinaya tabobaraha oo metelaya maraga dhinaca kale isagoo su'aalaha kaga jawaabaya qaab waafaqsan dhacdooyinka la sheegay (laakiin aanay lagama-maarmaan ahayn dhacdooyinka lamidka ah hadallada maragu). Tabobaraha iyo galaaska ayaa dabadeed ka wada hadli doono su'aalaha wax ku oolka ahaa iyo sababta.*

Cabdi waa 14 sano jir waa kuuli wax dhisa markuu heli karo, laakiin maalmaha badankooga wuxuu ku sugaa masaajidka agtiisa oo looma kireysto shaqana sababtoo ah da'diisa oo yar. Cabdi waxaa lagu eedeeyey horistaag sarkaal dowladeed sida ku xusan Qodobka 264 ee Xeerka Ciqaabta Guud.

Boolisku waxay Dacwad oogaha u sheegeen in Cabdi uu laagay dabadeedna feedhay nin taraafig boolis ah oo lagu magacaabo Xuseen masaajidka dibeddiisa markaasi oo uu ninka booliska ahi u sheegay isaga inuu dariiqa ka baxo. Sida ay boolisku sheegeen waxay ku qaadatey in afar iyaga ahi ay joojiyaan weerarka Cabdi uu ku hayey Xuseen oo ay dabadeed katiinadeeyeen. Waxay sharxeen in Cabdi uu gacanta ka jabay markii uu ka booday gaadhiga oo uu ku socday saldhiga booliska. Xuseen wuxuu sheegay inuu dhabarka kaga dhaawacmay weerarkii oo aanu ku shaqayn karin sida taraafig booliska muddo 10 casho ah dhaawaca dartii.

Cabdi wuxuu sheegay inuu 20 kale oo shaqo sugayey la taagnaa masaajidka agtiisa meel ay dadku maraan kadib uu u sheegay Saajinkani bileyksa ah Xuseen inay meesha ka dhaqaaqaan ama uu midkiiba bixiyo 5,000 SLSH. Cabdi wuxuu sheegay inuu qayb ahaan mushaharkiisa siiyo adeerkii Cabdulqadir oo la joogay ilaa 6 jirkiisii. Wuxuu yidhi Cabdilqadir lacag buu siiyey Xuseen laakiin weli Xuseen haddana umuu oggolaanin inuu joogo. Wuxuu ugu tawaawacay Karim (Taliyaha) in Xuseen uu tuug yahay kadibna Xuseen iyo saddex kale oo boolis ah Cali, Axmed, iyo Xakiin ay ku bilaabeen garaacis. Cabdi wuxuu sheegay in aanu la dagaalamin laakiin uu dhulka ku dhacay iyadoo afarta nin ba ay laag la dhacayaan. Daqiiqado kadibna way katiinadeeyeen iyagoo lugahiisa jiidayana uu ogaaday in gacantiisu ay jabtay.

Waxaad haysataa nuqullada qoraallada laga sameeyey Cabdi iyo afarta nin ee booliska ah. Waxaad sidoo kale haysaa maragyo dhawr ah oo la heli karo si ay u marag-furaan, oo uu ku jiro Maxamed oo wadaad ah, Cabdulqadir oo dhismaha ka shaqeeya, iyo Abokor oo ay Xuseen jaar yihiin.

**Hadalka Maxamed:** 15kii Maarso ilaa 9 subaxnimo waxaan ku socday masaajidka qadiimiga ah markii aan arkay shan ilaa lix nin oo boolis ah oo la murmaya koox shaqaale ah oo 15 qof ama ka badan ahayd. Waxaan dabadeed arkay booliska oo ku wareegsan wiil lagu buuqsanaa, dhulka ugu tuureen oo ay ku bilaabeen laag, waxa uu ka baryey inay ka joojiyaan, runtii aad bay u dhaawaceen, ugu dambeynna way ka joojiyeen. Waxay ku xidheen katiinado, waxayna u jiideen dhinaca gaadhi boolis oo akhtar ahaa, kuna tureen gudihiisa way dhaqaajiyeen.

**Hadalka Cabdulqadir:** waxaan taagnaa masaajidka qadiimiga ah anigoo rajeynaya inaan shaqo helo ilaa 9 subaxnimo ee Maarso 15. Rag kale oo badan ayaa iyaguna shaqo raadinayey. Sidani uunbay ahayd maalmaha kale. Mar dambe ayey boolisku nagu rabsheen lacag keena laakiin haddaanan shaqayn lacag ma siin karno, waana nakala eryeen. Maalintani Saajinku wuxuu noo sheegay in mid kastaa uu bixiyo 5,000 SLSH. Waxaan isku dayey inaan iska tago sababtoo ah lacag maan haysan, kadib waxaan maqlay baryo waxaanan arkay wiil dhulka yaala oo uu boolisku garaacayaan. Wuxuu dhulka u wadhnaa sidii ilmo aan dagaalami karin. Way naxdin badnayd, waxay u ekayd inuu weliba ooyayey. Haddii uu wiilkayga ahaan lahaa aniguna waxaan ku garaaci lahaa jilicsanaantiisa noocan ah.

**Hadalka Abokor:** ninkani jaarkayga ah ee Xuseen waa nin boolis ah waana nin fiican oo nin diimeed ah. Waxaan isaga garanayaa ilaa markaanu kurayda ahayn. Sanadkii hore gurigeyga ayaa gubtay waxaanu Xuseen ii sheegay inuu laba todobbaad oo dhammaadka Maarso ah iga caawin doono inaan dib u dhisto gurigeyga. Waxaan anigu keenay jaajuurkii gidaarada oo qudha laakiin Xuseen jaajuurkii oo dhan ayuu ii keenay. Lug ayaa igaga go'day miino sidaas darteed wax badan ma qaadi karo, laakiin Xuseen wuxuu u xooggan yahay sida dibiga waxaanu mar wada qaadi karaa jaajuur badan taasaa u saamaxday inuu u shaqeeyo si aniga iga degdeg badan. Xaqiiqo ahaan, Xuseen si aad u dhaqso badan ayuu u keenayey jaajuurka oo aanan anigu gaadhi karin, sidaas darteed wuu iska tagayey oo kubad ayuu la soo ciyaarayey wiilashiisa ama wuxuu soo guran jiray xaabo ilaa iyo inta aan mar kale u baahanayo jaajuur kale oo jaajuur ah. Caawimadiisa darteed ayaan 10 casho oo keliya ku dhammeystay jaajuurkaygii oo dhan si aan dib ugu dhisto gurigeyga.

**Hadalka Kariim:** waxaan u talinayey unug yar oo taraafik boolis ah ee goolada taraafikada ee ku xigta masaajidka Maarso 15 ilaa 9 subaxnimo. Gaadhigayga ayaan ku dhex jiray markii wiil yar oo dawarsanayaa uu waalni la yimid weerarayna mid kamid ah ciidankayga oo la yidhaa Xuseen, kuwii kalena way ka dul riixeen. Intaa kadib, Xuseen wuxuu ii sheegay aniga inuu dhabarku xanuunayo oo aanu dareemayn taabashadiisa. Waxaan u sheegay inuu gurigiisa tago oo uu dhakhtar u tago haddii uu ka soo rayn waayo. Xuseen weligii kamuu soo cabanin xanuun badanaana wuu soo shaqo tagi jiray wax ay noqoto ba markii uu awoodi waayey inuu soo shaqo tago tobankii casho ee dambe waxaan gartey inuu si xun u dhaawacmay.

**Hadalka Cali:** waxaan ka shaqaynayey shaqada taraafikada ee masaajidka Maarso 15 ilaa 9 subaxnimo markii Xuseen uu soo weeraray wiil dhalinyaro ah oo Al-shabaab ah kaasi oo ku dhawaaqayey hal-ku-dheg dowladda lagaga soo horjeedo. Ugu horreyntii wuxuu taagnaa haadka ay dadku maraan kadibna markii uu Xuseen eegay ayuu ku soo cararay isaga kuna soo booday dhabarkiisa waxaanu bilaabay inuu dhulka dhigo. Waxaan u qayliyey Axmed iyo Xakiim dhammaantayona waanu ku soo cararnay si aanu u caawino. Si wadajir ah ayaanu wiilkii yaraa uga jiidnay wuu laagtamayey waanu feedhtamayey markasta. Xuseen dhulka ayuu ku dhacay intii uu halgamayey waxaanu ka dhaawacmay dhabarka. Markaanu katiinadaynay Al-shababkii weli muu degine intii aanu saldhiga booliska kusii soconay ayuu ka booday gaadhigii oo uu gacanta ka jabay. Waxaan u malaynayaa inay Al-shabaab siiso maandooriye si ay sidani u sameeyaan iyagu.

**Hadalka Axmed:** waxaan shaqadii taraafikada ka waday masaajidka agtiisa meelahaa ilaa 9 subaxnimo ee Maarso 15. Xuseen, Xakiim, Cali iyo annigu waxaanu isku dayeynay inaanu kala erino koox iska joogayaal ah dariiqa weyn sababtoo ah waxay xanibeen socodkii. Wiil baa bilaabay qaylo waxaanu feedh iyo laag ku bilaabay Xuseen. Xuseen wuu qabtay wiilkii oo dhulka ayuu dhigay. Xuseen wuxuu ku dhaawacay dhabarkiisu markuu sidani sameynayey. Afartayada ayey nagu qaadatay inaanu katiinadayno sababtoo ah wuxuu isku dayayey inuu laagtamo iyo inuu feedhtamo. Waxaanu u qaadnay isaga gaadhiga.

**Hadalka Xuseen:** waxaan shaqadii taraafikada ka waday masaajidka agtiisa meelahaa ilaa 9 subaxnimo ee Maarso 15. Waxaan ku qayliyey wiil dhalinyaro ah oo isku dayayey inuu gawaadhida dhexdooda ka gudbo. Ismuu dhaqaajin, anniguna waxaan u maleeyey inuu dhagool yahay, sidaas darteed waan u dhowaaday waxaanan isaga ku amray inuu dib u dhaqaaqo. Waxaa iigu xigtay oo aan garanayaa wiilkii oo laag iyo feedh sidii nin waalan iigu wada. Waan ku durkay si aan u qabto laakiin wuxuu iga laagay cagta aniguna waxaan ku dhacay dhulka. Wuxuu igu sii waday weerarkii laakiin aad baan u dhaawacmay oo kor ba naftayda umaan soo qaadi karayn, aad baan uga mahad celinayaa in Xakiim, Cali iyo Axmed ay igu dhowaayeen oo ay iga dul kiciyeen. Markii la katiinadeeyey Axmed iyo Xakiim waxay saareen gaadhiga Karim si loo geeyo saldhiga booliska, Cali ayaa I caawiyey si aan u socdo. Sariirta kamaan soo kici karayn xanuun la'aan muddo wiig ah.

- Xuseen, Karim iyo Cali waxaa u yeedhay dacwad oogaha si ay u marag-furaan. Diyaari su'aalaha la weydiinayo mid kasta. Sidoo kale tilmaan maragyada aad ugu yeedhi lahayd marag-furka difaaca sababtana sharax.
- Dooddaadu dacwaddu waa in macmiilku uu sheegayo runta oo ay boolisku weydiiyeen laaluush oo ay weerareen macmiilkaaga.

Haddii wakhtiga su'aalaha aad weydiinayso uu si uun maragu uga leexdo hadalkiisa taasi ma tageerayso dooddaada dacwadda Qareenku waa inuu casilaa kuwaasi. Hadduu maragu si hadalkiisii waafaqsan wax u sheego Qareenku waa inuu Iftiimiyaa marag-furka soo saaraya ama soo bandhigaya wixii iska horimaad ah ee ka dhaxeeya maragyada dacwad oogaha iyo marag-furka xoojinaya hadalka maragyada difaaca.

## 2.5. Khabiirrada

Khuburadu waa sida maragyada kale marka laga reebo aqoonta ama waayo-aragnimada gaarka ah ee u oggolaanaysa iyaga inay ra'yi ka dhiibtaan arrimaha takhasusaadkooga ah.

Sida ku xusan Qodobka 157 ee XHC ra'yiga khuburada waxaa loo tixgaliyaa inay yihiin xaqiiqooyinka la xidhiidha: a) arrin khusaysa sharci shisheeye; ama b) arrin khusaysa sayniska ama farshaxanka

Sida ku xusan Qodobka 161 faqradiisa 1 ee XHC, Khuburada waxaa lagu magacaabi karaa codsiga Xeer-ilaaliyaha Guud ama eedeysanaha ama maxkamadda ayaa iskeed u samayn karta markasta oo *"Maxkamaddu ay u tixgaliso inay lagama-maarmaan tahay ama habboon tahay in ra'yiga khabiirka laga bixiyo arrin gaar ah."*, iyadoo khabiirka laga dooranayo, *"haddii ay macquul tahay, dad ay labada dhinac ku heshiiyeen dhexdooda"*. Haseyeeshee, waxaa macquul ah in dhinacyada midkood ama maxkamaddu ay iskeed ugu yeedho khabiir si uu marag ahaan u marag-furo (Art.161 faqradda 5). Magacaabista khabiirka si uu wax u caddeeyo kama hor joogsanayso dhinacna xaqiisa inuu kharashkiisa ku helo caddeynta khuburada farsamo.

Sidaas darteed, maraga khabiirka ah ee aad adigu u yeedhay, waxaad weydiin doontaa su'aalihii tooska ahaa sidii maragyada kale oo ay kuu dheer tahay su'aalaha qaar loogu talo galay inay khabiirka u oggolaadaan inuu bixiyo macluumaadkani soo socda:

- Faahfaahinta aqoonta, tabobarka, ama waayo-aragnimada khabiirka ee ay ku dhisan tahay khabiirnimadiisu.
- Tallaabooyinka uu khabiirku qaaday dacwaddani dhexdeeda ee salka u ah ra'yigiisa khabiirnimo.
- Ra'yigiisa khabiirnimo ee la xidhiidha dacwaddani.

Sidoo kale, Mabda' ahaan, su'aalo weydiinta khabiirka uu dhinaca kale keensaday waxay lamid tahay uun su'aalo weydiinta maragyada kale ee dhinaca kale. Khabiirka waxaa soo wajahi kara eex, soo kala dhowaysasho, khiyaamo, khalad, fursad la'aan uu wax ku eego, xasuus la'aan ama arrimaha kale ee qabanaya maraga caadiga ah.

Waxaa intaa dheer, waxaa macquul ah in lagaga horyimaad khabiirka arrimaha sida gaarka ah ula xidhiidha ra'yigiisa khibradeed. Meelahani soo socda ayuu Qareenku mararka qaarkood si dhammeystiran uga weerari karaa:

- In waxa khabiirku uu bartay, ku tabobartay ama uu waayo-aragnimada u leeyahay uu yahay mid leh dhisme aqooneed oo si guud loo aqoonsan yahay.

  Tusaale: *Khabiirku wuxuu Ph.D. ka haystaa Falsafada waxaanu sheeganayaa inuu awoodi karo inuu sheego in qofku uu been sheegayo isagoo eegaya iftiinka nuurka ah ee ku wareegsan jidhkiisa, taasi oo uu arki karo markuu eego koofiyadiisa gudaheeda.*

- In aqoonta, tabobarka ama waayo-aragnimada khabiirku ay ku filnaan karto inay isaga ka dhigto qof khabiir ku ah waxa uu sheeganayo inuu khabiir ku yahay.

  *Tusaale: Khabiirku wuxuu sheeganayaa inuu dhibanaha ku sameeyey baadhista sababta dhimashada oo uu ogaadey in wakhtiga dhimashadu uu ahaa 2:30 saac ee subaxnimadii Salaasada. Haseyeeshee, khabiirku dibloomadiisa caafimaadka wuxuu ka qaatey Iskuul ku yaala Baakistaan kaasi oo aanay aqoonsanayn wax dowlad ama mac-had aqooneed ah sanado badanna shaqadiisa qudhi waxay la xiriirtey ido.*

- In khabiirku uu ku shaqeeyo qaababka lagu aqoonsaday qaybta aqooneed ee uu takhasuskiisu yahay.

  *Tusaale: Khabiirku wuxuu haystaa digrii caafimaadka ah oo uu ka haysto jaamacad aad loo qadariyo oo Yurub ku taala. Wuxuu sheegay in markii uu baadhay caalamadahii ka muuqday dhibanaha dhimashada kadib uu odhan karo inuu dhibanahu u dhintay sumayn.*

- In khabiirku uu si saxsan ugu shaqeeyey qaababkii uu isticmaalayay dacwadda dhexdeeda.

  *Tusaale: Khabiirku wuxuu isticmaalay qalab loo qorsheeyey laguna soo saaray UK dhexdeeda si uu u ogaado in shayga laga qaaday eedaysanahu ay ahayd xashiishad, haseyeeshee, amarka ku dul qoran qalabku wuxuu leeyahay: "Ha ku soo saarin heerkulka ka sarreeya 25 C°" waxaana tijaabada la sameeyey xili maalin dhexdeed ah oo Julaay ahayd shaybaadh (laboratory) Hargeysa ku yaala oo aan la sugin xaraarada hawadiisa.*

Si aad khabiirka uga weerarto arrimaha khuseeya takhasusnimadiisa waxaa badanaa wanaagsan inaad yeelato khabiir (farsamo) oo aad ka heli karto talooyin iyo haddii la maarmi waayo marag-furis. Waxaa sidoo kale macquul ah inaad khabiirka ku carqaladayn karto qaybta uu aqoonta u leeyahay dhexdeeda adigoo isticmaalaya Buugga farsamo [tilmaamaha shaqada], qoraallada cilmiyeed, ama maqaalada aqooneed ee jariiradaha. Suurtogalnimada caqabadani keliya waxay ku xidhan tahay inaad marin u hesho khabiiro, Buuggaagta farsamo ee shaqadaasi, qoraallada cilmiyeed, ama maqaaladda aqooneed ee jariiradaha. Haseyeeshee, marka la eego heerka aqooneed ee hooseeya iyo fahamka kooban ee Garsooreyaasha, faa'iiddada in caqabad la saaro ra'yiga khabiirku waxay wakhtiyada qaar noqonaysaa wax aan waxba soo kordhin.

*Hawl-qabadka-Laba iyo tobanaad:*

- *Diidmooyin (Objection) noocee ah ayaad ka yeelan lahayn tusaalayaashani hoose ee marag-furka rayiga khabiirka?*

1. Dirawalkii meydka u qaaday meeshii la dhigayey ayaa bixiyey ra'yiga ah in qarax uu sabab u ahaa dhimashada.
2. Xidigiye digrii xidigiska ah ka haysta iskuul xidigiska lagu barto oo aad loo qadariyo oo ku yaala Beijing ayaa wuxuu furay in aanu dhibanahu ku kici karayn inuu is dilo sababtoo ah jaantuskiisa xidigisku wuxuu tusay isaga inuu ahaa nin aad farxaan u ah.

3. Ninkii booliska ahaa ee helay meydka ayaa ku marag furay inuu aaminsan yahay in sababta dilku ay ahayd dhibanaha oo isku badelay diin kale sababtoo ah markii uu baadhayey guriga dhibanaha wuxuu helay kutub leh muqaal qariib ah iyo Buuggaag ajaanib ah jaararkuna waxay booliska ku eegeen muqaalo cadawtinimo markii ay qaadayeen meydka.
4. Baadhihii booliska ee macmiilkaagu uu u qirtey dilka ayaa ku marag furay in uu u hanjabay macmiilkaaga markii uu ka codsaday in Qareen difaacaa uu joogo wakhtiga su'aalaha la weydiinayo, hanjabaadanina aanay cabsi geliseen qof dembilaawe ah.
5. Baadhihii caafimaad wuxuu ku marag furay in dilku aanu noqon karin is dil sababtoo ah calaamadda ka muuqatay wejiga dhibanahu waxay ahayd mid dhibaato iyo xanuunjin ah iyo in is dilku uu badanaa nabdoon yahay.

## 2.6. Gebogebada

Qodobka 119 faqradda 1 (b) ee Xeerka Habka Ciqaabtu wuxuu sinaayaa Qareenka difaaca inuu soo bandhigo doodo uu ku deedaaynayo eedda marka la joogo gebogebada dhageysiga dacwadda. Qareennada qaarkood ayaa jecel inay aaminaan in jeedinta dooddooda ee dhammaadka dacwaddu ay tahay inta qudha ee looga baahan yahay si ay uga guuleystaan dacwad oogaha oo ay xor uga dhigaan macmiillka. Haseyeeshee, runtu waa in *aasaaska doodda ugu dambeysa ee Qareenka ay tahay in la dhigo wakhtiga baadhista iyo dhageysiga dacwadda*.

Si maxkamadda si guul ah looga dhaadhiciyo sii deynta, Qareenku waa inuu sharaxaa sida dhacdooyinku ay u taageerayaan doodda difaaca ee dacwadda. Dhacdooyinka loo baahan yahay waa in la soo bandhigaa wakhtiyada su'aalaha la weydiinayo maragyada dacwad oogaha ama bandhigista maragyada difaaca iyo caddeynta.

Qareenku waa inuu sidoo kale si cad u sharaxaa sida doodda difaaca ee dacwaddu uga soo saarayso macmiilka in aanu gelin dembigani lagu eedayey inuu ku kacay.

Doodaha sharci ee aad loogu qanci karaa waa kuwa si buuxda u mideeya dhacdooyinka iyo sharciga la dabaqayo. Tusaale ahaan, inaad si cad u sheegto dhismaha sharci iyo dhacdo ee dooddaada.

*Tusaale:*

*"Sida ku xusan Qodobka 26 faqradda 2 ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland dembigu waa fal shakhsiyaddeed; xaqiiqada ah in walaalkii uu qirtey dembigani sinaba ugama dhigeyso Maxamed (macmiilkayga) inuu masuuliyaddeeda lahaa. Tigidhka laga helay jeebka Maxamed wakhtigii la soo xidhayey ayaa si shaki la'aan ah u caddeynaya inuu doon ka raacayey Berbera wakhtigii uu dembigu ka dhacayey Hargeysa."*

Inaad ku dooddo gunaanadka oo qudhi way ka fog tahay in lagu qanco.

*Tusaale:*

*"Ma jirto caddeyn ku filan oo muujinaysa in Maxamed uu walaalkii ka caawiyey dembigani, waa in laga dhigaa dembilaawe."*

Qayb kasta oo difaaca kamid ahi waxay ku dhisantaa dhismiha la dhigay marxaladahii hore. Soo koobida ama doodda gebogebadu waxay si wadajir ah iskugu xidhaa dhammaan qaybaha kala duwan si ay u caddeyso siday mid kastaaba u tageersan tahay gebogebada ah in macmiilku aanu dembi lahayn.

Inkastoo Qodobka 26 faqradda 3 ee Dastuurka Somaliland uu leeyahay *"Eddaysanahu waa dembilaawe inta aanu maxkamad horteed kaga caddaanin dembigu"*, Garsooreyaashu badanaa waxay u baahan yihiin wax yar marka laga yimaado xaqiiqada ah in boolisku ay xidheen macmiilkaaga iyo in dacwad ooguhu uu doortey inuu eedeeyo, si loogu helo dembiga[106].

Aaminsanaanta dembilaawenimadu si dhakhso ah oo bilaa shanqadh ah ayey u dhimanaysaa ilaa uu Qareenku nafta ku afuufo isagoo isku habaynaya isla markaana xaaladda lagu jiro ku dabaqaya daciifnimada dacwad oogaha dacwaddiisa iyo caddeynta dembilaawenimada. Qareenka qabta wax aan waxba ka badnayn inuu si guud u sheego dembilaawenimada lagama yaabo inuu guul gaadho. Gebegabada dhexdeeda, Qareenku waa inuu xaqiijiyaa in aanay macquul ahayn inay maxkamaddu iska indho-tirto dhacdooyinka iyo sharciga tageeraya gebogabada ah in macmiilkiisu aanu dembiga gelin.

Dacwadaha aan la heli karayn dhageysiga gaarka ah ee ku xukumista xabsiga ah, gebogebada ama doodda gunaanadku waa inay sidoo kale ka koobnaataa doodo lagu qanci karo oo ah in la qaato dabeecadda uu doorbidayo difaacu. Waxaa shaki la'aan jiraysa wakhtiyo dhif dhif ah oo aan dembiilenimada macmiilka si macquul ah looga hor iman karin oo ku xukumista xabsiga uun ay tahay meelaha uu Qareenku si togan wax uga qaban karo maxsuulka dacwadaha. Inkastoo culayska dhacdooyinku ay kala duwan yihiin dacwadahani, qaabab iskumid ah ayaa looga faa'iideystaa dacwadaha dhexdooda markay dooddu ka hadlayso keliya su'aalaha dembiilenimada iyo dembilaawenimada.

*Hawl-galka-Shanaad:*

Iyadoo la isticmaalayo dhacdooyinka ku xusan hawl-galka Afraad oo lagu darayo kuwa hoos ku xusan ka qayb-gale kastaa wuxuu soo qori doonaa dooda gebogebada ee dacwad oogaha ama Qareenka sida uu tabobarahu ugu kala igmado. Ka qayb-galayaal dhawr ah ayaa dabadeed la dooran doonaa si ay u jeediyaan dooddooda gebogebaada oo ay ka hadli doonaan tabobaraha iyo ka qayb-galayaasha kale.

Marag-furadii lagu sheegay dhageysigii dacwadda Cabdi:

106 Qodobka 13 faqradda 2 ee XHC wuxuu sheegayaa: "Eedaysanahu waa in loo aqoonsadaa inuu yahay dembilaawe ilaa xukunku uu noqdo kama dambeys".

**Kariim:** Marag-furka Karim ee dhageysiga dacwaddu wuxuu si dhammeystiran u waafaqsanaa hadalkii laga qoray. Haseyeeshee, wuxuu ku daray dhacdooyin dhawr ah oo uu kaga jawaabay su'aalihii Qareenka difaaca. Markii la weydiiyey sababta uu cabdi ugu sheegay dawarsade wuxuu yidhi: "Cali ayaa ii sheegay in wiilku yahay dawarsade caan ah". Markii la weydiiyey inuu Xuseen ku wargeliyey dhaqaaq la'aanta lugtiisa weerarka kadib wuxuu yidhi: "Maya, farihiisa oo keliya ayey ahaayeen".

**Cali:** Cali wuxuu ku marag-furay in aanu xasuusanin inuu Kariim u sheegay in wiilku uu ahaa dawarsade. Wuxuu ku marag-furay in Cabdi aanu joogin dhinaca socodka dadka ee wadada markuu weeraray Xuseen, in uu Xuseen ahaa ka taagnaa dhinaca socodka dadka ee wadada. Wuxuu dafiray inuu Cabdi dhabarka kaga booday Xuseen waxaanu sheegay in hadalkiisu uu khaldanaa oo waxa uu u ujeeday ay ahayd in Xuseen uu dib ugu booday dhinicii ay dadku u socdeen markii uu Cabdi soo weeraray isaga. Wuxuu furay inuu Xuseen dhulka ku dhacay kahor intii isaga iyo kuwa kale aanay u iman si ay u caawiyaan ee ma aha u dagaalankii ka dambeeyey. Cali waxaa lagu casilay hadalkiisii hore ee arrintani. Cali wuxuu haddana sheegay in aanu xaqiiqo ahaan xasuusan karin markii uu Cali dhacay. Wuxuu sheegay inuu aaminsanaa in Cabdi uu xubin ka ahaa Al-shabaab sababtoo ah wuxuu maqlay isaguu ku dhawaaqaya hal-ku-dhegyada Al-shabaab markii uu weerarayey Xuseen.

**Xuseen:** Xuseen wuxuu u marag-furay si meelo badan ka waafaqsan hadalkiisii laakiin wuxuu ku daray waxoogaa faahfaahin ah. markii la weydiiyey inuu hubay in Cabdi lagu qaaday gaadhiga Kariim wuxuu ku marag-furay inuu u malaynayo inuu madaxa dhulka ku dhuftay mar uu dhacay oo waxoogaa ku dawakhsanaa wixii dhacay markaa kadib. Markii la weydiiyey inuu u sheegay Karim in lugtiisu aanay dhaqaaqi karin wuxuu sheegay in aanu xasuusan karin inuu la hadlay Karim sababtoo ah madaxaa uu dhulka ku dhuftay. Markii la weydiiyey inuu la jaar yahay nin la yidhaa Abokor wuxuu yidhi haa wuu jiraa. Markii la weydiiyey in uu weligii ka caawiyey Abokor shaqo gurigiisa ah wuxuu sheegay inuu sidaasi sameeyey horaantii bisha Maarso dhacdadani kahor laakiin uu u joojiyey dhaawacyadani dartood.

**Maxamed:** Maxamed marag-furkiisu wuxuu si dhammeystiran u waafaqsanaa hadalkiisii laga qoray. Markii uu dacwad ooguhu weydiiyey in uu maqlay Cabdi oo leh wax hal-ku-dheg Shabaabi ah wuxuu ku jawaabay "I caawiya wey I dilayaane' ma hal-ku-dheg Shababi ah baa" Markii uu dacwad ooguhu weydiiyey in uu weligii xubin ka noqday kooxda Al-shabaab wuxuu ku jawaabay in wakhtigii uu iskuulka diiniga ah ku jiray urrurkani aanu jirin. Markii la weydiiyey in uu imika u tiiraanyeysan yahay Shabaabka wuxuu yidhi "Islaamku waa diin naxariis badan, waxaan ka tiiraanyeysanahay dhibaatooyinka ragga soo gaadhay oo dhan"

**Cabdulqadir:** Cabdulqadir wuxuu ku marag-furay in aanu arag wax aan caadi ahayn oo dhacay Maarso 15. Markii laga hor keenay hadalkiisii laga qoray wuxuu sheegay in aanu akhriyi karin qorina karin sidaas darteedna aanu wax fikrad ah ka haysanin waxa uu hadalku leeyahay. Markii la tusay saxeexiisa ku dul yaalay hadalka wuxuu qiray in inay calaamaddiisii tahay. Markii la weydiiyey haddii lagu sameeyey wax hanjabaado ah oo khuseeya hadalkani wuxuu yidhi in aanu xasuusan karin in loo hanjabay. Markii la weydiiyey inuu cidna kala hadlay hadalkiisa ilaa markii uu saxeexay wuxuu sheegay inuu la hadlay Cali oo uu sidani uun u sheegay in aanu waxba ogayn.

**Abokor:** Abokor marag-furkiisu wuxuu lamid ahaa hadalkiisii laga qoray marka laga reebo inuu furay in Xuseen uu dhammeeyey ka caawintiisii guriga Maarso 15. Markii laga hor keenay hadalkiisii laga qoray Abokor wuxuu yidhi in miinadii lugtiisa ka qaaday ay sidoo kale kala daadisay maskaxdiisa iyo inuu khalad ku sameeyey taariikhaha ku xusan hadalkiisa laga qoray. Markii la weydiiyey siduu khaladka ku gartey wuxuu sheegay in dhageysiga dacwadda kahor uu Xuseen xasuusiyey taariikhaha saxda ah iyo inuu aaminsan yahay in Xuseen boolis ahaan ay u badan tahay inuu ku saxan yahay taariikhaha. Markii la weydiiyey in uu ogaadey in Xuseen uu dhaawacmay Maarso 15 wuxuu sheegay inuu ogaaday inuu Xuseen si xun u dhutiniyay muddo todobbaadyo ah. Markii la weydiiyey in Xuseen ay ka muuqatay isku buuqsanaan iyo ilawshiyo wakhtigaasi uu dhutinayey, Abokor wuxuu yidhi: "sinaba iskumuu buuqsanayn, Xuseen badanaa aad buu u maskax badan yahay"

## 2.7. Ku Xukumida Xabsiga

Dacwadaha badankooga Xeerka Habka Ciqaabtu wuxuu u oggolaanayaa maxkamadda ikhtiyaar balaadhan oo ay ku go'aamiso dhererka xadhiga iyo xaaladaha kale ee xadhiga xadka uu sharcigu u dhigay dhexdiisa. Tani weeyi marka duruufaha wax fududeeya sida ku xusan Qodobka 119 ee Xeerka Ciqaabta Guud haddii dembiga ciqaabtiisu ay tahay tusaale ahaan, xadhiga, xabsiga lagu xukumayo la yarayn karo in aan ka badnayn saddexdii meelood meel ahaan.

### 2.7.1. Qiimaha Dhageysiga gaarka ah

Inagoo garanayna siday u weynaan karto saameynta maxkamadda go'aankeeda xilliga ku xukumista xadhigu waxaa muhiim ah in laga lahaado qorshe ku xukumista xadhiga ah oo hore u diyaarsan. Dhinaca difaacu waa inay codsi ka sameeyaan dhageysiga dacwadda hortii in arrimaha la xidhiidha ku xukumista xadhiga lagaga hadlo fadhi gaar ah oo ka dambeeya xukunka. Inkastoo badanaa dhaqanka maxkamadaha Somaliland uu yahay in lagu dhawaaqo ku xukumista xadhiga isla wakhtiga xukunka dacwadda, waa inay badanaa noqotaa himilada difaaca in la helo su'aasha dembiilenimada oo loo tixgaliyo si ka baxsan faahfaahinta ciqaabta. Dhinaca difaacu si fudud ugama hadli karaan arrimaha la xidhiidha ku xukumista xadhiga kahor xukunka maadaama in sidaasi la sameeyaa ay wiiqi karto sheegashadoodii dembilaawenimada oo ay kordhinayso u badnaanta xukunka dembiilenimada.

Sharciga caalamiga ahi wuxuu aqoonsan yahay xuquuqda eedeysanaha ee inuu kala hadlo maxkamadda su'aalaha la xidhiidha ciqaabta wakhti ku xukunka kadib ah iyo ciqaabta kahor[108].

Haddii eedaysanahu aanu is hortaageyn dembiilenimadiisa wakhtiga dhageysiga dacwadda guud ahaan aad bay u fududdahay in la mamnuuco marag-furka eedeysanaha ee khuseeya arrimaha la xidhiidha ciqaabta wakhtiga dhageysiga dacwadda. Haseyeeshee, marka dembiilenimada laga horyimaado helitaanka isla

107 Qodobka 76(2) Sharciga Rome ee Maxkamadda Caalamiga ah ee Dembiyada iyo Qodobka 143 ee Qodobbada habraaca iyo caddeynta ee Maxkamadda Caalamiga ah ee Dembiyada ayaa siiyey eedeysanaha xuquuqda inuu codsado dhageysi gaar ah oo caddaymo dheeraad ah ama soo gudbinta.

marag-furkaasi ee wakhtiga dhageysiga dacwaddu wuxuu noqon karaa qayrul-macquul ama wax aan lagu dhaqmi karayn.

Eedaysanahu wuxuu xaq u leeyahay inuu kaga horyimaado eedeynta lidka ku ah asbaabta ah in aanay jirin caddeyn ku filan oo lagu caddeyn karo dacwadda, isagoo isticmaalaya xaqa inuu aamusnaado wakhtiga dhageysiga dacwadda, kahor iyo kadib. Haddii dacwadda noocan ah eedeysanaha lagu helo dembiilenimada, ma heli doono fursad uu xilliga dhageysiga dacwadda kaga hadlo maxkamadda wax khuseeya duruufaha dembiga fududdeeya ama inuu muujiyo qoomamo ama ka xumaan.

### 2.7.2. Cadaymaha gaarka ah

Sida ku xusan Qodobka 117 ee XHC waxaa jirta suurtogalnimada burinta caddeynta. Haddii eedaysanahu uu keeno caddeyn aan sida macquulka ah laga rajeyn karayn in Xeer-ilaaliyaha guud uu saadaasho, Maxkamaddu waxay oggolaan kartaa Xeer-ilaaliyaha Guud inuu keeno burin. Xaaladdani, kadib markuu Xeer-ilaaliyaha Guud uu keenay burinta, eedaysanahu wuxuu keeni karaa caddeyn dheeraad ah difaaciisa gudihiisa.

Waxaa jira arrimo dhawr ah oo la xidhiidha ciqaabta oo dhinaca difaacu uu u baahan yahay inuu soo bandhigo caddeyn ama/iyo maragyada aan nooc ahaan la xidhiidhin dembiilenimada ama dembilaawenimada sidaas darteed soo bandhigistooda wakhtiga dhageysiga dacwaddu ay noqonayso wakhti lumis haddii la ogaado in eedaysanahu aanu dembi lahayn. Arrimahani waxaa ku jira:

- Xaddiga dhabta ah ee dhaawaca ama khasaaraha ee ay tahay in la magdhabo;
- Meeqaamka maaliyadeed ee eedeysanaha iyo awoodista iska bixinta ganaaxyada iyo magdhowga;
- Saameynta xadhiga iyo ciqaabaha kale ay ku yeelanayaan qoyska eedeysanaha iyo dadka hoos yimaada;
- Sharcinimada diwaanka dembiyada ee eedeysanaha;
- Duruufaha fududaynaya dembiga ee aan qiimo ku lahayn difaaca sida maskaxda ka jirnaanta, faqiirnimada, cadaadiska, naafanimada jidheed, caafimaadka liita, garaadka hooseeya, ama aqoon la'aanta, iyo
- Khatarta in eedaysanahu uu mar labaad dembiga galo.

Qareennadu waxay wakhtiyada qaar ku fikiraan inay si dhammeystiran u soo bandhigi karaan dhacdooyinka fududdaynta ah ee khuseeya ciqaabta keliya inay ka hadlaan ama iyagoo macmiilka faraya inuu sheego. Nasiib-darro, waxay Garsooreyaashu waayo-arag ku yihiin in dadka qaar ay sheegi doonaan been kasta oo ay u malayn karaan inay kaga feejignaanayaan ciqaabta ama isku deyeya inay ka dhigaan mid hoose. Sidaas darteed, si loo helo in la yareeyo ciqaabta, dhacdo yareynaysa darteed, waxaa lagama-maarmaan ah in la soo bandhigo marag looga qaateen ah iyo caddeymo kale. Haddaad ku doodeyso in aan macmiilkaaga xadhiga lagu fulin sababtoo ah wuxuu u dhimanayaa kansarka sambabada, waa inaad awoodi kartaa inaad soo bandhigto marag-furka dhakhtarkiisa iyo/ama warbiximaha kale ee cafimaadka ee ku habboon si loo caddeeyo arrintani.

### 2.7.3. Odhaahda Macmiilkaaga

Sida ku xusan Qodobka 119 faqradda 3 ee XHC eedeysanaha waa in badanaa loo oggolaadaa inuu yidhaahdo kelmada ugu dembaysa. Haseyeeshee, dedaal kasta waa in laga sameeyaa in laga feejignaado in eedaysanahu uu wax hadal ah sameeyo isagoon kala hadal Qareenka waxa uu rabo inuu ka hadlo marka hore. Way yar tahay inta ay macmiishu helaan fikrado wanaagsan oo khuseeya aragtiyaha iyo macluumaadka aad u caawinaya iyo waxa sii xumayn kara xaaladdooda. Waxaa guud ahaan habboon in lagu dhiirigaliyo macmiilka inuu ka hadlo dareenkiisa qoomamo haddii uu sidaasi samayn karayo[108]. Xitaa Garsooreyaasha ugu shakiga badan ayaa wakhtiyada qaar muujiya naxariis iyo rixim markuu soo bandhigo eedaysane aad uga xun oo si daacadnimo ah dhulka u yaala. Haseyeeshee, haddii macmiilkaagu aanu awoodin inuu hadlo isagoon cid kale eedayn iyo isagoon cudur-daar samayn, waxaa wanaagsan lahayd ba isagoo iska aamusa. Hadallada iskugu jira qoomamo iyo eedaynta sida tusaale ahaan: *"waan ka xumahay anigaa lugtiisa jebiyey laakiin wuxuu badanaa isku dayayey inuu baxsado"* ma aha qaar saacidaya.

### 2.7.4. Duruufaha Dembiga Fududdeeya

Arrimaha dembiga fududdeeya ee ay maxkamad gaar ahi u aqoonsan karto inay yihiin kuwa ugu saameynta weyn waxay badanaa noqon doonaan wax ku xidhan qofka [Garsooraha]. Haseyeeshee, dhacdooyinka qaar waxaa la odhan karaa inay macquul tahay in loo arko inay yihiin kuwa wax fududaynaya dacwaddo gaar ah dhexdooda.

Sida ku xusan Qodobka 40 ee Xeerka Ciqaabta duruufaha caadiga ah ee dembiga fududdeeya waxaa loo yaqaanaa:

a) *Marka falka loo galo sababo leh qiyam gaar ah ama ay bulshadu qiimeyso*

b) *Marka falka la galo iyadoo lagu jiro xaalad cadho ah oo ka dhalatay fal sharci-darro ah oo qof kale kula kacay;*

c) *Marka falka lagu galo duufsashada kulanno ama isku imaatin uu mamnuucay sharcigu ama hay'aduhu marka qofka falka ku kacay aanu ahayn caadeyste ama aanu shaqo ka dhigan fal-dembiyeemka;*

d) *Marka si kama' ah dembiyada lidka ku ah hantida, khasaare loogu geysto hantida dhinaca khasaarahu gaadhay;*

e) *Haddii marka lagu daro falka ama waajib gudasho la'aanta qofka falka geystay, fal-dembiyeed uu dhinaca dhibanaha ahi u galay si ula kac ahi uu wax ku lahaa sababta dhacdada;*

f) *Haddii dhageysiga dacwadda kahor qofka fal-dembiyeedka ku kacay uu si buuxda u bixiyey magdhowga khasaaraha ama, hadday macquul tahay, uu qaatey khasaaraha;*

108 Waxa ka reeban tani duruufaha marka la doonayo in rafcaan la qaato ee uu macmiilku rabo inuu sii wato dembilaawenimadiisa, taasoo ay tahay in macmiilka iyo Qareenkuba ay aad uga feejignaadaan wax kasta oo laga fahmi karo inay oggolaadeen dembiilenimada.

g) *ama markuu la yimaad dhageysiga dacwadda kahor iyo qayb kamid ah xaaladda ku xusan Qodobka 18 XCG, uu si xor ah oo wax ku ool ah u qaado tallaabooyin uu ku dhammeynayo ama ku yareynayo natiijada khasaaraha ama khatarta dembiga;*

h) *Duruuf kasta oo kale oo uu Garsooruhu u arko inay cudur-daar u noqonayso yareynta/hoos u dhigida ciqaabta.*

Waxaa intaa dheer, sida ku xusan Qodobka 75 XCG waxaa sidoo kale jira duruufo dembiga fududeeya oo keenaya in la yareeyo ciqaabta oo ay tahay inuu Garsooruhu tixgaliyo:

- Haddii Kaalmaynta uu bixiyey qofka fal-dembiyeedka ka qayb-qaatay ay kaalin aad u hooseya ku lahayd diyaarinta iyo fulinta dembiga (Qodobka 75 faqradda 1 XCG), iyo
- Haddii qofka fal-dembiyeedka galay ama ka qayb-qaatay lagu qasbay, gaar ahaan haddii uu ku qasbay masuulkiisu ama qof awoodda u leh, ama uu ku sababay qof aad u yar ama qof maskaxda ka dhiman ama ka jiran inuu galo dembi (Qodobka 75 faqradda 3).

Waxaa sidoo kale jira duruufo dembiga u fududeeya kolba nooca uu dembigu yahay sida lagu sheegay Qodobka 238 ee Xeerka Ciqaabta Guud ee falalka muhiimaddoodu aad u yar tahay ama Qodobka 303 XCG.

### 2.7.4.1. Falka laysku Qasbo in la galo

Dacwadaha aan lagu guuleysan karin isku difaacista in falka laysku qasbay, doodaha uu soo qadimay dhinaca difaacu ee muujinaya in dhinacaasi uu falka galay iyadoo la qasbayo waxay badanaa weli sii ahaan karaan kuwo xidhiidh la leh dacwadda iyadoo ah duruuf dembiga fuddudeynaysa. Tani waxaa ku jiri kara duruufaha marka, tusaale ahaan:

- Qof la soo dhoofiyey si looga qanacsado uu noqdo qof wax dhoofiya oo uu sheego inay ahayd dariiqa qudha ee uu kaga baxsan karayey xaaladdiisani tacadiga ah.
- Qofka fal-dembiyeedka galay sheegto in ay hayd inay dembiga saacidaan ama ay khatari ku iman lahayn isaga ama qoyskiisa.

### 2.7.4.2. Doorka Xaddidan ee Dembiga lagu lahaa

Ilaa iyo xadka uu qofka falka geystay ku lahaa gelitaanka caadiga ah ee dembigu waxay saameyn ku yeelan kartaa go'aaminta xadhiga ku habboon inkastoo aanay guud ahaan saameyn doonin masuuliyaddooda dembi.

Tusaaleyaasha doorarka hooseeya, gaar ahaan dacwadaha dadka laga ganacsado waxaa ku jira:

- Soo qaadista ('Transporting') dhibanaha fogaan gaaban;
- Kaga shaqaynta cunto kariye ama nadiifiso ahaan hawl-gal dadka lagaga qanacsado;
- Kireynta dhisme/qalab iyadoo la og yahay inuu isticmaalayo hawl-gal dadka lagaga qanacsanayo;
- Amaanaysiinta gaadiidka iyadoo la og yahay in loo isticmaalayo in lagu raro dadka laga qanacsanayo;
- Diyaarinta dhokumentiyo been ah iyadoo la og yahay in loo isticmaalayo si loo fududeeyo kaxeynta dadka laga qanacsanayo.

*Hawl-qabadka-Saddex iyo tobnaad:*

1. Macmiilkaaga Siciid wuxuu ku eedaysan yahay ka faa'iideysiga shaqaalaha kale ee ku xusan Qodobka 464 ee Xeerka Ciqaabta Guud. Wuxuu dembiga u dafiray booliska waxaanu imika kuu sheegay inuu doonayo inuu aamusnaado dhageysiga dacwadda. Dacwad ooguhu wuxuu kuu sheegay inuu soo bandhigi doono dhageysiga dacwadda dhokumentiyo caddeynaya in macmiilkaaga laba jeer oo hore lagu xukumay inuu ku kacay khiyaamo. Macmiilkaaguna wuxuu kuu sheegay in aan weligii hore loogu xukumin dembi ba.

- *Waa maxay tallaabooyinka aad qaadi lahayd kahor iyo wakhtiga dhageysiga dacwadda oo khuseeyaa xukunnadani hore?*

2. Macmiilkaaga Cumar wuxuu saxeexay qiraal qoran inuu haystay qof lahayste ah sida ku xusan Qodobka 460 ee Xeerka Ciqaabta Guud. Wuxuu kuu sheegay in qiraalku uu run yahay iyo inuu keliya aanu qabsanin dhibanahee, laakiin uu si xun u garaacay dhibanaha oo uu si joogto ah uga dhego beelay dhibanaha. Baadhis caafimaad ayaa xaqiijisay dhagoolenimada. Shan oday oo ka yimid tuulada Cumar ayaa kuu yimid oo kuu sheegay inay ku marag-furi doonaan maxkamadda horteeda in Cumar uu yahay nin nabadeed iyo nin diimeed oo aanu weligii ku tacadiyin qofna iyo in dhibanahu uu ahaa qof aan daacad ahayn iyo inuu ka been sheegayo dhagoolenimadooda.

- *Waa maxay tallaabooyin aad qaadi lahayd oo khuseeya shantani oday iyo marag-furkooda?*

*Hawl-galka-lixaad:*

Galaaska waxaa loo qaybinayaa kooxo shaqo oo ilaa 4 iyo 6 midkiiba. Koox kastaba waa inay liistaysaa doodaha ay soo bandhigi lahaayeen wakhtiga ku xukumista xadhiga iyo maragyada iyo caddeynta ay isticmaali lahaayeen si ay u kaabaan doodaha dacwadaha soo socda:

1. Macmiilkaaga Aadan waxaa lagu xukumay inuu xubin ka yahay koox hubaysan sida ku xusan Qodobka 234 ee Xeerka Ciqaabta Guud, oo uu ku mutaysan karayo ciqaab xabsi dheer ah. Macmiilkaaga oo 18 sano jira, laakiin aan waxba akhriyi karayn waxbana aan qori karin, waxaa lagu eedeyey inuu ka qayb-qaatey koox hubaysan oo ku kacaysay dhacitaanka muwaadiniinta dariiqa Puntland. Adeerkii waa mid kamid ah agaasimeyaasha kooxda hubaysan. Aadan markiiba waxaa qabtay booliska. Wuxuu adiga kuu sheegay inuu si xun u deymaysan yahay oo aanu rabin inuu yidhaahdo shay wax u dhimaya adeerkii sababtoo ah aabbihii markii uu dhintay kadib adeerkii ayaa aabbihii oo kale u noqday isaga.

2. Macmiilkaagaa Cabdulraxmaan waxaa lagu xukumay af-duubasho (qabsasho) sida ku xusan Qodobka 460 ee Xeerka Ciqaabta Guud isagoo dembiga ku gargaaray sida lagu sheegay Qodobka 74. Waa 23 jir waxaanu ku nool yahay cidhifka Hargeysa markii uu ka soo baxsaday gurigii qoyskooga ee Burco sababtoo ah may oolin cunto ku filan isaga iyo labadiisa walaal ee ka yar. Cabdulraxmaan waxaa la siiyey 10,000 SLSH si uu uga eego booliska markii ay kooxda af-duubayaasha ahi ay wiil uu dhalay nin maalqabeen ah oo ganacsade ah ku jujuubayeen gaadhigooga jiibka ah isagoo markaas ka yimid tukaanka aabbihii kuna socday gaadhiga. Adeegaha bulshadu wuxuu wareystay waalidka Cabdulraxmaan waxaanay doonayeen inuu guriga ku soo noqdo. Haseyeeshee, adeegaha bulshadu wuxuu ogaaday in qoysku uu aad faqiir u ahaa oo Cabdulraxmaan walaaladii ay u muuqdeen qaar si liidata loo quudiyey. Adeegaha bulshadu wuxuu kaloo ogaaday in Cabdulraxmaan adeerkii uu mekaaniga gaawadhida ka yahay Hargeysa dhexdeeda oo uu doonayey inuu Cabdulraxmaana gacan yare ugu shaqeeyo oo siiyo meel uu ku noolaado.

## 2.8. Rafcaannada

Sida ku xusan Qodobka 209 ee XCG eedaysanahu wuxuu xaq u leeyahay inuu rafcaan qaadan karo ama uu u qaadi karo wakiilkiisu. Qodobka 216 wuxuu sheegayaa in asbaabta rafcaanku ay noqdaan qaar cad oo faahfaahsan; haddii kale aan la oggolaanayn rafcaanka.

Xeerka Habka Ciqaabtu wuxuu sheegayaa in eedaysanahu aanu lahayn xaqa rafcaanka *“ee lidka ku ah xukun lagu helay dembiga kadib markii uu ugu jawaabay inuu dembigaasi qabo si waafaqsan qodobbada xeerkani”* (Qodobka 208).

### 2.8.1. Xaqiijinta Garmaqal Sax ah

Ujeeddada laga fahmi karo rafcaanku waa in la helo qaab lagaga cawil celin karo khaladaadka maxkamadda hoose. Haseyeeshee, khaladaadka waxaa la saxi karaa oo keliya haddii ay ku cad yihiin diiwaannada qoran ee loo soo gudbiyey Maxkamadda rafcaanka. Sidaas darteed, waxaa lagama-maarmaan ah in Qareenku uu eego galka si uu u xaqiijiyo in kaaliyahu uu si sax ah u diiwaangeliyey tallaabooyinkii muhiimka ahaa ee u dhacay sida uu dhigayo Xeerka Habka Ciqaabtu Qodobbada 94 iyo 132.

Qaybo adduunka kamid ah *“warbixiye maxkamadeed”* ayaa sameeya qaab-qoraal lagu diiwaangeliyo kelmad kasta oo uu ku hadlo qof kasta oo jooga fadhiga kasta ee maxkamadda. Nidaamyada kale duubitaan maqal iyo muuqaal ah ayey qaadataa maxkamaddu si loo xafido dhacdooyinka dhageysiga dacwadda. Sidaad u abuurto una ilaaliso diiwaanka dhageysiga dacwaddu muhiim noqon maayo, haddaan diiwaan ku filani aanu gaadhin maxkamadda rafcaanka.

### 2.8.2. Sharfida Xaqa Macmiilka ee Rafcaan

Su’aasha bal in rafcaan la bilaabaa waa mid ay tahay in lagu go’aamiyo la tashiga macmiilka. Xuquuqda rafcaanka waxaa leh macmiilka laakiin waa masuuliyadda Qareenka inuu u sheego macmiilka xuquuqdiisani oo uu u sharaxo faa’iidooyinka iyo khataraha la xidhiidha bilaabida rafcaanka. Go’aanka ugu dambeeya ee bal in rafcaan la qaato waxaa leh macmiilka.

Muddada bilaabista rafcaanku waa soddon casho oo ka bilaabanta ogeysiinta xukunka (Qodobka 214 ee XCG) ama 15 casho haddii rafcaanka laga qaadanayo go'aannade kale ee garsoor. Muddadani way ka dheer tahay in Qareenka mashquulka ahi uu si fudud ku ilaawo ama ku seegi karo. Ku guul-dareysiga in muddadaasi lagu sameeyo waxay noqon doontaa xadgudub weyn oo lagu sameeyey masuuliyaddii asluubeed ee Qareenka.

Haddii macmiilku aanu xidhnayn waxaa mararka qaar aad u adkaanaysa meel loogu hagaago iyo in la helo si ay u sameeyaan go'aan ay ka bixinayaan inay ka rafcaan qaadanayaan dacwaddooda. Qareenka waxaa la dhigi karaa xaalad qalafsan oo uu u dhaxaynayo inuu bilaabo rafcaan iyadoo aanu jirin oggolaansho uu bixiyey macmiilku ama uu iska daayo oo ay muddadii dhaafto. Dacwadaha badankooga, Qareenku waa inuu bilaabaa rafcaanka intii uu iska daynayn lahaa oo ay muddadu dhaafi lahayd. Haseyeeshee, caadi ahaan oggolaansho ayaa loo baahan yahay si loo gudbiyo rafcaan.

Sida ku xusan Qodobka Qodobka 209 faqraddiisa 2 ee XHC, Waxay u muuqataa in keliya dacwadaha *"La xukumo dilka, Qareenkii difaacayey eedeysanaha dhageysigii dacwaddu wuxuu ka rafcaan qaadan karaa iyadoo aanu jirin oggolaansho gaar ah inuu sidaasi sameyaa iyo xitaa hadday lid ku tahay rabitaanka qofka lagu xukumay"*. Haseyeeshee, sida lagu sheegay faqradda 4 ee Qodobka 209 XHC *"Eedaysanuhu wuxuu tirtiri karaa rafcaan uu qof kale u sameeyay iyadoo uu isaga metalayo, isagoo Maxkamadda ogeysiin siinaya in aanu rabin in loo sameeyo rafcaankani. Haddii ruuxa eedaysanaha ahi uu ka yar yahay qaangaadhka ama uu yahay mid aan isku filayn, waalidkiisa, ama wakiilkiisa sharciga ah ayaa loo oggol yahay inuu meel mariyo ogaysiintaasi aynu soo sheegnay."*

Masuuliyadda Qareenku waa inuu ilaaliyo xuquuqaha eedeysanaha oo sidaasi darteed Qareenku waa in aanu oggolaanin inay dhacdo xuquuqda rafcaanku iyadoo aanu ogayn macmiilku, haddii bilaabista rafcaanku ay si aaanu madmadow ku jirin lid ugu tahay danta ugu wanaagsan ee eedeysanaha mooyaane. Marka muddadu ay ku dhaafto waxa macquul ah oo keliya in la raadiyo dib u eegis sida ku xusan qodobbada 237 iyo 238 XHC oo la siinayo dib u eegis aad u xaddidan oo keliya.

### 2.8.3. Istaraatijiyadda Rafcaan

Xadka waxa ay Maxkamadda Rafcaanku tixgalin siin karto waxaa xaddidaya Xeerka Habka Ciqaabta Qodobka 85 oo la xidhiidha *"saxitaanka khaladaadka"* iyo 238 oo la xidhiidha dib u eegista. Markay noqoto istaraatijiyadda waxaa ugu wanaagsan Qareenka inuu ka hadlo dhammaan khaladaadka macquulka ah ee tallaabada rafcaanka inta uu dooranayo keliya wixii u muuqda inay yihiin khaladaadka ugu cad ama khaldan maadaama aanay macquul noqon karin in marka hore si buuxda loo saadaaliyo khaladaadka ugu muhiimsanaan doona Maxkamadda Rafcaanka.

Markasta oo ay macquul tahay Qareenku waa inuu isku dayaa inuu qaato faa'iidada ugu badan ee Xeerka Habka Ciqaabta Qodobka 231 faqradda 2.c. oo oggolaanaya keenista caddeyn cusub. Maxkamaddu waxay xitaa iskeed u dalbi kartaa caddeyn cusub.

Markuu dhammaado dhageysiga maxkamadda hoose Qareenku waa inuu fikrad cad ka haystaa waxaa uu ku hooseeyey ama ka maqnaa difaaca dacwadda. Qodobka 231 faqradda 2.c. waxay siinaysaa inaad soo hagaajiso ama xoojiso meelaha difaaca laga kobcin karo.

Maragyada, khabiirrada, dhokumentiyada ama caddeymaha kasta ee ay kaa diidday maxkamadda hoose dib ayaa loo keeni karaa loona baadhi karaa iyagoo ay weheliyaan kuwii kale ee la haystay ilaa la caddeeyo [sidii la rabay]. Haseyeeshee, Qareenku waa inuu maxkamadda u sharaxaa sida caddeynta cusubi ay lagama-maarmaan ugu tahay go'aanka macquulka ah iyo sababta waxyaabihii jiray aanay ugu filnayn.

Maxkamadda sare si ka duwan Maxkamadda Rafcaanka ah waxay keliya tixgalinaysaa khaladaadka sharci ma aha kuwa dhacdada (Qodobka 232 faqradda 2 XHC). Haddii caddeyn cusub la helo xukunka kadib iyo kadib markii ay Maxkamadda Rafcaanku go'aan ka qaadatay ama muddadii rafcaanka ay dhaaftay caddeyntaasi waxaa keliya oo lagu keeni karaa codsi dib u eegis (Qodobka 237 XHC).

*Hawl-qabadka-Afar iyo tobnaad:*

1. Maxkamadda hoose waxay aqbashay hadalkii difaaca macmiilkaaga ee qoraalka ahaa, laakiin waxaad ogtahay inay badanaa u diidaan Qareennadu inay hadlaan wakhtiga dhageysiga dacwadda oo ma filaysid inay kuu fasaxi doonaan inaad hadasho wakhtiga dhageysiga dacwadda Bashir. Haseyeeshee, waxaad aaminsan tahay in Maxkamadda Rafcaanku ay ku dhageysan karto adiga.

- *Tallaabooyinkee aad qaadi lahayd wakhtiga dhageysiga dacwadda Bashir ee maxkamadda hoose si aad uga faa'iiddeysatid fursadahaaga Maxkamadda Rafcaanka?*

2. Macmiilkaaga Ibrahim waxaa xukuntay maxkamadda hoose oo waxay u dhiibtay ciqaab ah saddex bilood. Ibrahim imika wuxuu jeelka ku jiray laba bilood sidaas darteed wuxuu keliya u baahan yahay inuu ku jiro soddon casho oo kale kahor intaan la sii deyn. Ibraahim waa beeroole waxaanu kuu sheegay in ay tahay inuu jeelka kaga baxo shan iyo afartan casho si uu u haraameeyo midhahiisii ama wuxuu waayi doonaa shay kasta qoyskiisuna way macaluuli doonaan. Waxaad og tahay in maxkamadda hoose ay samaysay khaladaad sharci oo ay ahayd in aan Ibrahim la xukumin, haseyeeshee, waxaad aaminsan tahay in haddii aad rafcaan bilowdo aan la sii deyn doonin Ibrahim ilaa uu dhammaanayo rafcaanku, taasi oo qaadan doonta in ka badan shan iyo afartan casho.

- *Maxay tahay talada aad siin lahayd Ibrahim markay noqoto xuquuqda rafcaanka?*

3. Macmiilkaaga Axmed waxaa lagu xukumay gogol-dhaaf sida ku xusan Qodobka 426 ee Xeerka Ciqaabta Guud oo salka ku hayey marag-furkii Xasan. Macmiilkaagu kaama rabo inaad rafcaan u bilowdo. Hal bil kadib muddadii rafcaanka ayey kuu yimideen Xasan saaxiibadii oo ay kuu sheegeen in Xasan uu iyaga u sheegay in marag-furkiisii lidka ku ahaa Axmed uu dhammaantii been ahaa.

- *Waa maxay tallaabooyinka haddiiba ay jiraan salka ku haya maragyadani cusub ee aad qaadi karto?*

## 2.8.4. Istaraatijiyadda meelo Habka kamid ah

Waxaa ka jira kala duwanaanshe weyn sida ay maxkamadaha Somaliland u qabtaan una qaadaan dhageysiga dacwadaha ciqaabta ah ee hortooda yimaada. Garsooreyaal badani waxay wax ka fahamsan yihiin Xeerka Habka Ciqaabta kuwa badana waxay qaateen tabobar Xeerka Habka Ciqaabta ah. Haseyeeshee, wakhtiyada qaar maxkamaduhu, ma fuliyaan dhammaan qodobbada Xeerka Habka Ciqaabta.

Caadi ahaan, marka maxkamaddu ay ka leexato habraacyada Xeerka Habka Ciqaabta waxay faa'iido u tahay dacwad oogaha waxaanay dhib ku tahay eedeysanaha. Waxaa jira laba sababood oo ay u caawinayso difaaca marka si adag loo raaco qodobbada habraacyada Xeerka Habka Ciqaabtu. Sababta ugu horeysaa waa in qodobbo badan oo Xeerka Habka Ciqaabta ahi ay dhigayaan xuquuqo ay leeyihiin eedeysanaha iyo Qareenka difaacu. Marka labaad, Eedaysanahu badanaa waa qofka ugu awoodda yar nidaamka caddaaladeed ee ciqaabta markaanay jirin qodobbadaasina waa kan cidda awoodda weyn baadhaadhayaa.

Haddii aad tuhunto in qodobbo gaar ah oo Xeerka Habka Ciqaabta ah ama sharci kale ah la rabo in layska dhaafo waxaa lagugula talinayaa in aad ogeysiiso Maxkamadda kahor ama bilowga dhageysiga dacwadda aad ku adkeysanayso in loo hoggaansanaado qodobbada gaarka ee dacwaddaada saameynaya.

Hal qaab oo tani loo sameyn karaa waa in aad gudbiso nuqulka hadalka difaacaaga qoran oo qaybta koowaad ee hadalku ay ka hadasho arrimaha habraaca ugu muhiimsan dacwaddaada. Haddii aad aaminsan tahay in Garsooreyaashu ayna akhriyin hadalkaaga qoran kahor dhageysiga dacwadda markaa waxaa wanaagsan inaad hadal ku jeediso waalaca aad ka qabto habraaca bilowga dhageysiga dacwadda.

*Tusaale ahaan: waxaa badanaa ka dhacda maxkamadaha in difaaca loo diido xuquuqda inoo keeno maragyo, sidaas darteed, haddii aad haysato maragyo difaaca si aad u keento dacwaddaada waxaa habboon inaad soo bandhigto qoraal iyo afba doodo khuseeya sida Qodobbada 116 iyo 179 ee Xeerka Habka Ciqaabta loogu dhaqmayo dacwaddaada.*

Inkastoo ay u badan tahay in Maxkamaddu ay raaci doonto Xeerka Habka Ciqaabta haddii aad qodobbada gaarka ah ku soo jeediso garsoorayaasha dareenkooda waxaa weli aad macquul u ah inay ku adkeystaan khaladaadkooga. Tani waa sababta aad u doonayso in dooddaadu ay qoraal u noqoto si haddii lagugu diido aad u yeelato dood kuugu hadha galka maxkamadda taasi oo ay dib u eegi doonto maxkamadda dambe ee rafcaanku. Waa inaad sidoo kale ku dedaashaa inaad lahaatid waxoogaa hadal-qoraal ah oo lagu qoray galka oo ka turjumaya xaqiiqada ah in maxkamaddu ay diidday codsigaagii iyo sababta ay sidaasi u sameeyeen.

Mid kamid ah dhinacyada ugu adag ee inaad Qareen ahaataa waa in uu soo celceliyo sameynta isla codsiyadii uu noocooga oo kale maxkamadda u jeediyey iyo in lagu celceliyo diidmada codsiyadaasi. Qareennadu waxay mararka qaarkood isku qanciyaan in aanay faa'iido lahayn inay keenaan doodo gaar ah sababtoo ah in lagaga diiday dacwado kale dhexdooda. Haseyeeshee, maadaama, uu macmiil kastaaba leeyahay xuquuq shakhsiyadeed oo ah in la difaaco Qareenka waxaa saaran masuuliyadda ah inuu u dalbo xuquuqahaasi macmiil kasta iyadoon loo eegayn xaqiiqada ah in xuquuqahaasi laga diiday kuwa kale isla maxkamaddani.

Waxaa intaasi dheer, in ku adkeysashada Qareenku ay saameyn yeelan karto wakhti dambe, gaar ahaan haddii tiro Qareenno ahi ku soo celceliyaan dood isku mid ah isla maxkamad qudha. Ku adkeysashadu waxay diraysaa farriin ah in aad hubto inaad saxan tahay iyo in xuquuqahani ay muhiim yihiin. Halka, inaad iska aamusnaato adigoo ay ku soo wajaheen tallaabooyin aan habboonayni iyo dafiraada xuquuqahu waxay hadal la'aantaada ka bixinaysaa inaad oggolaatay tallaabooyinkani.

Waa arrin taariikhda ku diwaan gashan in doodo sharci oo si joogto ah loo diiddanaa tobanneeyo sano ugu dambeyntii si guud loo oggolaaday. Tusaale ahaan, sanadkii 1896 Maxkamadda Sare ee Maraykanku waxay

ansaxisay midab kala sooca ilaa lixdan sano kadib sanadkii 1954 ay Maxkamaddu badeshay halkii ay ka taagnayd oo ay mamnuucday midab kala sooca. Isbadelkaasi weligii muu yimaadeen laakiin xaqiiqada ah in, labaatan sano hortood 1930-soddomeeyadii, koox Qareenno ah ayaa bilaabay inay ku celceliyaan oo nidaam ahaan uga horyimaadaan shuruucdii kala sooca[109].

Majiro nidaam sharci oo si run ah weligii u taagnaada oo aan isbadelin, mar hadday jirto in tirada iyo wax ku oolnimada Qareennada nidaamka Somaliland ay ku sii soconayaan inay sii kordhaan sanadaha soo socda, waxaa kuu wanaagsan inaad naftaada weydiiso waxa uu yahay hiraalka aad adigu ka leedahay waxa ay tahay in nidaamka sharci ee Somaliland uu u ekaado labaatan sano gudahood oo aad imika bilowdo ka shaqaynta isbadelada aad jeclaan lahayd inaad ku aragto.

*Hawl-qabadka-Shan iyo toban:*

1. Waxaad metelaysaa Maxamuud oo ku eedaysan dhimasho shil ah oo garaacis ku timid sida ku xusan Qodobka 434 ee Xeerka Ciqaabta Guud. Maxamuud wuxuu kuu sheegay in aanu dembiile ahayn oo uu joogay Masaajidka oo uu Quran kula dhiganayey wadaaddo kale xilligani ay boolisku leeyihiin dembi ayaad gashay. Dhammaan dacwadahaagii hore ee maxkamaddani dacwadda Maxamuud dhageysan doonta Garsooreyaashu weligood kuumay oggolaanin adiga inaad soo bandhigto maragyada difaaca.

- *Waa maxay tallaabooyinka aad qaadi lahayd dacwadda Maxamuud dhexdeeda ee la xidhiidha ka maqnaanshihiisa goobta dembiga?*

2. Macmiilkaaga Cabdul wuxuu ku eedaysan yahay hoggaaminta koox hubaysan sida ku xusan Qodobka 234 ee Xeerka Ciqaabta Guud. Caddeynta qudha ee isaga ku xidhiidhinaysa dembigu waa qorigii uu sitay markii la xidhay. Khabiir baadhayna wuxuu ku soo gebogabeeyey in xabadii laga helay goobtii uu dembigu ka dhacay laga soo riday qoriga Cabdul. Adiga iyo macmiilkaaga toona lama siin nuqulka ra'yigii khabiirka ee qoriga khabiirkana uma qorshaysna inuu joogo dhageysiga dacwadda. Waxaad og tahay in maxkamadda dhageysanaysa dacwadda Cabdul aanay weligeed ku dhaqmin Qodobka 161 faqradda 4 ee Xeerka Habka Ciqaabta.

- *Waa maxay tallaabooyinka aad qaadi lahayd dacwadda Cabdul ee la xidhiidha caddeynta baadhista khabiirka?*

3. Maxkamaddii hoose waxay ogaatey in Jaamac aanu dembi lahayn oo aanu ku xadgudbin Qodobka 446 ee Xeerka Ciqaabta Guud, laakiin dacwad oogaha ayaa ka rafcaan qaatey go'aanka. Jaamac wuxuu imika xidhnaa afar bilood oo dhaaftay ciqaabtii ugu badneyd ee ku xadgudubka Qodobka 446 iyo muddadii xadhiga hore sida ku xusan Qodobka 47 CPC.

- *Waa maxay tallaabooyinka aad qaadi lahayd dacwaddani Jaamac markay noqoto sii deyntiisa?*

109 Xaaladani isbadel muddada dheer ah waxaa lagu arki karaa nidaamyada Qanuunka Islaamiga ah iyo Sharciga Roomaaniyiinta ka soo jeeda (Civil Law) sidoo kale.

## 2.9. Dembiyada Fudud ee lagu Galo Gudaha ama Dibedda Maxkamadda

Sida ku xusan Qodobka 129 ee XHC marka dembiyada la galo wakhtiga dhageysiga dacwadda ee uu sharcigu dhigayo ciqaab xadhig ah, ama ciqaab kasii culus, Guddoomiyaha Maxkamaddu waa inuu:

a) Amraa in haddalka dembiga la diiwaangeliyo [la qoro], ama

b) Amrayaa in si degdeg ah loo xidho qofka fal-dembiyeedka galay.

Haddii ciqaabta uu sharcigu dhigayo ee fal-dembiyeedka la galay wakhtigii dhageysiga dacwaddu aanu dhaafsiisnayn awood-garsoorka Maxkamadda oo ay maxkamadduna tahay qaybta ciqaabta ee maxkamadda degmada, dabadeed sida ku xusan isla qodobkani: *"Xeer-ilaaliyaha Guud waa inuu sida ugu dhakhso badan u diyaariyaa eedda oo uu u keenaa Maxkamadda. Maxkamaddu, iyadoo hakinaysa dhageysigii dacwadda socotay, ama in yar kadib marka lagu dhawaaqo xukunka dhageysiga dacwadda, waa in la dhageystaa fal-dembiyeedka cusub. Haddii kale, xeer-ilaaliyaha guud waa inuu sida ugu dhakhso badan u bilaabaa si waafaqsan qodobbada xarafka a) ee faqradda 1 ee Qodobka 70."*

Si ka duwan shaqooyinka kale Qareenka kartidiisa waxaa si aan la kala saari karin si wadajir ah loola xidhiidhiyaa sida ay dadka kale u arkaan shakhsiyadda iyo qiyamka Qareenka. Meekaaniga gawaadhidu wuxuu weli sii qabsan karaa ganacsi wanaagsan xitaa haddii lagu arko isla wayni, cadho, uskag iyo dad la socod la'aan, haddii uu si wacan u hagaajinayo gawaadhida. Qareenka sababa fal-dembiyeed wuxuu si aan lagama-maarmaan ahayn u wiiqay kartidiisii isagoo waayaya qadarintii dadka kale ee nidaamka sharci ee bulshada balaadhan.

Qareenka caadi ahaan ma Kaalmeeyaan xoog weyn oo niman hubaysan ahi ama ma haysto waxyaabo badan oo saacidaya sidaas darteed waa inuu badanaa isticmaalaa qancin iyo weydiisashada qiimaynta kuwa kale si uu gaadho shay. Inay dadka kale ula dhaqmaan si qadarin ah ayaa aasaas u ah inay hantiyaan oo ay haystaan qadarintooda.

Waxaa wanaagsan in la ilaaliyo wanaaga oo haddii ay macquul ay ku jiraan xidhiidhka saaxiibtinimo ee ay la leeyihiin dhammaan ka qayb-qaatayaasha kale ee nidaamka caddaaladdeed ee ciqaabta oo ay ku jiraan masuuliyiinta ugu heerka hooseysa ee booliska, xafiiska xeer-ilaalinta, waaxda xabsiyada, iyo maxkamadaha. Xaqiiqdii, xidhiidhka wanaagsan ee la yeesho kaaliyeyaasha iyo shaqaalaha kale ee maamulka hay'adahu waxay u noqon karaan faa'iido balaadhan Qareen kasta halka xidhiidhkooda liitaana uu u noqon karo sababta dhibaatooyin badan.

Dabcan, Qareenka weligii uguma gorgortami karo danaha macmiilkiisa si u wanaagsan ilaalinta xidhiidh qof kale. Xaqiiqdii waxaa cad in sababtoo ah in Qareenku aanu ka joogsan karin oo soona noqnoqonaysa u meteli karo dad aan la aqoon oo uu dalabaad aan la aqoon ka sameyn doono qayb kasta nidaamka caddaaladeed ee ciqaabta ah in Qareenku aanu ku samayn karin inuu ka cadhaysiiyo kuwa kale si uu uga maadeysto darteed.

Qareennada waa inay badanaa ka go'an tahay oo ay wakhtiyada qaar u u dagaalamaan si ay macmiilkooga ugu matelaan si wax ku ool ah, laakiin waxaa jira cudur-daar dhifdhif ah in la noqdo bilaa akhlaaq. Qareennadu waa inay badanaa xasuusnaadaan in aanay ku lug lahaan khilaafka iyo muranka shakhsiyadeed laakiin ay u gali karaan si ay u fuliyaan masuuliyaddooda shaqo. Qareennadu waa in aanay badanaa la yaabin marka

si cadowtinimo iyo bilaa akhlaaq ah loo beegsado sababtoo ah fuddaydka iyo jaahilnimada dadka kale. Haseyeeshee, in aanay ku jaawibin si la nooc ah dabeecadaha xun oo keliya ayey Qareennadu ku caddeyn karaan in is faham waa' kasta oo ay la yimaadaan ay u gaar yihiin shaqadooda.

Qodobbo dabeecadeed oo waxooga kala duwan ayaa la dabaqaa wakhtiga qabashada dhageysiga dacwadda. Dhageysiga dacwaddu waa dhacdada ugu qiimaha badan ee ay tahay in la eego qaabka ugu muhiimsan. Haseyeeshee, dhageysiga dacwaddu sidoo kale xikmad ahaan waa masrixiyad oo qolka maxkamadduna waa masraxa uu Qareenku ku metalayo dhinaca. Dhageysiga dacwadda dhexdiisa waxaa jiri kara wakhtiyo marka ay wax ku ool tahay uu Qareenku muujiyo dareen ama xiise ku habboon dhacdada. Qareennadu iyagoo la socda dareenkoogu waa in aanay weliba waayin awoodda ay kaga jawaabayaan dhacdooyinka aan la filayn oo ay sameeyaan go'aannada qorshaysan ee degan oo dhageysiga dacwaddahu ay badanaa u baahan yahay.

In cadow laga dhigto dacwad oogahu uma fiicna danahaaga muddada fog waxaanay fogayn kartaa macmiishaada mustaqbalka. Haseyeeshee, in cadow laga dhigto Garsoorahu waxay lid ku tahay danahaaga ugu dhow ee macmiil kasta oo aad ku leedahay Garsoorahaasi hortiisa. Waxay noqon kartaa caqabad in laga joojiyo cadhada iyo naxdinta gaar ahaaneed ee Garsooraha doqonka iyo jaahilkaba ah, laakiin waxaa wanaagsan in la ogaado waxay ku xooggan tahay in sidaasi la yeelaa.

Qareennada isku daya inay caddeeyaan inay xariifiin yihiin iyagoo bahdilaya Garsoooraha waxay hadda caddeynayaan in aanay xariifiin ku ahayn inay qanciyaan Garsooraha.

Marka uu Qareenku metalayo dhibanaha himiladiisu waa inay noqotaa inuu ku tiriyo dacwad oogaha iyo garsooraha inay shuraako ku yihiin dedaalka lagu gaadhayo natiijo danta ugu wacan ee macmiilka ah. Dacwad oogaha iyo Garsooraha toona si run ah ulama noqon karo saaxiib haddii aanay walaac ku hayn ama aanay ka go'nayn iyaga danaha ugu wanaagsan ee macmiilku.

*Hawl-qabadka-Lix iyo tobnaad:*

1. Waxaad timid dhismihii maxkamadda si aad u gudbiso qoraalkii difaaca. Kaaliyaha ayaa ku arkay adigoo sugaya, laakiin wuu iska dhaafiyey oo wuxuu iska watay inuu shaahiisii iska sii cabo. Toban daqiiqo kadib wuxuu kuu sheegay in aanu kaa aqbali karin hadalkaasi ilaa aad isaga tusto ruqsaddaada Qareennimo. Markii uu baadhay ruqsaddaada dhawr daqiiqo kaaliyuhu wuxuu kuu sheegay in aanu kaa aqbali karin qoraalka sababtoo ah galkii Garsooraha ayaa xafiiskiisa u qaatey waxaanu Garsooruhu ka codsaday in aanay cidini soo rabshin.

- *Waa maxay tallaabooyinka aad qaadi lahayd?*

2. Macmiilkaagu wuxuu ku eedaysan yahay inuu dilay wiil dhallinyarro ah oo qoys balaadhan ka dhashay. Wakhtigii dhageysiga dacwadda qoyskii wiilka yar ayaa dhageystayaasha ku jira oo markii aad baxday ay ku dhawaaqeen aflagaado adiga kaa dhan ah oo hal nin oo jilicsan oo nin weyn ah ayaa cadhuufeeyey jaakeetkii suudhkaaga.

- *Waa maxay tallaabada aad qaadi lahayd?*

3. Waxaad su'aalo weydiinaysaa marag lid ku ah macmiilkaaga. Waxaad haysaa in dhokumentiyo muujinaya in maragaasi mar lagu xukumay markhaati beenaale laba jeerna tuuganimo. Su'aashii ugu horreysay ee aad weydiisaa waxay ahayd in marag-furkiisu uu run yahay dacwaddani, wuxuu kuugu jawaabay "sidee baad ugu dhacdaa inaad aniga igu eedayso khaayin, weligay been maan sheegin intii aan noolaa, waxaad tahay dembiile gaal ah oo dilaa ilaalinaya!"

- *Waa maxay tallaabada aad qaadi lahayd?*

4. Saacaddii ugu horreysay ee dhageysiga dacwadda Garsoorihii guddoominayey wuxuu kuu sheegay in "aanu xiisaynayn hataatacaaga dheer ee ku saabsan Xeerka Habka Ciqaabta iyo Heshiisyada Caalamiga ah. Haddii aad sii waddo waxaasi, waan ku xidhi doonaa adiga". Saacad kadib Garsoorihii dacwadda guddoominayey wuxuu amray in macmiilkaaga jeelka lagu celiyo inkastoo dhageysiga dacwadda ay u qorsheynayd in la wado maalintaasi oo dhan, sababtoo ah [buu yidhi] "waxaan ku daalay eegmada wajigiisani dilaaga ah".

- *Waa maxay tallaabada aad qaadi lahayd?*

# Cutubka 3aad: Kaalmada Sharci ee Marxaladda Dhageysiga Dacwadda ka Dambeysa

### Ujeeddooyinka Waxbarasho

Cutubkani ka qayb-galayaashu waxay:

- ku baran doonaan guud-marka sharciga maxalliga iyo caalamiga ah ee lagu dabaqayo marxaladda dhageysiga dacwadda ka dambeysa;
- samayn doonaan liistada dhibaatooyin kala duwan oo la xidhiidha marin-u-helidda goobaha xadhiga ee dadka sharciga ku shaqaynaya iyo xalalka lagu shaqaynayo.

Sida ku xusan Habraaca 6 ee Habraacyada iyo Mabaadi'da Qaramada Midoobey ee Marin-u-Helidda Kaalmada Sharci ee Nidaamayada Caddaaladeed ee Ciqaabta:

> *"45. Qaramadu waa inay xaqiijiyaan in dadka xidhan iyo carruurta xorriyadda laga qaaday ay marin-u-hellaan Kaalmada Sharci. Marka aan Kaalmada Sharci la heli karin, qaramadu waa inay xaqiijiyaan in dadkani lagu xidhay si waafaqsan sharciga.*
>
> *46. Ujeeddadani, Qaramadu waa inay keenaan tallaabooyin:*
>
> *(a) in dhammaan dadka la siiyo, oggolaanshaha goobta uu ku xidhnaanayo iyo wakhtiga xadhiga, inuu helo macluumaadka xeer-hoosaadka goobta xadhiga iyo xuquuqahooga uu sharcigu siinayo oo ay ku jirto xuquuqda Kaalmo sharci oo sirtiisa la ilaalinayo, talada iyo gargaarista; fursadaha in dib loo sii eegi dooni dacwaddiisa; xuquuqahooga wakhtiyada dacwadaha anshax-marinta ah; iyo habraacyada cabashooyinka, rafcaanka, sii deynta hore, saamaxaada iyo u naxariisashada. Macluumaadkani waa in loo bixiyaa qaab ka turjumaya baahida qofka jaahilka ah, laga tirada badan yahay, qofka naafada ah iyo carruurta waa inay ahaadaan luuqada uu qofka Kaalmada Sharci u baahani fahmi karo. Macluumaadka la siinayo carruurta waa in loo bixiyaa qaab ku habboon da'dooda iyo qaan-gaadhnimadooda. Qalabka macluumaadka waa in lagu kaabaa Kaalmada muuqaalka oo badanaa la dhigo qaybaha dhismeyaasha ay maxaabiistu sida joogtada ah marinka ugu hesho;*
>
> *(b) In lagu dhiirigaliyo urrurada Qareennada iyo sharciga iyo hawl-wadeennada kale ee sharcigu inay sameeyaan kooxo Qareenno [iyo caawiyeyaal sharci] si ay u booqdaan xabsiyada si ay u siiyaan la talin iyo gargaar sharci oo bilaash ah ah maxaabiista;*
>
> *(c) In la xaqiijiyo in maxaabiistu ay marin u helaan Kaalmada Sharci markay ujeeddadoodu tahay inay gudbiyaan rafcaanno ama ay u gudbiyaan codsiyada macaamilkoooga iyo xaaladdaha xadhigooda, oo ay ku jiraan markay soo wajahaan eedaymaha culus ee anshax-marinta ah iyo codsiyada saamaxaada, gaar ahaan maxaabiista ay soo wajahaan ciqaabta dhimashada, iyo sidoo kale, codsiyada damaanada iyo wakaalada dhageysiga damaanada;*
>
> *(d) In lagu wargeliyo maxaabiista ajaanibka ah markay suurtogal tahay, marka la heli karo, raadinta u wareejinta dalka uu u dhashay si uu ugu qaato ciqaabtiisa, iyadoo ku xidhan siday u oggolaadaan Qaramada ay khusaysaa."*

Caawiyeyaasha la aqoonsan yahay –sida kor lagu sheegayba- waxay door muhiim ah ku yeelan karaan caawinta dadka xabsiyadda ku jira. Sida ku xusan Habraaca 14.67. (f) ee Habraacyada iyo Mabaadi'da Qaramada Midoobey ee kor ku xusan, Qaramadu waa inay *"xaqiijiyaan in caawiyeyaasha sharci ee la aqoonsan yahay ee loo xilsaaray bixinta Kaalmada Sharci ay marin-u-helaan saldhigyada booliska iyo xabsiyadda, dhismayaasha xadhiga iyo xarumaha xadhiga dhegaysiga dacwadda ka horreeya iwm."*

Marka laga yimaado qoraallada lagu xusay Buuggani, kuwa sida gaarka ah loogu dabaqayo dadka xidhan iyo carruurtuba waa kuwani soo socda:

- Dhokumentiga Qaramada Midoobey ee Mabaadi'da lagu Ilaalinayo Dhammaan Dadka Xidhan ama Xabsiga ku jira 1998;
- Qodobbada Minqiyaaska aan laga Talaabsan karin ee Qaramada Midoobey ee la Macaamilka Maxaabiista 1955;
- Habraaca Qaramada Midoobey ee Hirgalinta wax ku oolka ah ee Qodobbada Minqiyaaska aan laga Talaabsan karin ee la Macaamilka Maxaabiista (Waxaa lagu ansaxiyey Wareegtada Golaha ee 1984/47);
- Heshiiska Qaramada Midoobey ee Xuquuqaha Carruurta iyo Waxyaabaha lagu kordhiyey 1989;
- Habraaca Qaramada Midoobey ee Ilaalinta Carruurta Xorriyadda laga qaaday 1990 (Havana Rules ama JDL);
- Qodobbada Minqiyaaska aan laga Talaabsan karin ee Qaramada Midoobey ee Maamulista Caddaaladda Caruurta 1985 (Beijing Rules);
- Habraaca Qaramada Midoobey ee ka hawl-galka carruurta Nidaamka Caddaaladeed ee Ciqaabta dhexdiisa 1997 (Waxaa lagu soo jeediyey Wareegtada ECOSOC ee 1997/30 ee 21 July 1997);
- Mabaadii'ida 1988 ee dhawrista dhamaan dadka xidhan oo dhan;
- Qodobbada Qaramada Midoobey ee la Macaamilka Haweenka Maxaabiista ah iyo Tallaabooyinka aan xadhiga asluub celinta ahayn ee lagu qaado haweenka maxaabiista ah – Waxaa lagu ansaxiyey Wareegtada Golaha Guud 65/229 ee 16 March 2011 (the Bangkok Rules);
- Soo Jeedinta Rec(2008)11 ee Guddida Golaha Wasiirrada ee Yurub ee Qodobbada Yurub ee in carruurta sharciga khilaafta lagu qaado xayiraaddo xorriyaddeed ama tallaabooyin oo la ansaxiyey 5 November 2008;
- Soo jeedinta Rec(2006)2 ee Qodobbada Jeelasha Yurub;
- Baaqa Kampala ee Xaaladaha Xabsiga ee Afrika[110] (1996) iyo Qorshaha Waxqabadka (1997);
- Baaqa Kadoma ee Go'aannada Adeegga Bulsho ee Afrika[111] iyo Qorshaha Waxqabadka (1997);
- Baaqa iyo Soo-jeedimooyinka Dakar[112] (1999);

110 Waxaa la ansaxiyey intii u dhaxeysay 19-21 September 1996.

111 Waxaa lagu ansaxiyey Shirkii Caalamiga ahaa ee Go'aannada Adeegga Bulsho ee Afrika oo ka dhacay Kadoma, Zimbabwe, 24-28 November 1997.

112 Wareegtada Xuquuqda Dhageysi Dacwadeed oo Caddaalad ah iyo Gargaarka oo Sharci Afrika oo lagu saxeexay Dakar, Senegal, 9 - 11 September 1999 iyadoo dabadeena ay wareegto ku ansaxiysay Guddida Xuquuqaha Dadka iyo Aadamaha Afrika, fadhigoodii 26[aad] ee caadiga ahaa November 1999.

- Baaqa Ouagadougou ee Socod-siinta Dib-u-habaynta Ciqaabta iyo Xabsiga Afrika iyo Qorshaha Waxqabadka[113] (2002);
- Kordhinta Axdiga Afrika ee Xuquuqaha Dadka iyo Aadamaha ee Xuquuqaha Haweenka Afrika[114] (2003),
- Baaqa Lilongwe iyo Qorshaha Waxqabad[115] (2004);
- Wareegtada Axdiga Afrika ee Xuquuqaha Aasaasiga ah ee Maxaabiista oo lagu ansaxiyey Shir Goboleedkii Afrika ee loogu Diyaar-garoobayey Shirweynahii Kow iyo Tobnaad ee Qaramada Midoobey ee Ka-hortaga Dembiyada iyo Caddaaladda Ciqaabta (Addis Ababa, March 2004), iyo
- Baaqa Abuja ee Waxyaabaha Ciqaabta Xabsiga ah lagu badeli karo[116] (2000).

Sida kor ku xusan, Qareennada iyo caawiyeyaasha sharcigu waxay ka caawin karaan dadka xidhan marxaladda dhageysiga dacwadda kahor inay helaan damaanad ama ciqaab loogu bedalo xadhiga (gaar ahaan carruurta aan loo baahnayn in la xidho sida walaaca hoos ku xusan), ama inay dhaqaajiyaan nidaamka maxkamadda; iyo dadka la xukumay inay helaan fursada ay kaga rafcaan qaadanayaan go'aanka dhageysiga koowaad iyo sidoo kale inay u sameeyaan nooc kasta oo ka cabashada xadgudubka xuquuqaha aadamaha ah wakhtiga xadhigooda ee ay ku sameeyeen saraakiisha ama kuwa la xidhani.

Caawiyeyaashu waxay sidoo kale ku caawin karaan maxaabiista sida kor ku xusan gaar ahaan inay bixiyaan barashada sharciga si ay ugu saamaxaan maxaabiista inay fahmaan sharciga iyo nidaamka oo ay ugu dabaqaan waxa ay baranayaan dacwaddahooga.

Dadka sharcigu ku shaqeeyaa waxay si gaar ah u caawin karaan kooxaha nugul ee la xidhay, gaar ahaan haweenka, haween carruurta wata, dadka dhallinyarrada ah, qaxootiga iyo dadka waddama ajaanibka ah u dhashay, waayeelka, dadka aad u buka iyo dadka maskaxda ka jiran, iwm.

*Doodda - Toddobaad:*

Galaaska waxaa laga codsanayaa inay ka fikiraan oo ay dib iskugu keenaan dhibaatooyinka la xidhiidha marin-u-helidda Kaalmada Sharci ee dhismayaasha xadhiga gudahooga iyo sidoo kale noocyada baahiyaha sharci ee maxaabiista iyo xalalka laga shaqayn karo.

113 Guddida Xuquuqaha Dadka iyo Aadamaha Afrika ayaa Baaqa iyo Wareegtadooda 64 ku ansaxiyey fadhigoodii caadiga ahaa ee 34[aad] oo ka dhacay Banjul, Gambia, 6 - 20 November 2003.

114 Waxaa lagu ansaxiyey fadhigii 2[aad] ee Shirweynaha Midowga Afrika, Maputo, CAB/LEG/66.6 (Sept. 13, 2000).

115 Waxaa lagu ansaxiyey Shirkii Kaalmada Sharci ee Caddaaladda Ciqaabta: Doorka Qareennada, Kuwa aan Qareennada ahayn iyo Hawl-wadeennada kale ee Afrika intii u dhaxaysay 22[kii] ilaa 24[kii] November 2004[ta], Lilongwe Malawi.

116 Baaqii Abuja wuxuu ka dhashay shir qaran oo waxyaabaha lagaga kaaftoomi karo ciqaabta xabsiga ah ku saabsanaa oo ka dhacay Abuja intii u dhaxaysay 8[dii] and 10[kii] February 2000.

# Qaybta III: Habraacyada Tabobarka Qareennada Iyo Hawl-Wadeennada Kaalmada Sharci Si Loo Caawiyo Dhibaneyaasha Iyo Kooxaha Nuqul

III

# Qaybta III: Habraacyada Tabobarka Qareennada Iyo Hawl-Wadeennada Kaalmada Sharci Si Loo Caawiyo Dhibaneyaasha Iyo Kooxaha Nuqul

## Ujeeddooyinka Waxbarasho

Qaybtani oo ka kooban laba Cutub, ka qayb-galayaashu waxay:

- Baran doonaan habraacyada Qareennada iyo hawl-wadeennada Kaalmada Sharci ee caawinta dhibaneyaasha iyo kooxaha nugul sida ku xusan minqiyaasyada caalamiga ah;
- Fahmi doonaan noocyada kala duwan ee hadda jira ee dhibanayaasha iyo ilaa xadka nuglaanshahooga;
- Fahmi doonaan muhiimada magdhowga iyo cawil celinta dhibanaha;
- Fahmi doonaan guud-marka sharci ee caalamiga ah iyo ilaalinta u gaarka ah qaybaha nugul ee kala duwan.

Qaybtani waxay ka kooban tahay habraacyada gaarka ah ee tabobarka iyo Kaalmooyinka Qareennada iyo hawl-wadeennada Kaalmada Sharci ay ku caawinayaan haweenka iyo kooxaha kale ee nugul, sida carruurta, dadka dhalinyarrada ah, waayeelka, dadka naafada ah, dadka la nool HIV/AIDS-ka, dadka maskaxda ka jiran iyo dadka aadka u buka, dadka gudaha ku baro-kacay, dadka ajaanibka ah ee ku lug lahaan kara nidaamka caddaaladeed iyagoo eedaysanayaal, ama dhibanaayaal ah ama maragyo. Haweenku waxay ku jiraan kooxaha kor lagu sheegay gaar ahaan wixii la xidhiidha dembiyada iyaga hoos u dhigaya gaar ahaanna daciifinaya sida tacaddiyada galmada ee jinsiga ku xidhan [oo loo soo gaabiyo] (SGBV)

Sida ku xusan Mabaadi'da Aasaasiga ah ee Qaramada Midoobey ee Doorka Qareennada[117] (Tilmaanta 4): *"Dowladdaha iyo Urrurada mihnadlayaasha Qareennadu waa inay kobciyaan barnaamijyada lagu caawinayo dadka faqiirka ah iyo dadka kale ee liita si ay u awood-siiyaan inay sheegtaan xuquuqahooga oo markii ay lagama-maarmaan tahay u dalbadaan gargaarka Qareennada"*.

Habraacyada iyo Mabaadi'da Qaramada Midoobey ee Marin-u-Helidda Kaalmada Sharci ee Nidaamayada Caddaaladeed ee Ciqaabtu waxay soo jeedinayaan in qorshaynta qaababka Kaalmada Sharci ee qarankooda dhexdiisa, Qaramadu ay ku xisaabtamaan baahiyaha: *"...kooxaha gaarka ah ee ay ku jiraan laakiin aanay ku koobnayn waayeelka, dadka laga tirada badan yahay, dadka naafada ah, dadka maskaxda ka buka, dadka la nool HIV-ga, iyo xanuunada kale ee sida ba'an u faafa, dadka maandooriyaha isticmaala, dadka dhalad ah ee dhulka loogu yimid iyo dadka asalka ah, dadka aan qaranka lahayn, dadka magangeliyo doonka, ajaanibka, qaxootiga, dadka gudaha ku baro-kacaya si waafaqsan habraaca 9 iyo 10."* (Habraaca 11.56).

117 Waxaa lagu ansaxiyey Shirweynahii Siddeedaad ee Qaramada Midoobey ee ka Hortaga Dembiyada iyo la Macaamilka Eedaysaneyaasha. Havana, Cuba, oo la bilaabay August 27 socday ilaa September 7, 1990.

# Cutubka 1: Caawinta Dhibaneyaasha

**Ujeeddooyinka Waxbarasho**

Cutubkani gudihiisa ka qayb-galayaashu waxay:

- Fahmi doonaan noocyada kala duwan ee nuglaanta dhibaneyaasha;
- Baran doonaan noocyada kala duwan ee dhibaneyaasha iyo baahiyaha gaarka ah ee laba qaybood ee dhibaneyaasha nugul (haweenka iyo carruurta), iyo
- Fahmi doonaan muhiimada magdhowga iyo cawil celinta dhibanaha.

Nidaamka caddaaladeed ee ciqaabta ee caddaaladda ah, wax ku oolka ah ee hufani waa nidaamka qadarinaya xuquuqaha aasaasiga ah ee dhibaneyaasha, eedaysanayaasha, iyo dembiileyaasha. Wuxuu awoodda saaraa baahida in laga hortago dhibanenimada, in la ilaasho oo la caawiyo dhibaneyaasha, in loola dhaqmo si naxariis leh iyo in la qadariyo sharaftooda. Dhibaneyaashu waa inay marin u helaan garsoorka iyo qaababka kale, si ay u raadsadaan magdhowga degdegga ah ee khasaaraha soo gaadhay. Waxaa intaa dheer, dhibaneyaashu waa inay marin u helaan gargaarka gaarka ah ee la tacaalaya dhibaatada dareen ahaaneed iyo dhibaatooyinka kale ee ka dhashay natiijada dhibanenimo.

Dembigu wuxuu qataa xaddi weyn oo jidhka, maaliyadda iyo dareenka dhibanaha ah. Haseyeeshee, badanaa nidaamka caddaaladeed ee ciqaabtu wuu ilaawaa dhibaneyaasha dembiga ama wakhtiyada qaar xitaa nidaamka laftiisa ayaa dib u dhibaateeya. Marmar dhif ah ayaa iyaga loo oggolaadaa inay si buuxda uga qayb-qaataan go’aannada iyaga khuseeya badanaana ma helaan gargaarka, taageerada iyo ilaalinta ay u baahan yihiin. Magdhowga dhibaatada ka dhalatay natiijada dhibanenimo badanaa lama helo oo marka la helana, badanaa waa mid aan ku filnayn ama yimaad xilli aad u dambeeya.

Waxaa la soo jeedinayaa in gargaarka dhibaneyaasha dembiga la raaco habraacyada Baaqa Mabaadi’da Aasaasiga ah ee Qaramada Midoobey ee Caddaaladda Dhibaneyaasha Dembiyada iyo Ku Xadgudubka Awoodeed[118] oo ku adkeynaya marin-u-helidda caddaaladda iyo si caddaalad ah ula macaamilka dhibaneyaasha iyo sidoo kale cawil celintooda ama magdhowga.

Sida ku xusan baaqani sare ku xusan:

> *“1. “dhibane” waxaa looga jeedaa dadka si, shakhsi ah ama guud ahaan, ula kulmay dhibaato, ay ku jirto mid jidheed ama dhaawac maskaxeed, dhibaato dhinaca dareenka ah, khasaare dhaqaale ama khasaare balaadhan oo soo gaadhay xuquuqahooga aasaasiga ah, oo ka dhashay fal ama fal gudasho la’aan kuwaasoo xadgudub ku ah xeerarka ciqaabeed ee lagaga dhaqmo Qaramada xubnaha ka ah, oo ay ku jiraan shuruucdaasi mamnuucaysa ku xadgudubka awoodeed.*

118 A/RES/40/34, adopted by the UN General Assembly on 29 November 1985.

*2. Qofka waxaa dhibane loo tixgalin karaa, baaqani gudihiisa, iyadoon loo eegayn in qofkii dhibta u geystay la gartay, la ogaaday, la eedeeyey ama la xukumay iyo iyadoon loo eegayn xidhiidhka qoysnimo ee ka dhaxeeya qofka dhibta geystay iyo dhibanaha. Kelmada "dhibane" waxaa sidoo kale ku jira, markay habboon tahay, qoyska isku sii dhow ama xigtada ay isku xidhan yihiin dhibanaha iyo iyo dadka ay ku dhacday dhibtu iyagoo soo faro-galiyey si ay u caawiyaan dhibanaha mashaqada ku jira ama ay ugu hortagaan dhibanenimada."*

Sida ku xusan Habraacyada iyo Mabaadi'da Qaramada Midoobey ee Marin-u-Helidda Kaalmada Sharci ee Nidaamayada Caddaaladeed ee Ciqaabta, Kaalmada Sharci waa inay og yihiin dhibaneyaasha dembigu (Mabda'a 4.24). Gaar ahaan, Habraaca 7.47 wuxuu soo jeedinayaa in Qaramadu ay qaadaan tallaabooyin ku filan Kaalmada Sharci ee dhibaneyaasha, si ay u xaqiijiyaan in:

*"(a) La siiyey talo, gargaar, daryeel, adeegyo iyo taageero ku habboon dhibaneyaasha dembiga, dhammaan nidaamka caddaaladeed ee ciqaabta gudahiisa, [laguna gaadhsiiyey] qaab ka hortagaya dhibanenimada soo noqnoqota iyo dhibanenimo labaad;*

*(b) Carruurta dhibaneyaasha ahi ay u heleen gargaar sharci sidii loo baahnaa, si waafaqsan Habraaca Arrimaha Caddaaladda ee ku taxaluqa Carruurta Dhibaneyaasha ah iyo Maragyada Dembiga;*

*(c) Dhibaneyaashu ay helaan talo sharci oo khusaysa dhinac kasta oo ku lug lahaanshahooga nidaamka caddaaladeed ee ciqaabta ah, oo ay ku jiraan suurtogalnimada qaadista fulin madani ah ama in la sameeyo dacwadda magdhowga oo dacwad gaar ah, oo sikastaba ula xidhiidha sharci-dejinta maxalliga ah;*

*(d) Dhibaneyaasha ay si degdeg ah u wargeliyaan booliska iyo adeegayaasha kale ee furinta (gaar ahaan, caafimaadka, bulshada iyo daryeel bixiyeyaasha carruurta) xuquuqdooda in la wargeliyo, xaqa ay u leeyihiin Kaalmada Sharci, gaargaar iyo ilaalinta iyo sida marin loogu helayo xuquuqahani;*

*(e) Aragtiyaha iyo walaacyada dhibaneyaasha la soo bandhigay lana tixgaliyey marxaladahii ku habboonaa ee nidaamka caddaaladeed ee ciqaabta haddii danahooga shakhsiyadeed ay saameeyaan ama haddii danaha caddaaladeed uu sidaasi farayo;*

*(f) Hay'adaha iyo urrurada aan dowliga ahayn ee adeegyada dhibanahu waxay siin karaan Kaalmo sharci dhibaneyaasha;*

*(g) Tallaabooyin iyo habraacyo loo sameeyey si loo xaqiijiyo wada shaqaynta isku dhow iyo nidaamyada u gudbinta habboon ee u dhaxeeya hawl-wadeennada Kaalmada Sharci iyo mihnadlayaasha kale (gaar ahaan caafimaadka, bulshada iyo daryeel bixiyeyaasha carruurta) si looga helo faham dhammeystiran dhibanaha, iyo sidoo kale, qiimeynta xaaladahiisa iyo baahiyahiisa sharci, nafsadeed, dareen, jidheed iyo maskaxeed."*

Waxaa intaa dheer, Kaalmada Sharci ee dhibaneyaasha waxaa si cad loogu sheegay qoraallo caalami ah oo gaar ah oo ka hadlay noocyo gaar ah ee dembiyada, gaar ahaan, dhoofin iyo ganacsiga dadka. Sidaas darteed, mabaadi'da iyo habraacyada Xafiiska Guddida Sare ee Xuquuqaha Aadamahu (OHCHR), wuxuu soo jeediyey in *"dhibanayaasha waa in la siiyaa gargaar sharci iyo noocyada kale ee gargaarka xaaladaha dacwad kasta oo ciqaab, madani ama tallaabo kale ah oo lagu haysto kuwa dadka dhoofiya ee ka ganacsada ama dadka ka faa'iiddeysta kuwa kale"* (xeer-tilmaameedka 6, faqradda 5).

Waddamo badan unugyo u gaar ah Kaalmeynta dhibaneyaasha ayaa la sameeyey oo si dhow ula shaqeeya booliska iyo qaybaha kale ee nidaamka caddaaladeed. Tusaale ahaan, Saambiya, bixiyeyaasha adeegga Kaalmada Sharci waxay sheegaan inuu xidhiidh wada shaqayneed oo wanaagsani ka dhaxeeyo saraakiisha booliska ee unugyada Kaalmaynta dhibanaha iyo u adeegayaasha bulshada[119]. Heshiis rasmi ah oo qaabka Qoraalka Is-Afgarashada ah ayey la galeen booliska, markaas ayaa sarkaal boolis oo ka socda unugga Kaalmaynta dhibaneyaasha si joogta loogu qoray xafiisyada Hawl-galka Caalamiga ah ee Caddaaladda iyo Xarunta Qaranka ee Kaalmada Sharci ee Haweenka si looga caawiyo dacwadaha.

## 1.1. Nuglaanshaha Dhibanaha

Qareenku waa inuu ku tabobarnaadaa inuu difaaco dhibaneyaasha nooc kasta oo dembi. Haseyeeshee, dhibaneyaasha qaarkood ayaa ka sii nuglaan kara kuwa kale sababo kala duwan oo ka dhasha:

- Nooca dembiga, tusaale ahaan. Dembiyada galmo, argagaxisada;
- Qaabka uu isticmaalay qofka dhibta geystay, tusaale ahaan. Tacadi/shaqaaqo, jidh-dil
- Arrimo dhismaha nololeed ah (Biological);
  - Da'da (gaar ahaan: carruurta iyo waayeelka)
  - Jinsiga
  - Caafimaadka (jidh ahaaneed ama/iyo maskax ka jirnaan ama wax u dhinnaanta dhibanaha)
- Arrimo nafsaddeed (Psychological) (maskax ahaan aan dhammeystirnayn ama isku dhexdaadsanaanta dhibanaha);
- Meeqaamka bulsho (tusaale, agoon, carmal)
- Meeqaamka sharci (tusaale, qaxoonti, dad bara-kacay, tahriibayaal)

Qaar kamid ah ama qaar badan oo sababaha nuglaanshaha ee kor ku xusan ah waxay u muuqdaan marka laysku celceliyo hal iyo qof keliya.

Waxaa jira arrimo iyagu qof ka dhigaya mid nugul sida da'da iyo hagaagsanaanta jidhka, markaas waxaan mugdi ku jirin in gaar ahaan, ilmaha iyo qofka naafada ahi ay nugul yihiin. Laakiin arrimahaasi nuglaanshaha e ee kor ku xusan qaarkood waa laga gudbi karaa ama xitaa ma muuqdaan, haddii isla qofkaasi uu horumariyey xirfadaha shakhsiyaddeed, mihnaddeed ama bulsho. Tusaale ahaan, haddii qofku u tabobaran yahay inuu waajaho xaalado adag oo ilaa dhib geystayaashu ay ku qasban yihiin shaqadiisa, (gaar ahaan, sida Sarkaal boolis), dembigu ma yeelanayo isla saameyntani oo sidaas darteed qaabka uu isticmaalay dhib geystahu sida tacadigu ma saamayn karo isaga ama kuma keenayo nuglaansho sida qofka kale ee aan sidiisa ugu tabobarnayn arrintani. Taasi macnaheedu waxaa weeye in nuglaanshahu uu yahay xaalad marka horeba jiri karta oo ka dhalata arrimahaasi kor ku xusan, laakiin ay kordhin karaan ama yarayn karaan arrimo kale.

119 eeg, UNODC (2011), Buugga Kaalmada Sharci ee Afrika, Taxanaha Buugga Nidaamka Caddaaladeed ee Ciqaabta.

Saameynta dembiga ku dhacay hal qof wuxuu u saameyn karaa hal ama in ka badan oo meelaha hoos lagu sheegay ah, laakiin saameyntani waxay qofka kaga sii khatar badnaan ama yaraan karaan haddii ay ka muuqdaan iskujirka arrimaha kor ku xusan midkood ama ka badan.

Dembigu wuxuu saameyn ku yeelan karaa meelaha soo socda:

- Jidh ahaan
- Maskax ahaan
- Dhaqaale ahaan (gaar ahaan dembiyada lidka ku ah hantida, laakiin sidoo kale waa saameynta dadban ee dembiga haddaanu dhibanahu sii shaqayn karin)
- Bulsho ahaan (gaar ahaan rabshada xasiloonida qoyska iyo ka dhex bixida bulshada deegaanka)
- Shaqo (gaar ahaan waayidda shaqada ee ka dhalatay saameynta jidheed or dhibaatada maskaxeed) and
- Meeqaamka qofka ee bulshada (gaar ahaan. Haddii dembiga uu galay qof qaxooti ah, iyadoo dembiga ku xidhan, tani waxay sababi kartaa inuu waayo meeqaamkiisa).

Waa in la ogaado in heerarka dhibaatada maskaxeed ee ay la kulmaan dhibaneyaasha qaarkood (kahor iyo wakhtiga dembi qaadista) ay u sarreyn karaan ilaa in dhibanahu[120] aanu weligii awoodi karin inuu Maxkamadda horteeda ka noqdo marag ama ka bixiyo marag-fur oo loo isticmaali karo aasaaska baadhista.

Marka tacadiga jidhka iyo galmada iyo ku xadgudubka joogtada ah ee aadka u ba'ani ay dhacaan, waxay u badan tahay inay dhibaneyaasha ku keenaan dhibaatooyin caafimaad oo is biirsada, saameyn in badan jirtana ay ku yeeshaan caafimaadkooda jidheed iyo maskaxeed ba, muddo dheer ayaanay saameyn ku yeelan karaan noloshooda.

Fal-celimaha maskaxeed ee dhibaneyaashu way faro-badan yihiin waanay xun yihiin waxaana la barbar dhigi karaa, ama ay dhaafayaan ba calaamadaha lagu yaqaan dhibaneyaasha la jidh-dilay.

Mararka qaarkood, cadhada dhibaneyaashu waxay ula muuqan kartaa la yaab baadheyaasha qaarkood, kuwaasoo filanayey dhibaneyaal qalbi jabsan, murugaysan ama cabsanaya. Haseyeeshee, cadhada dhibaneyaashu waa ka fal-celinta dhibaatada oo macquul ah. Ma aha wax aan caadi ahayn in dhibanahu uu *"murugaysnaado"* ama uu si fudud wax kasta uga cadhoodo oo inuu *"qarxaa"* ay dabeecaddiisa noqoto. Haddana, inkastoo dareennadaasi ay hoos u dhigi karaan, waxay u badan tahay inay dib uga soo baxaan iyagoo ku dhex jira caqabadaha soo wajaha dhibanaha.

## Xanuunka Walaaca Dhibaatada dabadeed (oo afka qalaad loo soo gaabsado PTSD):

PTSD waa kelmad qeexaysa xanuunka caafimaad ee maskaxda, oo qayb ahaan, ay sababaan hal ama ka badan dhacdooyin lagu dhibtooday oo qofka soo maray. Xanuunkani ayaa isku muujiya dhawr calaamado

120 Jo-Anne Wemmers, Katie Cyr, *Victims' needs within the context of the criminal justice system*, International Centre for Comparative Criminology, University of Montreal, Sept.2006.

maskaxeed oo khatar ah oo ay qabaan kuwa ay soo marto dhibaatooyin badan oo naxdin leh ama halis ah oo ay ka dhalatey ama loogu talogaley in ay dhibaato jireed oo ba'an lagu gaarsiiyo dhibbanaha[121].

Xanuunkani waxaa dhib ahaan keeney waa falcelinta xusuusta dhibbanuhu ku xusuusanayo dhibaatadaii soo martey. Tusaale ahaan, dhibbanayaasha loo geystey Rabshadda Jinsiga iyo Dheddig iyo Labka Ku fadhida (SGBV) ama shakhsiyaadka la tahriibiyey, dhibaatooyinka soo mara waa kuwo marar badan ku dhaca oo dabadheer – kuwaas oo ah kuwo mararka qaar ka beddelan hal dhibaato ooculus. Mararka qaar dhibaatooyinka waxaa ay dhibbanayaasha ku reebi karaan cawaaqib aan laga soo waaqsan karin. Dad badan oo ay ku dhacdey dhibaato, ayaa xanuunka kaga caafimaado muddo, laakiin qaar kale waxaa uu hayn karaa inta ay nool yihiin[122].

Sidaa daraaddeed, waxaa dhacda in dhibbanayaashu ay diidaan in loo aqoonsado dhibbanayaal ama in ay la shaqeeyaan maamullada.

Runtu waxay tahay in aynaan si dhib ah u fahmi karayn dabeecadaha dhibaneyaasha haddaynaan fahmin wixii soo maray qofka caadiga ah ama xaaladda ay dabeecaddu dhacdo.

## 1.2. Xaqa Magdhowga iyo Cawal-celinta ee Dhibanaha

### 1.2.1. Xaqa Magdhowga

Dhibaneyaashu waxay xaq u leeyihiin magdhowga dhibta ama/iyo ka faa'iiddeysiga ka soo gaadhay dembiga. Sida kor lagu sheegay, sida ku xusan Habraacyada iyo Mabaadi'da Qaramada Midoobey Dhibaneyaashu waa inay helaan talo sharci oo khusaysa dhinac kasta oo ku lug lahaanshahooga nidaamka caddaaladeed ee ciqaabta ah, oo ay ku jiraan suurtogalnimada qaadista fulin madani ah ama in la sameeyo dacwadda magdhowga oo dacwad gaar ah, oo si kastaba ula xidhiidha sharci-dejinta maxalliga ah (Habraaca 7.47.c).

Waxaa intaa dheer, Qaramadu waxay u isticmaali karaan maaliyadda lagu helay tallaabooyinka ciqaabeed ee qabashada ama ganaaxyada inay ku daboolaan Kaalmada Sharci ee dhibaneyaasha (Habraaca 12.60.b.ii).

Dembiyo gaar ah, sida ka ganacsiga dadka, OHCHR habraacyadeeda iyo mabaadi'deeda xuquuqaha aadamaha iyo ka ganacsiga dadka (Xeer-tilmaameedka 9) waxay ku sheegtay sidani soo socota:

121 See, Diagnostic and statistical manual of mental disorders, DSM-IV. Washington, DC: American Psychiatric Association, 1994.

122 Brown, Scheflin, Hammond (1998), *Memory, Trauma Treatment and the Law*, New York, NY: W. W. Norton; Cahill S.P., Foa E.B. (2004), "A glass half empty or half full? Where we are and directions for future research in the treatment of PTSD", in: Taylor S. (Ed.), Advances in the Treatment of Posttraumatic Stress Disorder: Cognitive-behavioral perspectives, New York: Springer, p. 267-313.

*"Sharciga caalamiga ahi wuxuu dhibanayaasha laga ganacsaday u aqoonsan yahay inay dad xuquuqahoogii aadamaha lagu xadgudbay, xuquuqda cawil celinta ku habboon kuna filan. Sida dhacda, dadkani badanaa ma awoodaan inay sheegtaan xuquuqdani sababtoo ah laguma wargelin suurtogalnimada iyo habraacyada cawil-celineed ee la soo bandhigay si loo helo magdhow, gaar ahaan qaabka khasaaraha ka dhashay dembiga ay dhibaneyaasha ka yihiin. Si looga cawil-celiyo dhibaatadani, waa inaynu la nimaadnaa gargaarkooda gaar ahaan Kaalmada Sharci, si iyaga loo siiyo fursad ay ku ogaadaan xuquuqahooga cawil-celinta wax ku oolka ah".*

Guud ahaan, waxaa jira laba hab oo loo codsan karo magdhowga dhibanaha:

- In laga bixiyo hantida qofka fal-dembiyeedka geystay ama
- Qaabka magdhowga uu Qaranku bixiyo (haddii uu mid jiro).

Maarenta magdhowga dhibanahu waxay noqon kartaa (sida ay dhigayaan shuruucda qaranka u dejisani) nidaamka garsoorka ama tallaabo maamul. Sheegashada magdhowgu waxay sida macquulka ah ka koobnaan kartaa dhawr qaybood, oo ay ku jiraan, laakiin aan ku koobnayn:

- Mushaharaadka aan la bixinin ama la dhimay;
- Ajuurada Maxkamadda iyo adeegyada sharci (haddii aanay jirin Kaalmo sharci);
- Kharashka caafimaadka;
- Waayidda fursadaha muddadii dhibanenimada;
- Xanuunka iyo dhibta ka dhalatay tacadiga jidheed ama maskaxeed;
- Magdhowga bahdilaada iyo macaamilka bini-aadam-darro ee soo raaca;
- Dhaawaca jidhka ee culus ama kala dhantaalmista caafimaadka jidhka ama maskaxda ee ka dhalatay dembiga.

Magdhowga waa inay ku jiraan kharashka dib ugu soo noqoshada bulshada iyo waxbarashada. Waxaa u baahan in hoosta laga xariiqo in xuquuqda magdhowga aan la siinayn oo qudha dhibanaha tooska ah ee dembiga. Qoyska, gaar ahaan dadka ay noloshoodu dhibanaha ku xidhnayd ee ku dhintay ama jidh ahaan iyo maskax ahaanba ku curyaamay natiijada ka dhalatay dhibanenimadani waxaa sidoo kale xaq loo siiyey magdhowgani.

Sida kor lagu xusay, sida ku xusan Qodobka A.2 ee Baaqa Qaramada Midoobey ee Mabaadi'ida Aasaasiga ah ee Caddaaladda Dhibaneyaasha Dembiga iyo ku Xadgudubka Awoodeed kelmada 'Dhibane' waxaa sidoo kale ku jira *"xigtada qoyska ee dhow ama dadka noloshoodu ku xidhan tahay dhibanaha toos ah iyo dadka ay dhibtu ka soo gaadhay soo faro-galinta ay ku caawinayeen dhibanaha dhibtu haysato ama uga hortagaan dhibanenimada"*. Tani macnaheedu waa in dadkani ay sidoo kale xaq u leeyihiin inay ka taxadaraan khasaaraha sida madax-bannaan uu iyaga ugu keenayo dhibanaha laftiisu.

### 1.2.2. Xaqa Cawil-celinta

Waxaa aad u muhiim ah in dhibanahu uu cambaareeyo dembiga oo uu waajaho dacwad kasta oo ciqaabeed si loogu xukumo dadka ku kacay fal-dembiyeedyadaasi, oo isagana laga caawiyo inuu dib u helo noloshiisii bulsho. Gargaaristiisa waa in lagu siiyaa waxyaabaha lagama-maarmaanka u ah cawil celintiisa iyo ku soo noqoshadiisa bulshada. Ku soo noqoshada dhibanaha ee nolosha bulshada waa inay aanay ku jirin oo qudha ku soo noqoshadiisa *"jidhka iyo maskaxda"* oo ka kooban daaweyn iyo ka gargaarista maskaxeed si looga saaro dhibanenimada loogana feejignaado dhibanenimada labaad ee mustaqbalka (oo uu sababi karo habraaca [dacwadda] ciqaabtu), laakiin waxay sidoo kale gaadhsiisan tahay ilaa *"ku soo noqoshada dhaqaale"* ee dhibanaha, oo looga jeedo magdhowga dhaqaale ee khasaaraha uu dembigu sababay.

Cawil celinta waxaa badanaa laysku khaldaa magdhowga dhaqaale ee khasaaraha labadoodana mararka qaarkood kolba midkood ayaa la isticmaalaa (waa laysku badelaa). Haseyeeshee, inkastoo magdhowyada badanaa loo yaqaano qaabka magdhowga laga bixiyo khasaaraha iyo dhaawaca (qaab wax lagu siinayo, inta badan lacag ah, qofkii uu ku dhacay dhaawacu), cawil celintu waa aragti ka balaadhan, oo ka kooban tallaabooyin la qaadayo si dhibanaha loogu soo celiyo meeshii u taagnaan lahaa haddii dhibanenimadu aanay dhici lahayn.

Sida iska cad su'aasha soo baxaysaa waa *"sidee baynu cawil celin uga hadli karnaa dacwadaha dhibanahu aanu lahayn meeqaam dhaqaale, bulsho ama shaqo dembiga hortii gaar ahaan qofka derbi jiifka ah?"* xaaladdani, cawil celinta waa in loo fahmaa inay tahay xaaladaha dhibanaha noloshiisa oo sharaf loo yeelayo.

Tani waa marxaladda ugu adag, sababtoo ah Qaramada badankoogu malaha imkaaniyaadkii looga baahnaa dib u soo celinta iyo cawil celinta buuxda ee dhibaneyaasha (sida xaaladdani Somaliland).

## 1.3. Noocyada gaarka ah ee dhibaneyaasha nugul

### 1.3.1. Dhibaneyaasha haweenka ah

Tacadiga lidka ku ah haweenku waxay u taagan yihiin ku xadgudub sharafeed, amni iyo xuquuqaha aadamaha. Arrinta tacadiga lidka ku ah haweenku way balaadhan tahay. Haddana, waxaa badanaa loo arkaa arrin gaar ah. Haddana, waa dembi, ay Qaranka masuuliyaddiisa tahay inuu ilaasho haweenka ah dhibaneyaasha nooc kasta oo tacadi ah.

Tacadiga jinsiga ka dhasha waxaa loo geystaa dhibaneyaasha jinsigooda dartii, waxaana loogu geysan karaa qoyska dhexdiisa, ama kooxda bulsheed, iyadoo aanay dhacayn tallaabooyin muuqda ama cad. Waxaana looga hadli karaa jidh ahaan, maskax ahaan, galmo ahaan iyo dhaqaale ahaan, waxaana ku jira meelahani tusaale ahaan tacadiga guriga, oo gaar ahaan haweenka ay ku dhibaateyn karaan xubnaha ragga dhibta badan ah ee qoysku, tusaale ahaan.

Adduunkoo dhan, ugu yaraan mid kamid ah saddexdii dumar ah ayaa la garaacay, lagu qasbay galmo ama haddii kale si xun loola dhaqmay wakhtigii ay noolayd[123]. Dumarku waxay ugu khatar badan yihiin guriga dhexdiisa tasoo kaga timaad ragga ay garanayaan oo badanaa xubin qoyska ka tirsan ama lamaane ah.

Sanadkii 1993, Qaramada Midoobey waxay ku qeexday tacadiga jinsiga ka dhasha inuu yahay: *"falkasta oo tacadiga jinsiga ka dhasha ah oo natiijadiisu ay tahay, ama ay u badan tahay inay natiijadiisu noqoto waxyeelo ama dhibaato jidheed, galmo, ama maskaxeed oo haweenka ka soo gaadha, oo ay ku jiraan ku hanjabaada falalkani, qasbida, ama xoriryad ka qaadista bilaa ujeeddada ah, haddii ay ka dhacaan nolosha guud ama gaar ahaaneedba."* Inay xusayso tacadi ah *"jinsi-ka dhalad"*, qeexida Qaramada midoobey waxay iftiiminaysaa baahida in la fahmo tacadiga gudaha xaaladda meeqaamka liita ee haweenka iyo hablaha bulshada dhexdeeda. Tacadigani lama fahmi karo haddii gaar looga saaro caadooyinka iyo qaab-dhismeedka bulshada iyo doorarka jinsiga ee bulshada dhexdeeda oo si weyn u saameysa u nuglaanshaha tacadiga ee dumarka.

Tacadiga jinsiga ka dhashaa ma aha muqaalka sinaansho la'aanta ee jinsiga oo qudha, laakiin wuxuu sidoo kale u adeegayaa inuu ilaasho sinaansho la'aantani awoodeed[124]. Sida lagu sheegay Daraasadda Ururka Caafimaadka Adduunka ee Caafimaadka Haweenka iyo Tacadiga Guriga ee Lidka ku ah Dumarka oo Waddamo Badan lagu sameeyey[125], inta u dhaxaysa 15 iyo 70% haweenka degaanno kala duwan oo adduunka oo dhan ah ayaa la kulmay nooc tacadi jidheed iyo/ama galmo ah wakhtigii ay noolaayeen.

Tacadiga lidka ku ah haweenku wuxuu noqon karaa dembi, sida:

- Dilka Hablaha
- dayacaada, nafaqo-xumada hablaha
- ku xadgudubka galmo ee carruurta
- kufsiga
- weerarka
- Dilka
- dhaawaca/qoonta
- ka ganacsiga jidhka ee la isku qasbo & ka ganacsiga dadka
- gudniinka hablaha

123 Ellsberg, M. and Heise L. (2005), *Researching violence against women: A practical guide for researchers and activists*, Geneva, Switzerland, Program for Appropriate Technology in Health, World Health Organization; Morrison, A., M. Ellsberg, et al. (2007). "Addressing Gender-Based Violence: A Critical Review of Interventions", The World Bank Research Observer 22(1): 25-51.

124 See, the UN Secretary General's in-depth Study on Violence against Women (2006): http://www.un.org/womenwatch/daw/vaw/v-sg-study.htm

125 Daraasadda Ururka Caafimaadka Aduunka waxaa la bilaabay sanadkii 1997 ujeeddadeenu waxay ahayd in la helo xogta la heli karo oo lays barbardhigi karo ee noocyada tacadiga kala duwan ee lidka ku ah haweenka ee waddamo dhaqan ahaan kala duwan. Waxaa la ururiyey macluumaad laga helay in ka badan 24,000 haween ah oo 10 dal oo kala duwan ah, waxaanay bixinaysaa macluumaad muhiim ah oo ku saabsan sida ay dumarku ugu dhaco tacadigu degaanada kala duwan: http://www.who.int/gender/violence/who_multicountry_study/en/

- xodxodasho goob shaqo ama goob dugsi
- guurka laysku qasbo

Istaraatijiyaddaha wacan iyo Tallaabooyinka lagu Shaqaynayo ee Tirtirista Tacadiga Lidka ku ah Haweenka ee Qaybaha Ka Hortagista Dembiyadda iyo Caddaaladda Ciqaabtu waa mid kamid ah Habraacyada ugu muhuumsan ee Qaramada Midoobey ee ka hadla baahiyaha dhibaneyaasha haweenka ah ee dembiyada tacadiga ah[126] nidaamka caddaaladeed ee ciqaabta dhexdiisa.

Wakhtigani Xeerka Ciqaabtu wuxuu ciqaabayaa oo keliya qaar kamid ah dembiyada kor ku xusan ee lidka ku ah haweenka:

- Art.398-400 (kufsiga iyo dembiyada la midka ah)
- Art.401 (*“afduubasho ujeeddadiisu tahay khaniisnimo ama guur”*)
- Art.408 (*“ku khasbida jidhka ka ganacsiga ama dhilaysiga”*)
- Art.431 (*“ku xadgudubka tallaabooyinka saxitaanka iyo anshaxa”*)
- Art.432 (Si xun ula macaamilka carruurta iyo xubnaha kale ee qoyska”)
- Art.434 (*“dilka”*)
- Art.435 (*“dilista ubadka”*)
- Art.439, 440 (*“weerarka”*, *“dhaawac”*)
- Art.442, 443 (*“dhimashada ama dhaawaca uu waalid geysto,”*)
- Art. 445 (*“dilka aan ula kaca ahayn”*)
- Art.449 (*“tuurista ilmaha ama imika dhashay sababo sharafeed awgeed”*)
- Art.455-458 (*“adoonsiga”* iyo dembiyada la midka ah)

Sida ku xusan Habraaca 9.51 ee Habraacyada iyo Mabaadi’da Qaramada Midoobey ee Marin-u-Helidda Kaalmada Sharci ee Nidaamka Caddaaladeed ee Ciqaabta:

> *“Qaramadu waa inay qaadaan tallaabooyinka mudan ee ku habboon so loo xaqiijiyo xuquuqda haweenka ee marin-u-helidda Kaalmada Sharci, oo ay ku jiraan:*
>
> *(a) Keenista siyaasad firfircoon oo aragtida jinsiga loogu darayo dhammaan siyaasadaha, shuruucda, habraacyada, barnaamijyada iyo dhaqannada la xidhiidha Kaalmada Sharci si loo xaqiijiyo sinaanshaha jinsiga iyo u sinaanshaha iyo caddaaladda marin-u-helidda caddaaladda;*
>
> *(b) Qaadista tallaabooyin firfircoon oo lagu xaqiijiyo in, haddii ay macquul tahay, la heli karo dumar Qareennada ah oo metela dumarka dembiga loo haysto, eedaysan ama dhibaneyaasha ah;*

126 UN General Assembly Resolution 65/228, *Strengthening crime prevention and criminal justice responses to violence against women*, 21 December 2010.

*(c) Siinta dhibaneyaasha dumarka ah Kaalmada Sharci, talada iyo adeegyada taageerada maxkamadda dhammaan dacwadaha sharci si loo xaqiijiyo marin-u-helidda Kaalmada Sharci loogana feejignaado dhibanenimada labaad iyo adeegyada kale ee ay ku jiri karaan turjumaada qoraallada sharci markii la codsado ama loo baahdo."*

Guud-marka shuruucda caalamiga ah ee sida gaarka ah u ilaalinaysa haweenka:

- Heshiiska Tirtirida Dhammaan Noocyada Takoorka Haweenka loo Geysto (Golaha Guud ee Qaramada Midoobey wuxuu ansaxiyey 1979);
- Xeer-Hosaadka Ikhtiyaarka ah ee Heshiiskaasi kor ku xusan (1999);
- Qodobbada Qaramada Midoobey ee la Macaamilka Haweenka Maxaabiista ah iyo Tallaabooyinka aan xadhiga asluub celinta ahayn ee lagu qaado haweenka maxaabiista ah (the Bangkok Rules);
- Baaqa Qaramada Midoobey ee Tirtirida Tacadiga lidka ku ah Haweenka (Res.1993);
- Xeerka loogu Dhaqmayo Xuquuqaha Haweenka Afrika (Xeer-hoosaad lagu Biirshay Axdiga Afrika ee Xuquuqaha Dadka iyo Aadamaha[127]), iyo
- Wareegtada Shirweynaha Caafimaadka Adduunku ka soo Saaray Tacadiga ee ahayd mudnaanta caafimaadka dadweynaha (1996).

Waxaa jira dhibaatooyin dhawr ah oo lagala kulmo wax ka qabashada dacwadaha dembiyada noocan ah. Dhibaneyaasha badanaa way ku adag tahay inay ka sameeyaan cabasho ama warbixin dembiyada noocan ah iyo ku xadgudubka. Waxay noqon kartaa wax qarsoon oo qofka ku kooban, ka warbixinta gaar ahaan kufsigu waxay dhibanaha saari kartaa ceeb ama xitaa waxay ku keeni kartaa dil sharafeed, maadaama badanaa ay adag tahay in la xaqiijiyo in dhibanaha loo arko inuu yahay dhibanaha dembilaawaha ah ee dembiga. Baqdintaasi darteed ayey haween tiro yari uga waramaan dembiyada galmada Somaliland gudaheeda sababtoo ah way baqanayaan.

Somaliland gudaheeda, waxaa laga soo waramayaa in ay ka jiraan kufsiyo kooxeed, fursadeed, ama aargudasho tacadi qabiil ka dhashay ah oo heerarkoodu sareeyaan. Dembiyada noocan ah badankooga ka wada hadla odayaasha bulshada (taasoo khilaafsan Baaqii Odayaashu ay ku goosteen inay dacwadaha noocan ah u gudbiyaan nidaamka caddaaladeed ee rasmiga ah). Haweenku waxay cadho ka muujiyeen heerka sii deynta dadka geystay fal-fembiyeedyada tacadiga galmo ee ka hawl-galaan oday dhaqameedku. Dhammaan deegaannadu waxay ka warameen dhaqanka guurka lagu khasbayo dhibaneyaasha kufsigu ku dhacaa inay dhaqan caam ah, oo ay ujeeddadiisu tahay si loo dejiyo qabiilooyinka. Ku dhaqanka shuruucda ee daciif ah iyo sidoo kale marinka kooban ee ay haweenku u helaan xafiisyada garsoorka (gaar ahaan kuwa aan iska bixin karin Qareenka) oo ah caqabada ugu weyn ee haweenka Somaliland. Nidaamka sharci ee Shareecadu wuxuu siinayaa ciqaab culus oo adag kuwa geysta tacadiga jinsiga ka dhasha (GBV). Shuruucdani way ka adag yihiin nidaamka shuruucda baarlamanka. Waxa ka duwan, xeer dhaqameed oo siinaya ciqaab ka

127 Xeer-hoosaad Xuquuqaha Haweenka waxaa ansaxiyey Midowga Afrika July 2003, wuxuu dhaqan-galay 2005.

fudud una debecsan dadka fal-dembiyeedka ku kaca. Iyadoo ay jirto in sharciga Shareecadu uu dembiyada galmada ka dhigay ciqaab culus, heerarka tacadiga galmo aad bay weli u sareeyaan dalka oo dhan.

Waxaa jirta taageero aad u yar oo la siiyo dhibaneyaasha dembiyadani[128] gaar ahaan meelaha baadiyaha ah waxaanay haweenku sheegaan inay ka baqaan inay u tagaan booliska.

Guud ahaan, waxaa jirtaa daneyn la'aan jinsiyeed oo balaadhan hay'adaha qaybta caddaaladda rasmiga ah dhexdooda. Inkastoo ay xaqiiqadu tahay inuu jiro Unugga Galmada iyo Tacadiga Jinsiga ka Dhasha oo ku yaal Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud ee Hargeysa si uu kormeero dacwadahani, una hayo xogta horumarka maamulka dacwadda ee qaybtani shaqo ee aadka u xasaasiga ah, waxaana u baahan in la ogaado in aanay jirin haween Qareenno ah oo ku filan. Inkastoo ay waxoogaa haween Qareenno iyo caawiyeyaal sharci ahi ay joogaan Hargeysa, Gabiley iyo Burco, meelaha kale ee Somaliland waxba ma joogaan taasoo qabyo weyn ku bannaynaysa heerka gargaarka loo heli karo haweenka ay soo wajahaan arrimo la xidhiidha tacadiga jinsiga ka dhasha.

Dhibaatooyinka haweenka ka soo wajaha nidaamka caddaaladeed ee Somaliland way badan yihiin. Haseyeeshee kuwa ugu waa weyn waxaa ku jira:

1. Xeer dhaqameedka oo meesha ka saaraya dhammaan xuquuqihii haweenka (baaqii odayaasha lama dabaqayo), gaar ahaan dacwadaha kufsiga oday dhaqameedku waxay imanayaan maxkamadda gobolka waxaanay dacwadda ku dhamaynayeen nidaamka caddaaladeed dibeddiisa iyagoo ku khasbaya dhibanta inuu guursado qofkii dembiga galay. Xeer-ilaaliyaha Guud ma soo faro-geliyo kamana cawdo xaqiiqada ah in dad dibeda ka ahi ay soo faro-geliyeen nidaamkii caddaaladeed. Haddii dhibantu ay lacag haysato oo nafteeda taageeri karayso waxay sii wadan kartaa nidaamka caddaaladeed. Laakiin caqabada ugu weyni waa in haweenku aanay dhaqaale ahaan u madax-bannaanayn inay isticmaalaan xuquuqahooga. Haddii ninku uu maxkamadda yimaado oo uu isagoo dhaarsan furo marag-furkiisu wuxuu ka xoog badan yahay laba dumar ah kooga.
2. Dhibaneyaasha haweenka ah wuxuu cadaadis badan kaga yimaadaa bulshada.
3. Waxaa intaa dheer, dacwadaha kufsiga waxaa aad u adag in la caddeeyo sababtoo ah Garsooreyaashu waxay badanaa u baahan yihiin caddeyn muuqata (astaamo/tixraacyo), oo ay dacwado badan adag tahay in la helaa.

### 1.3.2. Dhibaneyaasha carruurta ah

Carruurtu ma laha baahiyo iyo awoodo lamid ah dadka waa weyn, waxaana laga yaabaa in aanay awoodin inay sameeyaan go'aanno bisil. Waa in hoosta laga xariiqaa in carruurtu ay leeyihiin xuquuq gaar ah sida ku xusan Heshiiska Qaramada Midoobey ee Xuquuqaha Carruurta 1989 oo ay tahay in sidoo kale la tixgaliyo marka loogu yeedho in ay marag furan dacwadaha ciqaabta ah ee ay dhibaneyaasha ka yihiin.

128 Sida uu sheegay XAQSOOR, dedaaladii laga sameeyey in odayaasha lagu qanciyo in aanay dacwadaha ku dhammeyn nidaam caddaaladeed ee rasmiga ah dibeddiisa waxay dhaafi waayeen xaqiiqada ah in aanay maxkamaddo ku filani ka jirin Hargeysa wixii ka baxsan. *Ilaa maxkamaddo laga abuuro dhammaan deegaanka Somaliland, waxaa sii socon doonta in dembiyada lagu dhammeeyo nidaamka caddaaladeed ee rasmiga ah dibeddiisa.*

Carruurta gaar ahaan way nugul yihiin[129] waxaanay u baahan yihiin tallaabooyin ilaalineed oo dhaafsiisan kuwa ay tahay in laga qaado dadka waa weyn ee u marag furaya dhibaneyaal ahaan dacwadahani oo kale gaar ahaan dembiyada galmada.

Sida ku xusan Habraaca Qaramada Midoobey ee Caddaaladda ee arrimaha khuseeya dhibenayaasha iyo maragyada carruurta ah ee dembiga[130] dhibaneyaasha iyo maragyada carruurta ahi waa inay lahaadaan xuquuqaha soo socda:

1. Xuquuqda in loola macaamilo si sharaf iyo daneyn ah. Tani macnaheedu waa:

- Qof kasta oo nidaamka caddaaladda ahi waa inuu tixgalin tusaa wakhti kasta.
- Carruurta dhibaneyaasha iyo maragyada ah waa in loola dhaqmo qaab naxariis iyo xasaasiyad ah nidaamka caddaaladeed oo dhan.
- Ilmo kasta waa in loola dhaqmaa sida qof shakhsi ah oo leh baahiyahiisa, rajadiisa iyo dareenkiisa [u gaarka ah].
- Dadka baadhaya dacwaddu waa inay la qaataan ilmaha keliya wakhtiga ay lagama-maarmaanka tahay in lagu waxa dhacay oo qudha.
- Dadka wareysanaya dhibaneyaasha ama maragyada carruurta ah waa in si gaar ah loo tabobaray, si ay qaab habboon ugu weydiiyaan su'aalo habboon. Waa inay ka fikiraan wax uu ilmahu u baahan yahay, oo ay ula macaamilaan si caddaalad iyo tixgalin leh.
- Dhammaan dadka la xidhiidhaya ilmaha dhibanaha ama maraga ahi waa inay tixgaliyaan baahiyaha ilmaha, afkaartiisa iyo dareenkiisa. Waa inay ilmaha kula hadlaan meel uu ilmaha dareemayo degenaan iyo amni iyo luuqad uu ilmahu isticmaalo oo uu fahmayo.

2. Xuquuqda in laga ilaasho takoorka. Tani macnaheedu waa:

- Dhibaneyaasha carruurta ah iyo maragyada waa in loola dhaqmaa si dhexdhexaad ah iyo si siman iyadoon loo eegayn kuwa ay yihiin, halka ay ku nool yihiin, waxa ay waalidkoogu qabtaan, waxa ay tahay luuqada ay ku hadlaan, waxa ay tahay diintoodu, waxa ay ku fikirayaan ama ay odhanayaan, qani ama faqiir, waxaa tani ku jira haajirayaasha iyo qaxootiga iyo carruurta xanuunsanaysa, aan wax maqal ama hadal, ama isticmaala gaadhi curyaan ama biraha naafada.
- Carruurta qaarkood, sababtoo ah habka loo waxyeeleeyey, waxay u baahan yihiin gargaar iyo ilaalin gaar ah. Tani waxay noqon kartaa xaaladda carruurta galmo ahaan la weeraray. Sidoo kale, waa in la ogaadaa in gabdhaha iyo wiilashu ay lahaan karaan baahiyo kala duwan. Ilaalinta la siinayo waa in lagu dabaqaa baahiyahooga gaarka ah.
- Carruurtu da' kasta oo ay tahay waxay xaq u leeyihiin inay si buuxda uga qayb-qaataan nidaamka caddaaladeed, haddaanay ahayn dantooda ugu wacan. Markuu ilmahu yahay marag, marag-furka ilmaha waa in loo tixgaliyaa inuu yahay run haddii si kale la caddeeyo mooyaane iyo ilaa iyo inta uu ilmahu

129 eeg, Warbixinta Xoghayaha Guud ee Hirgalinta Habraacyada Caddaaladda ee Arrimaha khuseeya Dhibaneyaasha iyo Maragyada Carruurta ah ee Dembiga (E/CN.15/2008/11).

130 Economic and Social Council Resolution 2005/20 of 22 July 2005.

fahmayo su'aalaha ee uu ka jawaabay iyadoon la gargaarin. Ka qayb-qaadashada nidaamkani ilmaha waa in aanay dhibaato kaga iman ama aanu khatar gelin.

3. Xuquuqda wargelinta. Tani macnaheedu waa:

- Waxay leeyihiin xuquuqda in loo sheego waxa dhaci doona dhammaan marxaladaha nidaamka caddaaladeed. Carruurta waa in loo sheegaa waxa iyaga laga filayo markay marag-furayaan, sababta marag-furkoodu uu muhiim u yahay, goorta uu dhici doono, iyo sida. Waa in loo sheegaa siduu u caawinayo in la abuuro runta. Waa in sidoo kale loo sheegaa hababka kala duwan ee loo su'aali karo xilliga baadhista iyo dhageysiga dacwadda.
- Waxay leeyihiin xuquuqda in loo sheego xilliga iyo meesha dhageysiga iyo dhacdooyinka kale ee muhiimka ahi ay ka dhici doonaan.
- Waxay leeyihiin xuquuqda in loo sheego xuquuqaha dhibaneyaasha iyo maragyada carruurta ahi ay leeyihiin sida ku xusan Heshiiska Xuquuqda Carruurta iyo Baaqa Mabaadi'da Aasaasiga ah ee Caddaaladda ee Dhibaneyaasha Dembiyadda iyo ku Xadgudubka Awoodda, iyo sida xuquuqahani loo ilaalin doono.
- Waxay leeyihiin xuquuqda in loo sheego waxa ku dhacaya eedeysanaha. Tani oo ay ku jiraan in loo sheego in eedeysanaha la qabtay ama la xidhay, meesha eedaysanahaeedeysanaha lagu hayo iyo ilaa intee [goorma], iyo waxa ku dhici doona eedeysanaha dhageysiga dacwadda kadib.
- Waxay leeyihiin xuquuqda in loo sheego in ay macquul tahay inay ka helayaan magdhow ka caawiya inay kasoo kabtaan waxyeelada ku dhacday qofka fal-dembiyeedka geystay ama dowladda, iyo marka ay tani macquulka tahay sida lagu helayo.

4. Xuquuqda gargaarka wax ku oolka ah. Tani macnaheedu waa:

- Mihnadlayaashu waa inay dedaal kasta ka sameeyaan inay si wadajir ah ula shaqeeyaan markay caawinayaan dhibaneyaasha carruurta iyo maragyada ah si aanay carruurtu ugu qaadan nidaamka caddaaladda wakhti ka badan intii lagama-maarmaanka ahaa.
- Mihnadlayaashu waa inay horumariyaan hababka looga caawinayo carruurtu inay marag furto ama u bixiyaan caddeyn si aad u fudud. Tani waxaa ku jiri kara waxyaabo kale:
  - Xaqiijinta in khabiiro ama xubnaha qoyska dhow ay ilmaha la joogaan xilliga marag-furka markii loo baahdo, ilaa iyo inta ay ku jirto ilmaha danahiisa ugu fiicani.
  - Xaqiijinta in qof weyn ay maxkamaddu u magacoowday si uu u noqdo ilmaha *"ilaaliyahiisa sharci"*. Tani waxay lagama-maarmaan noqon kartaa haddii aan la heli karin ilmaha waalidkiisa ama qof ka masuul ah si uu u gaadho go'aanno uu ku jiro danaha ugu fiican ee ilmahu.

5. Xuquuqda qarsoonaanta sirtiisa. Tani macnaheedu waa:

- Waxaa aad u muhiim ah in dhammaan dhibaneyaasha iyo maragyada carruurta ahi ay leeyihiin sirtooda oo la ilaashay.
- Marka ilmahu ku jiro nidaamka caddaaladeed, qofna xaq uma leh inuu ogaado in ilmahu ku jiro marka laga reebo kuwa uu ilmaha aaminsan yahay oo leh xuquuqda inay ogaadaan in ilmahu uu ku jiro mooyaane.

Dadka waa weyni waa inay u ilaaliyaan magaca ilmaha sir ahaan oo aanay bixinin wax macluumaad ah oo lagu aqoonsan karayo ilmaha.

- Si loo ilaasho ilmaha, dadweynaha iyo warbaahintu waa in lagu ilaashaa qolka maxkamadda dibaddiisa xilliga ilmahu uu marag-furayo.

6. Xuquuqda in laga ilaasho dhibta xilliga nidaamka caddaaladda. Tani macnaheedu waa in mihnadlayaashu ay:

- Xaqiijiyaan in xilliga la filayo inuu ilmahu ka qayb-galo dhageysiga wakhti hore loo sii qorsheeyo si ilmahu u helo wakhti uu isku diyaariyo.
- Xaqiijiyaan in dhageysiyada dacwadda lagu dhammeystiro wakhtiga ugu gaaban ee ugu macquulsan, haddaanu dib u dhaco ahayn danaha ugu fiican ee ilmaha mooyaane. Baadhista ku taxaluqa ilmaha waa in loo sameeyaa sida ugu dhakhso badan ee ugu macquulsan oo la xaqiijiyaa in dacwadaha ku taxaluqa ilmaha la dhageysto ugu horreyn. Ilmaha waa in la weydiiyaa inuu yimaado maxkamadda keliya marka ay lagama-maarmaan tahay.
- Xaqiijiyaan in carruurta wax lagu weydiiyo qolal gaar ah oo ay ku dareemi karaan degenaan iyo amni. Qololka maxkamaddu waa inay sidoo kale u dhisan yihiin inay carruurtu ku dareemaan degenaan. Carruurtu waa inay awoodaan inay qaataan nasashooyin wakhtiga marag-furkooga, oo dhageysiga la muddeeyaa wakhtiga maalineed ee ugu fiican da'da iyo qofnimada ilmaha. Shay kasta oo macquul ah waa in loo sameeyaa si ilmaha loogu fududeeyo inuu marag-furo.
- Xaddidaan inta jeer ee ilmaha su'aalo la weydiinayo, uu bixinayo hadal, iyo ka qayb-galayo dhageysiga. Hal qaab oo arrintani loo sameyn karaa waa iyadoo kamarada muuqaalka lagu duubo waxa uu ilmahu leeyahay.
- Xaqiijiyaan in ilmahu uu la xidhiidho eedeysanaha keliya marka ay lagama-maarmaan tahay. Marka carruurta su'aalo lagu weydiinayo maxkamadda, waa inuu ka qarsoon yahay muuqaalka eedaysanahu, ilmaha waa in aanu weligii wax weydiinin eedaysanahu. Qolol nasasho oo gaar ah iyo meelo wareysiyada gaarka ah waa in loo heli karaa carruurta si u marag-furaan.
- Xaqiijiyaan, iyadoo uu Garsoorahu ka caawinayo in carruurta loogu weydiiyo su'aalaha maxkamadda qaab ay fahmi karaan oo aan iyaga cabsi gelinayn.

Haseyeeshee, sidaynu kor ku soo xusnay, waxaa mararka qaarkood adag in la go'aamiyo inuu qofka yahay qof aad u yar. Xaaladdahani, qofku waa inuu maskaxda ku hayaa inkastoo ay carruurtu u ekaan karaan inay ka weyn yihiin da'dooda, weli waxay yihiin carruur iyo in marka ay qayrul-macquul tahay in la go'aamiyo inuu qof yahay mid weyn ama yar, inay wanaagsan tahay in qofkaasi loo tixgaliyo inuu yahay mid yar. Waxaa badanaa wanaagsan in la ilaasho qof aan u qalmin ilaalintaasi, intii aan la ilaalin lahayn qof u qalma.

Waxa lagu xusay kor ee ku saabsan weydiinta su'aalaha ee maragyadu, waxay qabanayaan sidoo kale dadka da'da yar. Isla mabaadi'da dadka waa weyni waxay sidoo kale sharci ku yihiin dhibaneyaasha iyo maragyada carruurta ah. Waxaa intaa u dheer, mabaadi'da soo socota oo sidoo kale qabanaya:

- Ilmaha waa in aan weligii lagu baadhin isla meesha uu dembi ama ka faa'iiddeysi uu ka dhacay;
- Su'aalaha waa in looga hadlaa si xasaasiyad iyo tixgelinta carruurnimo ah;

- Su'aalo weydiinta ilmaha waa in badanaa lagu bilaabaa su'aalaha guud gaar ahaan ku saabsan da'diisa, qoyska, dhalashada (haddii ay tahay mid teena ka duwan) iwm.

Waxaa intaa dheer, in la abuuro qaabab gaar ah oo loo baadhayo dhibaneyaasha carruurta ah iyo habraacyo gaar ah oo lagaga feejignaanayo marag-furyada tirada badan ee dhibaneyaasha carruurta ah. Marka tan la dhammeystiro, waddamada qaar ayaa keena duubista marag-furka maqalka iyo muuqaalka ah, oo u oggolaanaysa inay maxkamadda kaga soo qayb-galaan maxkamadda muuqaalka lays arkayo.

# Cutubka 2: Caawinta Kooxaha Nugul

**Ujeeddooyinka Waxbarasho**

Cutubkani gudahiisa ka qayb-galayaashu waxay:

- Baran doonaan waxyaabaha u gaarka ah ilaalinta carruurta sharciga khilaafta iyo dhibaneyaasha carruurta;
- Fahmi doonaan kala duwannaanshaha qarsoon ee labadani qaybood ee kor ku xusan kuna baranayaan guud-marka sharci ee ilaalintooda;
- Baran doonaan guud-marka sharci iyo waxyaabaha u gaarka ah ilaalinta dhibaneyaasha haweenka ah iyo dadka ku kacay fal-dembiyeedka;
- Baran doonaan dhibaatooyinka soo wajaha dadka uu ku dhacay HIV/AIDS-ku & dadka maskaxda ka xanuunsanaya waxaanay baran doonaan sida loo siiyo gargaar sharci oo wax ku ool ah;
- Baran doonaan farqiga u dhaxeeya qaxootiga, dadka gudaha ku baro-kacay iyo muhaajiriinta iyo guud-marka sharciga caalamiga ah ee ilaalintooda;
- Baran doonaan qaababka lagu fahmo dhibanenimada qarsoon iyo hababka wax looga qabto xilliga baadhista iyo maxkamadda iyo,
- baran doonaan guud-marka sharci ee ilaalinta dhibaneyaasha iyo maragyada.

Qodobka 172-177 ee Xeerka Ciqaabtu waxay ka kooban yahay qodobbo gaar ah oo khuseeya dadka ku kaca fal-dembiyeedyada ee maskaxda ka jiran, waayeelka iyo carruurta ah. Tallaabooyin amni ayaa lagu xukumayaa dacwadahani halkii ciqaabta dembiga sida uu dhigayo qodobka 172 (sida geynta xarumaha waalida lagu daweeyo (dacwadaha maskaxda [khuseeya]).

Sida ku xusan habraaca 5.44.(a). Habraacyada iyo Mabaadi'da Qaramada Midoobey ee Marin-u-Helidda Kaalmada Sharci ee Nidaamayada Caddaaladeed ee Ciqaabta Kaalmada Sharci waa la bixiyaa sidoo kale si *"loo xaqiijiyo in eedaysnaahu uu fahmayo dacwadda lidka ku ah iyo natiijada macquulka ah ee dhageysiga dacwadda"*. Tani aad bay muhiim u tahay markay noqoto dadka maskaxda ka jiran ama dadka maskaxda ka dhiman (xanuun ama da' dartood), oo aan fahmi karin waxa dhacaya iyo sababta ama aan fahmi karin luuqada dacwadda sida qaxootiga iyo muwaadiniinta waddamada qalaad.

## 2.1. Carruurta Sharciga Khilaafta

Carruurta sharciga khilaafta gaar ahaan kuwani loo diray xabsiga waxay ku jiraan xaalad aan u fiicnayn nafahooga iyo mustaqbalkooda, sababtoo ah xadhiga iyo geynta carruurta xaaladda xadhigu ma waafaqsana mabda'a danta ugu fiican ee ilmaha sida uu soo jeediyey Heshiishka Xuquuqda Carruurta (CRC)[131].

131 See, UNODC (2009), *Strategies and Tactics for Defending Juvenile Cases.*

Marxaladda ka garnaqista ka horreysa, carruurta sharciga khilaafta waxay si joogto ah ula kulmaan xaaladahani soo socda:

- Isticmaalid la'aanta badelida ciqaabta carruurta ee marxaladda hore nidaamka caddaaladeed ee ciqaabta, oo ah wakhtiga baadhista ee booliska;
- Dhismayaasha dadka lagu xidho oo buux dhaafsamay taasoo xanibaysa nidaamka daryeelka iyo buuxinta xuquuqaha carruurta;
- Kala saaris la'aanta maxaabiista waa weyn iyo kuwa carruurta ah;
- Dacwadaha qaar waxay muujinayaan in eedaysanayaasha carruurta ah la geeyo dhismeyaasha dadka lagu xadho inkastoo dhageysiga dacwaddahoogu ay weli socoto;
- Xuquuqaha aasaasiga ah, sida tayada cuntada, waxbarashada, heerka caafimaadka, nadaafadda, dib u dhiska, lagama helo dhismayaasha dadka lagu xidho;
- Waxay u nugul yihiin in lagu xadgudbi xuquuqahooga, maxbuus ahaan iyo ilmo ahaan, oo ay ku jirto ku xadgudubka ay kula kacaan kuwa meesha kula xidhan ee ka waa weyn iyo saraakiisha dhismayaasha dadka lagu xidho.

Marxaladda u garnaqista, carruurta sharciga khilaafta waxay si joogto ah ula kulmaan xaaladahani soo socda:

- Carruur badan oo lagu tuhunsanaa dembiyo fudud iyo dembiyo ciqaabtoodu ay muddo yar tahay ayaa la eedeeyaa iyo xukunnada badankoogu waxay carruurta u diraan xabsiyadda;

Marxaladda u garnaqista, carruurta sharciga khilaafta waxay si joogto ah ula kulmaan xaaladahani soo socda;

- Meel kula xidhista dadka waa weyn;
- Dhismayaasha dadka lagu xidho oo buux dhaafsamay taasoo xanibaysa nidaamkii dib u dhiska maxaabiista wada xidhan ee carruurta ah;
- Xuquuqaha carruurta, sida cuntada ku filan, waxbarashada, heerka caafimaadka ku filan, ku dhaqanka diinta, dib u dhiska, booqashooyinka, si fiican looma fuliyo;
- Dhismayaal ku filan oo aan la hayn si loogu taageero barnaamijka dib u dhiska carruurta wada xidhan, sida dhismayaal wax lagu barto, laybareeri, dhismayaasha cayaaraha iyo dhismayaasha nadaafadeed;
- Waxay u nugul yihiin in lagu xadgudbi xuquuqahooga, maxbuus ahaan iyo ilmo ahaan, oo ay ku jirto ku xadgudubka ay kula kacaan kuwa meesha kula xidhan ee ka waa weyn iyo saraakiisha akhlaaq toosinta;
- Caqabado soo wajaha markay helaan fasaxa bixitaanka;
- Dayacaadda qoyska iyo bulshada;

Dadka sharci-yaqaanka ahi waxay ka caawin karaan carruurta xallinta dhibaatooyinka kor ku xusan badankooga dhammaan marxaladaha nidaamka garsoorka.

### 2.1.1. Mabaadi'da Caalamiga ah

Sida ku xusan Qodobka 37 (b), (c) iyo (d) ee Heshiiska Caalamiga ah ee Carruurta mabaadi'da aasaasiga ah ee ay tahay inay wax walba ka sareeyaan wakhtiga xadhiga iyo sidoo kale wakhtiga baadhista iyo nooc kasta oo xorriyad ka qaadista carruurta ah waa kuwani soo socda:

> *(b) Waa in aan ilmaha si sharci-darro ah ama aan sharciga waafaqsanayn xorriyadda looga qaadin. Xadhiga, maxbuusida iyo xadhiga xabsiga ah ee carruurtu waa inay waafaqsanaadaan sharciga waana in la isticmaalaa oo qudha markay yihiin tallaabada ugu dambeysa iyo wakhtiga ugu gaaban ee macquulka ah;*
>
> *(c) Ilmo kasta oo xorriyadda laga qaaday waa in loola macaamilaa si bini-aadamnimo ah waana in lagu tixgaliyaa sharafta uu leeyahay qofka bini-aadamka ah, qaab ku xisaabtamaya baahida dadka da'diisa ah.*
>
> *Gaar ahaan, ilmo kasta oo xorriyadda laga qaaday waa inuu ka gaar ahaadaa dadka waa weyn haddii loo tixgaliyo inay danta ugu fiican ee ilmahu ku jirto in aan sidaa la sameyn mooyaane waana inuu yeeshaa xuquuqda inuu si caadi ah ula xidhiidho qoyskiisa isgaadhsiin ahaan ama booqasho, marka la reebo duruufaha laga reebay;*
>
> *(d) Ilmo kasta oo xoriyadda laga qaaday waa inuu lahaadaa xuquuqda inuu si degdeg ah marin ugu helo Kaalmada Sharci iyo gargaarka sharci ee habboon, iyo sidoo kale xuquuqda inuu ka doodo sharcinimada xorriyada ka qaadistiisa maxkamadda ama hay'adaha kale ee awood u leh, madax-bannaan ee dhexdhexaadka ah hortooda, iyo go'aanka dhakhsaha ah ee tallaabadani.*

Sida uu dhigayo Qodobka 37.c ee Heshiiska Caalamiga ah ee Carruurta, carruurta xidhan waa in gaar looga saaraa dadka waa weyn. Sidaas darteed, carruurta waa in gaar looga saaraa dadka waa weyn ma aha keliya xadhiga xabsiga ah ama marka ay maxkamaddu soo saarto go'aanka xadhiga dhageysiga dacwadda ka horreeya, laakiin sidoo kale wakhtiga uu booliska uun soo xidho qofka (sabab kasta oo ay noqon karto gaar ahaan xitaa marka la hubinayo aqoonsiga carruurta). *'Goobta xadhiga' waa in aan loo aqoonsan keliya xabsiga iyo xarumaha asluubta, laakiin sidoo kale saldhigyada booliska ama meel kasta oo ilmaha fal-dembiyeed ku kaca ay ku hayaan hay'adaha (gaar ahaan guriga ama xitaa gaadhiga booliska). Hay'adaha xadhiga fulinaya waa in waajib lagaga dhigaa inay ilmaha si dhakhso ah u siiyaan marin-u-helidda sharciga iyo adeegyada kale iyadoo la tixgalinayo da'diisa iyo shuruudaha jinsiyeed ee ilmaha.*

Sida ku xusan Habraacyada iyo Mabaadi'da Qaramada Midoobey ee Marin-u-Helidda Kaalmada Sharci ee Nidaamayada Caddaaladeed ee Ciqaabta carruurta waxaa badanaa xaq loo siiyey Kaalmada Sharci, iyadoon waajib lagaga dhigayn inay caddeeyaan duruuftooda adag ee dhaqaale. Sidoo kale, carruurta waxaa badanaa laga dhaafay qaababka loo tijaabinayo Kaalmada Sharci (Habraaca 1.40.(c)).

Habraacyada Qaramada Midoobey (Habraaca 10.52) wuxuu soo jeedinayaa Qaramadu inay qaadaan tallaabooyin gaar ah oo carruurta khuseeya:

> *"Qaramadu waa inay xaqiijiyaan tallaabooyin gaar oo carruurta khuseeya si loo kobciyo marin-u-helidda wax ku oolka ah ee caddaaladda iyo ka hortagga ceebta iyo saameynta taban ee ka dhata ku luglahaanshaha nidaamka caddaaladdeed ee ciqaabta, oo ay ku jirto: ceebta*

*(a) Xaqiijinta xuquuqda inay carruurtu yeeshaan Qareen loo magacaabay inuu ku metelo magacooga, dacwadaha uu jiro ama jiro khilaafaadka dannaha oo ka dhaxeeya ilmaha iyo waalidkiisa ama dhinacyada kale eek a qayb-qaadanaya;*

*(b) U oggolaanshaha carruurta la soo qabtay, xidhay, la tuhunsan yahay ama lagu eedeeyey dembi inay la xidhiidhaan waalidkooga ama ilaaliyahooga isla wakhtigaasi iyo mamnuucida in la wareysto ilmaha iyadoo uu maqan yahay Qareenkiisu ama hawl-wadeennada Kaalmada Sharci, iyo waalidka iyo ilaaliyaha markii la heli karo iyo markay ku jirto danta ugu fiican ee ilmahu;*

*(c) Xaqiijinta xuquuqda carruurta in arrimaha la go'aamiyo iyadoo ay joogaan carruurta waalidkoogu ama ilaaliyahooga sharci, haddii aan loo tixgalin inay ku jirto danta ugu fiican ee ilmahu;*

*(d) Xaqiijinta in carruurtu si xor ah oo si buuxda ay sirtoodu u qarsoon tahay ula tashadaan waalidiinta iyo/ama ilaaliyeyaasha iyo wakiillada sharci ee kale;*

*(e) Siinta macluumaadka xuquuqaha sharci qaab ku habboon da'da ilmaha iyo qaan-gaadhnimada, luuqad uu ilmahu fahmi karo oo xasaasi ku ah jinsiga iyo dhaqanka. Siinta macluumaadka ee waalidiinta, ilaaliyeyaasha ama daryeelayaashu waa in ay noqotaa dheeraadka, ma aha badelka siinta macluumaadka ee carruurta;*

*(f) Kobcinta, hadday habboon tahay, weecinta nidaamka caddaaladeed ee ciqaabta iyo xaqiijinta in carruurtu leedahay xuquuqda Kaalmada Sharci ee marxalad kasta oo dacwadda ah haddii weecinta la dabaqaayo;*

*(g)Dhiirigalinta, hadday habboon tahay, isticmaalka tallaabooyinka iyo xayiraadaha lagu badeli karo xorriyad ka qaadista iyo in la xaqiijiyo in carruurtu ay leedahay xuquuqda Kaalmada Sharci sidaas darteed xorriyad ka qaadistu ay noqoto tallaabada ugu dambeysa iyo muddada gaaban habboon;*

*(h) Sameynta tallaabooyin lagu xaqiijinayo in dacwadaha garsoor iyo maamul lagu qabto jawi iyo qaab carruurta u oggolaanaya in si toos ah loo maqlo ama wakiil, ama guddida ku habboon u sameeyso qaab waafaqsan qodobbada habraac ee sharciga dalka. Ku xisaabtanka da'da ilmaha iyo qaadhnimadu waxay sidoo kale u baahan kartaa in wax laga badelo habraacyada iyo ku shaqaynta garsoorka iyo maamulka.*

*53. Sirta qarsoon iyo xogta shakhsiyadeed ee ilmaha ku lug leh ama lahaa dacwadaha garsoorka ama aan garsoorka ahayn iyo soo dhexgalka kaleba waa in la ilaashaa dhammaan marxaladaha, ilaalinta noocan ah waa inuu sharcigu damaanad qaadaa. Tani waxaa si guud ugu qarsoon in aan macluumaad iyo xog shakhsiyadeed ah midkoodna aan la bixin karin ama la daabaci karin, gaar ahaan warbaahinta, kaasi oo muujinaya ama si dadban u oggolaanaya in la sheego aqoonsiga ilmaha, oo ay ku jiraan sawirrada ilmaha, sharaxaada faahfaahsan ee ilmaha ama qoyska ilmaha, magacyada ama cinwaannada iyo diiwaanada maqalka iyo muuqaalka ah."*

Qoraallada heerka caalamiga ah ugu muhiimsan ee la xidhiidha caddaaladda carruurtu waa kuwani soo socda:

- Heshiiska Caalamiga ah ee Carruurta [132];

132 Waxaa lagu ansaxiyey oo loogu furay saxeexid, ansaxin iyo qaadasho wareegtada Golaha Guud ee Qaramada Midoobey 44/25 ee 20 November 1989.

- Qodobbada Qaramada Midoobey ee aan laga Talaabsan karin ee Maamulista Caddaaladda Carruurta (Beijing Rules)[133];
- Habraacyada Qaramada Midoobey ee ka Hortagga Dembi Gelista Carruurta (Riyadh Guidelines)[134];
- Qodobbada Qaramada Midoobey ee Ilaalinta Carruurta Xorriyadda laga Qaaday (Havana Rules)[135];
- Habraacyada Tallaabooyinka Carruurta ee Nidaamka Caddaaladeed ee Ciqaabta (Vienna Guidelines)[136];
- Habraacyada Caddaaladda ee Arrimaha Khuseeya Dhibaneyaasha iyo Maragyada Dembiga[137].

Dabcan qoraallo kale, inkastoo aan si gaar ah loogu dabaqayn carruurta, ayaa si toos ah ula xidhiidhi kara arrimaha la xidhiidha caddaaladda carruurta sida:

- Qodobbada Min-qiyaaska aan laga Talaabsan karin ee Qaramada Midoobey ee Macaamilka Maxaabiista [138];
- Min-qiyaaska aan laga Talaabsan karin ee Tallaabooyinka aan Xadhiga ahayn [139];
- Qodobbada Qaramada Midoobey ee la Macaamilka Haweenka Maxaabiista ah iyo Tallaabooyinka aan Xadhiga ahayn ee Haweenka Fal-dembiyeedka ku kaca (the Bangkok Rules)[140].

Sida ku xusan Qodobka 40.2.b (iv) ee Heshiiska Caalamiga ah ee Carruurta, ilmo kasta oo lagu haysto ama ku eedaysan inuu ku xadgudbay xeerka ciqaabtu wuxuu leeyahay xuquuqda *"In aan lagu cadaadin inuu marag-fur bixiyo ama uu qirto dembiga; in la baadho ama la baadhay maragyada kasoo horjeeda iyo inuu helo ka qayb-galka iyo su'aalo weydiinta maragyada oo isaga loo saameeyey xaalado sinnaan ah"*.

Waxaa muhiim ah in la ogaado in ficilada dadka waa weyn ee aan loo tixgelin Karin macaamil sharci-darro ah ay noqon karaan wax aan la aqbali Karin markay noqoto carruurta, xasaasiyaddooda u gaarka ah iyo nuglaanshahooga gaarka ah awgood.

### 2.1.2. Guud-marista Xeerarka Qaran

Heerka qaran, Xeerka Caddaaladda Carruurta ee 2007 (JJL) waxaa loo sameeyey si uu u nidaamiyo wax ka qabashada dadka dhallinyarada ah ee sharciga khilaafa. Tixgalinta ugu sarreynaysa ee wax ka qabashada carruurta sharciga ku gefta, iyadoo la og yahay nuglaanshaha iyo waayo-aragnimo la'aanta dadka

133 Waxa lagu ansaxiyey wareegtada Golaha Guud ee Qaramada Midoobey 40/33 ee 29 November 1985.

134 Waxa lagu ansaxiyey oo lagaga dhawaaqay wareegtada Golaha Guud ee Qaramada Midoobey 45/112 ee 14 December 1990.

135 Waxa lagu ansaxiyey wareegtada Golaha Guud ee Qaramada Midoobey 45/113 ee 14 December 1990.

136 Waxa lagu ansaxiyey wareegtada 1997/30 ee Golaha Qaramada Midoobey ee Dhaqaalaha iyo Bulshada ee 21 July 1997.

137 Waxa lagu ansaxiyey wareegtada 2005/20 ee Golaha Qaramada Midoobey ee Dhaqaalaha iyo Bulshada ee 22 July 2005.

138 Waxaa laga soo qaatey the First United Nations Congress on the Prevention of Crime and the Treatment of Offenders, held at Geneva in 1955, and approved by the Economic and Social Council by its resolutions 663 C (XXIV) of 31 July 1957 and 2076 (LXII) of 13 May 1977.

139 Awaxaa laga soo qaatey the UN General Assembly resolution 45/110 of 14 December 1990.

140 Resolution 65/229 adopted by the UN General Assembly on 16 March 2011.

dhallinyarada ah ee duruufahani oo kale iyo musuqmaasuqistooda muddada dheer ee la filan karo, waa inay ugu mudan tahay danta ugu fiican ee ilmahu, si waafaqsan Qodobka 6 ee Xeerka Caddaaladda Carruurta.

Sida ku xusan Qodobka 8 ee Xeerka Caddaaladda Carruurta:

> *"1. Ilmaha waxa xorriyadda laga qaadi karaa keliya marka ugu dambeysa, iyo muddada ugu yar ee ay lagama maarmaanka tahay.*
>
> *2. Ilmaha waxaa xorriyadda laga qaadi karaa oo keliya haddii lagu qabto isagoo dembiga faraha kula jira ama uu lagu eedaynayo inuu galay fal-dembiyeed uu sharcigu sheegay.*
>
> *3. Ilmaha xorriyadda laga qaaday waa in lagu hayo ama ilaasho meel nabad-geliyadiisa iyo badbaaddadiisuba ay sugan yihiin oo uu sharcigu oggol yahay."*

Waxa cad in ilaalinta dheeraadka ah ee nuglaanshaha ilmaha fal-dembiyeed ku kaca ay tahay in isticmaalka xadhiga iyo xorriyad ka qaadista si tallaabo looga qaado carruurta fal-dembiyeedyo ku kacdaa ay reeban tahay, oo keliya la isticmaalo markay noqoto xalka ugu dambeeya markaanay jirin qaabab kale oo macquul ah. Doorka Qareenku waa inuu ku qanciyo dacwad oogaha iyo maxkamadda kor ku xusan.

Waxaa qiimo leh in la sheego waxyaabaha ku jira Qodobka 8(2) ee sare – shuruuda ah in xadhigu uu keliya bannaan yahay haddii ilmaha lagu qabto *"isagoo falka gacmaha kula jira"* ama uu ku eedaysan yahay fal-dembiyeedyo lagu qeexay sharciga. Ma jiro cudur-daar kale oo ilmaha loogu xidhi karo sabab kale, sida dabeecadda qalqaalinimada oo aan ka dhignayn dembi, ama *awoodis la'aanta ilmaha waalidkiisu aanay kaantarooli karin ilmaha*. Dib u eegista dacwad kasta oo ilmo *xidhani waa inay sheegtaa sababta xadhiga – oo ah tilmaamista dembiga iyo caddeymaha oo tixgalinta la siiyo faqradaha Qodobka 8(1) oo ah in xadhigu uu noqdo muddada ugu yar ee lagama-maarmaanka ah.*

Qodobka 9 ee Xeerka Caddaaladda Carruurtu wuxuu si cad u sheegay xuquuqda Qareenka difaac oo ku dhex jira xuquuqo kale:

> *"Ilmo kasta oo xorriyadda laga qaaday wuxuu xaq u leeyahay:*
>
> *a) La ogeysiiyo eedaha loo haysto.*
>
> *b) Waalidkiisa ama ilaaliyahiisa lagu wargeliyo sababta loo xidhay lana sameeyo xidhiidho.*
>
> *c) La aaminsanaado dembilaawe ilaa dembiilenimadiisa laga caddeeyo maxkamad sharci ah.*
>
> *d) Qareen sharci yeesho oo uu ula xidhiidho la taliyeyaashiisa sharci si xor ah.*
>
> *e) Aamusnaado oo wax la weydiiyo oo qudha iyadoo ay joogaan waalidkiisa, ilaaliyahiisa ama Qareenkiisa sharci.*
>
> *f) Joogitaanka waalidkiisa ama ilaaliyahiisu dhammaan marxaladaha dacwadda.*
>
> *g) Si degdeg ah loo horkeeno maxkamadda.*
>
> *h) Loo oggolaado inuu u yeedho marag oo uu su'aalaha tooska ah weydiiyo, su'aalona uu weydiiyo maragyada dhinaca kale.*
>
> *i) Uga rafcaan qaadan karaa go'aan kasta ama ciqaab kasta oo isagu lagu riday maxkamadda ka sarreysa.*

*j) Adeegyada turjumaad bilaash ah haddii luuqada maxkmaddu aanay ahayn afkiisa hooyo.*

*k) Laga ilaasho nooc kasta oo jidh dil ah iyo ciqaabta maskaxeed.*

*l) Lagu xidho meel ka gaar ah dadka waa weyn hablahuna ay ka gaar yihiin wiilasha.*

*m) Cunto iyo biyo ku filan; dhar, go' sariireed iyo bustayaal iyo daaweyn caafimaad, daryeel iyo taageero.*

*n) Waxbarasho iyo waxyaabo la akhristo.*

*o) Booqashada joogtada ah ee waalidka, xigtada iyo/ama Qareennada.*

*p) Ilmaha maskaxda naafada ka ah ama aan awoodin inuu hadlo ee xorriyadda laga qaaday waa inuu lahaadaa xuquuqaha qodobka hore uu dhigayo, wuxuu sidoo kale leeyahay xuquuqda inuu lahaado khabiir u sharaxa baahiyahiisa iyo waxyaabaha looga baahan yahay."*

Waxaa sidoo kale jirta in carruur badan aan la diiwan-gelin dhalashadooda iyo in aanu jirin nidaam laysku haleyn karo oo lagu ogaan karo da'da dhabta ah ee carruurtani (waxaa jirta in imika aanay suurtogal ahayn tijaabada hiddo sidaha (DNA) in dalka gudahiisa lagu sameeyo) arrinta da'da masuuliyadda dembi ayaa noqonaysa mid fikir u baahan. Aad bay muhiim u tahay sababtoo ah waxay qeexaysaa in ilmaha lagu oogi karo dacwad ciqaab ah. Sida ku xusan Qodobka 61 ee Xeerka Caddaaladda Carruurta dhageysiga hore dhexdiisa Garsooruhu waa inuu go'aamiyaa da'da ilmaha.

Qodobka 10 ee Xeerka Caddaaladda Carruurtu wuxuu dhigayaa:

*"Marka laga yimaado qodobbada xeerka ciqaabta iyo xeerarka kale:*

*1. Qof kasta oo marka uu falka ku kacayo aanay weli da'diisu gaadhin 15 sano ma yeelan karo masuuliyad dembi.*

*2. Qof kasta oo dhammaystay 15 sano jir ilaa da'da u dhaxaysa 18 jir, waxaa ay yeelanayaan mas'uuliyad dambi oo loo raacayo Xeerka Ciqaabta, balse ma aha mid dhammaystiran.3.*

*3. Qof kasta oo marka uu falka galay da' ahaan ay u dhammaystirantahay 18jir waxa uu yeelanayaa mas'uuliyad dambi oo dhammaytiran (complete-criminal punishment), loona aqoonsanmaayo caruurta iyo da'yarta midna."*

Qofka da'yarta ah ee aan gaadhin da'da 15 jirka dembi looma qabsan karo. Sida qodobkaasi ku sheegan majiro wax cudurdaar ah sharciga ciqaabta xadhiga ama eedaynta qof ilmo ah dacwado ciqaabo oo la baadhay, maadaama dacwadahani uu reebayo qodobkani.

Waxaa intaa dheer, Qodobka 11 ee Xeerka Caddaaladda Carruurtu wuxuu dhigayaa in ciqaabta ilmaha fal-dembiyeedka ku kacay uu u dhigmo *"...duruufaha ilmaha, culayska iyo dabciga fal-dembiyeedka."*

Sida ku xusan Xeerka Caddaaladda Ciqaabta, ciqaabta ugu badan ee ilmaha fal-dembiyeedka ku kacay kama badan karto 15 sano oo xadhig ah. Waxaa intaa sare dheer, Qodobka 14 ee Xeerka Caddaaladda Carruurtu wuxuu dhigayaa ka qayb-galka ilmaha inta ay dacwaddu socoto iyo diyaarinta dacwadda sidani soo socota:

> *"1. Ilma kasta oo awoodi kara inuu gudbiyo afkaartiisa, waa in la siiyo fursad uu ku caddeeyo afkaartiisa dacwad kasta oo ilmaha khuseysa.*
>
> *2. Maxkamaddu waa inay qiimayso afkaarta ilmaha, waana in la siiyaa miisaan u qalma oo waafaqsan ilmaha da'diisa iyo qaangaadhnimadiisa.*
>
> *3. Waa masuuliyadda Garsooraha inuu u qabto Qareen ama turjumaan si uu u caawiyo ilmaha aan awoodi karayn inuu caddeeyo afkaartiisa.*
>
> *4. Qareenka uu sheegayo Qodobka hore waa in aanu ka habsaamin fadhiyada maxkamadda."*

Qodobbadani sare waxay xaqiijinayaan in ilmahu uu door buuxa ka ciyaaro inta ay dacwaddu socoto markay macquul tahay.

### Tallaabooyinka dhageysiga dacwadda ka horeeya

Habraac shaqo ahaan, Qodobbada 46 ilaa 55 ee Xeerka Caddaaladda Carruurtu waxay ka hadlayaan arrimaha khuseeya hor imaatinka ilmaha ee Maxkamadda Carruurta Horteeda. Arrimaha ugu muhiimsan ee lagaga hadlay qaybtani xeerku waxay ka dhasheen walaaca in xadhiga ilmahu uu waafaqsanaado shuruucda khusaysa, gaar ahaan Xeerka Habka Ciqaabta, in habraaca lagu abuuray Xeerkani Caddaaladda Carruurtu la raacay iyo in hay'adaha iyo dadka ay habboon tahay la wargeliyo lana ogeysiiyey xadhigaasi. Waxaa jira shuruuddo ah in waalidka iyo ilaaliyayaasha la wargeliyo, oo iyaga ama wakiilkooga sharci ay tahay waajib tahay inuu joogo su'aalo kasta oo la weydiinaayo ilmaha (Qodobbada 47 iyo 51). Waxaa jirta faqrad kamid ah Qodobka 55 in ilmaha ku eedaysan inuu fal-dambiyeed ku kacay la siiyo damaanad inta uu dhageysiga dacwaddu socdo.

### Dhageysiga hore

Dhageysiga hore ee dacwaddu wuxuu u baahan yahay dhawr marxaladood oo dacwadda ilmaha ee maxkamaddu inay dhacaan. Dhageysiga hore waxaa ugu horreyn ilmaha looga baahan yahay inuu ka jawaabo eedda (Article 58) kahor intaanay maxkamaddu ka hadal suurto galnimada dacwadda in laga weeciyo nidaamka caddaaladeed ee ciqaabta si waafaqsan Qodobka 59. Dadka la doonayo inay ka soo qayb-galaan dhageysiga hore sida ku xusan Qodobka 60, marka laga yimaado ilmaha ku eedaysan inuu ku kacay fal-dembiyeedka, waa:

a) Waalidka iyo ilaaliyaha ilmaha
b) Haddii aan waalidka iyo ilaaliyaha la heli karayn, qof weyn oo ku habboon ayuu Garsoorahu u magacaabi karaa
c) Xeer-ilaaliyaha
d) Sarkaalka hubiyaha
e) Qof kasta oo kale oo uu Garsoorahu u oggolaaday oo joogitaankiisu uu lagama-maarmaan u yahay una fiican tahay danta ugu fiican ee ilmaha
f) Wakiilka Sharci

g) Sarkaalka booliska carruurta ee baadhay dacwadda,

Fadhiyada Maxkamadda

Qabsoomida fadhiyada maxkamadda ee Maxkamadda Carruurta waxa lagu dhigay Qodobbada 74 ilaa 86 ee Xeerka Caddaaladda Carruurta. Qodobbada badankoogu waxaa ka muuqanaysa ruuxda sharci ilaalinaya xuquuqaha iyo dhammeystirnaanta ilmaha, oo maxsuul togan ka raadinaya dacwadda, kaasi oo dabci ahaan kor u soo qaadis iyo dhaqan celin ah. Su'aalaha la weydiinayo ilmaha markay socoto dacwaddu waa in aanay si caddaan ah u noqon kuwo cadawtinimo ah si waafaqsan Qodobka 79 ee xeerkani, waana in dhageysiga dacwadda laftiisa la dedajiyaa, oo dib u dhigistu aad u yar tahay intii macquul ah waana inay qaadataa wakhtiga gaaban ee ugu macquulsan si waafaqsan Qodobka 82.

Haddii dacwadda lidka ku ah ilmahu ku eedaynayso in uu jiro fal-dembiyeed ay si wadajir ah u galeen qof ama dad weyn, haddii aanay wiiqayn danta caddaaladda, qaabka loo qaadayo dacwaddu waa in laba dhageysi dacwadeed oo kala duwan loo qabtaa dadka waa weyn iyo ilmaha eedeysanaha ah. Haddii danaha caddaaladda uu noqdo in dadka waa weyn iyo carruurta si wadajir dacwaddooda loo qaado, Qodobka 81 ee Xeerka Caddaaladda Carruurta wuxuu leeyahay waxa si wadajir ah loogu qaadayaa dhageysiga dacwadaha Maxkamadda Carruurta.

## 2.2. Dadka la Taag Daran Xanuunka HIV/AID-ka

Dadka la taag daran HIV/AIDS-ku badanaa waa dad daawooyin isticmaala kuwaasi oo u nugul inay isku abaabulaan kooxo si ay u galaan dembiyo.

Afrika, gaar ahaan Afrikada saxaraha ka hooseysa, waa gobolka uu adduunka sida ugu xun u saameeyey HIV-gu[141]. Saddexdii qaybood ee dhammaan dadka uu ku dhacay HIV-gu ku dhowaad laba qaybood oo kamid ahi waxay ku nool yihiin Afrikada saxaraha ka hooseysa, Qaarada Afrika waa guusha ugu adag ee uu gaadhay fiditaanka HIV-ga ee adduunku. Waxaa xaaladdani sidoo kale laga arki karaa xabsiyadda. Haseyeeshee, xaaladda HIV-ga ee Xabsiyadda Afrika waxay ahayd meel ay dhib badan tahay in laga hadlaa waxaanay u baahan tahay danayn muhiim ah, taageero maaliyadeed iyo siyaasadeed. Deddaalada lagu kaantaroolayo HIV-ga iyadoon mudnaanta la siinin xaaladda xabsiyadda dhexdoodu waa kuwo loogu talo galey inay guul-dareystaan.

Maxaabiistu waxay khataro kala duwan ugu jiraan gudbista HIV-ga xilliga xadhiga:

- Khataro la socda dhaqanada galmo (aan ilaashanayn), ee xooga ah ama la oggol yahay;
- Isticmaalka dawada laysku mudayo;
- Wadaagista qalabka tinta layskaga xiiro;
- Wakhtiga uurka ama naas-nuujinta, iyo
- Marka la daryeelayo ilkaha iyo caafimaadka.

141 UNODC -UNAIDS - WHO (2004), Advocacy Guide: HIV/AIDS prevention among injecting drug users.

Waxaa u baahan in la tilmaamo in dadka uu hayo HIV/AIDS-ka ee khilaafa nidaamka garsoorku aanay lahayn waxyaabo ku filan oo loogu badeli karo xadhiga waxaanay aad ugu dhow dahay in dadkani ay ku dhammeystaan isla xarumaha ay ku xidhan yihiin sida dembiilayaasha kale.

Xaaladda dadka xidhan ee uu hayo HIV/AIDS-ku[142] way argagax badan tahay waddamo badan, maadaama ay badanaa ku xidhan yihiin xaalado aanay ka jirin daaweyn caafimaad iyo xaaladaha xadhiga oo aan fiicnayn. Aynu tilmaano in daryeelka iyo daaweynta maxaabiista dadka la taag daran HIV/AIDS-ka ay ka jirto dacwad-sharci oo Maxkamadda Yurub ee Xuquuqda Aadamahu ay xukun ka soo saartay ku xadgudubka qodobka 3 ee Heshiishka Yurub ee Xuquuqda Aadamaha oo mamnuucaya macaamilka bini-aadam-darrada ah[143]. Sida ugu badan dadka la taag daran HIV/AIDS-ku waxay u xanuunsadaan xanuuno kale, sida xiiqda, bronchitis, jooniska, psoriasis, iwm.

Sida ku xusan Baaqa Afrika ee ka Shaqaynta, ka Hortaga, Daaweynta, Daryeelka iyo Taageerista dadka HIV/AIDS-ka qaba ee Xabsiyada ku jira[144], dhawr waddan oo Afrikada Saxaraha ka hooseeya ah ayaa sheegay inuu HIV/AIDS-ku ku dhaco in ka badan 25% heerka dadka xabsiyada ku jira. Xaddigani waa laba jibaar iyo saddex jibaarka dadka uu HIV-gu ku dhaco dadweynaha waddamadani. Dadweynaha Afrikada Saxaraha ka hooseeya, 70% dadka qaaxada qaba (TB) waxay qabaan HIV; TB-du waxay keentaa ku dhowaad 40% dhimashada uu sababay AIDS-ku.

Aqoonta iyo waxbarasho la'aanta maxaabiista iyo shaqaalaha xabsiyada ee khataraha qaadista iyo gudbinta HIV/AIDS-ka, iyo sidoo kale maqnaanshaha tallaabooyinkii ilaalinta ahaa iyo adeegyada daryeel caafimaad oo ku filan ayaa kordhiyey khataraha xanuunkani. Degaankani, khataraha shaqaalaha ay ka soo qaadaan goobtani shaqo dabadeedna qoysaskoodu [u gudbinayaan] ayaa iyadna sidoo kale sii kordhinaysa.

Ujeeddo ahaan, Baaqu isagoo aqoonsan u nuglaanshaha gaarka ah ee xanuunadani ku keenaan HIV/AIDS-ka carruurta, dhallinyarada, haweenka, carruurta naafada ah iyo jinsiyada lagaga badan yahay xabsiyada, wuxuu Qaramada Afrika ka qayb galinayaa *"dib u dhiska nidaamka caddaaladeed ee ciqaabta oo ujeeddadiisu tahay kobcinta xaaladaha nololeed ee goobaha dadka lagu xidho, gaar ahaan in la yareeyo dadka buux dhaafay, samaynta waxyaabo lagu badeli karo xadhiga iyo yareynta nuglaanshaha maxaabiista"*.

Iyadoo tani la tixgelanayo, Baaqa Madrid ee 2009[145] *"markii la oggaaday xaqiiqooyinka iyo macluumaadka xanuunada lays qaadsiiyo sida HIV/AIDS-ka, qaaxada [TB], jooniska iyo xanuunada galmada layskugu gudbiyo ee xabsiyada dhexdooda iyo xaddiga sare ee dhimashada sii deynta dabadeed dhacda, sida ay shirka u soo bandhigeen khabiirro caalami ah oo la yaqaan; [...] la og yahay suurto galnimada xabsiyada si ay wax uga noqoto ilaalinta caafimaadka dadweynaha caalamka iyo si loo yareeyo sinaanshe la'aanta*

142 UNODC -UNAIDS - WHO (2004), Advocacy Guide: HIV/AIDS prevention among injecting drug users.

143 eeg, go'aanka ECHR: *Artyomov v. Russia* of 27 May 2010 (application no 14146/02); *Aleksanyan v. Russia* of 22 December 2008 (application no 46468/06) and *Yakovenko v. Ukraine* of 25 October 2007 (application no 15825/06).

144 Adopted on 18 November 2009.

145 UNODC – WHO (2010), The Madrid Recommendation: Health protection in prisons as an essential part of public health. See also, UNODC (2010), *From coercion to cohesion. Treating drug dependence through health care, not punishment*, Discussion paper based on a scientific workshop, UNODC, Vienna, October 28-30, 2009.

*caafimaadka; [...] iyo fahmida in ka hortaga wax ku oolka ah lagu heli karo in hore loogu aqoonsado khatarahani dhammaan marxaladaha nidaamka caddaaladeed ee ciqaabta; [...] wuxuu aqoonsaday baahida muhiimka ah ee dhammaan nidaamyada xabsiyadu ay u qabaan tallaabooyinka la isticmaali karo ee lagu badeli karo xadhiga xabsiga haddii ay macquul tahay iyo in la yareeyo dadka buux dhaafsamay xabsiyada gudahooga [...]".*

Sida ku xusan 15 waxqabadyada furaha ah ee ay soo jeedisay siyaasadda UNODC, ILO, UNDP, WHO, UNAIDS[146] ee ka hortagga, daaweynta iyo daryeelka xabsiyada dhexdooda iyo meelaha la degan yahay ee xidhan: *"Dhammaan qaababka cadaadiska ah waa in laga feejignaada, baadhistana lagu sameeyaa oggolaanshe la bixiyey, macluumaadka tijaabada ka horreeya, la talinta tijaabada ka dambeysa, ilaalinta sirta qarsoon iyo marin-u-helidda adeegyada ay ku jiraan la socoshada ku habboon, daaweynta ka hortaga ah iyo daaweynta kale sidii loo baahdo."*[147]

Waddamo dhawr ah, sida gobolo Maraykanka ah[148], eedaysanayaasha ku eedaysan fal-dambiyeedyada galmada (ee ay ku jiraan kuwa galmadu ay tahay tiir kamid ah dembiga iyo dacwadaha kale ee sidoo kale ay maxkamaddu sidaasi aaminsan tahay), ayey maxkamaddu amartaa in laga soo baadho HIV-ga marka eedda la soo gudbiyo. Waxaa sidoo kale baadhista la amraa intaan xabsiga loo gudbin iyo kahor intaan laga sii deyn Waaxda Dhaqan celinta. Natiijada baadhista eedeysanaha waa in la siiyo dhibanaha ama waalidkiisa ama ilaaliyahiisa sharci haddii dhibanahu uu yar yahay.

Natiijada baadhista eedeysanaha waa in sidoo kale la siiyaa Xeer-ilaaliyaha dacwadda oogaya iyo Qareenka eedeysanaha.

## 2.3. Dadka Maskaxda ka Jiran[149]

Waa in la ogaadaa in baahida Kaalmada Sharci ee dadka maskaxda ka jiran ama maskaxda wax uga dhiman yihiin ay dhacdo:

- Dacwadaha qof maskaxda ka jiran ama maskaxda wax uga dhiman yihiin uu fal-dembiyeed ku eedaysan yahay;
- Dacwadaha qof maskaxda ka jiran ama maskaxda wax uga dhiman yihiin uu dhibane ka yahay fal-dembiyeed ciqaab ah (oo ka madax-bannaan xaqiiqada in qofkaasi uu ku jiro isbitaal maskaxeed ama aanu ku jirin), iyo

146 UNODC, ILO, UNDP, WHO, UNAIDS, Policy Brief. Prevention, treatment and care in prisons and other closed settings: a comprehensive package of interventions, http://www.unodc.org/documents/hiv-aids/HIV_comprehensive_package_prison_2013_eBook.pdf

147 United Nations Office on Drugs and Crime, World Health Organization and Joint United Nations Programme on HIV/AIDS (2008), *HIV in Places of Detention: A Toolkit for Policymakers, Programme Managers, Prison Officers and Health Care Providers in Prison Settings* (Vienna, United Nations Office on Drugs and Crime.

148 Tusaale ahaan: in Missouri. See: http://rainn.org/public-policy/legal-resources/missouri/hiv-testing

149 Baillargeon J., Penn J.V., Knight K., Harzke A.J., Baillargeon G., Becker E.A. (2010), "Risk of reincarceration among prisoners with co-occurring severe mental illness and substance use disorders", *Adm. Policy Ment. Health,* 37 (4): 367-74.

- Dacwadaha madaniga marka qof maskaxda ka jiran ama maskaxda wax uga dhiman yihiin uu kaga jiro isbitaal maskaxeed, difaacista xuquuqahiisa sharci (sida dhaxalka).

Buuggani waxaynu kaga hadli doonaa labada dacwaddood ee hore. Waxyaabaha aynu hore kor uga soo xusnay ee dhibaneyaasha nugul ayaa sidoo kale qabanaya dacwadda dadka maskaxda ka jiran ama maskaxda wax uga dhiman yihiin.

Markay noqoto dadka maskaxda ka jiran ee fal-dembiyeed ku kaca[150], sida ku xusan habraaca 5.44. (a). ee Habraacyada iyo Mabaadi'da Qaramada Midoobey ee Marin-u-Helidda Kaalmada Sharci ee Nidaamayada Caddaaladeed ee Ciqaabta Kaalmada Sharci waa in la siiyaa si *"xaqiijiyo in eedaysanahu uu fahmo dacwadda loo haysto iyo natiijooyinka macquulkq ah ee dhageysiga dacwadda"*. Tani aad bay muhiim u tahay markay noqoto dadka maskaxda ka jiran iyo kuwa maskaxda wax uga dhiman yihiin ee aan awoodin inay fahmaan waxa dhacaya xilliga baadhista iyo dhageysiga dacwadda si ay isku difaacaan. Dacwadahani, doorka Qareenku waa inuu hubiyo in:

- Khabiir xanuunada maskaxda ah la amray iyo
- Haddii khabiirku uu go'aamiyey inay jirto xanuunka/dhinnaanshaha maskaxeed ee eedeysanaha, inuu hubiyo in maxkamaddu ay mudnaanta siisay ilaa iyo xadka xanuunkani, ama dhinaanshaha/awoodis la'aanta marka la qiyaasayo kaska qofka fal-dembiyeedka geystay. Awoodis la'aanta [fahamka] buuxdaa waxay keenaysaa in aan la ciqaabin. Dacwadda noocan ah maxkamaddu waa inay ciqaabta ka dhintaa eedeysanaha ama ay amartaa tallaabooyinka daaweynta ku habboon sida uu dhigayo qodobka 176 ee Xeerka Ciqaabtu.

Qodobka 25.3 ee soo jeedinta Rec(2004)10 ee Guddida Wasiirada Golaha Yurub[151] waxay lagu sheegay baahida Kaalmada Sharci ee dadka maskaxda ka khalkhalsan: *"Qaramada xubnaha ka ahi waa inay tixgaliyaan Qareen u qabashada qofka dhammaan dacwadaha maxkamadda horteeda. Marka qofku aanu is difaaci karin, qofku waa inuu yeeshaa xuquuqda inuu Qareen helo iyo si waafaqsan shuruucda qaran inuu helo Kaalmo sharci. Qareenku waa inuu marin-u-helaa dhammaan macluumaadka oo uu xaq u yeeshaa xuquuqda inuu ka doodo caddeynta maxkamadda horteeda."*

Waxaa la sheegay in Ururka Qaramada Midoobey ee Caafimaadku uu ku qiyaasayo in saddexdii Somalilander ah midkood uu ku dhacay nooc kamid ah xanuunada maskaxda, xaddi kamid ah kuwa ugu sarreeya adduunka[152]. Somaliland, qalalaasaha aan dhammaanayn ee qarankani Geeska Afrika wuxuu dhaliyey in la waayo shaqooyin, qoysas, guryo iyo hanti oo kordhiya xanuunka maskaxda.

150 Baahiyaha xubnaha qoyska dadka maskaxda ka jiran ee fal-dembiyeed ku kaca, eeg: Tsang, H.W.H.; Pearson, V.; Yuen, C.H; "Family needs and burdens of mentally ill offenders", International Journal of Rehabilitation Research: March 2002 - Volume 25 - Issue 1 - pp 25-32.

151 https://wcd.coe.int/ViewDoc.jsp?id=775685&Site=COE

152 According to an article published in the "Hiiraan Online": http://hiiraan.com/news4/2012/May/23898/ un_one_in_three_ somalis_mentally_ill.aspx

Xarunta Maskaxda Xabiib[153] waxay ka kooban tahay shabakad siddeed xarumo caafimaad iyo xarumo dhaqan celineed oo Somaliland ku yaala, oo iyadoo ay caawinayaan WHO iyo deeq-bixiyeyaasha caalamiga ahi gargaara hawlaha sharci ee ka qayb-galka dhammaan noocyada dacwadaha oo loo keeno hay'addani maskaxda. Bukaanka Xarunta Maskaxda Xabiib badankoogu waxay dhibaneyaal ku noqdeen dagaalada Muqdisho oo waa la jidh dilay ama waxaa lagu qasbay inay daawadaan dadkii ay jeclaayeen oo hortooda lagu dilayo.

Inkastoo Somaliland badankeega dadka maskaxda ka jiran lagu xidho sariirta ama lagu sii daayo dariiqyada oo ay wareegaan, iyadoo lagu dhaafo dhibaato joogto ah iyo dhaawacyo jidheed, Somaliland gudaheeda bukaannada waxaa silsiladaha laga furay ilaa 2010.

Somaliland, sida ay xusayaan wararka bilowga ah ee aanu helnay majiro qof dembi galay oo la keenay Isbitaalka maskaxda ee Hargeysa sanadkani 2013. Haseyeeshee, dadka dembiga ku kacay ee Isbitaalka la keenay ilaa iyo imika waxay ku jireen dacwado kufsi ah, weerar jidheed oo middi ah, sumayn (mid kamid ah dacwadaha ugu dhowaa waa nin sumeeyey 3 xubnood oo qoyskiisa ah), iyo dhagaxaan la tuuray oo lagu jebiyo daaqadaha gaadhiga.

Caadi ahaan, bukaannadu waxay ku qaataan 3 bilood ilaa 2 sano isbitaalka maskaxda. Haseyeeshee, waxaa jira bukaanno badan oo ku jira xabsiga Hargeysa (30 qof, bishani Maarso 2013). Qaar kamid ah lama baadhin inay maskaxda ka jiran yihiin wakhtigii dhageysiga dacwadda qaarna waxay maskaxda ka xanuunsadeen iyagoo xabsiga ku jira oo ay sababtay soocistu.

Bilowgii 2013 Xeer-Ilaaliyaha Guud wuxuu waraaq u diray Agaasimaha Guud ee Isbitaalka, taasoo ay dhakhaatiirtu baadhay in qofkii eedaysnaa uu maskaxda ka xanuunsanayey. Xaaladdani oo kale qofkani waxaa loo gudbiyaa isbitaalka maskaxda. Waxaa la sheegay in qaar badan loo gudbiyey, laakiin aanay ku jirin in badan. Waxaa baahiyaha dadka maskaxda ka jiran ku jira baahida gargaarka sharci. Bukaannada badankooga waxaa ka faa'iideysta qoysaskooda, gaar ahaan haddii waalidku dhinto iyadoo wiilkoogu uu ku jiro isbitaalka waalnida, qofna ma ogaan doono inuu helay qaybtiisii sharciga ahayd ee dhaxalka.

## 2.4. Qaxootiga, Dadka Gudaha ku Baro-kacay iyo Dadka Ajaanibka ah

Kala duwannaanshaha ka dhaxeeya qaxootiga iyo muhaajiriinta dhaqaalahu aad buu u qarsoon yahay. Markaynu ka hadlayno muhaajiriinta, waxaynu u jeednaa dadka dhulkooda ka taga si ay ugu noolaadaan meel kale. Haseyeeshee, dadka ka yimid dhulkoodu sabab isku mid ah ugamay iman sidaas darteedna waa in aanay ku jirin isku qayb oo aanay helin macaamil iskumid ah.

Markaas waxaynu u baahanahay in aynu u kala saarno:

- Dadka iskood u haajiray iyo
- Dadka aan iskood u haajirin.

153 Abdirahman Ali Awale, known as Habeb, is an advocate for the mentally ill, who opened his mental center in Mogadishu in 2005.

Dadka iskood u haajiray waa dadka u dhashay waddamo kale ee kaga tagey dhulkooga doonistooda sabab maaliyadeed ah — oo sidaas darteed, loogu yeedho *"Muhaajiriinta Dhaqaale"*— ama sababo kale (shakhsiyadeed ama sababo qoys) oo iyaga ku dhaliyey inay qaataan go'aanka ay dooranayaan meel kale oo ay ku noolaadaan. Muhaajiriinta badankoogu sababo maaliyadeed ay uga tagaan dalkooga hooyo si ay nolol fiican u helaan.

Dadka aan iskood u haajirin waa marka go'aanka inay ka qaxaan dalkooga hooyo ama meesha ay degan yihiin aanu ku xidhnayn rabitaanka qofka, haddii si kale loo yidhaahdana aanay xor u ahayn (iskood) ikhtiyaarkooda. Qaybtani waxaa kamid ah Qaxootiga, dadka gudaha ku baro-kacay iyo duruufaha qaarkood dhibaneyaasha ka ganacsiga bini-aadamka (haddii ay baro-kacaan ama lagu khasbay inay dibedda tagaan).

Sida ku xusan qeexida lagu sheegay Heshiiska Qaramada Midoobey ee la Xidhiidha Meeqaamka Qaxootiyada 1951[154] (Heshiiska Geneva) Qodobka 1.A.2 Qaxooti waa:

> *"Qof kasta oo: cabsi macquul ah oo uu ka qabo in si xun loola dhaqmo sababtoo ah nasabkiisa, diintiisa, jinsiyaddiisa, xubinnimada koox bulsheed gaar ah, ama aragtida siyaasadeed, kaga maqan dalkiisa uu u dhashay oo aanu awoodin ama cabsidani oo uu qabo aanu rajeynaynayn inuu helo ilaalinta dalkaasi".*[156]

Sababta si xun loogula dhaqmayaa waa inay noqotaa mid kamid ah shanta asbaabood uu liisteeyey Qodobka 1 A (2) ee Heshiiska Qaxootiga:

- Nasabka,
- diinta,
- Jinsiyadda,
- Xubinnimada koox bulsho oo gaar ah ama,
- Aragtida siyaasadeed.

Si xun ula dhaqanka ku dhisan asbaab kale la tixgelin maayo[156].

*Nasabka* macnahiisa ugu balaadhan ee loo isticmaalo waxaa ku jira qoomiyadaha iyo kooxaha bulsho ee isku meel ka tafiirmay.

*Diintu* waxay leedahay macno balaadhan, oo ay ku jiraan aqoonsiga koox ku talo gashay inay wadaagaan dhaqanno ama aaminsanaan isku mid ah, iyo sidoo kale si fiican ugu dhaqanka diin.

*Jinsiyadda* waxaa ku jirta jinsiyadda shakhsiyadeed. Si xun ula dhaqanka qoomiyad, kooxo isku af iyo dhaqan ah oo dadweynaha kamid ah waxaa sidoo kale la odhan karaa si xun ula dhaqamid ku dhisan jinsiyad.

154 Waxaa 28 July 1951 lagu qaatey the United Nations Conference of Plenipotentiaries on the Status of Refugees and Stateless Persons convened under General Assembly resolution 429 (V) of 14 December 1950.

155 Eeg, Handbook on Procedures and Criteria for Determining Refugee Status under the 1951 Convention and the 1967 Protocol relating to the Status of Refugees, UNHCR 1979, HCR/IP/4/Eng/REV.1 Reedited, Geneva, January 1992.

156 Kaalmada Sharci ee joojinta xaaladaha qoxoontinimo, eeg: Fitzpatrick Joan and Bonoan Rafael (2003), *Cessation of Refugee Protection,* Cambridge University Press.

*Koox bulsho oo gaar ah* waxaa lagu qeexaa dadka wadaaga xaalad, caadooyin, iyo meeqaam bulsho. Qaybtani waxay soo gashaa si xun ula dhaqanka ku dhisan mid kasta oo kamid ah afarta asbaabood ee kale. Waxaa loo isticmaalaa qoysaskii hantigoosiga ahaa ee dowladdihii soofiyeetka joogay, dadka dhulka leh (landowners), dadka isku jinsiga ee isku galmooda, dadka wax abuura iyo dadkii hore ugu jiri jiray ciidanka.

*Aragtida siyaasadeed* waxaa lagu qeexaa fikradaha aanay u dul qaadan karin maamuladu, oo ay ku jiraan ra'yiga lagu dhaliilayo siyaasadaha xukumada iyo qaababkooga. Waxaa ku jira ra'yiyada lala xidhiidhiyo shakhsiyaad (sida maamulada oo u maleeya inuu qof leeyahay ra'yi siyaasadeed oo gaar ah) xitaa haddii qofku aanu lahayn ra'yigaasi. Shakhsiyaadka qariya ra'yiyadooda siyaasadeed ilaa kadib ay ka qaxaan dalkoogu waxay yeelanayaan meeqaamka qaxootiga haddii ay caddeyn karaan in afkaartoodu ay u badan tahay inay ku keeni karto in si xun loola dhaqmo haddii ay dalkooga ku noqdoon.

Magan-geliyo doon — waa kuwa ka raadinaya meeqaam qaxootinimo waddan kale — caadi ahaan waxay u baahan yihiin inay shakhsiyan sameeyaan in cabsidooda in si xun loola dhaqmaa ay macquul tahay oo ay maraan nidaamka sharci ee waddanka martida loo yahay uu ku go'aamiyo inay u qalmaan meeqaamka qaxootinimo. Inkastoo meeqaamka qaxootinimo ay caadi ahaan tahay in lagu go'aamiyo shakhsi ahaan, waxaa sidoo kale soo baxay xaalado kooxaha ku baro-kacay duruufaha tilmaamaya in xubnaha kooxda loogu tixgelin karo shakhsi ahaan inay yihiin qaxooti. Haseyeeshee, xilliyada qaxu badan yahay, macquul ma noqon karto in dalka martida loo yahay uu sameeyo baadhitaan shakhsi ah. Duruufahani oo kale, gaar ahaan marka dadku ay u qaxayaan sababo isku mid ah, waxaa lagu dhawaaqi karaa go'aaminta meeqaamka qaxootinimo ee 'kooxda' ah, taasi oo qof kasta loo tixgaliyo qaxooti, markaanay jirin caddeyn sidaasi ka duwani.

Dadka laga yaabo in lagu qasbay inay uga qaxaan dhulkooga sababo lamid kuwa qaxootiga laakiin aan ka gudbin xuduud caalami ah, haseyeeshee u baahan ilaalin la lamid ah ta qaxootiga waxaa loogu yeedhaa dadka gudaha ku baro-kacay[157]. Sida ku xusan Mabda'a 4.2 ee mabaadi'da habraaca baro-kacista gudaha *"dad gudaha ku baro-kacay oo la hubo, sida carruurta, gaar ahaan dadka yar yar ee aan la wehelin, hooyooyinka la filayo, hooyooyinka wata carruurta yar yar, dumarka guriga, dadka naafada ah iyo dadka waayeelka ah, waa in la siiyaa ilaalinta iyo gargaarka ay u baahan tahay xaaladdooda iyo wax ka qabashada ay xisaabta ugu jirto baahiyahooga gaarka ahi"*.

Qaxootiga adduunka badankoogu waxay sugaan xalalka xooga badan ee duruufahooga. Inkastoo badanka laga siiyo magan-geliyo ku meel-gaadh ah ama kooban waddamada jaarka ah, ma awoodaan inay sharciyeystaan meeqaamkooga ama ay soo dhex galaan. Xuquuqdooda dhaqdhaqaaq iyo shaqada badanaa aad baa loo xaddidday, fursado waxbarasho iyo dib udhis badanaa majiraan ama aad baa loo waayey. Qaxootiyadani sidoo kale waxaa soo weerari kara ciidanka nabedgaliyada ee maxalliga ah ama ciidanka xuduudka ka soo talaabay oo ka yimid dalkay ka soo jeedaan. Bisha Juun 2011 UNHCR waxay ku qiyaastay tirada qaxootiyada 15.1 milyan[158].

157 See, UNHCR Guiding Principles on Internal Displacement. Also, Amnesty International (1997), *Africa: In Search of Safety - the Forcibly Displaced and Human Rights in Africa.*

158 See, UNHCR Global Report 2013.

Qeexitaanka 1951 ee Heshiiska Qaxootiga waxaa aqbalay Heshiiska lagu Maamulayo Qaybaha Gaarka ah ee Dhibaatooyinka Qaxoootiga ee Afrika, ee uu ansaxiyey Ururka Midowga Afrika sanadkii 1969. Qeexitaanka waa la balaadhiyey oo waxaa lagu daray dadka kaga taga dhulkooda si xun oo loola dhaqmayo ma aha keliya laakiin sidoo kale sababtoo ah tallaabooyinka gardaro oo dalkooga dibedda ka yimid, la qabsaday ama kaga bateen awoodo ajaanib ah ama rabshado khatar ah oo nidaamka kharibay.

Heshiisyadani caalamiga ah iyo gobol ee soo socda ayaa go'aamiya min-qiyaaska ilaalinta qaxootiga iyo dadka soo baro-kacay:

- Heshiiska Qaramada Midoobey ee la xidhiidha Meeqaamka Qaxootiga[159];
- Xeer-hosaadka Qaramada Midoobey ee la xidhiidha Meeqaamka Qaxootiga [160];
- Heshiiska lagu Maamulayo Qaybaha Gaarka ah ee Dhibaatooyinka Qaxoootiga ee Afrika[161];
- Heshiiska lagaga soo hor-jeedo Jidh-dilka iyo noocyada kale ee Arxan-darrada, bini-aadam-darrada ama ula Macaamilka sida Bahdilan ama Ciqaabta (Heshiiska Qaramada Midoobey ee lagaga soo horjeeda Jidh-dilka)[162];
- Mabaadi'da Habraaca Baro-kacista Gudaha [163].

Waa in la ogaadaa in marka laga yimaado dhawacyada jidheed iyo macaluusha boqolkiiba inta badan qaxootiyadu ay yeesheen astaamaha Xaaladda walaaca dhibaatada laga soo gudbay ka dhashay (PTSD) oo ay weheliyaan saameynta kor lagu soo sheegay[164].

Qaxootiga iyo bara-kacayaashu waxay muujiyaan khatarta badan ee u nuglaanshaha tacadiyada galmada iyo jinsiga ka dhasha, ka ganacsiga dadka iyo dhibanenimada ka timaad dembiileyaasha kooxaha isku abaabula. Gargaarka sharci waa in si dhakhso loo siiyaa si dadkaasi kor ku xusan ay:

- Marin ugu helaan habraacyada go'aaminta meeqaamka ('status'),
- Uga feejignaadaan in loola macaamilo sida muhaajiriin ku soo xadgudbay ama si sharci-darro u degay dhulka oo khatar u gelinay oggolaansho dambe, tarxiilid degdeg ah, dib u celin iyo sidoo kale,
- Iskaga difaacaan dacwadaha inay dembiyada galaan ay ku qasbaan kooxo abaabulan. Gargaarka sharci ee la siinayo dacwaddani waa in aanay lamid noqonin dadka kale ee eedaysan, laakiin waxaa jirta aqoon gaar ah oo loo baahan yahay. Qareenka difaacu waa inuu si fiican u yaqaanaa Heshiiska Jiniifa 1951 iyo

159 Waxaa ansaxiyey Shirkii Ergayada Qaramada Midoobey ee Meeqaamka Qaxootiyada iyo Dadka aan Waddanka lahayn ee 28 July 1951 oo layskugu yeedhay wareegtada Golaha Guud 429 (V) of 14 December 1950.

160 Waxaa ansaxiyey wareegtada Golaha Dhaqaalaha iyo Bulshada ee 1186 (XLI) ee 18 November 1966 waxaana lagu soo qaatay wareegtada Golaha Guud 2198 (XXI) ee 16 December 1966.

161 Waxaa ansaxiyey Ururka Midowga Afrika 10 September 1969.

162 Waxaa ansaxiyey Golaha Guud ee Qaramada Midoobey 10 December 1984.

163 Waxaa ansaxiyey Golaha Guud ee Qaramada Midoobey 1998.

164 Adduunka, Tobannaan kun oo qaxooti ah ama qaxooti hore oo degay waddamada Galbeedka ayaa laga yaabaa inay ku jiraan xaaladda waalaca dhibaatada ka dhashay. See, Fazel M., Wheeler J., Danesh J., *Prevalence of serious mental disorder in 7000 refugees resettled in western countries: a systematic review,* Lancet, 2005 April 9–15;365(9467):1309–14.

xeer-hoosaadka la xidhiidha Meeqaamka Qaxootiga (Protocol of New York), iyo sidoo kale Heshiiska Maamulaya Qaybaha Gaarka ah ee Dhibaatooyinka Qaxootiga ee Afrika.

Sida ku xusan Qodobka 31 ee Heshiiska Jiniifa oo ay ku jiraan magan geliyo dooonku waxay leeyihiin xuquuqda inaan lagu ciqaabin soo gelista sharci-darrada ah ee dhulka Qaranka martida loo yahay. Waxaa intaa dheer, sida ku xusan Qodobka 32 waxay leeyihiin xuquuqda inaan la caydhin, marka laga reebo markay jiraan shuruudo la hubo oo si adag u qeexan.

Mabda'a inaan qofka dib loo soo celin ('non-refoulement',) oo mamnuucaya ku celinta qaxootiga dhulkii ay naftooda iyo xorriyaddooda khatarta la geliyey, waxaa lagu yaqaan inuu yahay xeer dhaqamadeedka sharciga caalamiga ah. Hadduu sidaa yahayna wuxuu qabanayaa dhammaan Qaramada, iyadoon loo eegayn inuu qaatey Heshiiska 1951 ama Xeer-hoosaadkiisa 1967[165]. Qaxootiga raadinaya ilaalintu waa in aan laga hor istaagin gelitaanka dal maadaama ay tani noqonayso dib u celin ('refoulement').

Si xun ula dhaqmida waa in laga duwaa ciqaabta fal-dembiyeedka sharci. Dadka ka soo qaxay dacwad lagu oogey ama ciqaabta fal dembi ah caadi ahaan ma aha qaxooti[166]. Waa in la xasuusnaadaa in Qaxoontigu uu yahay dhibane ama uu noqon lahaa dhibane caddaalad-darro ee aanu ahayn caddaalad ka carar.

Haseyeeshee, Kala duwannaanshahaasi sare mararka qaarkood wuu qarsoomi karaa. Marka ugu horreysa, qofka ku kacay dembiga sharci ah waxaa dushiisa noqon karta ciqaab xad dhaaf ah, oo noqon karta si xun ula dhaqmid marka loo eego macnaha qeexida. Waxaa intaa dheer, dacwad oogista ciqaabta sabab lagu xusay qeexida (tusaale ahaan, marka amar diiniya oo *"sharci-darro"* la siiyo ilmaha) ayaa iyada lafteedu noqon karta si xun ula dhaqmid.

Mar labaadka, waxaa jiri kara xaalaado iyadoo qofku uu ka cabsanayo dacwad oogista ama ciqaabta dembiga sharci uu sidoo kale lahaan karo *"cabsi macquul oo in si xun loola dhaqmo ah"*. Xaaladahani qofka ku jiraa waa qaxooti. Haseyeeshee, waxaa lagama-maarmaan noqon karta in la eego in dembiga laysku hayaa aanu ahayn dabeecad khatara oo codsadaha dhigaysa xadka mid kamid ah qaybaha la diiday.

Si loo go'aamiyo in dacwad oogistu ay noqonayso si xun ula dhaqmid, waxaa lagama-maarmaan noqonaysa in lagu noqdo shuruucda dalka ay khusayso, iyadoo ay macquul tahay in sharcigu aanu waafaqsanayn min-qiyaaska xuquuqda aadamaha ee la oggol yahay. Haseyeeshee, sida ugu badan sharcigu ma noqon karo mid takoor ah ee waa ku dhaqankiisa. Dacwad oogista dembiga lidka ku ah 'nidaamka bulshada" sida qaybinta qoraallo ay wax ku qoran yihiin, ayaa noqon karta ujeeddada si xun ula dhaqmida qofka oo ay asbaabtiisu tahay qoraalka oo ay siyaasadi ku jirtay.

Dacwadaha noocan ah, iyadoo ay sabab u tahay adkaanshaha in la qiimeeyo sharciga dal kale, maamulada qaranku waa inay badanaa go'aan qaataan iyagoo ka qiyaas qaadanaya sharcigooda. Waxaa intaa sii dheer, xalku wuxuu noqon karaa in la raaco mabaadi'da ay dhigayaan heshiisyada kala duwan oo caalami ah, gaar

165 UNHCR (2011), The 1951 Convention relating to the status of refugees and its 1967 Protocol, p.5.

166 See, UNHCR, Handbook on Procedures and Criteria for Determining Refugee Status under the 1951 Convention and the 1967 Protocol relating to the Status of Refugees, paras 56 to 60.

ahaan Heshiisyada Caalamiga ah ee Xuquuqda Aadamaha, oo ka kooban rabitaano qabanaya qaramada xubnaha ka ah waana heshiisyo qaramo badan oo xubno ka ah Heshiiska 1951 ay qaateen.

Haseyeeshee, xaaladaha qaar qaxootiyada waxaa laga qaadi karaa meeqaamka sababo gaar ah dartood. Heshiiska 1951, Qodobka 1 F wuxuu sheegayaa dadka qaybo kamid ah oo aan loo tixgalin inay u qalmaan ilaalinta caalamiga ah. Dadka noocan ahi waa kuwa ku kacay:

*"(a) dembi lid ku ah nabadda, dembi dagaal, ama dembi lid ku ah bini-aadamnimada, oo sida heshiisyada caalamiga ah lagu sheegay inay diidaan siintooda, dembiyadani dartood;*

*(b) dembi culus oo aan siyaasad ahayn oo uu ku galey dibedda dalka qaxootiga kahor intii aan qaxooti ahaanta looga oggolaan dalkaasi;*

*(c) Qofka galey dembi khilaafaya ujeeddooyinka iyo mabaadi'da Qaramada Midoobey."*

Caadi ahaan waxay noqon doonta wakhtiga nidaamka lagu go'aaminayo meeqaamka qaxootinimo ee qofka marka ay soo baxayaan xaqiiqooyinka keenaya diidmada qaybahani. Haseyeeshee, waxaa sidoo kale dhici karta in xaqiiqooyinka diidmada la ogaado keliya kadib marka qofka loo aqoonsado qaxooti. Xaaladahani, qaybta diidmadu waxay sababaysaa in laga noqdo go'aankii hore ee la qaatay. Waxaa u baahan in la ogaado in dembiga lagu xukumo waddanka martida loo yahay aanu keenayn qaybta diidmada ah ama tirtirista meeqaamka qaxootiga.

Waxaana u baahan in hoosta laga xariiqo in keliya dembiga uu ku galo ama la aaminsan yahay inuu ku galay codsadahu *"dibedda dalka qaxootiga kahor intii aan qaxooti ahaanta looga oggolaan dalkaasi"* ay asbaab u tahay diidmada.

Qaxootiga dembi culus ku gelaya dalkii uu qaxootiga ka ahaa dhexdiisu waxaa la marinayaa hab waafaqsan sharciga dalkaasi. Xaaladaha sii xun, Qodobka 33 faqraddiisa 2 ee Heshiiskani waxay oggolaanaysaa in lagu celiyo ama uu ku noqdo dalkiisii hooyo ee hore haddii intuu dembi galo lagu helo xukun kama dambeys ah oo dembi *"gaar ahaan culus"* oo uu khatar ku keenay bulshadii dalka uu qaxootiga ka yahay

Waxa noqonaya dembi *"culus"* oo aan siyaasad la xidhiidhin ujeeddada qaybtani diidmada ah way adag tahay in la qeexaa, gaar ahaan maadaama kelmada *"dembi"* ay leedahay macnayaal kala duwan nidaamyada sharci ee kala duwan dhexdooda. Waddamada qaarkood, kelmada *"dembi"* waxaa loo yaqaan keliya fal-dembiyeedyada dabciga khatarta ah leh. Waddamo kalena waxay ka kooban tahay wax kasta tuugada fudud ilaa dilka. Haseyeeshee, xaaladdani, dembiga *"culus"* waa inuu noqdaa dembi weyn ama fal ay ciqaabtiisu badan tahay. Haseyeeshee, sida ku xusan fasiraada Heshiiska Jiniifa dabaqista qaybtani diidmada, waxaa lagama-maarmaan ah in la sameeyo dheelitir ka dhaxeeya dabciga dembiga la aaminsan yahay inuu galay codsaduhu iyo xaddiga si xun ula dhaqmida laga baqayo. Haddii qofku uu cabsi macquul ah ka qabo in si xun oo aad u daran loola dhaqmo, sida si xun ula dhaqan khatar gelinaya noloshiisa ama xorriyaddiisa, dembigu waa inuu cuslaadaa si isaga loo diido. Haddii si xun ula dhaqmida laga baqayaa ay culays yar tahay, waxaa lagama-maarmaan noqonaysa in la eego dabciga dembiga ama dembiyada la aaminsan yahay in la galay si

loo loo ogaado in codsaduhu aanu run ahaantii ahayn caddaalad ka carar ama in dabeecaddiisa dembiilenimo aanay ka culays badanayn dabeecaddiisa inuu yahay qaxooti dhab ah[167].

## 2.5. Marka Eedaysanahu uu yahay Dhibanaha

Waxaa aad u muhiim ah in badanaa la xasuusnaado in arrimahu aanay noqon karin sida loo arkayo. Sidaas darteed, waxay u badan tahay, in dad lagu keenay inay yihiin dad fal-dembiyeed ku kacay ay xaqiiqo ahaan yihiin dhibaneyaal. Gaar ahaan, dembiyada ay carruurtu tahay dadka fal-dembiyeedka geystay, ilmahu wuu xishoon karaa ama xitaa wuxuu noqon karaa mid aad u dhibaateysan iyadoo lagu qasbay inuu dembiga ku kaco taasoo aanu doonayn ama aanu awoodayn inuu ka hadlo runta. Badanka carruurtaasi way aamusnaadaan; aamusnidoodaasi ayaa loo fasirtaa inay dembiileyaaal yihiin[168].

Mararka qaarkood, (sida kor lagu xusay dacwadaha la xidhiidha dhibaneyaasha), waxaa dhici karta – saameynta dhibanenimada- in dadka dhibaneyaasha laga dhigay ay yeeshaan xasuus kala go'da. Xaaladdani, waxay dareemi karaan (cadaadiska su'aalaha ay boolisku weydiinayaan) in ay buuxiyaan meelaha bannaan iyagoo ka baqaya haddaanay si sax ah u jawaabin in sarkaalka booliska ah (ama dacwad ooguhu) uu u malayn karo inay been sheegayaan. Haseyeeshee, tani waxay leedahay khatarta inay ka keento natiijo taban wixii ay dhibaneyaashu filayeen oo ay run ahaantii ka dhigto sarkaalka booliska ahi inuu aamino in ay been sheegayaan.

Haddii booliska, Dacwad oogaha iyo Garsoorahu aanay ka war hayn dhibta qofka haysata waxay u badan tahay inay ku keenaan cabsi muuqata ama qarsoon. Sidaas darteed, waa inay si gaar ah uga war qabaan dhibaatada xasaasiga ah oo ay uga feejignaadaan dib u dhibaateynta dhibanaha/maraga[169].

Qiraalka dembiga waa inuu iskii u bixiyay eedaysanahu isagoo maskaxdiisu taam tahay. Tani macnaheedu waa in qiraalka eedaysanahu uu sharci-darro yahay xaaladahani soo socda:

- Haddii xaaladda maskaxeed ee eedaysanahu ay ku keentay inuu qirto dembiga;
- Haddii qiraalka lagaga soo saaray tacadi, cadaadis ama qaab kale oo sharci-darro ah, sida kor lagu soo sheegay; ama
- Haddii qiraalka la sameeyey iyadoon loo madax-bannaanayn sababo kale awgood, sida eedeysanaha oo qirtay isagoo ka baqaya inuu ku qabsan doono qofka runta ah ee fal-dembiyeedka ku kacay.

Si loo baadho qiraalka lagu qanacsan yahay su'aalaha soo socda waa in la weydiiyaa:

167 eeg UNHCR, Handbook on Procedures and Criteria for Determining Refugee Status under the 1951 Convention and the 1967 Protocol relating to the Status of Refugees, para 156.

168 Dhacdada dhibaata leh kadib, sida kor ku xusan dadka badankoogu; caruurta iyo dadka waa weynba, waxaa ku dhici karta saameyn jidheed iyo tu maskaxeed ba. Tani waa qaybta dabiiciga ah ee uu aadmigu kaga jawaabo walaaca. Xaaladaha dhibtu qofka soo marto saameyntani way sii jiri kartaa oo waxay sababi kartaa inay si ku meel gaadh ah xasuustu uga lunto (calaamadaha 'xaaladda walaaca dhibta laga soo gudbay ka dhasha' *(PTSD).* eeg, Barbara Mitchels, "Let's Talk: Developing Effective Communication with Child Victims of Abuse and Human Trafficking," UNICEF, 2004, accessed at www.childtrafficking.org.

169 Ibid.

- *Qiraalka si cad ma loo sameeyey?*
- *Ma waxay ka kooban tahay waxyaabo lagu daray ama iska hor imanaya?*
- *Eedaysanahu ma qof saddexaad ayuu ku xusayaa qiraalkiisa?*

Qareenka difaacu waa inuu joogaa meel uu ka hubin karaayo qiraalka uu bixinayo eedaysanahu wakhtiga baadhista isla markaana waa in aanu ku qancin qiraalka kediska ah ee uu bixiyo qofka la wareysanayaa. Haddii eedaysanahu uu ku jiro xaaladda dhibaatada laga soo gudbay waxay u badan tahay, sida kor ku xusan, inuu naftiisa ku eedeeyo wixii dhacay oo uu eedda iska qaato isagoo qiranaya wax aanu weligii ku kacin.

Marka la qiimaynayo qiraalka qofku wuxuu u baahan yahay in la hubiyo:

- Dabeecadda Qiraalka (ma si madax-bannaan buu ku yimid mise kumay iman?) iyo
- Wuxuu Qiraalku ka kooban yahay (muxuu ilmahu qiranayaa?)

Ugu horreyn, dabeecadda qiraalka markay noqoto, tixgalin gaar ah waa in la siiyaa arrimahani soo socda: mararka qaarkood, gaar ahaan markay noqoto carruurta, waxay rabaan inay dareemaan inay muhiim yihiin oo dareenka oo dhami uu xaggooda u soo jeedo, iyagoo iska dhaafaya in haddii ay ka been sheegaan dembiga ay saameyn taban ku yeelanayso noloshooda. Sidaas darteed, waxaa muhiim ah in hoosta laga xariiqo ilamaha saameynta qiraalkiisa iyo xadhiga dambe. Waa in la ogaadaa in male-awaalka (imagination) iyo go'aan gaadhista ('judgmental'), male-awaalku uu yahay ka ugu horreeya ee ku abuurma maskaxda ilmaha oo uu heerka ugu sarreeya gaadho inta u dhaxaysa da'da 3-5 sano. Da'da 5 ilaa 10 sano waa dheelitirka ka dhaxeeya male-awaalka iyo go'aanka kadibna mar kale male-awaalka ayaa kor u kaca wakhtiga qaanqaadhnimada (12 ilaa 18 sano)[170]. Tani macnaheedu waa in ilmaha laga filayo inuu been sheego, tanina waa qayb caadi ah oo

170 Cilmi baadhis ay sameysay Waaxda Cilmi Nafsiga ah, Jaamacadda California ee Maraykanka ayaa baadhay horumarka awoodda lagu eegayo xooganaanta xasuusta iyo maqnaashaha xasuusta ee wakhtiga soo celinta. Laba tijaabo ayaa carruur 7-jir ah, 10-jir ah, iyo dad waa weyn ayaa ansaxiyey oo haddana malo-awaalay iyagoo ansaxinaya talloobooyin is daba socda oo aanay hore u arag iyo kuwo la wada yaqaan. Laba todobbaad kadib, waxay dhammeytireen tijaabo xasuusta ah oo la weydiiyey inay sheegaan inay tallaabo kasta ansaxiyeen, ay mala-awaaleen ama ay cusub tahay iyo inay bixiyaan go'aan ay ku kalsoon yihiin jawaab kasta. Natiijooyinku waxay muujiyeen in ka qayb-galayaasha kooxaha da' kastaa ay si dhmameystiran u hubiyeen kala duwannaanshaha xoogganaanta xasuusaha tallaabooyinka la ansaxiyey iyo xasuusaha tallaabooyinka la malo-awaalay. Haseyeeshee, marka la barbardhigo 10-jirka iyo dadka waa weyn, 7-jiradu waxay muujiyeen hoos udhaca hubinta xasuusta kala duwanaanshaha xoogganaanta xasuusta ee tallaabooyinka la malo-awaalay iyo sidoo kale hoos u dhaca hubinta xasuusta maqan. Natiijooyinku waxay iftiimiyeen horumarro xasuusaha ah oo saameyn muhiim ah ku leh saxitaanka xasuusta. eeg, Ghetti S., Lyons K.E., Lazzarin F., Cornoldi C., "The development of meta-memory monitoring during retrieval: the case of memory strength and memory absence", *Journal of Experimental Child Psychology,* 2008 Mar.; 99(3): 157-81.

kamid ah nidaamka horumarkiisaa[171]. Tani waa sababta dadka qaadh-gaadhaya aan loogu tixgelin inay yihiin marag fiican, sababtoo ah waxay u badan tahay inay meelaha bannaan ku buuxin doonaan male-awaalkooda. Isla sababtaasi ayaa ilmaha si kedis ah qiraalka u bixiyey laga yaaba inuu noqdo mid lagu qasbay inuu been sheego[172]. Sida ku xusan faallada Lr. 10 ee Heshiiska Xuquuqaha Carruurta Child (tilmaanta 57): *"da'da ilmaha, horumarka ilmaha, dhererka su'aalaha lays weydiinayo, faham la'aanta ilmaha, cabsida saameynta aanu garanayn ama suurtogalnimada muuqata ee xadhiga ayaa keeni kara qiraal aan run ahayn. Taasi oo noqon karta xitaa inay u sii badnaato haddii abaal-marin la ballanqaado sida: 'waxaad tegi doontaa guriga isla marka aad noo sheegto sheekada runta ah', ama ciqaab fudud ama sii deyn loo ballanqaado."* Haseyeeshee, tani macnaheedu ma aha in ilmaha aan loo dhegaysan marag ahaan, laakiin keliya waa in imtixaanka marag-furka ama qaybo kamid ah la qaataa. Gaar ahaan qiraallada fal-dembiyeedyada ee carruurta waa in la eegaa iyadoo laga shakiyayo[173].

Waxaa intaa dheer, waxaa sidoo kale laga yaabaa in qofka eedeysanaha ahi uu ku jiro xaalad uu qof kale iska baadayo, sida dhibanta lagu qasbay inay jidhkeeda ka ganacsato ee uu qofkii ka faa'iideysanayey ugu hanjabay inuu qoyskeeda u sheegi doono inay si badheedh ah jidhkeeda uga ganacsanaysay. Waxaa laga waramay in dacwad uu qof ku qasbay carruur inay wax xadaan oo dabadeed [markii la qabtay] uu ugu hanjabay in haddii ay sheegaan aqoonsigiisa uu dili doono qoysaskooda. Carruurtu markii la xidhay waxay qaateen dhammaan eedihii, inkastoo run ahaantii ay ahaayeen dhibaneyaasha dacwaddani.

Dabcan, qiraalka qudha, ee ka baxsan caddeyn kale malaha sharciyad. Qareenka difaacu waa inuu ku qanciyaa booliska (marka dambena dacwad oogaha iyo maxkamadda) inay si wadajir ah ula qiimeeyaan macluumaadka wax caddeynaya cilmi-baadhis ay ku sameeyaan xaaladda eedeysanaha. Haddii eedaysanahu

171 Eeg sidoo kale cilmi-baadhis kale oo ay sameysay Waaxda Cilmi-nafsiga ee Jaamacadda Yale ee Maraykanku, kala duwannaansha da'da ee hubinta runta dhacdooyin laga wada shaqeeyey ayaa la baadhay dad iskugu jira 4-jir, 8-jir, 12-jir, iyo dad waa weyn. Ka qayb-galayaashu tallaabooyinka qaarna way wada shaqeeyeen kuwo kalena way malo-awaaleen. Kadib, ayaa la weydiiyey inay sheegaan in tallaabo kasta la qabtay, malo-awaaley ama ay cusub tahay. Tijaabadani xasuusta ayaa toddobaad kadibna lagu soo celiyey, 4-jirka ayay kaga adkayd in ka soo saaraan tallaabooyinka la malo-awaaley labada kooxood ee kale ee da'doodu ugu weyn tahay. Tallaabooyinka la malo-awaaley ayaa badanaa lagu khaldayey kuwa la qabtay in ka badan inta kuwa la qabtay lagu khaldayey kuwa la malo-awaaley, inkastoo arrintani ay badanaa keli ku tahay labada kooxood ee da'doodu ugu yar tahay, hubinta xaqiiqadu way yaraanaysay xilliba xilliga uu ka dambeeyo, gaar ahaan arrimaha la malo-awaaley. Tallaabooyinka uu ka qayb-galahu ahaa sababta tallaabada ay ka takoorid badnaa kuwa uu qof kale sababta tallaabada leeyahay. Shayga la isticmaalayo ayaa sii kordhinayey takoorida tallaabooyinka la malo-awaaley, gaar ahaan dib u dhaca kadib. Isku ekaanshaha tallaabooyinku wax saameyn ah maleh. Sida wax looga qabanayo marag-furka ilmaha goob-joogaha ah ayaa lagaga hadlay. eeg, Sussman A.L., "Reality monitoring of performed and imagined interactive events: developmental and contextual effects", *Journal of Experimental Child Psychology,* 2001 June; 79(2): 115-38. Also, Cohen G., Faulkner D., "Age differences in source forgetting: effects on reality monitoring and on eyewitness testimony", *Psychology and Aging,* 1989 Mar.; 4(1): 10-7; McDaniel M.A., Lyle K.B., Butler K.M., Dornburg C.C., "Age-related deficits in reality monitoring of action memories", *Psychology and Aging,* 2008 Sept.; 23(3): 646-56.

172 A mythomaniac is a person lying or exaggerating to an abnormal degree. See, Dike, Charles C. "*Pathological Lying: Symptom or Disease?*", Psychiatric Times, June 1, 2008.

173 In one study of 125 proven false confessions, 33% involved juveniles. See, Steven A. Drizin (Northwestern University), and Richard A. Leo (University of California), (2004), "The Problem of False Confessions in the Post DNA World", *North Carolina Law Review*, 82:891-1007.

uu carruur yahay cilmi-baadhis dheeraad ah oo ilmaha xaaladdiisa bulsho, dhaqan iyo qoys iyo sidoo kale faahfaahinta shakhsiyaddiisa ah ayaa loo baahanaya.

*Tusaale* [175]

[Qoraal lagu daabacay [jariiradda] The National May 02, 2012]

ABU DHABI // Cinwaan:

"Tobanka Soomalida ah ee afduubtay markabka Imaaraadka ee MV Arrilah waa lagu qasbay inay weerarkaasi fuliyaan, Qareenkooda ayaa ku dooday"

Axmed Al Othali wuxuu shalay Maxkamadda Federaalka u sheegay in aanay nimankani lahaan karin masuuliyadda weerarka sababtoo ah Madaxooga oo ah nin Iran u dhashay oo lagu magacaabo Cabdulmajiid ayaa ugu hanjabay inuu dili doono haddii aanay ka qayb-qaadanin.

"Dhammaanteen waynu garanaynaa xaaladda walaaladeena Somaliland iyo faqriga haysta, markii caalamku uu albaabada ka xidhay eedaysanayaasha, waxay ka raadsadeen shaqooyin qof loogu yeedho Cabdullaahi," ayuu yidhi Al Othali.

Wuxuu yidhi ragga waxaa shaqo lagu siiyey badda laakiin waxay ka yaabeen inay ogaadeen inay u shaqaynayaan qof Iran u dhashay oo "may ogayn hawlaha laga doonayo inay qabtaan ".

Markii gaadhigoodu uu soo gudbay dhawr wadiiqo oo xagga MV Arrilah ah, waxaa raggani lagu amray inay markabka ku boodaan "markii ay diideenna waxaa loogu hanjabay dil"

Mr. Al Othali wuxuu sidoo kale dafiray inay raggu beegsadeen kuwii markabka dul joogay. "Qoraallada dacwaddu waxay xuseen inay yaaleen hub fudud iyo RPG," ayuu yidhi.

"Haddii beegsigoodu uu ahaa inay helaan la haystayaasha ku dhuumanayey qolka injiinka, miyaanay RPG-yadu awoodin inay gubaan albaabka oo uu furmo?"

Mud. Al Othali wuxuu yidhi in kuwa dul joogay MV Arrilah ee isku dhuumanayey qolka injiinku aanay aqoonsan karayn afduubayaashooda, oo aanay arki karayn wixii ka dhacayey qaybaha kale markabka.

"Waxaan ka arkay muuqaalka markabka YouTube-ka. Wuu baaladhan yahay," ayuu yidhi.

Hadallada eedaysaneyaasha iyo maragyadu isku mid ayey ahaayeen, "xitaa khaladaadkii higaada ayaa lagu celceliyey ", ayuu yidhi Mud. Al Othali, isagoo ku daraya shakiyadani ka soo baxay baadhista Dacwad oogaha Dowladda.

"Turjumaanka ayaa saxeexay qiraallada eedaysanayaasha oo lagu sameeyey Carabi – ilaa iyo goorma ayuu turjumaan u saxeexi doonaa eedaysane?"

Mud. Al Othali wuxuu ku cawday in aanay jirin warbixin caafimaad oo khuseysa dhaawacyada la sheegayo inay soo gaadheen kuwii dul joogay MV Arrilah, iyada oo qalabka markabka saaran ee la mid ah sanduuqa madow ee diyaaraha, aan weli la soo helin.

174 http://hiiraan.com/news4/2012/May/23895/pirates_were_forced_to_raid_uae_vessel.aspx.

Toban kani Soomalida ah ayaa la qabtay markii kooxaha ka hortaga argagaxisadu ku dawakheen markab siday saliid badan Abriil sanadkii hore kadib markii lagu afduubay badda carabta, bariga Cumaan, isagoo ka yimid Uustareeliya kuna socday Jebel Cali.

Markabkani oo 37,000- ton ah waxaa leh laba shirkadood oo hoos yimaada Shirkadda Saliida Qaranka ee Abu Dhabi, badbaadintuna waxay dhacday wakhtiga la muujinayey sida ay Imaraadka uga go'an tahay inay wax uga qabtaan budhcad badeeda.

- *Galaaska ayaa laga filayaa inay ka hadlaan dacwaddani.*

## 2.6. Ilaalinta Maraga

Sida kor ku xusan, maragyadu waa tiirka aasaas u ah dacwadda maxkamadda. Waa caddeynta waxa ay maragyadu awoodda u leeyihiin inay maxkamadda ka bixiyaan, qaabka caddeynta loo bixiyey iyo mudnaanta uu garsoorku siiyo caddeyntaasi ayaa go'aamiya natiijada dacwadda. Awoodda maragyadu ay ku bixin karaan caddeyn aan wax la yeeli karin iyo markaanay jirin wax cabsi oo uu ka qabo natiijo aan la doonayn oo ka soo baxda inuu ka bixiyo caddeyn lid ku ah dadka fal-dembiyeedka ku kaca maxkamadda dhexdeeda ayaa sugi karta in la ciqaabo dadka fal-dembiyeedka ku kaca.

Sida ku xusan Habraacyada iyo Mabaadi'da Kaalmada Sharci ee Nidaamyada Caddaaladeed ee Ciqaabta, Kaalmada Sharci waa in loo qorsheeyaa sidoo kale maragyada (Mabaadi'da 5.25). Gaar ahaantiiba, Habraaca 8 wuxuu sheegayaa:

*"48. Qaramadu waa inay qaadaan tallaabooyin ku filan, markay habboon tahay, inay xaqiijiyaan in:*

*a) Hay'adaha ay khusaysaa si degdeg ah ugu wargeliyeen maragyada xuquuqahooga wargelinta, xaqa ay u leeyihiin inay la gargaaro lana ilaasho iyo sida marin loogu helo xuquuqahaasi;*

*b) Talo, gargaar, xarumo daryeel iyo taageero ku habbon la siiyey maragyada dembiyada dhammaan nidaamka caddaalaadeed ee ciqaabta;*

*c) Maragyada carruurta ahi ay heleen gargaarkii sharci ee loo baahnaa si waafaqsan Habraacyada Arrimaha Caddaaladda ee Khuseeya Carruurta Dhibaneyaasha iyo Maragyada dembiga ah;*

*d) Hadalka kasta ama marag-furka uu bixiyo maragu dhammaan marxaladaha nidaamka caddaaladeed ee ciqaabta in si sax ah loo fasiray loona turjumay;*

*49. Qaramadu waa inay markay habboon tahay maragyada siiyaan Kaalmo sharci.*

*50. Duruufaha ay habboon tahay in maragyada la siiyo Kaalmo sharci waxaa ku jira, laakiin aanay ku koobnayn:*

*a) Marka uu maragu khatar ugu jiro inuu naftiisa wax ku caddeeyo;*

*b) marka amniga iyo wacnaanta maragu ay khatar ku jiraan ka dhalatay meeqaamkoogani, iyo*

*c) Marka maragu uu gaar ahaan nugul yahay, oo ay ku jirto markuu baahiyo gaar ah qabo."*

Dhibaneyaasha meeqaamka maragnimada waxaa u weheliya meeqaamkooda dhibanenimo, maadaama ay yihiin maraga ugu muhiimsan dacwadda ciqaabta ah. Maragyada[175] iyo xubnaha qoyskooga waa in la ilaashaa noloshooda, jidhkooda iyo noloshooda gaar ahaaneed inta ay socoto dacwaddani garsoorku.

Arrinta ilaalinta nolosha gaarka ah ee maragyadu waxay u baahan tahay su'aalahani soo socda:

- Waa maxay macnaha nolosha gaarka ah?
- Waa maxay macnaha *"ilaalin"*? iyo
- Waa ayo cidda aynu ka ilaalinayno maraga iyo dhibanaha (iyo qoysaskooda)? Iyo ilaa intee?

Waxaa la yidhaa in aragtida *"Sirta qarsoon"* ay khusayso dhacdo kasta oo ka dhacda xayn-daabka qofnimo ama qoys oo aanu qofku doonayn inay u muuqato dadweynaha.

Ilaalinta sirta qarsoon ma khusayso oo keliya nolosha qofnimo ama qoys guud ahaan, laakiin sidoo kale faahfaahinta khusaysa dhacdada dembiga. Waa in sidoo kale la xasuusnaadaa in ilaalintani ay qabanayso qof kasta oo dowladda metelaya ama wakiil gaar ah iyo xitaa warbaahinta ilaa go'aanka kama dambeysta ah ee dacwadda.

Sirta qarsoon waxaa lagu ilaaliyey heer caalami Qodobka 12 Baaqa Caalamiga ah ee Xuquuqaha Aadamaha 1948:

> *"Qofna waa in aan lagula kicin in si aan sharciga waafaqsanayn loo faro-geliyo sirtiisa qarsoon, qoyskiisa, gurigiisa ama isgaadhsiintiisa, waana in aan la weerarin sharaftiisa iyo sumcaddiisa. Qof kastaaba wuxuu leeyahay xuquuqda ilaalinta sharciga ee ka hortagga faro-gelinta ama ku xadgudubkani".*

Waxaa jira dhawr heer oo ilaalinta uu maragu heli karo ah:

- Haddii ay jiraan walaacyo khuseeya amniga maraga oo laga qabo eedeysanaha dacwadda ciqaabta ah, waxaa suurtogal ah in eedeysanaha la saaro shuruudo damaanad ah oo lagu xaqiijinayo amniga maraga. Shuruudahani damaanadu waxay mamnuuci karaan xidhiidh, hadduu toos yahay iyo haddaanu ahayn, ama uu ku soo wajahayo maraga dhinac saddexaad ama wax lamid ah. waxaa sidoo kale macquul ah in la saaro eedeysanaha inay mamnuuc ka tahay inuu tago fogaan go'an oo cinwaanka maraga ah. waxaa jiri karta shuruud ah inuu dejiyo meel kale si looga ilaaliyo maraga (oo ay ka reebanaan karaan ka qayb-galka maxkamadda ama ula kulan wakiilka sharci ballan xaddidan).
- Duruufaha qaarkood aqoonsiyada maragyada ayaa laga ilaalin karaa eedeysanaha, inkastoo danta caddaaladda badanaa looga arko inay khatar badan tahay, gaar ahaan marka maraga laga hadlayaa uu yahay eedeeyaha ugu weyn. Dacwadaha ay jiraan hawl-galo boolis oo qarsoodi ahaan waxay arrintu noqon kartaa in danta caddaaladdu ay u shaqaynayso inay ilaaliso maragyada noocan ah oo la qariyo qaababka baadhista. Tani waxaa lagu dhaqmayaa xaaladaha dembiga abaabulan ee uguna khatarsan.

175 Kaalmada Sharci ee Maragyada Caruurta, eeg ECOSOC Res. 2005/20 of 22.7.2005: Guidelines on Justice in Matters Involving Child victims and Witnesses of Crime.

- Eedeysanaha waxaa lagu rumaan gareyn karaa jeelka si loo xaqiijiyo in aanay jiri karin faro-gelin toos ah oo maraga uu ku sameeyo eedaysanahu.
- Ugu dambeyn, waxaa la isticmaali karaa barnaamijka ilaalinta maraga, kaasi oo maraga goobta laga badeli karo oo deddaal laga sameynayo si loo ilaaliyo (ama badelo) astaamaha aqoonsiyada maragyada si looga ilaaliyo faro-gelinta, oo ay soo raacdo aargudashada dhageysiga dacwadda laga filan karo. Kani waa qaab adag oo kharash badan, badanaa u baahan ilaalin balaadhan oo joogto ah, waxaanu badanaa ka jiraa waddamada horumaray.

Qareennadu waa inay mudnaanta siiyaan arrimaha amniga maragyada iyo xubnaha qoysaskooda oo ay isku dayaan inay xal u helaan inta uu u suurtogalin karo nidaamku kahor intaanay ka muujin dhageysiga dacwadda. Iyagoo wada shaqaynaya booliska iyo Xeer-ilaaliyaha Guud xalka ugu wanaagsan ee ilaalinta maraga waa in la helaa.

# Qoraallada La Tixraacay




1. American Bar Association - ABA (February 2002), *Ten Principles of a Public Defense Delivery System*.

2. Amnesty International (1997), *Africa: In Search of Safety - the Forcibly Displaced and Human Rights in Africa*.

3. Amnesty International (1998), *Fair Trials Manual:* http://www.amnesty.org

4. Baillargeon J., Penn J.V., Knight K., Harzke A.J., Baillargeon G., Becker E.A. (2010), *"Risk of reincarceration among prisoners with co-occurring severe mental illness and substance use disorders"*, *Administration and Policy in Mental Health,* 37 (4): 367-74.

5. Danish Institute for Human Rights (2010), *A Human Right to Legal Aid*.

6. Drizin Steven A. and Leo Richard A. (2004), *"The Problem of False Confessions in the Post DNA World"*, North Carolina Law Review, 82:891-1007.

7. Ellsberg, M. and L. Heise (2005), Researching violence against women: A practical guide for researchers and activists, Geneva, Switzerland, Program for Appropriate Technology in Health, World Health Organization.

8. Fazel M., Wheeler J., Danesh J. (2005), *Prevalence of serious mental disorder in 7000 refugees resettled in western countries: A systematic review,* Lancet, April 9–15, 2005;365(9467): 1309–14.

9. Fitzpatrick Joan and Bonoan Rafael (2003), *Cessation of Refugee Protection,* Cambridge University Press.

10. Gerow Josh R. (1995), *Psychology: An Introduction*, Scott, Foresman and Company, (p. 268-271: eye witnesses).

11. Gershaw David A. (1996), *"I Saw It With My Own Eyes!"*: http://virgil.azwestern.edu/~dag/lol/EyesSawIt.html

12. Green, B.L., Goodman, L. A, Krupnick, J.L., Corcoran, C.B., Petty, R.M., Stockton, P., and Stern, N.M. (2000), *"Outcomes of single versus multiple trauma exposure in a screening sample"*, *Journal of Traumatic Stress*, 13(2): p. 271-286

13. Harlow, Carol (1999), *"Access to Justice as a Human Right: The European Convention and the European Union"*, in: Philip Alston (ed.), *The EU and Human Rights,* Academy of European Law, European University Institute, Oxford University Press, p.187-214.

14. Hertz Randy, Guggenheim Martin, Amsterdam Anthony G. (2012), *Trial Manual for Defense Attorneys in Juvenile Delinquency Cases*, National Juvenile Defender Center.

15. Houseman Alan W. and Perle Linda E. (2003), *Securing Equal Justice for All: A Brief History of Civil Legal Assistance in the United States*, Center for Law and Social Policy, November 2003.

16. Lawyers Committee for Human Rights (2000), *What is a Fair Trial? A Basic Guide to Legal Standards and Practice,* N.Y.; www.lchr.org

17. Lilongwe Declaration on Accessing Legal Aid in the Criminal Justice System in Africa, Conference on Legal Aid in Criminal Justice: the Role of Lawyers, Non-Lawyers and other Service Providers in Africa Lilongwe, Malawi, November 22-24, 2004.

18. Loftus, Elizabeth F. and Palmer, J.C. (1974), *"Reconstruction of auto-mobile destruction: An example of the interaction between language and memory"*, Journal of Verbal Learning and Verbal Behaviour, 13, pp.585 -589.

19. Loftus, E.F. (1979), *Eyewitness Testimony,* Cambridge, MA: Harvard University Press. (Reissued with new Preface in 1996).

20. Loftus, E.F. (1980), *Memory: Surprising New Insights Into How We Remember and Why We Forget* (Reading, Mass.: Addison-Wesley Pub.). [Reprinted by NY: Ardsley Press 1988].

21. Loftus, E.F. (1998), *"Illusions of Memory"*, *Proceedings of the American Philosophical Society* 142: 60–73.

22. Loftus, E.F., Doyle, J.M. and Dysert, J. (2008), *Eyewitness testimony: Civil and Criminal, 4th edition.* Charlottesville, Va: Lexis Law Publishing.

23. Loftus, E.F., Hoffman, H.G. (1989), *"Misinformation and memory: The creation of memory"*, *Journal of Experimental Psychology: General* 118: 100–104.

24. McQuoid-Mason, David, *The Legal Aid Board and the Delivery of Legal Aid Services in South Africa*: www.legalaidreform.org

25. Mitchels, Barbara (2004), *"Let's Talk: Developing Effective Communication with Child Victims of Abuse and Human Trafficking,"* UNICEF, 2004.

26. Morrison, A., M. Ellsberg, et al. (2007), *"Addressing Gender-Based Violence: A Critical Review of Interventions"*, The World Bank Research Observer, 22(1): 25-51.

27. National Legal Aid and Defender Association - NLADA (Nov.2010), *International Legal Aid and Defender System Development Manual. Designing and Implementing Legal Assistance Programs for the Indigent in Developing Countries:* http://hakinetwork.org/wp-content/uploads/2011/06/International_Manual_2010.pdf.

28. Open Society Justice Initiative, (February 2004), *Legal Aid Reform and Access to Justice.*

29. Public Interest Law Institute (2009), *Making Legal Aid A Reality - A Resource Book for Policy Makers and Civil Society.*

30. Regan, Francis (1999), *The transformation of* Legal Aid*: comparative and historical studies*, Oxford University Press: http://books.google.com/books ?id=khG_4Dk96J4C&dq=legal+aid.

31. Roger, Smith (2002), *Legal Aid: Models of Organisation* - paper presented to the European Forum on Access to Justice Conference, Budapest, 5-7 December 2002.

32. Schacter, Daniel L. (2001), *The Seven Sins of Memory: How the Mind Forgets and Remembers* (Houghton Mifflin Co.).

33. Soar, Peter (ed.) (2001), *The New International Directory of Legal Aid*, Martinus Nijhoff Publ.

34. Solidarity for African Women's Rights -SOAWR (2011), *A Guide for Using the Protocol on the Rights of Women in Africa for Legal Action*, Equality Now:

35. http://www.equalitynow.org/sites/default/files/Manual%20on%20Protocol%20on%20Women%20Rights%20in%20Africa_EN.pdf

36. Stephens Helynn (January 2004), *"Price of pro bono representations: examining lawyers' duties and responsibilities"*, *Defense Counsel Journal,* 71, no. 1, p. 71-79.

37. Tsang, H.W.H.; Pearson, V.; Yuen, C.H. (March 2002), *"Family needs and burdens of mentally ill offenders"*, *International Journal of Rehabilitation Research,* Volume 25 - Issue 1 - pp 25-32.

38. UN *Principles and Guidelines on Access to Legal Aid in Criminal Justice Systems*, E/CN.15/2012/24; Commission on Crime Prevention and Criminal Justice, Twenty-first session, Vienna, 22-26 April 2012.

39. UN *Basic Principles on the Role of Lawyers*, Eighth United Nations Congress on the Prevention of Crime and the Treatment of Offenders, Havana, 27 August to 7 September 1990, U.N. Doc. A/CONF.144/28/Rev.1 at 118 (1990).

40. UNHCR (2008), *Handbook for the Protection of Women and Girls.*

41. United Nations Office on Drugs and Crime (UNODC) (2008), *Good Practices in the Protection of Witnesses in Criminal Proceedings Involving Organized Crime*.

42. UNODC (2009), *Strategies and Tactics for Defending Juvenile Cases.*

43. UNODC (2011), *Handbook on improving access to* Legal Aid *in Africa*.

44. UNODC (2011), *Access to* Legal Aid *in Criminal Justice Systems in Africa Survey Report.*

45. UNODC/ UNDP /UNICEF (2011), *Child-Friendly* Legal Aid *in Africa*.

46. UNODC (1999), *Handbook on Justice for Victims.*

47. UNODC (2010), *From coercion to cohesion. Treating drug dependence through health care, not punishment*.

48. UNODC - UNAIDS - WHO (2004), *Advocacy Guide: HIV/AIDS prevention among injecting drug users*.

49. UNODC – WHO (2010), *The Madrid Recommendation: Health protection in prisons as an essential part of public health*.

50. UNODC, World Health Organization and Joint United Nations Programme on HIV/AIDS (2008), *HIV in Places of Detention: A Toolkit for Policymakers, Programme Managers, Prison Officers and Health Care Providers in Prison Settings,* Vienna, United Nations Office on Drugs and Crime.

51. Van der Kolk, Bessel A. (2001), *"The assessment and treatment of complex PTSD"* in: *Traumatic Stress*: Rachel Yehuda, (ed.), Chapter 7, American Psychiatric Press:

52. http://www.traumacenter.org/products/pdf_files/Complex_PTSD.pdf

53. Van der Kolk, Bessel A., Mc Farlane Alexander C., Weisaeth Lars (eds.) (1996), *Traumatic Stress: The Effects of Overwhelming Experience of Mind, body and Society,* New York: Guilford Press.

54. Van der Kolk Bessel A. and Fisler Rita (1995), *"Dissociation and the fragmentary nature of traumatic memories: Overview and exploratory study"*, *Journal of Traumatic Stress*, Vol.8, Issue 4, p.505.

55. Van Dijk, Jan J.M. (2002), *Empowering Victims of Organized Crime; on the Compliance of the Palermo Convention with the UN Declaration on Basic Principles of Justice for Victims*, ERA- Forum I/2002.

56. Vrij Aldert, Akehurst Lucy, Soukara Stavroula, Bull Ray (2004), *"Let Me Inform You How to Tell a Convincing Story: CBCA and Reality Monitoring Scores as a Function of Age, Coaching and Deception"*, Canadian Journal of Behavioural Science, 36 (2). pp. 113-126.

57. Vrij Aldert, Akehurst Lucy, Soukara Stavroula, Bull Ray, *"Detecting Deceit Via Analyses of Verbal and Nonverbal Behavior in Children and Adults"*, *Human Communication Research*, Volume 30, Issue 1, pp.8-41.

58. Wemmers, Jo-Anne and Cyr, Katie (Sept.2006), *Victims' needs within the context of the criminal justice system*, International Centre for Comparative Criminology, University of Montreal.

59. Wilson, Richard J. (2002), *"Principles, Sources and Remedies for Violation of the Right to Assigned Legal Assistance in International Human Rights Law"*, February 5, 2002; Electronic copy available at: http://ssrn.com/abstract=1028900

60. Yehuda, Rachel (ed.), (1998), *Psychological Trauma* (*Review of Psychiatry* Series, special issue no 17), American Psychiatric Press.

61. Yuille, J. C., and Cutshall, J.L. (1986), *"A case study of eyewitness memory of a crime"*, *Journal of Applied Psychology*, 71, pp.291-301.

62. *Zaragoza, M. S., Belli, R., and Payment, K. E. (2007), "Misinformation effects and the suggestibility of eyewitness memory", in: M. Garry and H. Hayne (eds.), "Do Justice and Let the Sky Fall".*

# Lifaaqyo:
# Qoraallada Ka Qayb-Galayaasha La Siinayo

Qoraalladani waxay ka kooban yihiin layliyo qof kastaa ka shaqaynayo (hawl-qabadyo) iyo layliyo si guud (galaaska) looga shaqaynayo (hawl-galo) iyo sidoo kale doodo, su'aalo iyo dacwado-sharci.

## Tabobarka Maalinta 1

Qoraalka 1: Su'aalo (Qaybta 1, Cutubka. 2)

Qoraalka 2: Hawl-qabadka-koowaad (Qaybta 1, Cutubka 3)

Qoraalka 3: Dacwad-sharci Kow (Qaybta 1, Cutubka 3)

Qoraalka 4: Hawl-qabadka-Labaad (Qaybta 1, Cutubka 3)

Qoraalka 5: Hawl-qabadka-Saddexaad (Qaybta 1, Cutubka 3)

Qoraalka 6: Hawl-qabadka-Afraad (Qaybta 1, Cutubka 3)

Qoraalka 7: Dacwad-sharci Labaad (Qaybta 1, Cutubka 3)

Qoraalka 8: Hawl-qabadka-Shanaad (Qaybta 1, Cutubka 3)

Qoraalka 9: Hawl-qabadka-Lixaad (Qaybta 1, Cutubka 3)

## Tabobarka Maalinta 2

Qoraalka 10: Hawl-qabadka-Todobbaad (Qaybta 1, Cutubka 3)

Qoraalka 11: Hawl-qabadka-Siddeedaad (Qaybta 1, Cutubka 3)

Qoraalka 12: Hawl-galka-Koowaad (Qaybta 1, Cutubka 3)

Qoraalka 13: Hawl-qabadka-Sagaalaad (Qaybta 1, Cutubka 3)

Qoraalka 14: Su'aalo (Qaybta 1, Cutubka 3)

Qoraalka15: Hawl-galka-Labaad (Qaybta 1, Cutubka 3)

Qoraalka 16: Doodda-Koowaad (Qaybta 2, Cutubka 1)

Qoraalka 17: Doodda-Labaad (Qaybta 2, Cutubka 1)

Qoraalka 18: Doodda-Saddexaad (Qaybta 2, Cutubka 1)

Qoraalka 19: Doodda-Afaraad (Qaybta 2, Cutubka 1)

Qoraalka 20: Hawl-galka-Saddexaad (Qaybta 2, Cutubka 1)

Qoraalka 21: Hawl-qabadka-Tobnaad (Qaybta 2, Cutubka 2)

Qoraalka 22: Doodda-Shanaad (Qaybta 2, Cutubka 2)

Qoraalka 23: Doodda-Lixaad (Qaybta 2, Cutubka 2)

## Tabobarka Maalinta 3

Qoraalka 24: Hawl-qabadka-Koow iyo toban (Qaybta 2, Cutubka 2)

Qoraalka 25: Hawl-galka-Afaraad (Qaybta 2, Cutubka 2)

Qoraalka 26: Hawl-qabadka-Laba iyo toban (Qaybta 2, Cutubka 2)

## Tabobarka Maalinta 4

Qoraalka 27: Hawl-galka-Shanaad (Qaybta 2, Cutubka 2)

Qoraalka 28: Hawl-qabadka-Saddex iyo toban (Qaybta 2, Cutubka 2)

Qoraalka 29: Hawl-galka-Lixaad (Qaybta 2, Cutubka 2)

Qoraalka 30: Hawl-qabadka-Afar iyo tobnaad (Qaybta 2, Cutubka 2)

Qoraalka 31: Hawl-qabadka-Shan iyo tobnaad (Qaybta 2, Cutubka 2)

Qoraalka 32: Hawl-qabadka-Lix iyo tobnaad (Qaybta 2, Cutubka 2)

Qoraalka 33: Doodda Todobbaad (Qaybta 2, Cutubka 3)

UNODC
United Nations Office on Drugs and Crime